# Kuwa u hiloobay

## barashada Shamaa'ilka Khatimka Nabiyada

## sallallaahu calayhi wasallam

**Sharaxaad kooban oo ku saabsan Shamaa'ilka Maxammediga ah**

**Diyaarintii: Marwa Maxamed Al-Badri**

**Allaahow nagu irsaaq Firdowsa sare**

# Kuwa u hiloobay

## barashada Shamaa'ilka Khatimka Nabiyada

## Sallallaahu calayhi wasallam

**Sharaxaad kooban oo ku saabsan Shamaa'ilka Maxammediga ah**

**Diyaarintii: Marwa Maxamed Al-Badri**

**Allaahow nagu irsaaq Firdowsa sare**

Bismillaahir raxmaanir raxiim

Daabacaadda labaad
2025

Lambarka diiwaangelinta ee xarunta maktabadda qaranka
(2025/3/1736)

Cinwaanka kitaabka: kuwa u hiloobay barashada shamaa’ilka khatimka nabiyada sallallaahu calayhi wasallam

Qoraaga: al-badri, marwa maxamed al-mutawalli maxamed

Xogta daabacaadda: cammaan – urdun: daar al-khaliij, 2025

Sharaxaadda muuqaalka: 157 bog

Lambarka kala soocidda: 239

Erayada tilmaamaya: akhlaaqda rasuulka / nolosha rasuulka / fadliga / siirada nabiga / culuumta islaamka

Daabacaadda: labaad

– qoraagu wuxuu si buuxda u qaadanayaa mas’uuliyadda sharciyeed ee ku saabsan waxa ku jira qoraalkiisa, mana matalayso aragtida xarunta maktabadda qaranka ama hay’ad dowladeed kale.

Isbn: 978-9923-23-242-2

Isku dubbaridka, naqshadaynta iyo daabacaadda: daar al-khaliij ee daabacaadda iyo qaybinta 077935983

**Bismillaahir raxmaanir raxiim**

**Xuquuqda daabacaadda way dhowran tahay**

**Daabacaadda koowaad**
**2025**



Allaahow annagu waxaan
kaa magan galaynaa
inaan wax kula wadaajinno
annagoo og,
waxa aannaan ogaynna
waxaan kaa waydiisanaynaa
dambi dhaaf.

Bismillaahir raxmaanir raxiim
alxamdulillaahi Rabbiga caalamka oo dhan

Allaahow ku salli Maxamed iyo xaasaskiisa iyo faraciisa sidii aad ugu salliday Ibraahiim, kuna barakee Maxamed iyo xaasaskiisa iyo faraciisa sidii aad ugu barakaysay Ibraahiim, adigu waxaad tahay mid la mahadiyo oo sharaf badan.

Runtii waa sharaf weyn inaan wax ka qorno gacaliyaha Maxamed sallallaahu calayhi wasallam, kana hadalno Shamaa'ilkiisa, sifihiisa iyo akhlaaqdiisa. Waa raaxo gaar ah iyo mid ka mid ah raaxooyinka jannada garashada inaan akhrinno kitaab ka hadlaya isaga sallallaahu calayhi wasallam.

**Wax badan ayaan kugu leenahay adiga Rasuulkii Allaah. Adiga ayaa na bartay sida loo gudbo dhibaatooyinka loona dhiso quruxda. Waxaan markhaati ka nahay, Rasuulkii Allaahow, inaad gaarsiisay risaalada sida ugu wanaagsan. Hadalkayaguna halkan wuxuu ku saabsan yahay adiga oo keliya maxaa yeelay waxaad tahay nicmo, Rabbigeenna jalla jalaaluhu wuxuu yiri:**

**﴿وَأَمَّا بِنِعْمَةِ رَبِّكَ فَحَدِّثْ﴾ [الضحى: 11]**

**﴿Nicmadda Rabbigaana (Islaamka, Towxiidka, Qur'aanka, Xaqa, sheeg (oo ka mahad celi)﴾ [Ad-duxaa:11]**

**Nicmooyinka ugu qaalisanow... Allaah wuxuu run ka sheegay adiga markii uu yiri "idinkiinna dhexdooda." Mana qiyaasi karno, Rasuulkii Allaahow, saacado nooga farxad badnaan lahaa inaan ku fariisanno waqtigaaga, annagoo dhegaysanayna hadalkaaga, markaasna ku siinayna feejignaanteenna, jacaylkeenna iyo danaynteenna.**

**Allaahow... Haddii ay ahaan lahayd fadhi dhab ah.**

Mar kasta oo aan si badan kuu naqaan ayaan si badan kuu jecel nahay. Aad ayaan kuu jecelnahay Rasuulkii Allaah. Waxaanan u baahan nahay waqti aad u dheer si loo sharaxo xiisaha iyo xanuunka ka dhashay seegidda saaxiibtinimadaada.

Ilaa aan kulanno, tani waa markhaatigeenna: gacaliyaha Allaahow, waxaad gaarsiisay risaalada, waxaadna gudatay amaanada. Allaah ha ku gaarsiiyo, Rasuulkii Allaahow, maqaamka la mahadiyo ee aad rajaynayso, iyo wasiilada iyo fadliga. Balliga agtiisana kulanku wuu macaanaan doonaa, Abul-Qaasimow, korkaaga ha ahaato salaadda ugu wanaagsan iyo salaanta ugu dhamaystiran.

# Hibayn

**Ku socota laambadda ifaysa..**

Ku socota gacaliyaha Maxamed sallallaahu calayhi wasallam..
Ku socota naxariista la hibeeyey..
Ku socota kii jacaylkiisu ku nool yahay quluubtayada..
Ku socota kii iigu yimid riyo markii aan ku jiray dhibaatadaydii ugu adkayd..
Ku socota kii dhegtayda si tartiib ah ugu yiri salaan markii ay iga go'een waddooyinkii bogsashada oo balaayadu dheeraatay..
Ku socota kii u yimid addoonta faqiirka ah ee tabarta yar si uu ugu qalbi qaboojiyo markii xanuunnadu bateen, gardarroobeen, kana bateen awooddii loo lahaa adkaysigooda..

Waxay noqotay habeenkii bogsashada, habeenkii farxadda, bilowgii raynraynta iyo bilowgii ku xirnaantaada, Rasuulkii Allaahow..

Allaah ha kaa abaal mariyo aniga iyo muslimiintaba kheyr badan, gacaliyaha Allaahow..

Aad ayaan kuu jecelnahay Rasuulkii Allaah, dhammaanteennuna waxaan rajayn iyo hunguri ka qabnaa in Kan sharafta iyo karaamada leh nagu maamuuso wehelnimadaada Firdowsa sare.

Waxaan kuu bishaaraynaynaa Rasuulkii Allaahow.. Weli waxaan ku sugannahay ballantii, sayidka rusushaow.. Annagoo leh ruux adag iyo jir daciif ah..

Waxaan sii raaci doonnaa jidkaaga sannadaha oo dhan dib u noqosho la'aan, hana dhaco waxa dhici doona..

Allaah ayaa kaalmo laga weydiistaa, mana jiro awood iyo xoog toona aan ka ahayn Allaah, Sarreeyaha weyn.

Addoonadda u baahan Allaah..

Marwa Al-Badri

# Hibayn

Waxaan mahad iyo shukri u jeedinayaa Allaah cazza wa jall kaas oo fadligiisa iyo deeqsinimadiisa ku hanuuniyey, ku waafajiyey, fududeeyey, nicmeeyey, isla markaana iga caawiyey dhamaystirka shaqadan anigoon lahayn fadli hore oo aan soo bandhigay ama awood aan leeyahay.

Iyadoo laga duulayo hadalka gacaliyaha la doortay sallallaahu calayhi wasallam:

**"من لم يشكر الناس لم يشكر الله"**

**"Qofkii aan dadka u mahadnaqini, Allaahna uma mahadnaqo"**

waxaan shaqadan ugu horrayn u hibaynayaa ninkayga gacaliyaha ah Al-Xaaj Daariq, iyo aabbahay iyo hooyaday oo ah qabowga indhahayga iyo taajka madaxayga:

**﴿وَقُل رَّبِّ ارْحَمْهُمَا كَمَا رَبَّيَانِي صَغِيرًا﴾ [الإسراء:24]**

**﴿Rabbiyow! Ugu Naxariiso siday ii soo koriyeen anigoo yar﴾ [Al-israa:24]**

Allaahow ka dhig shaqadan sadaqo socota oo u taal iyaga.

Waxaan sidoo kale u hibaynayaa carruurtayda uu Allaah ii barakeeyey: Minnatullaah, Islaam, iyo Maxamed. Allaahow ka dhig kuwo uu Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam ku faano ummadaha maalinta qiyaamaha, iyo carruurta muslimiinta.

Iyo walaashayda gacalisada ah Jihaad Haaruunti, oo ah saaxiibaddayda faafinta sunnada iyo Shamaa'ilka Nabiga sallallaahu calayhi wasallam, iyo walaalahay Bilaal iyo Cumar, Allaah ha barakeeyo.

Iyo Samaax, gacalisadayda iyo saaxiibadda Shamaa'ilka Nabiga sallallaahu calayhi wasallam, iyo saaxiibaddayda jidkayga iyo taageeradayda Manaar. Waxaan si gaar ah ugu mahadnaqayaa gabadhii fikradda kitaabka lahayd, Allaah haka raalli noqdo, iyo walaashii qortay oo ururisay, Allaah ha ka abaal mariyo kheyr. Sidoo kale dhammaan walaalihii ka kala yimid dalal Carbeed iyo kuwo aan Carab ahayn ee ka qayb qaatay faafintiisa si ay uga farxiyaan Nabiga sallallaahu calayhi wasallam. Allaah haka siiyo dhammaantood abaalgudkii ugu wanaagsanaa.

Waxaan sidoo kale u hibaynayaa Sheekh Maxamed Khayri, Sheekh Xaazim Shumaan, iyo Sheekh Xasan Al-Xusayni kuwaas oo ahaa sababta ugu weyn, fadliga Allaah ka dib, ee furitaankan. Allaah haka siiyo aniga iyo Islaamka abaalgudkii ugu wanaagsanaa, hana nagu kulmiyo dhammaanteen Firdowsa sare iyada oo aan xisaab iyo cadaab toona jirin.

Waxaan kitaabkan u hibaynayaa dhammaan kuwa jecel Rasuulka Allaah iyo sunnada Rasuulka sallallaahu calayhi wasallam, iyo dhammaan ummadda Maxamed sallallaahu calayhi wasallam.

Bismillaahir raxmaanir raxiim

Alxamdulillaahi Rabbiga caalamka oo dhan, salaadda iyo salaantuna ha ahaato gacaliyaheenna iyo qabowga indhahayaga Maxamed sallallaahu calayhi wasallam, korkiisa iyo ehelkiisa, saxaabadiisa dhammaantood iyo kuwii si wanaagsan u raacay ilaa maalinta qiyaamaha.

Kadib markii la dersay oo laga fiirsaday kitaabka Shamaa'ilka Nabiga sallallaahu calayhi wasallam ee Imaam Abii Ciise At-Tirmidi raximahullaah..

Kadib markii ay caddaatay in qaar ka mid ah ereyada Carabiga fasaxa ah ee ku jira kitaabka Shamaa'ilka ay ku adag yihiin muslimiinta intooda badan.

Allaah wuxuu nagu waafajiyey inaan soo ururinno macnayaasha iyo faa'iidooyinka axaadiista Shamaa'ilka Nabiga sallallaahu calayhi wasallam qaab fudud oo faa'iido leh, kaas oo ka kaafinaya ardayga cilmiga iyo muslimiinta guud ahaan raadinta dheer ee macnayaasha axaadiista Shamaa'ilka.

Sababtoo ah jacaylka Rasuulka Allaah iyo soo nooleynta sunnadiisu waa cibaado uu waajib ku yahay muslim kasta inuu raaco oo aanu dayicin..

Cibaadadanna ma iman karto ilaa lagu garto sallallaahu calayhi wasallam. Qofku ma jeclaan karo qof gaar ah ilaa uu ku garto sifihiisa, akhlaaqdiisa iyo Shamaa'ilkiisa.

Qaar ka mid ah culimada ayaa yiri: "Waa qof dayacan kii aan aqoon Shamaa'ilka Nabigiisa sallallaahu calayhi wasallam." Aqoontaasna kuma koobna culimada oo keliya, balse waa waajib saaran muslim kasta iyo muslimad kasta oo u ikhlaas leh Allaah cazza wa jall.

Sidaas darteed..

Kadib markii Allaah cazza wa jall nagu nicmeeyey barashada Shamaa'ilka Nabiga sallallaahu calayhi wasallam ee Imaam At-Tirmidi raximahullaah, Allaahna nagu dhadhansiiyey dareenno aan la sifayn karin oo jacayl iyo ku xirnaantaada Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam ah, iyo ku xirnaanta sunnadiisa oo aanu qalbiga hore ugu jirin..

Waxaan rabnay inaan dunida oo dhan u sheegno si dhow cidda uu yahay Nabiga naxariista Maxamed sallallaahu calayhi wasallam. Waxaan xitaa Allaah cazza wa jall ka baryeynaa in malaayiin lagu hanuuniyo kitaabkan, uuna sabab u noqdo hanuunka dadka aan

muslimiinta ahayn ee Islaamka, si uu Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam noogu farxo Balliga agtiisana kulanku wuu macaanaan doonaa maalinta qiyaamaha.

Shamaa'ilka Nabiga sallallaahu calayhi wasallam waxay na barayaan Nabigeenna Maxamed sallallaahu calayhi wasallam waxayna noo caddaynayaan qaabka uu u noolaa sallallaahu calayhi wasallam, taas oo horseedaysa gaaridda maqaamka jacaylka Rasuulka sallallaahu calayhi wasallam, xiisaha loo qabo iyo soo nooleynta sunnadiisa, dabadeedna faafinteeda iyo ku hagidda muslimiinta, annagoo rajaynayna inaan ku guulaysanno deriskiisa sallallaahu calayhi wasallam ee Firdowsa sare idanka Allaah, Allaah ayaana kaalmo laga weydiistaa.

Rasuulka sallallaahu calayhi wasallam wuxuu yiri:

**"مَنْ أَحْيى سُنَّتي فَقَدْ أَحَبَّني، وَمَنْ أَحَبَّني كانَ مَعي في الجَنَّة". [أخرجه الترمذي]**

**"Qofkii soo nooleeya sunnadayda wuu i jeclaaday, qofkii i jeclaadana wuxuu ila jiri doonaa jannada." [Waxaa soo saaray At-Tirmidi]**

Waxaa sidoo kale fadliga Allaah cazza wa jall lagu tarjumay kitaabkan luqadda Carabiga lagana dhigay luqado badan, kuwaas oo kala ah: Ingiriisi, Jarmal, Faransiis iyo Holandays.

**Qorshaha shaqada ee kitaabkan:**

1. Waxaan kitaabkan kooban ku soo ururinnay inta badan axaadiista saxiixa ah ee kitaabka Shamaa'ilka Nabiga sallallaahu calayhi wasallam ee At-Tirmidi raximahullaah, annagoo ku darnay sharaxaad fudud. Waxaan reebnay axaadiista xambaarsan inta badan macnayaasha, mana xusin axaadiista kale ee macnayaashaas ku soo noqnoqday.
2. Waxaan ka saarnay axaadiista aadka u daciifka ah iyo qaar ka mid ah axaadiista saxiixa ah si aan looga daalin akhristaha iyo si loo yareeyo ku noqnoqoshada isla macnaha.
3. Waxaan tirtirnay silsiladaha wariyayaasha si qoraalku u koobnaado.
4. Waxaan ku darnay takhriij fudud oo axaadiista ah.
5. Waxaan sharaxnay ereyada adag, isla markaana caddeynay macnayaasha dhibka lahaa.
6. Marka Allaah nagu waafajiyey, waxaan xusnay faa'iido xadiiska ku jirta, sidoo kalena waxaan ku darnay soo nooleynta sunnad laga fahmay xadiiska haddii ay jirto.
7. Dhammaadka inta badan cutubyada waxaan ku darnay iftiin yar ama fikir kooban oo ku saabsan Nabiga sallallaahu calayhi wasallam..

8. Waxaa dhammaadka kitaabka lagu daray cutub ku saabsan fadliga salaadda Nabigeenna Maxamed iyo cutub ku saabsan qaacidooyinka salaadda Nabiga sallallaahu calayhi wasallam si faa'iidada loo dhamaystiro in shaa Allaah.

Allaahow ka dhig cilmi faa'iido leh iyo camal wanaagsan oo la aqbalay oo sii jira ilaa maalinta qiyaamaha, kana dhig kayd noo yaal agtaada oo uu ku farxo Nabigaaga iyo gacaliyahaaga Maxamed sallallaahu calayhi wasallam.

Waxaan ku jeclahay Rasuulkii Allaahow, ee ma aqbalaysaa?

Run ahaantii ma aanan arag nuurka wajigaaga.. Mana aanan maqal macaanida codkaaga..

Mana jirin maalin aan seefta kula qaaday safkaaga..

Mana aanan dagaallamin Uxud, mana aanan Badr ku dilin madax ka mid ah gaalada..

Mana aanan hijroon maalin, mana aanan ka mid noqon ansaarta..

Laakiin Nabigii Allaahow, Allaah baan ku dhaartaye waan ku jeclaaday.. Ololka jacaylka qalbigayga ku jira waa sida duufaan xoog leh..

Gacaliyahaygii Rasuulkii Allaahow, ee ma aqbalaysaa?

Waxaana had iyo jeer igu jira wax yar oo jahawareer ah..

Yaan ahay anigu marka loo eego saxaabada nebiga iyo kuwii la doortay?

Ma aanan noqon Anas kii kuu adeegay..

Mana aanan noqon Cumar kii ku garab istaagay..

Mana aanan noqon Abuu Bakar kii ku rumaystay..

Mana aanan noqon Xamza, Camr ama Khaalid..

Mana jirin maalin aan calan qaaday.. Islaamkaygana sharaf ahaan ayaan uga helay aabbahay.

Waxaan ahay ilmo isku dayaya inuu jacaylkaaga ku qariyo guuldarrooyinkiisa..

Laakiin Nabigii Allaahow..

Naftaydu waxay aad ugu hiloobaysaa jacaylka Allaah iyo jacaylkaaga Rasuulkii Allaahow.

## Qeexidda Shamaa'ilka Nabiga sallallaahu calayhi wasallam

Allaah ha nooleeyo quluubta kuwa jecel ee u hiloobay inay bartaan Shamaa'ilka Nabiga sallallaahu calayhi wasallam.

Waxaa laga qoray Shamaa'ilka Nabiga sallallaahu calayhi wasallam kitaabo badan, laakiin kitaabka Abii Ciise Maxamed bin Ciise At-Tirmidi ee Shamaa'ilka Nabiga sallallaahu calayhi wasallam waa mid ka mid ah kitaabada ugu wanaagsan ee soo ururiyey axaadiista Shamaa'ilka, waxaana loo qaddaray faafid iyo sii jiritaan ilaa maanta.

Waa maxay macnaha Shamaa'ilka Nabiga sallallaahu calayhi wasallam?

Shamaa'ilka Nabiga sallallaahu calayhi wasallam:

Waa mid ka mid ah culuumta Islaamka ee danaynaysa xuska dhinacyada shakhsiyadeed ee la xiriira Nabiga Allaah Maxamed bin Cabdullaah sallallaahu calayhi wasallam. Waxaana ku jira:

Sifihiisa abuur ahaan iyo akhlaaq ahaan sallallaahu calayhi wasallam. Shamaa'ilkuna waa dabeecadaha iyo sifooyinka uu ku gaar ahaa Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam dhinaca:

Abuurkiisa: muuqaalkiisa, midabkiisa, qaabkiisa, muuqaalkiisa dibadda iyo socodkiisa...

Iyo akhlaaqdiisa: sifooyinkiisa, akhlaaqda iyo anshaxa uu ku qurxoonaa sallallaahu calayhi wasallam sida deeqsinimadiisa, dulqaadkiisa, geesinimadiisa iyo akhlaaqdiisa wanaagsan.

Kitaabka Shamaa'ilka ee At-Tirmidi wuxuu sidoo kale ka hadlay shanleysiga Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam, dharkiisa, cuntadiisa, cabbiddiisa, koobkiisa iyo agabkiisa gaarka ah sida kabihiisa, faraantigiisa, cimaamaddiisa, maradiisa dhexda lagu xirto, gogoshiisa, seeftiisa iyo gaashaankiisa. Wuxuu sidoo kale xusay fadhiyadiisa sallallaahu calayhi wasallam iyo socodkiisa, wuxuuna galay faahfaahinta cibaadadiisa, dabadeed dhimashadiisa iyo in lagu arko sallallaahu calayhi wasallam riyada, si loo garto sallallaahu calayhi wasallam looguna daydo dhaqan ahaan, camal ahaan iyo hanuun ahaan.

Nasabkiisa sallallaahu calayhi wasallam: waa Maxamed bin Cabdullaah bin Cabdil-Mudalib bin Haashim bin Cabd Manaaf bin Qusay bin Kilaab bin Murra, wuxuuna ka soo jeedaa farcankii Ismaaciil calayhis salaam.

Maxay tahay sababta ay tahay inaan baranno Shamaa'ilka Nabiga sallallaahu calayhi wasallam? Sababtoo ah aqoontan dhammaystiran waxay ina hoggaaminaysaa jacaylka Rasuulka sallallaahu calayhi wasallam iyo wanaajinta raaciddiisa. Sidoo kale qofna ma jeclaan karo qof kale oo uu si dhab ah u raaco isagoo aan si fiican u aqoon.

Shamaa'ilka Nabiga sallallaahu calayhi wasallam waxay si buuxda noogu sifaynayaan Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam sidii inaan aragno, aqoontaasna ee sifihiisa sallallaahu calayhi wasallam waxay wax weyn ka beddeli doontaa xiriirkeenna Rasuulka Allaah.

**"عن أنس بن مالك أنَّ رَجُلًا مِن أهْلِ البَادِيَةِ أتَى النَّبِيَّ صلَّى اللهُ عليه وسلَّم فَقالَ: يا رَسولَ اللَّهِ، مَتَى السَّاعَةُ قَائِمَةٌ؟ قالَ: ويْلَكَ! وما أعْدَدْتَ لَهَا؟ قالَ: ما أعْدَدْتُ لَهَا إلَّا أنِّي أُحِبُّ اللَّهَ ورَسولَهُ، قالَ: إنَّكَ مع مَن أحْبَبْتَ". [أخرجه البخاري]**

**"Waxaa laga soo weriyey Anas bin Maalik in nin reer baadiye ah uu u yimid Nabiga sallallaahu calayhi wasallam markaasuu yiri: 'Rasuulkii Allaahow, goorma ayay qiyaamadu dhici doontaa?' Wuxuu yiri: 'Halaag baa kuu sugnaadayee, maxaad u diyaarsatay?' Wuxuu yiri: 'Wax aan u diyaarsaday ma jiro aan ka ahayn inaan jeclahay Allaah iyo Rasuulkiisa.' Wuxuu yiri: 'Waxaad la jiri doontaa cidda aad jeceshahay." [Waxaa soo saaray Al-Bukhaari].**

Waa bishaaro weyn oo qofka ku dhiirrigelinaysa adeecidda isagoo hunguri ka qaba in lala soo saaro gacaliyaha sallallaahu calayhi wasallam oo uu helo wehelnimadiisa Firdowsa sare.

Haddaba ma haysannaa jacayl qalbiyadeenna ku jira oo nagu filan inaan ku wehelnno jannada?

Kitaabkani waa fursad aan ku cusboonaysiinno jacaylka Allaah dabadeedna jacaylka Rasuulka sallallaahu calayhi wasallam, annagoo isku dayayna inaan si ka badan u baranno si aan u adeecno una raacno sunnadiisa.

**﴿قُلْ إِن كُنتُمْ تُحِبُّونَ اللَّهَ فَاتَّبِعُونِي يُحْبِبْكُمُ اللَّهُ وَيَغْفِرْ لَكُمْ ذُنُوبَكُمْ وَاللَّهُ غَفُورٌ رَّحِيمٌ﴾ [آل عمران: 31]**

**﴿dheh: Haddaad Alle jeceshihiin, i soo raaca, Alle baa idin jeclaan oo idiin dhaafi dunuubtiinna. Alle waa Denbi Dhaaf Badane, Naxariis Badan﴾ [Aala Cimraan]**

**Haddii ay garan lahaayeen way jeclaan lahaayeen..**

Waa in si fiican loo gartaa Rasuulka sallallaahu calayhi wasallam si aan ugu raacno jacayl.

Barashada Shamaa'ilka Nabiga sallallaahu calayhi wasallam waa fursad uu leeyahay muslim kasta. Waxaa laga yaabaa in Allaah cazza wa jall u furo oo ku arsaaqo daacadnimada niyada iyo wanaajinta raacitaanka, dabadeedna ku arsaaqo deriska Nabiga Maxamed sallallaahu calayhi wasallam ee Firdowsa sare iyo in lagu arko riyada.

## Iftiin

**Khasnadda salaadda Nabiga sallallaahu calayhi wasallam..**

Salaadda Nabiga waa faa'iido weyn oo waajib ka dhigaysa in Allaah loogu mahadnaqo. Haddii aad caadaysatana qalbigaagu wuxuu sii ahaan doonaa mid ku xirnaantaada Rasuulka Allaah badan tahay, waxaadna noqon doontaa dadka ugu dhow isaga sida uu sheegay sallallaahu calayhi wasallam:

**"أَولَى النَّاسِ بي يومَ القيامَةِ أكثَرُهم علَيَّ صلاةً". [أخرجه الترمذي].**

**"Dadka iigu dhow maalinta qiyaamaha waa kuwa iigu badan salaadda korkayga." [Waxaa soo saaray At-Tirmidi].**

**"إني أكثر الصلاة عليك فكم أجعل لك من صلاتي، فقال: ما شئت، قال: قلت: الرُّبع؟ قال: ما شئت، فإن زدت فهو خير لك، قلت: النِّصف؟ قال: ما شئت فإن زدت فهو خير لك، قال: قلت فالثُّلثين؟ قال: ما شئت فإن زدت فهو خير لك، قلت أجعل لك صلاتي كلها؟ قال : إذن تُكفى هَمّك ويُغفَر لك ذَنبُك".[أخرجه الترمذي]**

**Dhageyso sidoo kale Ubayy bin Kacab markii uu ku yiri Rasuulka Allaah: "Waxaan badiyaa salaadda aan kugu salliyo; haddaba intee ayaan kaaga dhigayaa ducadayda?" Wuxuu yiri: "Sidaad doonto." Wuxuu yiri: "Rubuc?" Wuxuu yiri: "Sidaad doonto, haddii aad kordhisana waa kuu khayr." Wuxuu yiri: "Badh?" Wuxuu yiri: "Sidaad doonto, haddii aad kordhisana waa kuu khayr." Wuxuu yiri: "Saddex meelood labo?" Wuxuu yiri: "Sidaad doonto, haddii aad kordhisana waa kuu khayr." Wuxuu yiri: "Ma ducadayda oo dhan ayaan kaaga dhigaa?" Wuxuu yiri: "Markaas welwelkaaga waa lagaa filnaanayaa, dambigaagana waa laguu dhaafayaa" [Waxaa soo saaray At-Tirmidi].**

- "Imisa ayaan kaaga dhigaa ducadayda?" Macnaheedu waa: intee ayaan ducadayda naftayda aan u duceeyo uga beddelaa salaadda Nabiga sallallaahu calayhi wasallam.

Salaaddu luqad ahaan waa duco. Sheekhul-Islaam Ibn Taymiyyah wuxuu yiri: "Qofkani wuxuu leeyahay duco uu ku ducaysto, haddii uu booska ducadiisa geliyo salaadda Nabiga

sallallaahu calayhi wasallam, Allaah ayaa uga kaafinaya waxa ka welwel gelinaya adduunkiisa iyo aakhiradiisa. Maxaa yeelay mar kasta oo uu hal mar ku salliyo, Allaah ayaa toban jeer ku sallinaya. Haddii uu u duceeyo mid ka mid ah mu'miniinta, malaa'igta ayaa oranaysa: Aamiin, adigana wax la mid ah ha lagu siiyo. Haddaba ducada Nabiga sallallaahu calayhi wasallam ayaa taas uga mudan."

Ama macnaha "Ducadayda oo dhan ayaan kaaga dhigaa" wuxuu noqon karaa: mar kasta oo aan naftayda u duceeyo waxaan kugu sallinayaa sallallaahu calayhi wasallam.

Ka fiirso sida uu dareemay Ubayy bin Kacab markii Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam ku yiri:

"إنَّ اللهَ قد أمَرَني أنْ أُقْرِئَك القرآنَ، فقال له أُبيّ: آللهُ سَمَّاني لك؟ قال: نعَمْ، فجعَلَ يبْكي".[أخرجه البخاري].

**"Allaah wuxuu i amray inaan kuu akhriyo Qur'aanka." Ubayy wuxuu yiri: "Allaah ma magacaabay magacayga?" Wuxuu yiri: "Haa." Markaasuu bilaabay inuu ooyo. [Waxaa soo saaray Al-Bukhaari].**

Subxaanallaah, waa Allaah kan Ubayy radiyallaahu canhu u doortay nicmadaas weyn. Ma naqaan sirta uu Allaah cazza wa jall ugu gaar yeelay nicmadaas.
Haddii aan baarno taariikhda Ubayy, waxaan arki doonnaa inuu ku takhasusay waxyiga, laakiin waxaa jiray wax kale; Ubayy wuxuu aad ugu badnaa salaadda uu ku salliyo Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam. Waxaa laga yaabaa in maqaamkaas gaarka ah ee Allaah ku mannaystay uu sabab u ahaa qaybta weyn ee uu Ubayy radiyallaahu canhu u qoondeeyey salaadda Nabiga.
Markii uu Ubayy radiyallaahu canhu badiyey xuska Rasuulka sallallaahu calayhi wasallam, maqaamkiisii waa la kor yeelay ilaa Allaah cazza wa jall magaciisa uga xusay Nabiga sallallaahu calayhi wasallam. Qof kasta oo ku xirma kan xuskiisa sare loo qaadayna wuu sarreeyaa, Allaah ayaana ogaal badan.

Nabiga sallallaahu calayhi wasallam wuxuu ummaddiisa ku hanuuniyey inaysan ku badbadin ammaantiisa, isla markaana aysan ka dejin meeshiisa sidii ay nasaaradu ula dhaqmeen Ciise calayhis salaam markii ay ku andacoodeen inuu yahay wiilka Allaah, Allaahna wuu ka sarreeyaa waxay tilmaamayaan.

Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam wuxuu yiri:

"لَا تُطْرُونِي كما أَطْرَتِ النَّصَارَى ابْنَ مَرْيَمَ؛ فإنَّما أَنَا عَبْدُهُ، فَقُولوا: عبدُ اللَّهِ وَرَسُولُهُ ". [أخرجه البخاري ]

**“Ha iigu badbadinna ammaanta sidii ay nasaaradu ugu badbadiyeen Ciise ina Maryam. Waxaan ahay addoonkiisa ee dhaha: Addoonkii Allaah iyo Rasuulkiisa.” [Waxaa soo saaray Al-Bukhaari].**

Barashada Shamaa’ilka Nabiga sallallaahu calayhi wasallam waxay u timid inay kabto dayacaaddeenna ku aaddan gacaliyaha sallallaahu calayhi wasallam. Haddii uusan jirin ma aynaan garteen Islaamka. Haddii uusan jirin weli waxaan ku dhex wareegi lahayn mugdiyada jaahiliyadda. Isaga ayaa ahaa kii Allaah cazza wa jall u soo diray naxariis caalamka oo dhan.

Allaahow ku salli Maxamed iyo ehelka Maxamed sidii aad ugu salliday Ibraahiim iyo ehelka Ibraahiim.

Kuna barakee Maxamed iyo ehelka Maxamed sidii aad ugu barakaysay Ibraahiim iyo ehelka Ibraahiim. Adigu waxaad tahay mid la mahadiyo oo sharaf badan.

Salaad joogto ah oo waaraysa weligeed, tiro ahaan inta ay ku xuseen kuwa ku xusa iyo inta ay ka halmaameen xuskaaga kuwa halmaamay.

## Ku soo dhawoow ardayga cilmiga

Waxaa laga soo weriyey Safwaan bin Cassaal radiyallaahu canhu inuu yiri:

**"أتيتُ رسولَ اللهِ ﷺ وهو مُتَّكِئٌ في المسجدِ على بُرْدٍ لهُ أحمرَ فقلتُ لهُ يا رسولَ اللهِ إني جئتُ أطلبُ العِلْمَ فقال : مرحبًا بطالبِ العِلْمِ إنَّ طالبَ العِلْمِ لتحُفُّهُ الملائكةُ وتَظُلُّهُ بأجنحتِها ثم يركبُ بعضُهم بعضًا حتى يبلغوا السماءَ الدنيا من حُبِّهِمْ لما يطلبُ". [صححه الألباني] .**

**"Waxaan u imid Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam isagoo ku tiirsan masjidka dusha maro guduudan oo uu lahaa. Waxaan ku iri: Rasuulkii Allaahow, waxaan u imid inaan raadsado cilmi. Markaasuu yiri: 'Ku soo dhawoow ardayga cilmiga. Ardayga cilmiga malaa'igtu way hareeraysaa, baalashoodana way ku hadheeyaan, dabadeed qaarba qaar bay fuulaan ilaa ay ka gaaraan samada adduunka, sababta jacaylkooda ay u qabaan waxa uu raadinayo." [wuxuu saxiixiyey Al-Albaani].**

## Niyooyinka barashada Shamaa'ilka Nabiga sallallaahu calayhi wasallam

Cusboonaysii niyadaada oo noolee dareennadan qalbigaaga inta aad akhrinayso kitaabkan, maxaa yeelay niyada muslimka ayaa ka gaarta camalkiisa.

1. Akhri kitaabkan si aan u garto Nabiga naxariista, una cusboonaysiiyo xiisahayga iyo jacaylkayga Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam, si aan u helo jacaylkiisa iyo wehelnimadiisa janno saqafkeedu yahay Carshiga Ar-Raxmaan.
2. Waxaa laga yaabaa in Allaah i arsaaqo oo iga caawiyo wanaajinta raacitaanka iyo ku dayashada gacaliyaha la doortay sallallaahu calayhi wasallam.
3. Anigoo niyaysan raadinta cilmi iyo barashada shareecada iyo sunnada.
4. Si aan uga farxiyo Nabiga sallallaahu calayhi wasallam oo aan u qaboojiyo indhihiisa anigoo dalbanaya aqoontiisa iyo raacitaanka sunnadiisa.
5. Waxaa laga yaabaa in Allaah igu sharfo inaan ku arko riyo bishaaro leh isagoo iga raalli ah, i bishaaraynaya, i qalbi qaboojinaya, i sugaya oo wajigayga ku dhoolla-caddaynaya.
6. Waxaa laga yaabaa in Allaah ii isticmaalo kor u qaadidda xuska Maxamed sallallaahu calayhi wasallam iyo soo nooleynta sunnadiisa ummaddan dhexdeeda.
7. Waxaa laga yaabaa in Allaah ii furo cilmi ahaan iyo camal ahaanba sunnada iyo bariddeeda muslimiinta.
8. Anigoo niyaysan inaan barto, faafiyo oo gaarsiiyo sunnada Rasuulka sallallaahu calayhi wasallam dhinaca dacwada.
9. Anigoo niyaysan inaan noqdo qof sunnada leh.
10. Anigoo niyaysan u gargaaridda diinta Islaamka iyo difaacidda Allaah iyo Rasuulkiisa.
11. In aqoontayda Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam ay noqoto meherka Firdowsa sare, u dhowaanshaha Allaah, iyo derisnimada Rasuulkiisa sallallaahu calayhi wasallam.
12. Waxaa laga yaabaa in Allaah carrabkayga u fasaxo badinta salaadda iyo salaanta Rasuulka sallallaahu calayhi wasallam.

## 1. Qaar ka mid ah waxyaabihii laga wariyey abuurkii Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam

**1. "عَنْ أَنَسِ بْنِ مَالِكٍ رضـي الله عنه، قال : كَانَ رَسُـولُ الله ﷺ ، لَيْسَ بِالطَّوِيلِ الْبَائِنِ ، وَلاَ بِالْقَصِـيرِ ، وَلاَ بِالأَبْيَضِ الأَمْهَقِ ، وَلاَ بِالآدَمِ، وَلاَ بِالْجَعْدِ الْقَطَطِ ، وَلاَ بِالسَّبْطِ ، بَعَثَهُ اللَّهُ تَعَالَى عَلَى رَأْسِ أَرْبَعِينَ سَنَةً ، فَأَقَامَ بِمَكَّةَ عَشْرَ سِنِينَ ، وَبِالْمَدِينَةِ عَشْرَ سِنِينَ ، وَتَوَفَّاهُ اللَّهُ تَعَالَى عَلَى رَأْسِ سِتِّينَ سَنَةً ، وَلَيْسَ فِي رَأْسِهِ وَلِحْيَتِهِ عِشْرُونَ شَعَرَةً بَيْضَاءَ ﷺ".**
**[أخرجه البخاري ومسلم].**

**1. "Laga soo weriyey Anas bin Maalik radiyallaahu canhu, wuxuu yiri: Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam ma ahayn mid aad u dheer oo dheeraantiisu muuqato, mana ahayn mid gaaban, mana ahayn mid aad u caddaan badan, mana ahayn mid aad u madow, mana ahayn mid timihiisu aad u qalloocan yihiin, mana ahayn mid timihiisu aad u toosan yihiin. Allaah tabaaraka wa tacaalaa wuxuu soo diray isaga isagoo jira afartan sano. Wuxuu Makka joogay toban sano, Madiinana toban sano. Allaah tabaaraka wa tacaalaa wuxuu oofsaday isaga isagoo jira lixdan sano, mana aysan ku jirin madaxiisa iyo garkiisa labaatan timo oo caddaan ah sallallaahu calayhi wasallam." [waxaa soo saaray Al-Bukhaari iyo Muslim].**

- Aad u caddaan badan: caddaan aad u daran.

- Aad u madow: madow aad u daran.

- Timo aad u qalloocan: timo qalloocan sida timaha dadka Xabashida.

- Timo aad u toosan: timo si fudud u daadsan.

Tani waa tilmaanta sayidkeenna Maxamed sallallaahu calayhi wasallam ee uu ku tilmaamay saxaabiga Anas bin Maalik oo ahaa adeegihii Rasuulka sallallaahu calayhi wasallam, kana mid ahaa saxaabadii ugu dhawaa isaga, maadaama uu si joogto ah ugu adeegayey.

Rasuulka sallallaahu calayhi wasallam ma ahayn mid aad u caddaan badan mana ahayn mid aad u madow, balse wuxuu ahaa dhexdhexaad labadaas u dhexeeya. Caddaankiisana waxaa ku jiray casaanyo. Timihiisuna waxay ahaayeen kuwo u dhexeeya qalloocnaan iyo toosnaan.

**2. "عن الْبَرَاءِ بْنِ عَازِبٍ رضِــــي الله عنه ، قال : كَانَ رَسُـــولُ اللهِ ﷺ ، رَجُلا مَرْبُوعًا ، بَعِيدَ مَا بَيْنَ الْمَنْكِبَيْنِ ، عَظِيمَ الْجُمَّةِ إِلَى شَحْمَةِ أُذُنَيْهِ ، عَلَيْهِ حُلَّةٌ حَمْرَاءُ ، مَا رَأَيْتُ شَيْئًا قَطُّ أَحْسَنَ مِنْهُ". [أخرجه مسلم].**

**2. "Laga soo weriyey Al-Baraa' bin Caazib radiyallaahu canhu, wuxuu yiri: Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam wuxuu ahaa nin dherer dhexdhexaad ah, garbaha kala fog, leh timo badan oo dhaadheer oo gaaraya jilicsanaanta dhegihiisa, wuxuuna xirnaa dhar labo qaybood ah oo casaan ah. Weligay ma arag wax isaga ka qurux badan." [waxaa soo saaray Muslim].**

- Dherer dhexdhexaad ah: dhexdhexaad ahaan u taagan.

- Garbaha: qaybta sare ee dhabarka, taasoo muujinaysa ballaarnimada laabta.

- Timo badan oo dhaadheer: timihiisu waxay gaarayeen garbaha ama garbaha dushooda.

- **Faa’iido:**

(Waxaa jira tilmaamo kale oo ku saabsan dhererka timihiisa sallallaahu calayhi wasallam), kuwaas oo ah:

- Timo gaaraya garbaha: timaha gaaraya garbaha oo daboolaya marka ay dheeraadaan, waana ka dheer yihiin timaha dhaadheer.
- Timo dhexdhexaad ah: timaha gaaraya jilicsanaanta dhegaha (bartamaha dhegaha).

Kuwaas ayaa ah tilmaamaha laga wariyey dhererka timaha Rasuulka sallallaahu calayhi wasallam waqtiyo iyo xaalado kala duwan.

Kala duwanaanshaha tilmaanta dhererka timaha wuxuu ku xirnaa waqtiga ay saxaabadu arkeen Rasuulka sallallaahu calayhi wasallam.

- Dhar labo qaybood ah oo casaan ah: dadka Carabta dhexdooda, dhar labo qaybood ah waa maro daboolaysa korka iyo hooseba. Isku darka go’a (qaybta sare) iyo marada dhexda lagu xirto (qaybta hoose) ayaa loo yaqaan dhar labo qaybood ah. Dharka Rasuulka sallallaahu calayhi wasallam wuxuu lahaa xarriijimo madow mana ahayn casaan saafi ah, sababtoo ah ragga waxaa laga reebay xirashada casaan saafi ah.

**3 . "عَنِ الْبَرَاءِ بْنِ عَازِبٍ ، قَالَ : مَا رَأَيْتُ مِنْ ذِي لِمَّةٍ فِي حُلَّةٍ حَمْرَاءَ أَحْسَنَ مِنْ رَسُولِ اللهِ ﷺ ، لَهُ شَعَرٌ يَضْرِبُ مَنْكِبَيْهِ ، بَعِيدُ مَا بَيْنَ الْمَنْكِبَيْنِ ، لَمْ يَكُنْ بِالْقَصِيرِ ، وَلا بِالطَّوِيلِ". [أخرجه مسلم]**

**3. “Laga soo weriyey Al-Baraa’ bin Caazib, wuxuu yiri: Ma arag qof leh timo gaaraya garbaha oo xirnaa dhar labo qaybood ah oo casaan ah kana qurux badan Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam. Wuxuu lahaa timo garaacaya garbihiisa, garbaha kala fog, mana ahayn mid gaaban mana ahayn mid dheer.” [waxaa soo saaray Muslim].**

Halkan Al-Baraa’ bin Caazib radiyallaahu canhu markii uu arkay, timihiisu waxay ahaayeen timo gaaraya garbaha, taasoo ka dhigan in timaha Rasuulka sallallaahu calayhi wasallam ay gaarayeen garbihiisa oo daboolayeen.

Al-Baraa’ radiyallaahu canhu wuxuu tilmaantan ku caddeeyey quruxda Nabigeenna Maxamed sallallaahu calayhi wasallam iyo wanaagga abuurkiisa; timihiisu waxay gaarayeen garbihiisa iyo dhabarka sare, wuxuuna sallallaahu calayhi wasallam ahaa nin garbo ballaaran leh oo dherer dhexdhexaad ah.

- **Faa'iido:**

Tilmaanta dhererka timaha Rasuulka sallallaahu calayhi wasallam way kala duwanaan jirtay iyadoo ku xiran xaaladaha iyo waqtiyada ay saxaabadu radiyallaahu canhum ku arkeen.

**4. "عَنْ عَلِيِّ بْنِ أَبِي طَالِبٍ رضي الله عنه، قَالَ : لَمْ يَكُنِ النَّبِيُّ ﷺ بِالطَّوِيلِ، وَلا بِالْقَصِيرِ ، شَثْنُ الْكَفَّيْنِ وَالْقَدَمَيْنِ، ضَخْمُ الرَّأْسِ، ضَخْمُ الْكَرَادِيسِ، طَوِيلُ الْمَسْرُبَةِ ،إِذَا مَشَى تَكَفَّأَ تَكَفُّؤًا ، كَأَنَّمَا يَنْحَطُّ مِنْ صَبَبٍ ، لَمْ أَرَ قَبْلَهُ ، وَلا بَعْدَهُ مِثْلَهُ ، ﷺ".[أخرجه أحمد والترمذي].**

**4. "Laga soo weriyey Cali bin Abii Daalib radiyallaahu canhu, wuxuu yiri: Nabiga sallallaahu calayhi wasallam ma ahayn mid dheer mana ahayn mid gaaban, gacmo iyo cago adag leh, madax weyn, kala-goysyo waaweyn, leh xarig timo dheer oo laabta ah. Markuu socdo wuxuu u socon jiray isagoo hore u janjeera, sidii qof meel sare ka soo degaya. Ma arag isaga ka hor iyo isaga ka dib mid la mid ah sallallaahu calayhi wasallam." [waxaa soo saaray Axmed iyo At-Tirmidi].**

- Gacmo iyo cago adag: gacmo iyo cago adag, taasina waa sifo lagu ammaano ragga.

- Madax weyn: madax weyn balse xubnihiisu iswaafaqsan yihiin.

- Kala-goysyo waaweyn: xubno waaweyn oo isku dheellitiran.

- Xarig timo dheer oo laabta ah: waa xarig timo ah oo ka soo baxa laabta ilaa xuddunta.

- Hore u janjeera: dhinaca hore ayuu u janjeeri jiray.

- Sida qof meel sare ka soo degaya: wuxuu sallallaahu calayhi wasallam u socon jiray si degdeg ah isagoo jirkiisu hore u janjeero.

Halkan Cali bin Abii Daalib wuxuu ku tilmaamay:

"Ma arag isaga ka hor iyo isaga ka dib mid la mid ah." Qof kasta oo arkay Rasuulka Allaah Maxamed sallallaahu calayhi wasallam wuxuu la yaabay quruxda abuurkiisa iyo akhlaaqdiisa, sallallaahu calayhi wasallam.

**5. "عن جَابِرَ بْنَ سَمُرَةَ رَضِيَ الله عَنْهَ، قال : كَانَ رَسُولُ اللهِ ﷺ ضَلِيعَ الْفَمِ، أَشْكَلَ الْعَيْنِ، مَنْهُوسَ الْعَقِبِ. قَالَ شُعْبَةُ : قُلْتُ لِسِمَاكٍ: مَا ضَلِيعُ الْفَمِ ؟ قَالَ :عَظِيمُ الْفَمِ. قُلْتُ : مَا أَشْكَلُ الْعَيْنِ ؟قَالَ : طَوِيلُ شِقِّ الْعَيْنِ. قُلْتُ : مَا مَنْهُوسُ الْعَقِبِ ؟ قَالَ: قَلِيلُ لَحْمِ الْعَقِبِ".[أخرجه مسلم].**

**5. "Laga soo weriyey Jaabir bin Samura radiyallaahu canhu, wuxuu yiri: Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam wuxuu lahaa af weyn, indho dheer oo qurux badan, cirib**

**khafiif ah. Shucbah wuxuu yiri: waxaan ku iri Simaak: maxaa loola jeedaa af weyn? Wuxuu yiri: af ballaaran. Waxaan iri: maxaa loola jeedaa indho dheer oo qurux badan? Wuxuu yiri: indho leh jeex dheer. Waxaan iri: maxaa loola jeedaa cirib khafiif ah? Wuxuu yiri: cirib hilibkeedu yar yahay." [waxaa soo saaray Muslim].**

Rasuulka sallallaahu calayhi wasallam wuxuu lahaa af weyn, indho leh jeex dheer iyo baalal indhood oo dhaadheer, kuwaas oo ka mid ahaa astaamaha quruxda. Ciribtiisuna hilib badan ma lahayn (ciribtu waa lafta dambe ee cagta).

**6. "عنْ جَابِرِ بْنِ سَمُرَةَ رَضِيَ الله عَنْهَ، قَالَ : رَأَيْتُ رَسُولَ اللهِ ﷺ ، فِي لَيْلَةٍ إِضْحِيَانٍ ، وَعَلَيْهِ حُلَّةٌ حَمْرَاءُ ، فَجَعَلْتُ أَنْظُرُ إِلَيْهِ وَإِلَى الْقَمَرِ ، فَلَهُوَ عِنْدِي أَحْسَنُ مِنَ الْقَمَرِ".[أخرجه الترمذي].**

**6. "Laga soo weriyey Jaabir bin Samura radiyallaahu canhu, wuxuu yiri: Waxaan arkay Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam habeen dayaxu buuxo, isagoo xirnaa dhar labo qaybood ah oo casaan ah. Mar ayaan isaga eegayey marna dayaxa, aniguse wuxuu ila ahaa isaga inuu ka qurux badan yahay dayaxa." [waxaa soo saaray At-Tirmidi].**

- Habeen dayaxu buuxo: habeen iftiin badan leh oo dayaxu buuxo.

Allaah ha kuu barakeeyo Rasuulkii Allaahow, sidee u qurux badan tahay tilmaantaadu. Marka aad aragtaan dayaxa oo buuxa, xusuusta tilmaanta Nabigiinna iyo quruxdiisa sallallaahu calayhi wasallam. Kani waa Jaabir bin Samura oo leh: mar kasta oo uu eegay isaga iyo dayaxa, wuxuu arkayey inuu isaga ka qurux badan yahay dayaxa sallallaahu calayhi wasallam.

**7. "سَأَلَ رَجُلٌ الْبَرَاءَ بْنَ عَازِبٍ رَضِيَ الله عَنْهَ : أَكَانَ وَجْهُ رَسُولِ اللهِ ﷺ مِثْلَ السَّيْفِ ؟ قَالَ : لا ، بَلْ مِثْلَ الْقَمَرِ" [ أخرجه البخاري.]**

**7. "Nin ayaa weydiiyey Al-Baraa' bin Caazib radiyallaahu canhu: wajiga Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam ma wuxuu la mid ahaa seefta? Wuxuu yiri: maya, balse wuxuu la mid ahaa dayaxa." [waxaa soo saaray Al-Bukhaari].**

Ninkii markii uu weydiiyey tilmaanta Nabiga sallallaahu calayhi wasallam inuu wajigiisu la mid ahaa seefta, wuxuu ula jeeday dherer iyo dhalaal, taasina waxay ka mid tahay hadallada Carabta. Al-Baraa' bin Caazib radiyallaahu canhu wuxuu ku tilmaamay kii ugu kheyrka badnaa ee cagihiisu dhulka mareen in wajigiisu uu la mid ahaa dayaxa, sallallaahu calayhi wasallam.

**8 . "عنْ جَابِرِ بْنِ عَبْدِ اللهِ رَضِيَ الله عَنْهَ، أَنَّ رَسُولَ اللهِ ﷺ ، قَالَ: عُرِضَ عَلَيَّ الأَنْبِيَاءُ ، فَإِذَا مُوسَى عَلَيْهِ السَّلامُ، ضَرْبٌ مِنَ الرِّجَالِ ، كَأَنَّهُ مِنْ رِجَالِ شَنُوءَةَ ، وَرَأَيْتُ عِيسَى بْنَ مَرْيَمَ عَلَيْهِ السَّلامُ ، فَإِذَا أَقْرَبُ مَنْ رَأَيْتُ بِهِ شَبَهًا عُرْوَةُ بْنُ**

**مَسْعُودٍ ، وَرَأَيْتُ إِبْرَاهِيمَ عَلَيْهِ السَّلام ،فَإِذَا أَقْرَبُ مَنْ رَأَيْتُ بِهِ شَبَهًا صَاحِبُكُمْ ، -يَعْنِي : نَفْسَهُ-، وَرَأَيْتُ جِبْرِيلَ عَلَيْهِ السَّلامُ ، فَإِذَا أَقْرَبُ مَنْ رَأَيْتُ بِهِ شَبَهًا دِحْيَةُ". [أخرجه مسلم].**

**8. "Laga soo weriyey Jaabir bin Cabdillaah radiyallaahu canhu, in Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam yiri: Anbiyada ayaa la i tusay. Muuse calayhis salaam wuxuu ahaa nin jirkiisu dhuuban yahay, sidii ragga qabiilka Shanuu'ah. Waxaan arkay Ciise bin Maryam calayhis salaam, qofka ugu eg ee aan arkayna wuxuu ahaa Curwa bin Mascuud. Waxaan arkay Ibraahiim calayhis salaam, qofka ugu eg ee aan arkayna wuxuu ahaa saaxiibkiinna - isagoo ula jeeda naftiisa. Waxaan arkay Jibriil calayhis salaam, qofka ugu eg ee aan arkayna wuxuu ahaa Dixyah." [waxaa soo saaray Muslim].**

- Nin jirkiisu dhuuban yahay: jir fudud oo aan buurnayn.

- Shanuu'ah: magaca qabiil.

- **Faa'iido:**

Curwa bin Mascuud wuxuu ahaa saxaabi weyn oo u baxay inuu ehelkiisa ugu yeero Islaamka, markaas ayay fallaadh ku dileen sannadkii sagaalaad ee hijrada.

Dixyah Al-Kalbi wuxuu ahaa saxaabi weyn oo qurux badan, Jibriil calayhis salaamna marar badan ayuu Nabiga sallallaahu calayhi wasallam ugu iman jiray isagoo qaabkiisa leh.

**9. "عن سعيد الجريري قال سمعت أبا الطفيل يقول: رَأَيْتُ النَّبِيَّ ﷺ وَمَا بَقِيَ عَلَى وَجْهِ الأَرْضِ أَحَدٌ رَآهُ غَيْرِي ، قُلْتُ : صِفْهُ لِي ، قَالَ : كَانَ أَبْيَضَ، مَلِيحًا، مُقَصَّدًا". [أخرجه مسلم ]**

**9. "Saciid Al-Jurayri wuxuu yiri: waxaan maqlay Abuu At-Tufayl oo leh: Waxaan arkay Nabiga sallallaahu calayhi wasallam iyadoo aanu dhulka korkiisa joogin qof isaga arkay oo aan aniga ahayn. Waxaan iri: ii tilmaam. Wuxuu yiri: wuxuu ahaa caddaan, qurux badan, dhexdhexaad ku ah dhammaan xubnihiisa." [waxaa soo saaray Muslim].**

- Qurux badan: muuqaal wanaagsan.

- Dhexdhexaad ku ah dhammaan xubnihiisa: xubnihiisu dhammaantood waa isku dheellitiran yihiin.

- Abuu At-Tufayl: wuxuu ahaa saxaabigii ugu dambeeyey ee geeriyooda.

## Iftiin

**Kani waa qayb ka mid ah tilmaanta Nabigiinna. Qeexid uu bixiyey Abuu Hurayrah radiyallaahu canhu ayuu ku yiri: “Waxay u ekaanaysay sidii qorrax wajigiisa ka socota.” Maqaarkiisu wuxuu ahaa caddaan leh casaanyo. Jirkiisuna wuxuu ahaa dherer dhexdhexaad ah, garbo ballaaran leh, xubno waaweyn leh, madax weyn leh, jirkiisuna si wanaagsan ayuu isu waafaqsanaa, sallallaahu calayhi wasallam.**

**Wuxuu lahaa weji u ifaya sida dayaxa habeenka uu buuxo. Waxaa dusha ka muuqday nuur. Indhihiisu waxay ahaayeen kuwo kuul leh isaga oo aan kuul marsanayn. Timaha baalasha indhihiisu way dheeraayeen. Wuxuu lahaa timo gaaraya bartamaha dhegihiisa, garbihiisana daboolaya marka uu dheereeyo, sallallaahu calayhi wasallam. Indhihiisu aad bay u madowayeen, caddaankooduna aad buu u caddaa, taasina waxay ka mid ahayd astaamaha quruxda ee Carabta.**

**Wuxuu u socon jiray isagoo hore u janjeera, socod degdeg ah oo leh himilo iyo go’aan adag, tallaabadiisuna kalsooni bay lahayd, sallallaahu calayhi wasallam.**

Nabigeenna sallallaahu calayhi wasallam wuxuu lahaa sunno qalloocan oo aan is gaarin. Ilkihiisana waxaa u dhexeeyey kala-bax yar, taas oo ka mid ahayd quruxda. Qof kasta oo arka wuxuu la yaabi jiray quruxda abuurkiisa iyo wanaagga akhlaaqdiisa, sallallaahu calayhi wasallam.

Haddii indhahaygu ku dhacaan wajiga Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam isagoo faraxsan oo rayraysan, taas ayaa iiga kheyr badan adduunka iyo waxa ku jira oo dhan. Wuxuu sallallaahu calayhi wasallam yiri isagoo u hiloobaya inuu na arko:

**"وَدَدْتُ أَنِّي لَقِيتُ إِخْواني.. فَقالَ أَصْحابه ﷺ أَوَلَيْس نحنُ إِخْوانُك؟ قال ﷺ : أَنْتُم أَصْحابي ولَكن إِخْواني الّذِين آمَنُوا بي وَلَم يَرُونِي". [أخرجه أحمد وصححه الألباني].**

**“Waxaan jeclaan lahaa inaan la kulmo walaalahay.” Saxaabadiisu sallallaahu calayhi wasallam waxay yiraahdeen: “Miyaannaan ahayn walaalahaa?” Wuxuu sallallaahu calayhi wasallam yiri: “Idinku waxaad tihiin saxaabadayda, laakiin walaalahay waa kuwa i rumaystay iyaga oo aan i arag.” [waxaa soo saaray Axmed, wuxuuna saxiixiyey Al-Albaani.]**

******************

# 2. Qaar ka mid ah waxyaabihii laga wariyey shaabadda nabinimada

10. "عن السَّائب بْنِ يَزِيدَ رَضِيَ الله عَنْهُ قال : ذَهَبَتْ بِي خَالَتِي إِلَى النَّبِيِّ ﷺ، فَقَالَتْ: يَا رَسُولَ الله ، إِنَّ ابْنَ أُخْتِي وَجِع فَمَسَحَ رَأْسِي وَدَعَا لِي بِالْبَرَكَةِ ، وَتَوَضَّأَ ، فَشَرِبْتُ مِنْ وَضُوئِهِ ، وَقُمْتُ خَلْفَ ظَهْرِهِ ، فَنَظَرْتُ إِلَى الْخَاتَمِ بَيْنَ كَتِفَيْهِ ، فَإِذَا هُوَ مِثْلُ زِرِّ الْحَجَلَةِ". [أخرجه البخاري ومسلم].

**10. "Laga soo weriyey As-Saa'ib bin Yaziid radiyallaahu canhu, wuxuu yiri: Eeddaday ayaa ii kaxaysay Nabiga sallallaahu calayhi wasallam, markaasay tiri: Rasuulkii Allaahow, wiilka walaashay wuu xanuunsan yahay. Markaas ayuu madaxayga masaxay, wuxuuna ii baryey barako. Wuu waysaystay, aniguna waxaan ka cabbay biyihii waysaysigiisa. Kadib waxaan istaagay dhabarkiisa gadaashiisa, markaas ayaan eegay shaabadda u dhexeysa garbihiisa, waxayna ahayd sida ukunta qoolleyda." [waxaa soo saaray Al-Bukhaari iyo Muslim].**

- Ukunta qoolleyda: cad hilib ah oo soo baxay oo le'eg ukunta qoolleyda, kuna yaallay dhabarkiisa sallallaahu calayhi wasallam. Tani waxay ahayd mid ka mid ah tilmaamaha shaabadda nabinimada, waana calaamad ka mid ah calaamadaha nabinimadiisa sallallaahu calayhi wasallam.

11. "عَنْ جَابِرِ بْنِ سَمُرَةَ رَضِيَ الله عَنْهُ قَالَ: رَأَيْتُ الْخَاتَمَ بَيْنَ كَتِفَيْ رَسُولِ اللهِ ﷺ، غُدَّةً حَمْرَاءَ، مِثْلَ بَيْضَةِ الْحَمَامَةِ". [أخرجه مسلم].

**11. "Laga soo weriyey Jaabir bin Samura radiyallaahu canhu, wuxuu yiri: Waxaan arkay shaabadda u dhexeysa garbaha Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam, waxay ahayd cad hilib ah oo casaan ah, sida ukunta qoolleyda." [waxaa soo saaray Muslim].**

- Cad hilib ah oo casaan ah: cad hilib ah oo soo baxay, kuna dhow garabka bidix.

12. "عنْ عَاصِمِ بْنِ عُمَرَ بْنِ قَتَادَةَ عَنْ جَدَّتِهِ رُمَيْثَةَ رَضِيَ الله عَنْهَا قَالَتْ: سَمِعْتُ رَسُولَ اللهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ -وَلَوْ أَشَاءُ أَنْ أُقَبِّلَ الْخَاتَمَ الَّذِي بَيْنَ كَتِفَيْهِ مِنْ قُرْبِهِ لَفَعَلْتُ- يَقُولُ لِسَعْدِ بْنِ مُعَاذٍ رضي الله عنه يَوْمَ مَاتَ: (اهْتَزَّ لَهُ عَرْشُ الرَّحْمَنِ)".[أخرجه أحمد والطبراني في الكبير].

**12. "Laga soo weriyey Caasim bin Cumar bin Qataadah, isaga oo ka werinaya ayeeyadiis Rumaythah radiyallaahu canhaa, waxay tiri: Waxaan maqlay Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam - haddaan doonayo inaan dhunkado shaabadda u dhexeysa garbihiisa dhowaan darteed waan samayn lahaa - isagoo ku leh Sacad bin Mucaad radiyallaahu canhu maalintii uu geeriyooday: 'Carshiga Ar-Raxmaan ayaa u ruxmay isaga.'" [waxaa soo saaray Axmed iyo Ad-Tabaraani Al-Kabiir].**

13. "عن أَبِي زَيْدٍ عَمْرُو بْنُ أَخْطَبَ الأَنْصَارِيُّ رضي الله عنه قَالَ: قَالَ لِي رَسُولُ اللهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ: يَا أَبَا زَيْدٍ! ادْنُ مِنِّي فَامْسَحْ ظَهْرِي، فَمَسَحْتُ ظَهْرَهُ، فَوَقَعَتْ أَصَابِعِي عَلَى الْخَاتَمِ قُلْتُ: وَمَا الْخَاتَمُ؟ قَالَ: شَعَرَاتٌ مُجْتَمِعَاتٌ" [أخرجه أحمد وابن حبان والحاكم].

**13. "Laga soo weriyey Abuu Zayd Camru bin Akhtab Al-Ansaari radiyallaahu canhu, wuxuu yiri: Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam wuxuu igu yiri: 'Abuu Zaydow, ii soo dhowaaw oo dhabarkayga masax.' Markaas ayaan dhabarkiisa masaxay, farahaygiina waxay ku dhaceen shaabadda. Waxaan iri: Waa maxay shaabaddu? Wuxuu yiri: 'Timo yar yar oo isu urursan.'" [waxaa soo saaray Axmed, Ibnu Xibbaan iyo Al-Xaakim].**

Tani waa tilmaan kale oo ku saabsan shaabadda nabinimada.

**14. "عَنْ أَبِي نَضْرَةَ الْعَوَقِيِّ قَالَ: سَأَلْتُ أَبَا سَعِيدٍ الْخُدْرِيَّ رضي الله عنه عَنْ خَاتَمِ رَسُولِ اللهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ - يَعْنِي خَاتَمَ النُّبُوَّةِ- فَقَالَ: كَانَ فِي ظَهْرِهِ بِضْعَةٌ نَاشِزَةٌ". [أخرجه أحمد.]**

**14. "Laga soo weriyey Abuu Nadrah Al-Cawqi, wuxuu yiri: Waxaan weydiiyey Abuu Saciid Al-Khudri radiyallaahu canhu shaabadda Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam - isagoo ula jeeda shaabadda nabinimada - markaas ayuu yiri: Waxay dhabarkiisa ku ahayd cad hilib ah oo soo baxay." [waxaa soo saaray Axmed].**

- Cad hilib ah oo soo baxay: cad hilib ah oo kor uga soo baxsan jirka.

**15. "عنْ عَبْدِ اللهِ بْنِ سَرْجِسَ رضي الله عنه قَالَ: أَتَيْتُ رَسُولَ اللهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ وَهُوَ فِي أُنَاسٍ مِنْ أَصْحَابِه، فَدُرْتُ هَكَذَا مِنْ خَلْفِه، فَعَرَفَ الَّذِي أُرِيدُ، فَأَلْقَى الرِّدَاءَ عَنْ ظَهْرِهِ، فَرَأَيْتُ مَوْضِعَ الْخَاتَمِ عَلَى كَتِفَيْهِ مِثْلَ الْجُمْعِ حَوْلَهَا خِيلَانٌ كَأَنَّهَا ثَآلِيلُ، فَرَجَعْتُ حَتَّى اسْتَقْبَلْتُهُ، فَقُلْتُ: غَفَرَ اللَّهُ لَكَ يَا رَسُولَ اللهِ، فَقَالَ: وَلَكَ، فَقَالَ الْقَوْمُ: أَسْتَغْفَرَ لَكَ رَسُولُ اللهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ؟ فَقَالَ: نَعَمْ، وَلَكُمْ، ثُمَّ تَلاَ هَذِهِ الآيَةَ: وَاسْتَغْفِرْ لِذَنْبِكَ وَلِلْمُؤْمِنِينَ وَالْمُؤْمِنَاتِ". [أخرجه مسلم].**

**15. "Laga soo weriyey Cabdillaah bin Sarjis radiyallaahu canhu, wuxuu yiri: Waxaan u imid Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam isagoo la fadhiya qaar ka mid ah saxaabadiisa. Markaas ayaan gadaashiisa uga wareegay sidan. Wuxuu gartay waxa aan doonayo, markaas ayuu go'a dhabarkiisa ka qaaday. Waxaan arkay meesha shaabaddu kaga taallay garbihiisa, waxay ahayd sida cad hilib isu urursan oo hareeraheeda ay ku yaallaan burooyin madow oo u eg finan qallalan. Markaas ayaan dib ugu soo laabtay oo hortiisa fariistay, waxaanan iri: Allaah ha kuu dambi dhaafo Rasuulkii Allaahow. Wuxuu yiri: 'Adigana sidoo kale.' Dadkii ayaa yiri: Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam ma kuu dambi dhaaf baryey? Wuxuu yiri: Haa, idinkana sidoo kale. Kadib wuxuu akhriyey aayaddan: 'Una dambi dhaaf weydiiso dambigaaga iyo mu'miniinta iyo mu'minaatka.'" [waxaa soo saaray Muslim].**

- Burooyin madow: jamacii bar madow, waana dhibic madow oo jirka ka soo baxda.

- Finan qallalan: finan adag oo mararka qaar maqaarka ka soo baxa.

Shaabadda nabinimadu waxay ahayd cad hilib ah oo soo baxay oo u dhexeysa labada garab ee Rasuulka sallallaahu calayhi wasallam, kuna dhow garabka bidix. Waxay le'ekayd ukunta qoolleyda, hareeraheedana waxaa ku wareegsanaa burooyin madow, waxaana dusheeda yiillay timo yar yar oo isu urursan. Waxayna ahayd calaamad ka mid ah calaamadaha nabinimadiisa, sallallaahu calayhi wasallam.

******************

# 3. Qaar ka mid ah waxyaabihii laga wariyey timaha Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam

**16 ."عَنْ أَنَسِ بْنِ مَالِكٍ رضـي الله عنه قَالَ: كَانَ شَـعْرُ رَسُـولِ اللهِ صَـلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَـلَّمَ إِلَى نِصْـفِ أُذُنَيْهِ."[أخرجه مسلم].**

**16. "Laga soo weriyey Anas bin Maalik radiyallaahu canhu, wuxuu yiri: Timaha Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam waxay gaari jireen bartamaha dhegihiisa." [waxaa soo saaray Muslim].**

**17."عَنْ عَائِشَـةَ رضـي الله عنها، قَالَتْ: كُنْتُ أَغْتَسِـلُ أَنَا وَرَسُـولُ اللهِ صَـلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَـلَّمَ مِنْ إِنَاءٍ وَاحِدٍ، وَكَانَ لَهُ شَعْرٌ فَوْقَ الْجُمَّةِ وَدُونَ الْوَفْرَةِ". [أخرجه الترمذي].**

**17. "Laga soo weriyey Caa'isha radiyallaahu canhaa, waxay tiri: Aniga iyo Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam waxaan ka qubaysan jirnay hal weel, wuxuuna lahaa timo ka gaaban timaha dhaadheer kana dheer timaha dhexdhexaadka ah." [waxaa soo saaray At-Tirmidi].**

- Timaha dhaadheer: timaha gaaraya garbaha ama garbaha dushooda.

- Timaha dhexdhexaadka ah: timaha gaaban ee gaaraya dhegaha oo aan dhaafin.

- **Soo nooleynta sunnada:**

Ragga oo timaha dheereeya ilaa ay ka gaaraan dhegaha ama garbaha iyagoo ku dayanaya Rasuulkeenna sallallaahu calayhi wasallam.

**18."عَنِ ابْنِ عَبَّاسٍ رضي الله عنه: أَنَّ رَسُولَ اللهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ كَانَ يُسدِلُ شَعْرَهُ، وَكَانَ الْمُشْرِكُونَ يَفْرُقُونَ رُؤُوسَهُمْ، وَكَانَ أَهْلُ الْكِتَابِ يُسْدِلُونَ رُؤُوسَهُمْ، وَكَانَ يُحِبُّ مُوَافَقَةَ أَهْلِ الْكِتَابِ فِيمَا لَمْ يُؤْمَرْ فِيهِ بِشَيْءٍ، ثُمَّ فَرَقَ رَسُولُ اللهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ رَأْسَهُ". [أخرجه البخاري ومسلم.]**

**18. "Laga soo weriyey Ibnu Cabbaas radiyallaahu canhu: Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam wuxuu daadin jiray timihiisa, mushrikiintuna waxay kala qaybin jireen timahooda. Ahlu Kitaabkuna way daadin jireen timahooda. Wuxuuna jeclaa inuu ku**

**waafaqo Ahlu Kitaabka waxyaabaha aan wax amar ah laga siin. Kadib Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam timihiisa ayuu kala qaybin jiray." [waxaa soo saaray Al-Bukhaari iyo Muslim].**

- Daadin jiray: timaha ayuu madaxa hareerihiisa u sii dayn jiray isaga oo aan laba qaybood u kala bixin.

- Kala qaybin jiray: timaha ayuu laba dhinac u kala saari jiray.

Timihiisu sallallaahu calayhi wasallam ma ahayn kuwo aad u qalloocan sida timaha dadka Xabashida, mana ahayn kuwo aad u toosan, balse waxay ahaayeen dhexdhexaad labadaas u dhexeeya. Dhererka timihiisuna mar wuxuu ahaan jiray timo gaaraya garbaha, mar timo dhaadheer, marna timo dhexdhexaad ah.

Wuxuu kala qaybin jiray timihiisa, wuxuuna Makka yimid isagoo leh afar tidcood, sallallaahu calayhi wasallam.

## Iftiin

**Imaam Maalik bin Anas marka lagu weydiiyo fiqiga wuu hadli jiray oo wax sharxi jiray. Laakiin marka lagu weydiiyo xadiiska Nabiga sallallaahu calayhi wasallam, wuu qubaysan jiray, cadarna wuu marsan jiray, wuxuuna xiran jiray dharkiisa ugu wanaagsan, kadibna ayuu ka warrami jiray xadiiska Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam. Wuxuu sidaas u samayn jiray weynaynta iyo qaddarinta maqaamka Nabiga sallallaahu calayhi wasallam.**

******************

# 4. Qaar ka mid ah waxyaabihii laga wariyey shanlaynta timaha Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam

**19. "عَنْ عَائِشَةَ رضي الله عنها، قَالَتْ: كُنْتُ أُرَجِّلُ رَأْسَ رَسُولِ اللهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ وَأَنَا حَائِضٌ". [أخرجه البخاري ومسلم].**

**19. "Laga soo weriyey Caa'isha radiyallaahu canhaa, waxay tiri: Waxaan shanlayn jiray madaxa Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam aniga oo xaadada qaba." [waxaa soo saaray Al-Bukhaari iyo Muslim].**

- Shanlayn jiray: waxaan hagaajin jiray oo shanlayn jiray timihiisa sallallaahu calayhi wasallam.

20. "عَنْ عَائِشَةَ رضي الله عنها قَالَتْ: إِنْ كَانَ رَسُولُ اللهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ لَيُحِبُّ التَّيَمُّنَ فِي طُهُورِهِ إِذَا تَطَهَّرَ، وَفِي تَرَجُّلِهِ إِذَا تَرَجَّلَ، وَفِي انْتِعَالِهِ إِذَا انْتَعَلَ". [أخرجه مسلم].

**20. "Laga soo weriyey Caa'isha radiyallaahu canhaa, waxay tiri: Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam wuxuu jeclaa inuu ka bilaabo dhinaca midig marka uu is daahirinayo, marka uu timaha shanlaynayo, iyo marka uu kabaha xiranayo." [waxaa soo saaray Muslim].**

- Marka uu timaha shanlaynayo: marka uu timaha hagaajinayo.

- Shanlaynta timaha: waa hagaajinta timaha, saliid marinta iyo jilcintooda.

21."عَنْ عَبْدِ اللهِ بْنِ مُغَفَّلٍ رضي الله عنه، قَالَ: نَهَى رَسُولُ اللهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ عنِ التَّرَجُّلِ إِلاَّ غِبًّا". [أخرجه أحمد وأبو داود والترمذي].

**21. "Laga soo weriyey Cabdillaah bin Mughaffal radiyallaahu canhu, wuxuu yiri: Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam wuxuu reebay shanlaynta joogtada ah, marka laga reebo marba marka ay baahi jirto." [waxaa soo saaray Axmed, Abuu Daawuud iyo At-Tirmidi].**

- Marba marka ay baahi jirto: maalinba maalin ama waqtiba waqti iyadoo loo eegayo baahida.

Rasuulka sallallaahu calayhi wasallam wuxuu dhexdhexaad ka ahaa hagaajinta timihiisa, halka badinta jilcinta iyo isku mashquulinta qurxinta timaha laga reebay reebitaan karaahiyo ah.

Hooyadeenna Caa'isha radiyallaahu canhaa waxay shanlayn jirtay madaxiisa sharafta leh iyada oo xaadada qabta. Nabigeenna sharafta lehna wuxuu jeclaa inuu dhinaca midig ka bilaabo wax kasta.

- **Soo nooleynta sunnada:**

In dhinaca midig laga bilaabo waxyaabaha la sheegay iyo dhammaan camalladeenna, xitaa dharka, cuntada iyo waxyaabaha kale, marka laga reebo gelitaanka musqusha maadaama aysan ahayn meel sharaf leh, iyo in la niyeysto ajarka soo nooleynta sunnadan mar kasta.

******************

## 5. Qaar ka mid ah waxyaabihii laga wariyey cirrada Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam

**22. "عَنْ قَتَادَةَ قَالَ: قُلْتُ لأَنَسِ بْنِ مَالِكٍ رضي الله عنه: هَلْ خَضَبَ رَسُولُ اللهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ؟ قَالَ: لَمْ يَبْلُغْ ذَلِكَ، إِنَّمَا كَانَ شَيْبًا إلى صُدْغَيْهِ وَلَكِنْ أَبُو بَكْرٍ رضي الله عنه، خَضَبَ بِالْحِنَّاءِ وَالْكَتَمِ".[أخرجه أحمد] ، [وأخرجه مسلم وفيه زيادة: كَانَ فِى لِحْيَتِهِ شَعَرَاتٌ بِيضٌ] .**

**22. "Laga soo weriyey Qataadah, wuxuu yiri: Waxaan ku iri Anas bin Maalik radiyallaahu canhu: Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam ma xinneystay? Wuxuu yiri: Taasi ma gaadhin heerkaas. Waxa keliya oo jiray cirro yar oo ku taalay labada dhinac ee madaxiisa, laakiin Abuu Bakar radiyallaahu canhu wuxuu ku xinneysan jiray xinne iyo katam." [waxaa soo saaray Axmed[, ]Muslimna wuxuu soo saaray iyadoo ay ku jirto dheeraad ah: "Garkiisa waxaa ku jiray timo cadcad"].**

- Xinneysasho: beddelidda caddaanka cirrada iyadoo la adeegsanayo xinne, madow ama wax kale.

- Taasi ma gaadhin heerkaas: timihiisa kuma aysan badnayn cirro u baahan xinneysasho, taasoo ka dhigan in timaha caddaanku yaraayeen.

- Labada dhinac ee madaxiisa: meesha u dhexeysa dhegta iyo isha, halkaas ayaana cirrada Rasuulka sallallaahu calayhi wasallam ugu badnayd.

- Xinne: geed loo isticmaalo midabaynta timaha, midabkiisuna u janjeero casaanka.

- Katam: geed loo isticmaalo midabaynta timaha, midabkiisuna u janjeero madowga. Marka la isku daro isaga iyo xinnaha waxaa ka soo baxa midab u dhexeeya casaanka iyo madowga.

**23. "عَنْ أَنَسٍ رضي الله عنه قَالَ: مَا عَدَدْتُ فِي رَأْسِ رَسُولِ اللهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ وَلِحْيَتِهِ إِلاَّ أَرْبَعَ عَشْرَةَ شَعْرَةً بَيْضَاءَ". [أخرجه أحمد].**

**23. "Laga soo weriyey Anas radiyallaahu canhu, wuxuu yiri: Madaxa iyo garka Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam kama aanan tirin wax ka badan afar iyo toban timo oo caddaan ah." [waxaa soo saaray Axmed].**

**24."عَنْ نَافِعٍ عَنْ ابْنِ عُمَرَ قَالَ: إِنَّمَا كَانَ شَيْبُ رَسُولِ اللهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ نَحْوًا مِنْ عِشْرِينَ شَعْرَةً بَيْضَاءَ". [أخرجه أحمد وابنُ ماجه].**

**24. "Laga soo weriyey Naafic, laga soo weriyey Ibnu Cumar, wuxuu yiri: Cirrada Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam waxay ahayd qiyaastii labaatan timo oo caddaan ah." [waxaa soo saaray Axmed iyo Ibnu Maajah].**

Kala duwanaanshaha tirada cirrada ee werinnada ku timid waxay ku xirnayd kala duwanaanshaha waqtiyada ay saxaabadu radiyallaahu canhum ku arkeen Nabiga sallallaahu calayhi wasallam iyo kala duwanaanshaha da'diisa sallallaahu calayhi wasallam.

**25. "عَنِ ابْنِ عَبَّاسٍ رضي الله عنه قَالَ: قَالَ أَبُو بَكْرٍ رضي الله عنه: يَا رَسُولَ اللهِ، قَدْ شِبْتَ، قَالَ: شَيَّبَتْنِي هُودٌ، وَالْوَاقِعَةُ، وَالْمُرْسَلَاتُ، وَعَمَّ يَتَسَاءَلُونَ، وَإِذَا الشَّمْسُ كُوِّرَتْ". [أخرجه الترمذي وابن أبي شيبة].**

**25. "Laga soo weriyey Ibnu Cabbaas radiyallaahu canhu, wuxuu yiri: Abuu Bakar radiyallaahu canhu wuxuu yiri: Rasuulkii Allaahow, waad cirroowday. Wuxuu yiri: 'Huud, Al-Waaqicah, Al-Mursalaat, Camma Yatasaa'aloon iyo Idhash Shamsu Kuwwirat ayaa i cirroyeeyey.'" [waxaa soo saaray At-Tirmidi iyo Ibnu Abii Shaybah].**

- Waad cirroowday: waxaa bilaabmay inay kaa muuqdaan timo caddaan ah.

- **Faa'iido:**

Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam wuxuu xusay suuradahaan sababta oo ah waxa ku jira oo ah xuska argagaxyada ummadihii hore iyo argagaxyada qiyaamaha. Halkan waxaa ku jirta fariin iyo hakad uu Nabigu sallallaahu calayhi wasallam inoogu sheegayo inaan la noolaano Qur'aanka oo aan dareenno macnaha aayadaha.

Akhri suuradahaan uu xusay Rasuulka sallallaahu calayhi wasallam adigoo tadabbur iyo khushuuc leh kuna dayanaya isaga sallallaahu calayhi wasallam. Allaahow naga fududee argagaxyadaan, nooguna naxariiso naxariistaada, naxariis badanayaasha kan ugu naxariista badanow.

**26. "عَنْ أَبِي رِمْثَةَ التَّيْمِيِّ تَيْمِ الرَّبَابِ رضي الله عنه قَالَ: أَتَيْتُ النَّبِيَّ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ وَمَعِي ابْنٌ لِي، قَالَ: فَأُرِيتُهُ، فَقُلْتُ لَمَّا رَأَيْتُهُ: هَذَا نَبِيُّ اللهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ وَعَلَيْهِ ثَوْبَانِ أَخْضَرَانِ، وَلَهُ شَعْرٌ قَدْ عَلَاهُ الشَّيْبُ، وَشَيْبُهُ أَحْمَرُ." [أخرجه أحمد والطبراني والحاكم].**

**26. "Laga soo weriyey Abuu Rimthah At-Taymi radiyallaahu canhu, wuxuu yiri: Waxaan u imid Nabiga sallallaahu calayhi wasallam aniga iyo wiil aan dhalay. Markii aan arkay ayaan iri: Kani waa Nabigii Allaah sallallaahu calayhi wasallam. Wuxuu xirnaa laba dhar oo cagaaran, wuxuuna lahaa timo ay cirro daboolayso, cirradiisuna waxay ahayd casaan." [waxaa soo saaray Axmed, Ad-Tabaraani iyo Al-Xaakim].**

- Cirradiisu waxay ahayd casaan: waxaa lagu xinneeyey xinne.

Ma jiro is khilaaf u dhexeeya xadiiskan iyo xadiiskii hore ee cutubkaan, sababtoo ah xadiiskaas waxaa laga yaabaa in Anas radiyallaahu canhu uusan arkin Nabiga sallallaahu calayhi wasallam isagoo xinneystay waqtigaas. Mid walba wuxuu wariyey xadiiskiisa waqti kala duwan.

- **Faa'iido:**

Xinnuhu faa'iidooyin badan ayuu u leeyahay timaha oo kuma koobna oo keliya midabayntooda, balse sidoo kale waa walax ka hortagta caabuqa iyo fangaska, waxayna nidaamisaa qanjirrada dufanka waxayna xoojisaa timaha.

**27. "قِيلَ لِجَابِرِ بْنِ سَمُرَةَ رضي الله عنه: أَكَانَ فِي رَأْسِ رَسُولِ اللهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ شَيْبٌ؟ قَالَ: لَمْ يَكُنْ فِي رَأْسِ رَسُولِ اللهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ شَيْبٌ إِلاَّ شَعَرَاتٌ فِي مَفْرِقِ رَأْسِهِ، إِذَا ادَّهَنَ وَارَاهُنَّ الدُّهْنُ". [أخرجه أحمد والحاكم].**

**27. "Waxaa lagu yiri Jaabir bin Samurah radiyallaahu canhu: Madaxa Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam ma ku jirtay cirro? Wuxuu yiri: Madaxa Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam kuma jirin cirro aan ahayn timo yar yar oo ku yaallay kala qaybta madaxiisa, marka uu saliid marsadana saliiddu way dabooli jirtay." [waxaa soo saaray Axmed iyo Al-Xaakim].**

- Saliid marsaday: madaxiisa ayuu cadar ama saliid ugu marin jiray, sallallaahu calayhi wasallam.

- Saliid: wax kasta oo la isku dufanayo ha ahaato kuwo udgoon leh ama aan lahayn.

- Saliiddu way dabooli jirtay: waxay qarin jirtay oo asturi jirtay timaha caddaanka ah. Marka uu sallallaahu calayhi wasallam cadar marsado cirradiisu ma muuqan jirin, wuxuuna badin jiray saliid marinta timihiisa.

- **Faa'iido:**

Cilmigu wuxuu caddeeyey faa'iidooyin badan oo ku jira duugista maqaarka madaxa lagu duugo saliidaha dabiiciga ah, waxaana ka mid ah kicinta socodka dhiigga ee maqaarka madaxa.

- **Soo nooleynta sunnada:**

Waxaan madaxa ku marinaynaa cadar ama saliid, annagoo dareemayna inaan ku dayanayno Nabiga sallallaahu calayhi wasallam.

Haddii aan timaha saarno cadar, ma illoobi doonno tilmaantan Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam, waxaana heli doonnaa ajarka raacidda sunnada. Waxaan ku dhaqmaynaa sunnadaan, carruurteenana waan baraynaa.

## Iftiin

**Waxaa lagu yiri mid ka mid ah culimada xadiiska: Maxaa wejiyadiinnu u ifayaan oo u nuurayaan, culimada atharka ahow? Wuxuu yiri: Badnaanta salaaddeenna Nabiga sallallaahu calayhi wasallam darteed. Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam ayaa yiri… Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam ayaa sameeyey… Waxaa laga soo weriyey Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam…**

**Allaahow ku sallii Maxamed iyo ehelka Maxamed sidii aad ugu salliday Ibraahiim iyo ehelka Ibraahiim, kuna barakee Maxamed iyo ehelka Maxamed sidii aad ugu barakaysay Ibraahiim iyo ehelka Ibraahiim. Adigu waxaad tahay mid la mahadiyo oo sharaf badan.**

******************

# 6. Qaar ka mid ah waxyaabihii laga wariyey xinneysashada Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam

**28. "عَنْ أَنَسٍ رضي الله عنه قَالَ: رَأَيْتُ شَعْرَ رَسُولِ اللهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ مَخْضُوبًا". [تفرد به الترمذي].**

**28. “Laga soo weriyey Anas radiyallaahu canhu, wuxuu yiri: Waxaan arkay timaha Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam oo xinneysan.” [At-Tirmidi kaligiis ayaa wariyey].**

- **Faa’iido:**

Culimadu waxay sheegeen in Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam uu xinneystay timihiisa, balse xinneysashadiisu ay yaraayeen, sababtoo ah timaha caddaanka ah ee timihiisa iyo garkiisa ku jiray way yaraayeen.

Badanaa Nabiga sallallaahu calayhi wasallam wuxuu ka tagi jiray xinneysashada, balse wuxuu isku xinneeyey xinne si uu u caddeeyo inay bannaan tahay. Timaha caddaanka ah ee uu lahaa waxay u dhexeeyeen afar iyo toban ilaa labaatan timo oo caddaan ah.

Tani waxay ku xirnayd kala duwanaanshaha waqtiyada iyo waxa saxaabadu arkeen, maadaama cirradu sii badato marka da'du korodho. Cirrada ugu badan ee Nabiga sallallaahu calayhi wasallam waxay ku taallay labada dhinac ee madaxiisa iyo kala qaybta madaxiisa.

******************

# 7. Qaar ka mid ah waxyaabihii laga wariyey kuulka Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam

**29. "عَنِ ابْنِ عَبَّاسٍ رضـي الله عنه، أَنَّ النَّبِيَّ صَـلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَـلَّمَ قَالَ: اكْتَحِلُوا بِالإِثْمِدِ فَإِنَّهُ يَجْلُو الْبَصَـرَ، وَيُنْبِتُ الشَّعْرَ". [أخرجه الترمذي].**

**29. "Laga soo weriyey Ibnu Cabbaas radiyallaahu canhu, in Nabiga sallallaahu calayhi wasallam yiri: 'Kuula ku marsada ithmidka, waayo wuxuu nadiifiyaa aragga, wuxuuna soo saaraa timaha.'" [waxaa soo saaray At-Tirmidi].**

- Ithmid: waa dhagax la shiido oo kuul ahaan loo isticmaalo, wuxuuna leeyahay noocyo kala duwan. Waxaa la sheegaa in ithmidka Yemen uu aad u wanaagsan yahay.

- Wuxuu nadiifiyaa aragga: wuxuu xoojiyaa aragga, nadiifiyaa, ka saaraa qiiqa iyo daciifnimada, wuxuuna ka dhigaa aragga mid cad oo saafi ah.

- Wuxuu soo saaraa timaha: wuxuu soo saaraa baalasha indhaha, wuu koriyaa wuxuuna dheereeyaa.

**30. "عَنْ جَابِرٍ هُوَ ابْنُ عَبْدِ اللهِ رضـي الله عنه، قَالَ: قَالَ رَسُولُ اللهِ صَـلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَـلَّمَ: عَلَيْكُمْ بِالإِثْمِدِ عِنْدَ النَّوْمِ، فَإِنَّهُ يَجْلُو الْبَصَرَ، وَيُنْبِتُ الشَّعْرَ". [أخرجه ابن ماجه].**

**30. "Laga soo weriyey Jaabir bin Cabdillaah radiyallaahu canhu, wuxuu yiri: Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam wuxuu yiri: 'Ku dadaala isticmaalka ithmidka marka la seexanayo, waayo wuxuu nadiifiyaa aragga, wuxuuna soo saaraa timaha.'" [waxaa soo saaray Ibnu Maajah].**

Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam wuxuu kuulan jiray ithmidka marka uu seexanayo saddex jeer isha kasta, isagoo ka bilaabaya isha midig. Wuxuuna sallallaahu calayhi wasallam lahaa weelka kuulka lagu rito.

- **Soo nooleynta sunnada:**

Isticmaalka ithmidka marka la seexanayo, taasoo ka mid ah daawada Nabiga.

Aan ku dayanno Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam, oo aan raacno hanuunkiisa ee sunnada kuulaysiga ithmidka, kaasoo ah nooca ugu wanaagsan uguna faa’iidada badan ee kuulka indhaha.

******************

# 8. Qaar ka mid ah waxyaabihii laga wariyey dharka Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam

**31. "عَنْ أُمِّ سَلَمَةَ رضي الله عنها، قَالَتْ: كَانَ أَحَبُّ الثِّيَابِ إِلَى رَسُولِ اللهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ يَلبَسُه الْقَمِيصُ". [أخرجه أبو داود والترمذي].**

**31. “Laga soo weriyey Ummu Salamah radiyallaahu canhaa, waxay tiri: Dharka ugu jeclaa ee Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam xirto wuxuu ahaa qamiiska.” [waxaa soo saaray Abuu Daawuud iyo At-Tirmidi].**

**32. "عَنْ أَسْمَاءِ بِنْتِ يَزِيدَ رضي الله عنها قَالَتْ: كَانَ كُمُّ قَمِيصِ رَسُولِ اللهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ إِلَى الرُّسْغِ". [أخرجه أبو داود والترمذي].**

**32. “Laga soo weriyey Asmaa’ bint Yaziid radiyallaahu canhaa, waxay tiri: Gacanka qamiiska Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam wuxuu gaari jiray curcurka.” [waxaa soo saaray Abuu Daawuud iyo At-Tirmidi].**

- Curcur: waa lafaha isku xira calaacalaha iyo cududda. Gacankiisu sallallaahu calayhi wasallam ma ahayn mid dheer mana ahayn mid gaaban, taasina waxay ka mid ahayd dhexdhexaadnimada.

**33. “Laga soo weriyey Anas bin Maalik, in Nabiga sallallaahu calayhi wasallam soo baxay isaga oo ku tiirsan Usaamah bin Zayd, isagoo xiran dhar Qatari ah oo uu isku duubay, markaas ayuu dadka salaad ku tukiyey.” [waxaa soo saaray Axmed].**

- Dhar Qatari ah: dhar leh casaanyo oo hore looga sameyn jiray Baxrayn, waxaana la sheegaa inay hadda tahay dalka Qatar. Dharkooda waxaa lagu tirin jiray dharka ugu quruxda badan.

- Isku duubay: dharku wuxuu saarnaa garbihiisa isagoo qoorta uga duuban, sida qofka ixraaman sameeyo.

**34. "عَنْ أَبِي سَعِيدٍ الْخُدْرِيِّ رضي الله عنه قَالَ: كَانَ رَسُولُ اللهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ إِذَا اسْتَجَدَّ ثَوْبًا سَمَّاهُ بِاسْمِهِ (عِمَامَةً أَوْ قَمِيصًا أَوْ رِدَاءً ) ثُمَّ يَقُولُ: اللَّهُمَّ لَكَ الْحَمْدُ كَمَا كَسَوْتَنِيهِ، أَسْأَلُكَ خَيْرَهُ وَخَيْرَ مَا صُنِعَ لَهُ، وَأَعُوذُ بِكَ مِنْ شَرِّهِ وَشَرِّ مَا صُنِعَ لَهُ". [أخرجه أحمد وأبو داود والترمذي].**

**34. “Laga soo weriyey Abuu Saciid Al-Khudri radiyallaahu canhu, wuxuu yiri: Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam marka uu xirto dhar cusub wuxuu ugu yeeri jiray magaciisa, sida cimaamad, qamiis ama go’, kadibna wuxuu oran jiray: ‘Allaahow adigaa mahad leh sidaad ii siisay dharkaan. Waxaan kaa baryayaa kheyrkiisa iyo kheyrka loo sameeyey, waxaanan kaa magan galayaa sharkiisa iyo sharka loo sameeyey.’” [waxaa soo saaray Axmed, Abuu Daawuud iyo At-Tirmidi].**

- Xiray dhar cusub: xirtay dhar cusub.

- Ugu yeeri jiray magaciisa: wuxuu oran jiray cimaamad ama qamiis ama go’.

- **Faa’iido:**

Maqaamka xamdigga ee Allaah agtiisa waa weyn yahay. Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam wuxuu yiri:

**"إنَّ اللَّهَ ليَرضى عن العبدِ أن يأكُلَ الأَكلَةَ فيحمَدَهُ عليها أو يشرَبَ الشَّربَةَ فيحمَدَهُ علَيها" [أخرجه مسلم].**

**“Allaah wuxuu ka raalli noqdaa addoonka marka uu cunto cuno oo uu ku xamdiyo, ama cabbid cabo oo uu ku xamdiyo.” [waxaa soo saaray Muslim.]**

Allaah wuu kaa raalli noqonayaa haddii carrabkaaga iyo qalbigaaga ku mashquuliyaan xamdiggiisa tabaaraka wa tacaalaa.

U fiirsada xadiiska Nabiga sallallaahu calayhi wasallam ee uu wariyey Mucaad bin Anas, in uu sallallaahu calayhi wasallam yiri:

**"من أكل طعاماً ثم قال: الحمد لله الذي أطعمني هذا الطعام ورَزَقنيه من غير حول مني ولا قوة، غُفِر له ما تقدَّم من ذنبه وما تأخر.. ومن لبِس ثوباً فقال: الحمد لله الذي كساني هذا الثوب ورَزَقنيه من غير حول مني ولا قوة، غُفِر له ما تقدم من ذنبه وما تأخر".[أخرجه الترمذي وابن ماجه]**

**“Qofkii cunto cuna kadibna yiraahda: Alxamdulillaah kii i quudiyey cuntadaan oo i siiyey anigoon awood iyo xoog toona lahayn, waxaa loo dambi dhaafayaa dambigiisii hore iyo kii dambe. Qofkii xirta dhar kadibna yiraahda: Alxamdulillaah kii i huwiye dharkaan oo i siiyey anigoon awood iyo xoog toona lahayn, waxaa loo dambi dhaafayaa dambigiisii hore iyo kii dambe.” [waxaa soo saaray At-Tirmidi iyo Ibnu Maajah.]**

Immisa jeer ayay ina dhaaftay fursadda raallinimada Allaah iyo dambi dhaafka dambiyadeenna, kaliya sababta oo ah inaanan Allaah ku xamdin dhar kasta oo aan xiranno, cunto kasta oo aan cunno iyo cabbid kasta oo aan cabno?

**35. "عَنْ أَنَسِ بْنِ مَالِكٍ رضي الله عنه قَالَ: كَانَ أَحَبَّ الثِّيَابِ إِلَى النبي صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ يَلْبَسُهُ الْحِبَرَةُ". [أخرجه البخاري ومسلم].**

**35. "Laga soo weriyey Anas bin Maalik radiyallaahu canhu, wuxuu yiri: Dharka ugu jeclaa ee Nabiga sallallaahu calayhi wasallam xirto wuxuu ahaa maro qurux badan." [waxaa soo saaray Al-Bukhaari iyo Muslim].**

- Maro qurux badan: dhar ka yimaada Yemen oo laga sameeyo geedka linen-ka ama cudbi, waxayna ahaayeen kuwo qaali ah.

**36. "عَنْ عَوْنِ بْنِ أَبِي جُحَيْفَةَ عَنْ أَبِيهِ رضي الله عنه قَالَ: رَأَيْتُ النَّبِيَّ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ وَعَلَيْهِ حُلَّةٌ حَمْرَاءُ كَأَنِّي أَنْظُرُ إِلَى بَرِيقِ سَاقَيْهِ". قَالَ سُفْيَانُ: نُرَاهُ حِبَرَة . [أخرجه أحمد والترمذي.]**

**36. "Laga soo weriyey Cawn bin Abii Juxayfah, isaga oo ka werinaya aabbihiis radiyallaahu canhu, wuxuu yiri: Waxaan arkay Nabiga sallallaahu calayhi wasallam isagoo xiran dhar labo qaybood ah oo casaan ah, waxaanan moodayey inaan arkayo iftiinka labada lugood." Sufyaan wuxuu yiri: Waxaan u aragnaa inay ahayd maro qurux badan. [waxaa soo saaray Axmed iyo At-Tirmidi].**

- Iftiinka labada lugood: dhalaalkooda.

**37. "عَنْ أَبِي رِمْثَةَ رضي الله عنه قَالَ: رَأَيْتُ النَّبِيَّ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ وَعَلَيْهِ بُرْدَانِ أَخْضَرَانِ". [أخرجه الترمذي والنسائي].**

**37. "Laga soo weriyey Abuu Rimthah radiyallaahu canhu, wuxuu yiri: Waxaan arkay Nabiga sallallaahu calayhi wasallam isagoo xiran laba go' oo cagaaran." [waxaa soo saaray At-Tirmidi iyo An-Nasaa'i].**

- Laba go' oo cagaaran: laba dhar oo leh xarriijimo cagaaran.

**38. "عَنْ عَائِشَةَ رضي الله عنها قَالَتْ: خَرَجَ رَسُولُ اللهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ ذَاتَ غَدَاةٍ وَعَلَيْهِ مِرْطٌ مِنْ شَعَرٍ أَسْوَدَ". [أخرجه الترمذي].**

**38. "Laga soo weriyey Caa'isha radiyallaahu canhaa, waxay tiri: Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam ayaa subax soo baxay isagoo xiran maro madow oo dhogor ah." [waxaa soo saaray At-Tirmidi].**

- Maro: go' laga sameeyo dhogor, badanaa waxaa loo isticmaalaa qaybta hoose sida ixraamka.

**39. "عَنْ عُرْوَةَ بْنِ الْمُغِيرَةِ بْنِ شُعْبَةَ عَنْ أَبِيهِ رضي الله عنه : أَنَّ النَّبِيَّ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ لَبِسَ جُبَّةً رُومِيَّةً ضَيِّقَةَ الْكُمَّيْنِ". [أخرجه أحمد والترمذي والنسائي].**

**39. “Laga soo weriyey Curwah bin Al-Mughiirah bin Shucbah, isaga oo ka werinaya aabbihiis radiyallaahu canhu, in Nabiga sallallaahu calayhi wasallam xirnaa jubbad Roomaaniyad ah oo gacmo cidhiidhi ah leh.” [waxaa soo saaray Axmed, At-Tirmidi iyo An-Nasaa’i].**

- Jubbad: dhar hore ka furan oo dusha laga xirto.

- Gacmo cidhiidhi ah: gacmaheedu waxay gaari jireen cududda iyagoo cidhiidhi ah oo aan ballaarneyn.

- **Faa’iidooyin:**

Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam wuxuu yiri:

**"البِسُوا مِنْ ثِيابِكُم البياضْ فَإِنَّها مِنْ خَيْر ثِيابِكُم". [أخرجه أبو داود].**

**“Xirta dharkiinna caddaanka ah, waayo waa dharkiinna ugu wanaagsan.” [waxaa soo saaray Abuu Daawuud.]**

Rasuulka sallallaahu calayhi wasallam marka uu xirto dhar cusub oo ah cimaamad, qamiis ama go’, wuxuu oran jiray:

**"اللهم لك الحمد أنت كسوتنيه، أسألك من خيره وخير ما صُنع له وأعوذ بك من شره وشر ما صُنع له". [أخرجه أبو داود].**

**“Allaahow adigaa mahad leh, adigaa i huwiye. Waxaan kaa baryayaa kheyrkiisa iyo kheyrka loo sameeyey, waxaanan kaa magan galayaa sharkiisa iyo sharka loo sameeyey.” [waxaa soo saaray Abuu Daawuud.]**

Dharka uu xirnaa Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam:

1. Dhar labo qaybood ah oo casaan ah: waa dhar ka kooban maro hoose iyo maro sare, mana ahayn casaan saafi ah, balse waxaa ku jiray madow.
2. Qamiiska: wuxuu ahaa dharka ugu jeclaa sallallaahu calayhi wasallam. Gacanka qamiiskuna wuxuu gaari jiray curcurka, qamiiskiisuna wuxuu ahaa mid furan ama leh badhamo balse furnaa.
3. Dhar Qatari ah: wuxuu ku tiirsanaa Usaamah bin Zayd radiyallaahu canhu isagoo xiran dhar Qatari ah oo leh casaanyo, kaasoo hore looga sameyn jiray Baxrayn. Nabiguna sallallaahu calayhi wasallam wuxuu geeriyooday isagoo xiran dhar Qatari ah.

4. Maro qurux badan: waxay ka mid ahayd dharka ugu jeclaa Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam. Waxay ka imaan jirtay Yemen, waxaana laga sameyn jiray linen ama cudbi. Waxayna ahayd dhar la qurxiyey oo qaali ah.
5. Laba go' oo cagaaran: waa laba dhar oo leh xarriijimo cagaaran.
6. Maro: waa go' madow oo dhogor ah oo loo isticmaalo qaybta hoose ee jirka.
7. Jubbad Roomaaniyad ah: waa dhar dheer oo hore ka furan, una eg dishdasha ama dharka culimada Azhar, gacmaheeduna waxay ahaayeen cidhiidhi. Nabiga sallallaahu calayhi wasallam wuxuu ku xirnaa dagaalkii Tabuuk.

******************

# 9. Qaar ka mid ah waxyaabihii laga wariyey noloshii Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam

**40. "عَنْ مُحَمَّدِ بْنِ سِـــيرِينَ قَالَ: كُنَّا عِنْدَ أَبِي هُرَيْرَةَ رضـــي الله عنه، وَعَلَيْهِ ثَوْبَانِ مُمَشَّـــقَانِ مِنْ كَتَّانٍ فَتَمَخَّطَ فِي أَحَدِهِمَا، فَقَالَ: بَخٍ بَخٍ يَتَمَخَّطُ أَبُو هُرَيْرَةَ فِي الْكَتَّانِ، لَقَدْ رَأَيْتُنِي وَإِنِّي لَأَخِرُّ فِيمَا بَيْنَ مِنْبَرِ رَسُولِ اللهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ وَحُجْرَةِ عَائِشَةَ رَضِيَ الله عنها مَغْشِيًّا عَلَيَّ فَيَجِيءُ الْجَائِي فَيَضَعُ رِجْلَهُ عَلَى عُنُقِي يُرَى أَنَّ بِي جُنُونًا، وَمَا بِي جُنُونٌ، وَمَا هُوَ إِلاَّ الْجُوعُ." [أخرجه البخاري].**

**40. "Laga soo weriyey Maxamed bin Siiriin, wuxuu yiri: Waxaan joognay Abuu Hurayrah radiyallaahu canhu, isagoo xiran laba dhar oo linen ah oo la midabeeyey, markaas ayuu sanka ku tirtirtay midkood, kadibna wuxuu yiri: Waa yaab! Waa yaab! Abuu Hurayrah wuxuu sanka ku tirtirayaa dhar linen ah! Waxaan is arkay anigoo ku dhacaya meel u dhexeysa minbarka Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam iyo qolka Caa'isha radiyallaahu canhaa anigoo miyir beelay, markaas ayuu qof imanaya cagta saaraya qoortayda isagoo moodaya inaan waalanahay. Mana aanan waalnayn, ee waxay ahayd gaajo keliya." [waxaa soo saaray Al-Bukhaari].**

- La midabeeyey: lagu rinjiyeeyey geed gaar ah, lagana sameeyey linen, wuxuuna ahaa nooc qaali ah oo dharka ka mid ah.

- Waa yaab! Waa yaab!: waa eray loo isticmaalo ammaan iyo farxad.

- Cagta saaraya qoortayda: qofku wuxuu cagta saari jiray qoorta Abuu Hurayrah radiyallaahu canhu isagoo moodaya inuu waalan yahay oo uu suuxay waalli darteed, taasina waxay ahayd dhaqankoodii ay kula dhaqmi jireen qofka waalan ilaa uu ka soo kaco. Xaqiiqduse waxay ahayd inuu u dhacayay daciifnimo iyo tamar yari ka dhalatay gaajo. Markii furashooyinku bateen xilligii khulafada raashidiinta oo maalku badnaaday, xaaladdiisa iyo xaaladda kuwo kale oo badan waxay isu beddeshay hodantinimo.

Caa'isha radiyallaahu canhaa waxay tiri:

**"إن كنا آل محمد ﷺ نمكث شهراً ما نستوقد بنار ما هو إلا الأسودان التمر والماء". [أخرجه مسلم].**

**"Annaga reer Maxamed sallallaahu calayhi wasallam bil dhan dab ma shidi jirin, waxaana keliya oo aan haysan jirnay timir iyo biyo." [waxaa soo saaray Muslim.]**

Waxaa ku jira samirka yareynta raaxada adduunka iyo doorbididda nolosha aakhiro.

## Iftiin

Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam wuxuu yiri:

**"إن من ورائكم زمان صبر للمُتمسِّك فيه أجر خمسين شهيداً منكم". [صححه الألباني].**

**"Waxaa idinka dambayn doona waqti samir badan, qofka diintiisa ku dhagana wuxuu heli doonaa ajarka konton shahiid oo idinka mid ah." [Al-Albaani wuxuu ka dhigay saxiix.]**

**Farxad iyo bishaaro ha u sugnaato qof kasta oo adkaystay, samray, kitaabkana ku qaatay xoog iyo go'aan adag.**

**Sidoo kale farxad ha u sugnaato qof kasta oo ka fogaaday wax kasta oo aan raalli gelinayn Allaah iyo Rasuulkiisa, qof kasta oo dadaalay, iyo haweeney kasta oo ku dadaashay tarbiyeynta carruurteeda tarbiyad diini ah oo raalli gelisa Allaah kana farxisa Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam.**

**Allaahow noo kab dayacaaddeenna, carruurteenana noogu barbaari nicmo iyo karaamo.**

**Bishaaro ha u sugnaato qof kasta oo towbad keenay oo u noqday Allaah, iyo haweeney kasta oo ku adkaysatay xijaabkeeda iyadoo ay badatay fisqiga iyo is qurxinta.**

**Bishaaro ha u sugnaato qof kasta oo yiri: waan maqallay waana adeecnay ammar kasta oo Allaah iyo Rasuulkiisu na fareen. Waan maqallay waana adeecnay, waanan ka joogsannay xaaraan kasta.**

**Allaahow noo fududee annaga iyo qof kasta oo adiga dartaa u dadaalay arrimaheena, laabahayagana noo waasici. Noo fududee sunnada, noogana dhig mid noo sahlan oo noo barakaysan. Annaga iyo carruurteennana naga dhig kuwa uu Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam ku faano ummadaha maalinta qiyaamaha..**

**Allaahow waxaan ku weydiisanaynaa iimaan aan noqonayn, nicmo aan dhammaanayn, iyo la socoshada Nabigaaga Maxamed sallallaahu calayhi wasallam ee jannada ugu sarraysa waaridda.**

******************

## 10. Waxyaabihii laga wariyey kabaha haragga ah ee Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam

**41. "عَنِ ابْنِ بُرَيْدَةَ عَنْ أَبِيهِ رضي الله عنه، أَنَّ النَّجَاشِيَّ رضي الله عنه أَهْدَى لِلنَّبِيِّ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ خُفَّيْنِ أَسْوَدَيْنِ سَاذَجَيْنِ، فَلَبِسَهُمَا ثُمَّ تَوَضَّأَ وَمَسَحَ عَلَيْهِمَا". [أخرجه أحمد وأبو داود والترمذي].**

**41. "Laga soo weriyey Ibnu Buraydah, isaga oo ka werinaya aabbihiis radiyallaahu canhu, in An-Najaashi radiyallaahu canhu uu hadiyad ahaan ugu diray Nabiga sallallaahu calayhi wasallam laba kabo harag ah oo madow oo saafi ah, markaas ayuu xiray kadibna waysaystay oo ku masaxay." [waxaa soo saaray Axmed, Abuu Daawuud iyo At-Tirmidi].**

- Madow oo saafi ah: madow aan wax kale lagu dhex darin, aan lahayn qurxin ama naqshad. Kabaha haragguna waxay ahaayeen harag madow oo dhaafaya canqowga.

- **Soo nooleynta sunnada:**

Masaxa kabaha haragga ah, iyadoo shardi ay tahay in lagu xirto daahaar buuxa, isla markaana ay daboolayaan cagta oo dhan.

Masaxa kabaha haragga ah wuxuu u bannaan yahay qofka deggen hal maalin iyo habeen, qofka safarka ahna saddex maalmood. Waxaa la masaxayaa korka kabaha masax fudud. Sidoo kale waxaa bannaan in la masaxo sharabaadada daboolaysa cagta oo dhan oo aan maqaarka cagtu ka muuqan hoostooda, sida ay qabaan culimada fiqiga intooda badan.

**42. "قَالَ الْمُغِيرَةُ بْنُ شُعْبَةَ رضي الله عنه: أَهْدَى دِحْيَةُ لِلنَّبِيِّ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ خُفَّيْنِ، فَلَبِسَهُمَا". [أخرجه الترمذي].**

**42. "Al-Mughiirah bin Shucbah radiyallaahu canhu wuxuu yiri: Dihyah ayaa hadiyad ahaan ugu keenay Nabiga sallallaahu calayhi wasallam laba kabo harag ah, markaas ayuu xiray." [waxaa soo saaray At-Tirmidi].**

- **Faa'iido:**

Dihyah Al-Kalbi wuxuu ahaa saxaabi weyn oo muuqaal qurux badan lahaa. Sayidkeenna Jibriil calayhis salaam badanaa wuxuu imaan jiray isagoo qaabkiisa leh. Wuxuu Rasuulka

Allaah sallallaahu calayhi wasallam hadiyad ahaan u siiyey laba kabo harag ah, markaas ayuu xiray sallallaahu calayhi wasallam.

******************

# 11. Qaar ka mid ah waxyaabihii laga wariyey kabaha Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam

**43. "عَنِ ابْنِ عَبَّاسٍ رضي الله عنه قَالَ: كَانَ لِنَعْلِ رَسُولِ اللهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ قِبَالاَنِ مَثنيّ شِرَاكُهُمَا".[أخرجه ابن ماجه.]**

**43. "Laga soo weriyey Ibnu Cabbaas radiyallaahu canhu wuxuu yiri: Kabaha Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam waxay lahaayeen laba suun oo kabaha lagu adkeeyo."[Waxaa soo saaray Ibnu Maajah].**

- Laba suun oo kabaha ku yaalla: waa laba xarig oo kabaha ku yaalla, kuwaas oo mara faraha dhexe iyo kuwa ku xiga, ama waa laba suun oo korka kabaha lagu adkeeyo si ay caguhu ugu dhegaan kabaha.

**44. "عن عِيسَى بْنُ طَهْمَانَ قَالَ: أَخْرَجَ إِلَيْنَا أَنَسُ بْنُ مَالِكٍ رضي الله عنه نَعْلَيْنِ جَرْدَاوَيْنِ لَهُمَا قِبَالاَنِ .قَالَ: فَحَدَّثَنِي ثَابِتٌ بَعْدُ عَنْ أَنَسٍ أَنَّهُمَا كَانَتَا نَعْلَيِ النَّبِيِّ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ". [أخرجه البخاري].**

**44. "Laga soo weriyey Ciisaa bin Taxmaan wuxuu yiri: Anas bin Maalik radiyallaahu canhu wuxuu noo soo bixiyey laba kabo oo siman oo leh laba suun. Kadibna Thaabit ayaa ii sheegay isagoo ka werinaya Anas in ay ahaayeen kabihii Nabiga sallallaahu calayhi wasallam". [waxaa soo saaray Al-Bukhaari].**

- Laba kabo oo siman: waa laba kabo oo aan timo lahayn. Anas bin Maalik radiyallaahu canhu oo ahaa adeegihii Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam ayaa hayn jiray kabihiisa sallallaahu calayhi wasallam.

**45. "عَنْ عُبَيْدِ بْنِ جُرَيْجٍ أَنَّهُ قَالَ لاِبْنِ عُمَرَ رضي الله عنهما: رَأَيْتُكَ تَلْبَسُ النِّعَالَ السِّبْتِيَّةَ، قَالَ: إِنِّي رَأَيْتُ رَسُولَ اللهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ يَلْبَسُ النِّعَالَ الَّتِي لَيْسَ فِيهَا شَعَرٌ، وَيَتَوَضَّأُ فِيهَا، فَأَنَا أُحِبُّ أَنْ أَلْبَسَهَا".[أخرجه البخاري ومسلم].**

**45. "Laga soo weriyey Cubayd bin Jurayj inuu ku yiri Ibnu Cumar radiyallaahu canhumaa: Waxaan arkay adigoo xiran kabaha sibtiyada ah. Wuxuu yiri: Waxaan arkay Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam isagoo xiran kabaha aan timaha lahayn, sidoo kalena ku waysaysanaya, sidaas darteed waxaan jeclahay inaan xirto". [Waxaa soo saaray Al-Bukhaari iyo Muslim].**

- Kabaha sibtiyada ah: waa kabo laga sameyn jiray haragga lo'da oo la midabeeyey ama la dubay, waxaana loo bixiyey sibtiyo sababtoo ah timaha ayaa laga xiiri jiray haragga.

- **Faa'iido:**

Cabdullaahi bin Cumar bin Al-Khattaab wuxuu aad ugu dadaali jiray raacidda Rasuulka sallallaahu calayhi wasallam ilaa ay ku sigatay in lagu yiraahdo waa waalan yahay. Wuxuu ku dayday Rasuulka sallallaahu calayhi wasallam xitaa xirashada kabaha sibtiyada ah. Xitaa radiyallaahu canhu wuxuu mari jiray waddadii uu maray Rasuulka sallallaahu calayhi wasallam, dabadeedna dib ayuu uga soo laaban jiray isaga oo aan wax baahi ah qabin. Marka la weydiiyana wuxuu ku jawaabi jiray inuu arkay Rasuulka sallallaahu calayhi wasallam oo waddadan maraya sidaas darteedna uu isaga la mid sameeyey.

**46.** "عَنِ السُّدِّيِّ قَالَ: حَدَّثَنِي مَنْ سَمِعَ عَمْرَو بْنَ حُرَيْثٍ رضي الله عنه يَقُولُ: رَأَيْتُ رَسُولَ اللهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ يُصَلِّي فِي نَعْلَيْنِ مَخْصُوفَتَيْنِ". [أخرجه النسائي في الكبرى.]

**46. "Laga soo weriyey As-Suddiy wuxuu yiri: Waxaa ii warramay qof ka maqlay Camr bin Xurayth radiyallaahu canhu isagoo leh: Waxaan arkay Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam isagoo ku tukanaya laba kabo oo la tolay oo la kabay". [Waxaa soo saaray An-Nasaa'i Al-Kubraa].**

- La tolay oo la kabay: waxaa ku yiillay tolmo iyo kabid muuqata.

- **Faa'iido**:

Nabiga sallallaahu calayhi wasallam wuxuu toli jiray kabihiisa, sidoo kalena wuu dayactiri jiray dharkiisa sida laga xaqiijiyey arrintiisa sallallaahu calayhi wasallam. Tani waxay ka mid tahay raadadka kuu sawiraya hanuunkiisa dhinaca kabaha, mana uu ahaan jirin mid isku dhibaya arrinkooda. Waxa kale oo ku jirta daliil muujinaysa in qofkii ku tukada kabaha ay salaaddiisu sax tahay haddii ay daahir yihiin.

**47.** "عَنْ أَبِي هُرَيْرَةَ رضي الله عنه، أَنَّ رَسُولَ اللهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ قَالَ: لاَ يَمْشِينَ أَحَدُكُمْ فِي نَعْلٍ وَاحِدَةٍ، لِيُنْعِلْهُمَا جَمِيعًا أَوْ لِيُحْفِهِمَا جَمِيعًا".[أخرجه البخاري ومسلم] .

**47. "Laga soo weriyey Abuu Hurayrah radiyallaahu canhu in Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam uu yiri: Midkiinna yuusan ku socon hal kabo, ha wada xirto labadaba ama ha wada siibo labadaba". [Waxaa soo saaray Al-Bukhaari iyo Muslim].**

**48.** "عَنْ عَائِشَةَ رضي الله عنها قَالَتْ: كَانَ رَسُولُ اللهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ يُحِبُّ التَّيَمُّنَ مَا اسْتَطَاعَ فِي تَرَجُّلِهِ وَتَنَعُّلِهِ وَطُهُورِهِ". [أخرجه البخاري].

**48. "Laga soo weriyey Caa'isha radiyallaahu canhaa waxay tiri: Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam wuxuu jeclaa ka bilaabidda dhinaca midig intii uu awoodo marka uu shanlaynayo timihiisa, xirashada kabaha, iyo daahirsanaanta".[ Waxaa soo saaray Al-Bukhaari].**

- **Faa'iidooyin:**

- Rasuulka sallallaahu calayhi wasallam wuxuu xiray noocyo ka mid ah kabaha:

1. Laba kabo oo siman oo aan timo lahayn.
2. Kabaha sibtiyada ah oo laga sameeyey haragga lo'da la dubay.
3. Laba kabo oo la tolay oo la kabay.

**Dardaarannada Nabiga sallallaahu calayhi wasallam ee xirashada kabaha:**

**1. "لا يمشِيَنَّ أحدكم في نعل واحدة لِيُحْفِهما جميعاً أو لِيُنعِلهما جميعاً". [أخرجه مسلم].**

1. **"Midkiinna yuusan ku socon hal kabo, ha wada siibo labadaba ama ha wada xirto labadaba". [waxaa soo saaray Muslim].**

(Tani waxay muujinaysaa caddaaladda xitaa labada cagood dhexdooda).

**2. "إذا انتعل أحدكم فليبدأ باليمين وإذا نزع فليبدأ بالشمال".[أخرجه البخاري].**

2. **"Marka uu midkiin xirto kabaha ha ka bilaabo midigta, marka uu siibayana ha ka bilaabo bidixda".[Waxaa soo saaray Al-Bukhaari].**
3. Wuxuu jeclaa ka bilaabidda dhinaca midig marka uu kabaha xiranayo.

## Iftiin

**Kuwani waa sunnooyin aad maalin kasta ku dhaqmi karto dhaqdhaqaaqyo aad u fudud. Sidaas ayaad maalintaada ugu maalgelinaysaa ajarro badan oo aad Allaah ka rajaynayso adigoon wax daal ah dareemayn. Naftaada ku barbaari sunnooyinkan, maxaa yeelay waxaa ku jira ajar weyn.**

**Waxa la mid ah ducada xirashada dharka, ducada marka cuntada la dhammeeyo, iyo magacaabidda Allaah ka hor arrin kasta.**

**Jeclaada Rasuulka Allaah oo nooleeya sunnadiisa. Carruurtiinnana bara jacaylka Nabiga sallallaahu calayhi wasallam. Akhriya siiradiisa, kuna camal fala sunnadiisa, kuna dhega hanuunkiisa. Weyneeya sunnadiisa. Raadiya sunnada Nabiga sallallaahu calayhi**

**wasallam. Raadiya dadka weynaynaya sunnadiisa. Aan samirno, ballantuna waxay ka dhici doontaa xawdka agtiisa. Allow maanaan arag isaga, laakiin waan jeclaannay, waxaana ku dadaallay raacidda sunnadiisa, ee ha naga reebin wehelnimadiisa Firdowsa sare.**

******************

## 12. Qaar ka mid ah waxyaabihii laga wariyey faraantiga Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam

**49. "عَنْ أَنَسِ بْنِ مَالِكٍ رضـي الله عنه قَالَ: كَانَ خَاتَمُ النَّبِيِّ صَـلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَـلَّمَ مِنْ وَرِقٍ، وَكَانَ فَصُّـهُ حَبَشِـيًّا". [أخرجه مسلم].**

**49. "Laga soo weriyey Anas bin Maalik radiyallaahu canhu wuxuu yiri: Faraantiga Nabiga sallallaahu calayhi wasallam wuxuu ka samaysnaa lacag, waxaana dhagixiisu ahaa Xabashi". [waxaa soo saaray Muslim].**

- Lacag: bir lacag ah.

- Dhagixiisa: dhagaxa qaaliga ah ee faraantiga lagu rakibo.

- Xabashi: waxaa laga sheegay dhowr macne;
waxaa la yiri dhagaxaas wuxuu ka yimid Xabasha, sidoo kale waxaa la yiri wuxuu lahaa midab la mid ah midabka dadka Xabasha.

**50. "عَنْ أَنَسِ بْنِ مَالِكٍ رضي الله عنه قَالَ: كَانَ خَاتَمُ رَسُولِ اللهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ مِنْ فِضَّةٍ فَصُّهُ مِنْهُ ."[أخرجه الترمذي والنسائي].**

**50. "Laga soo weriyey Anas bin Maalik radiyallaahu canhu wuxuu yiri: Faraantiga Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam wuxuu ka samaysnaa lacag, dhagixiisuna isla lacagtaas ayuu ka samaysnaa". [waxaa soo saaray At-Tirmidi iyo An-Nasaa'i].**

Ibnu Xajar wuxuu yiri: Waxaa laga yaabaa inuu ahaa faraanti kale; mid wuxuu ahaa Xabashi, kan kalena wuxuu ka samaysnaa lacag.

**51. "عَنْ أَنَسِ بْنِ مَالِكٍ رضـي الله عنه قَالَ: لَمَّا أَرَادَ رَسُولُ اللهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ أَنْ يَكْتُبَ إِلَى الْعَجَمِ قِيلَ لَهُ: إِنَّ الْعَجَمَ لاَ يَقْبَلُونَ إِلاَّ كِتَابًا عَلَيْهِ خَاتَمٌ، فَاصْطَنَعَ خَاتَمًا فَكَأَنِّي أَنْظُرُ إِلَى بَيَاضِهِ فِي كَفِّهِ". [أخرجه البخاري ومسلم].**

**51. "Laga soo weriyey Anas bin Maalik radiyallaahu canhu wuxuu yiri: Markii Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam uu doonay inuu warqad u qoro dadka aan Carabta ahayn, ayaa loo sheegay: Dadka aan Carabta ahayn ma aqbalayaan warqad aan lahayn shaabad. Markaas ayuu sameystay faraanti, waxaana moodaa inaan eegayo caddaankiisa isagoo gacantiisa ku jira". [waxaa soo saaray Al-Bukhaari iyo Muslim].**

**52. "عَنْ أَنَسِ بْنِ مَالِكٍ رضي الله عنه قَالَ: كَانَ نَقْشُ خَاتَمِ رَسُولِ اللهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ: مُحَمَّدٌ سَطْرٌ، وَرَسُولٌ سَطْرٌ، وَاللَّهُ سَطْرٌ". [أخرجه البخاري].**

**52. "Laga soo weriyey Anas bin Maalik radiyallaahu canhu wuxuu yiri: Qoraalka ku xardhanaa faraantiga Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam wuxuu ahaa: Maxamed sadar, Rasuul sadar, Allaah sadar". [waxaa soo saaray Al-Bukhaari].**

**53. "عَنْ أَنَسِ بن مالك رضي الله عنه: أَنَّ النَّبِيَّ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ كَانَ إِذَا دَخَلَ الْخَلَاءَ نَزَعَ خَاتَمَهُ". [أخرجه أبو داود والترمذي والنسائي.]**

**53. "Laga soo weriyey Anas bin Maalik radiyallaahu canhu: Nabiga sallallaahu calayhi wasallam marka uu gelayo meesha lagu saxaroodo wuu siibi jiray faraantigiisa". [waxaa soo saaray Abuu Daawuud, At-Tirmidi iyo An-Nasaa'i].**

**54."عَنِ ابْنِ عُمَرَ رضي الله عنهما قَالَ: اتَّخَذَ رَسُولُ اللهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ خَاتَمًا مِنْ وَرِق، فَكَانَ فِي يَدِهِ ثُمَّ كَانَ فِي يَدِ أَبِي بَكْرٍ وعُمَرَ رضي الله عنهما، ثُمَّ كَانَ فِي يَدِ عُثْمَانَ رضي الله عنه، حَتَّى وَقَعَ فِي بِئْرِ أَرِيسٍ نَقْشُهُ: مُحَمَّدٌ رَسُولُ اللَّهِ". [أخرجه أبو داود.]**

**54. "Laga soo weriyey Ibnu Cumar radiyallaahu canhumaa wuxuu yiri: Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam wuxuu samaystay faraanti lacag ah. Wuxuu ku jiray gacantiisa, dabadeedna wuxuu galay gacanta Abuu Bakar iyo Cumar radiyallaahu canhumaa, kadibna wuxuu galay gacanta Cusmaan radiyallaahu canhu ilaa uu ku dhacay ceelka Ariis. Qoraalkiisuna wuxuu ahaa: Maxamed Rasuulka Allaah". [waxaa soo saaray Abuu Daawuud].**

Macnaha xadiisku waa in faraantigu ku jiray gacanta Nabiga sallallaahu calayhi wasallam, markii uu geeriyoodayna uu galay gacanta Abuu Bakar radiyallaahu canhu. Markii Abuu Bakar radiyallaahu canhu geeriyoodayna wuxuu galay gacanta Cumar radiyallaahu canhu, markii dambena wuxuu galay gacanta Cusmaan radiyallaahu canhu.

- **Faa'iido**:

Waxaa jira laba ra'yi oo ku saabsan arrinta lumitaanka faraantiga; ma Cusmaan radiyallaahu canhu qudhiisa ayaa lumiyey, mise wuxuu lumay xilligii uu khaliifka ahaa, mise qof kale ayaa sabab u ahaa.

- Ra'yiga koowaad: Wuxuu fadhiyey ceelka Ariis markaas ayuu faraantigu ceelka ku dhacay. Waxaa jiray dad Cusmaan u qabay nacayb, markaas waxay sheegeen inuu iibiyey faraantiga,

inkastoo Cusmaan bin Caffaan radiyallaahu canhu dadaal badan sameeyey si uu faraantiga u soo saaro balse uusan helin.

- Ra'yiga labaad: Wuxuu lumay xilligii khilaafadiisa kadib markii uu gacanta uga dhacay Mucayqiib oo ahaa saxaabi weyn ceelka Ariis agtiisa. Cusmaan radiyallaahu canhu ayaa siiyey faraantiga Mucayqiib si uu ugu shaabadeeyo waraaqaha, wuxuuna la taagnaa faraantiga ceelka agtiisa markaas ayuu ku dhacay. Wariyayaashu waxay sheegeen inay ceelka baareen muddo saddex maalmood ah iyagoo biyaha ka guraya, laakiin ma aysan helin faraantiga, ugu dambayntiina way ka quusteen. Faraantiguna intaas kadib uma gudbin Cali iyo saxaabada kale midna.

******************

## 13. Qaybo ka mid ah waxa laga weriyey in Nabiga sallallaahu calayhi wasallam uu faraantiga ku xiran jiray gacantiisa midig

**55. "عَنْ عَلِيِّ بْنِ أَبِي طَالِبٍ رضي الله عنه: أَنَّ النَّبِيَّ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ كَانَ يَلْبَسُ خَاتَمَهُ فِي يَمِينِهِ". [أخرجه النسائي.]**

**55. "Laga soo weriyey Cali bin Abii Daalib radiyallaahu canhu: Nabiga sallallaahu calayhi wasallam wuxuu faraantigiisa ku xiran jiray gacantiisa midig." [waxaa soo saaray An-Nasaa'i].**

**56. "عَنِ ابْنِ عُمَرَ رضي الله عنهما: أَنَّ النَّبِيَّ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ اتَّخَذَ خَاتَمًا مِنْ فِضَّةٍ، وَجَعَلَ فَصَّهُ مِمَّا يَلِي كَفَّهُ، وَنَقَشَ فِيهِ مُحَمَّدٌ رَسُولُ اللهِ، وَنَهَى أَنْ يَنْقُشَ أَحَدٌ عَلَيْهِ وَهُوَ الَّذِي سَقَطَ مِنْ مُعَيْقِيبٍ فِي بِئْرِ أَرِيسٍ" .[أخرجه الترمذي.]**

**56. "Laga soo weriyey Ibnu Cumar radiyallaahu canhumaa: Nabiga sallallaahu calayhi wasallam wuxuu samaystay faraanti lacag ah, dhagixiisana wuxuu ka dhigay dhinaca calaacalaha u jeeda, waxaana ku xardhanaa: Maxamed Rasuulkii Allaah, wuxuuna reebay in qof kale wax la mid ah ku xardho. Waana kii ka dhacay Mucayqiib ceelka Ariis." [. Waxaa soo saaray At-Tirmidi].**

- Mucayqiib: waa saxaabi weyn oo ka mid ahaa kuwii ka qayb galay Baycat Ar-Ridwaan.

- Ceelka Ariis: ceelkan wuxuu ku yaallay agagaarka masaajidka Qubaa, waxaana la aasay si loogu ballaariyo masaajidka.

- **Faa'iidooyin:**

- Nabiga sallallaahu calayhi wasallam wuxuu faraantiga ku xiran jiray gacantiisa midig, halka Xasan iyo Xuseen radiyallaahu canhumaa ay ku xiran jireen gacanta bidix.
- Nabiga sallallaahu calayhi wasallam wuxuu samaystay faraanti si uu waraaqo ugu qoro dadka aan Carabta ahayn, maadaama aysan aqbalin warqad aan shaabad lahayn.

- Nabiga sallallaahu calayhi wasallam wuxuu warqado u diray Kisraa, Qaysar, iyo An-Najaashi.
- Faraantigu wuxuu ku jiray gacanta Nabiga sallallaahu calayhi wasallam, kadibna Abuu Bakar, kadibna Cumar, kadibna Cusmaan radiyallaahu canhum, ilaa uu kaga dhacay ceelka Ariis. Cusmaan radiyallaahu canhu wuxuu isku dayey inuu soo saaro, awooddiisana wuu ku bixiyey, balse ma uusan helin.
- Qoraalka ku xardhanaa faraantiga wuxuu ahaa: "Maxamed Rasuulkii Allaah"; Maxamed hal sadar, Rasuul hal sadar, Allaahna hal sadar.

- **Noocyada faraantiyadiisa sallallaahu calayhi wasallam:**

1. Faraanti lacag ah, dhagixiisuna wuxuu ahaa Xabashi; taas macnaheedu waa in dhagixiisu ka yimid dhulka Xabashida, ama inuu madow ahaa sida midabka dadka Xabashida.
2. Faraanti lacag ah oo dhagixiisuna sidoo kale lacag ahaa.

Waxaa aad u badan axaadiista sheegaya in Nabiga sallallaahu calayhi wasallam uu faraantiga ku xiran jiray gacantiisa midig. Haddaba ma bannaan tahay in faraanti lagu xirto gacanta bidix?

Haa, way bannaan tahay sida ay culimadu sheegeen.

******************

## 14.Qaybo ka mid ah waxa laga weriyey sifada seefta Rasuulka sallallaahu calayhi wasallam

**57. "عَنْ أَنَسٍ رضي الله عنه قَالَ: كَانَتْ قَبِيعَةُ سَيْفِ رَسُولِ اللهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ مِنْ فِضَّةٍ". [أخرجه أبو داود والترمذي.]**

**57. "Laga soo weriyey Anas radiyallaahu canhu, wuxuu yiri: Qabashada seefta Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam waxay ahayd lacag." [waxaa soo saaray Abuu Daawuud iyo At-Tirmidi].**

- Qabashada seefta: waa qaybta ku taal dhammaadka gacanta seefta si aysan gacantu uga simbiriirixan, waxaana bannaan in lacag loo isticmaalo waxyaalahan oo kale, halka isku qurxinta dahabka ah aan la bannayn.

**58. "عن ابن سيرين قال: صنعت سيفي على سيف سمرة بن جندب، وزعم سمرة أنّه صنع سيفه على سيف رسول الله ﷺ وكان حنفيّا". [أخرجه أحمد والترمذي].**

**58. "Laga soo weriyey Ibnu Siiriin, wuxuu yiri: Waxaan seeftayda u sameeyey sida seefta Samurah bin Jundub, Samurahna wuxuu sheegay in uu seeftiisa u sameeyey sida**

**seefta Rasuulka sallallaahu calayhi wasallam, waxayna ahayd Xanafiyah." [waxaa soo saaray Axmad iyo At-Tirmidi].**

- Waxay ahayd Xanafiyah: waxaa loogu nisbeeyey qabiilka Banii Xaniifah, qabiilkaas oo caan ku ahaa samaynta seefaha. Sidaas darteed seeftu waxay ahayd nooca Xanafiyah, waxaana jiray sidoo kale seefo Yamani ah.

******************

# 15. Qaybo ka mid ah waxa laga weriyey sifada gaashaanka Rasuulka sallallaahu calayhi wasallam

**59. "عَنِ الزُّبَيْرِ بْنِ الْعَوَّامِ رضـــي الله عنه قَالَ: كَانَ عَلَى النَّبِيِّ صَـــلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَـــلَّمَ يَوْمَ أُحُدٍ دِرْعَانِ، فَنَهَضَ إِلَى الصَّخْرَةِ فَلَمْ يَسْتَطِعْ، فَأَقْعَدَ طَلْحَةَ تَحْتَهُ، وَصَعِدَ النَّبِيُّ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ حَتَّى اسْتَوَى عَلَى الصَّخْرَةِ قَالَ: سَمِعْتُ النَّبِيَّ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ يَقُولُ: أَوْجَبَ طَلْحَةُ ". [أَخرجه الترمذي و الحاكم في المستدرك.]**

**59. "Laga soo weriyey Az-Zubayr bin Al-Cawwaam radiyallaahu canhu, wuxuu yiri: Maalintii Uxud Nabiga sallallaahu calayhi wasallam wuxuu xirnaa laba gaashaan. Markaas ayuu u kacay dhagax weyn, balse ma uusan awoodin inuu fuulo. Sidaas darteed wuxuu Dalxa hoostiisa fariisiyey, Nabiguna sallallaahu calayhi wasallam wuu fuulay ilaa uu si fiican ugu istaagay dhagaxa. Wuxuu yiri: Waxaan maqlay Nabiga sallallaahu calayhi wasallam oo leh: Dalxa wuxuu mutaystay." [waxaa soo saaray At-Tirmidi iyo Al-Xaakim ee Al-Mustadrak.]**

- Gaashaanka: waa bir loo xirto sida qamiiska si looga gaashaanto hubka. Gaashaamadu waa biro isku xiran, mararka qaarna waxaa ku dheggan silsilado si ay u kordhiyaan difaaca.

- Dalxa wuxuu mutaystay: micnihiisu waa inuu sameeyey camal uu Allaah ugu waajibiyey jannada.

- **Faa'iido:**

Xadiiska dhexdiisa Nabiga sallallaahu calayhi wasallam wuxuu fuulay dhagaxa maalintii Uxud si muslimiintu u arkaan, loogana beeniyo wararkii sheegayey in la dilay, si ay markay arkaan u xasillaan.

Dalxa radiyallaahu canhu, difaacii badnaa ee uu Nabiga sallallaahu calayhi wasallam difaacayey darteed, gacantiisu way naafoowday dhaawacyadii badnaa awgood, waxayna sidaas ku sii jirtay inta uu noolaa oo dhan. Jidhkiisana wuxuu uga dhigay sallaan uu Nabiga sallallaahu calayhi wasallam ku istaago. Saxaabadu markaas waxay yiraahdeen: "Maalintii Uxud oo dhan waxay ahayd Dalxa."

Allaah hakaa raalli noqdo Dalxa, hana kaa siiyo abaalmarinta ugu wanaagsan annaga darteed. Allaahow nagu soo ururi kooxda Nabigeenna Maxamed sallallaahu calayhi wasallam iyo saxaabadiisa.

**60. "عَنِ السَّائِبِ بْنِ يَزِيدَ رضي الله عنه، أَنَّ رَسُولَ اللهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ كَانَ عَلَيْهِ يَوْمَ أُحُدٍ دِرْعَانِ، قَدْ ظَاهَرَ بَيْنَهُمَا". [أخرجه ابن الجارود في المنتقى.]**

**60. "Laga soo weriyey As-Saa'ib bin Yaziid radiyallaahu canhu, in Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam uu maalintii Uxud xirnaa laba gaashaan, midna uu kan kale dusha ka saaray." [waxaa soo saaray Ibnu Al-Jaaruud ee Al-Muntaqaa].**

- Midna uu kan kale dusha ka saaray: wuxuu xiray mid ka mid ah labada gaashaan dusha kan kale.

## Iftiin

**Waa digniinihii bishaarada waday iyo laambadda ifaysa sallallaahu calayhi wasallam.**

**Bal qiyaasa isaga oo kasoo degaya godka Xiraa'...**
**Oo la gariiraya culayska waxyiga...**
**Laguna go'doomiyey dooxadii Abii Daalib...**
**Dhagaxna lagu tuuray Daa'if...**
**Laga hor istaagay gelitaanka Makka...**
**Loona maleegayo in la dilo...**
**Dhiiggiisana lagu qaybiyo qabaa'illada...**
**La eryanayo maalintii hijrada...**
**Dhiigga ka masaxaya wajigiisa maalintii Uxud...**
**Kana cabanaya suntii ay u gelisay haweeney Yahuudiyad ahayd...**

**Intaas oo dhan ayuu u dhibtooday si uu diintan noogu soo gaarsiiyo...**
**Sallallaahu calayhi wasallam...**

**Ee ha dayicinina...**

**"Qoraal la soo xigtay"**

**Allaahow ku sallii Maxamed iyo ehelka Maxamed sidii aad ugu salliday Ibraahiim iyo ehelka Ibraahiim, adigu waxaad tahay mid la mahadiyo oo sharaf badan.**

**Allaahow ku barakee Maxamed iyo ehelka Maxamed sidii aad ugu barakaysay Ibraahiim iyo ehelka Ibraahiim, adigu waxaad tahay mid la mahadiyo oo sharaf badan.**

******************

## 16. Qaybo ka mid ah waxa laga weriyey sifada koofiyadda birta ah ee Rasuulka sallallaahu calayhi wasallam

**61. "عَنْ أَنَسِ بْنِ مَالِكٍ رضي الله عنه: أَنَّ النَّبِيَّ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ دَخَلَ مَكَّةَ وَعَلَيْهِ مِغْفَرٌ، فَقِيلَ لَهُ: هَذَا ابْنُ خَطَلٍ مُتَعَلِّقٌ بِأَسْتَارِ الْكَعْبَةِ، فَقَالَ: اقْتُلُوه". [أخرجه البخاري ومسلم.]**

**61. "Laga soo weriyey Anas bin Maalik radiyallaahu canhu: Nabiga sallallaahu calayhi wasallam wuxuu galay Makka isaga oo xiran koofiyad bir ah. Markaas ayaa lagu yiri: Kani waa Ibnu Khadal oo ku dheggan daahyada Kacbada. Markaas ayuu yiri: Dila." [waxaa soo saaray Al-Bukhaari iyo Muslim].**

- Koofiyadda birta ah: waa gaashaan loo sameeyo cabbirka madaxa oo loo xirto sida koofiyad dagaal.

- Ibnu Khadal: Nabiga sallallaahu calayhi wasallam wuxuu amray in la dilo maalintii furashadii Makka. Cabdullaahi bin Khadal wuxuu lahaa adeege muslim noqday, dabadeedna wuu dilay. Wuxuu sidoo kale Nabiga sallallaahu calayhi wasallam ku caayi jiray gabayo, wuxuuna lahaa laba addoomo dumar ah oo u heesi jiray cayda Nabiga sallallaahu calayhi wasallam. Ibnu Khadal hore ayuu muslim u ahaa balse wuu riddooday.

Allaahow waxaan kaa baryaynaa ku sugnaanshaha diintaada.

******************

## 17. Qaybo ka mid ah waxa laga weriyey cimaamadda Rasuulka sallallaahu calayhi wasallam

**62. "عن جابر قال: دخل النبي صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ مَكَّةَ يَوْمَ الْفَتْحِ وَعَلَيْهِ عِمامة سوداء". [أخرجه مسلم.]**

**62. "Laga soo weriyey Jaabir, wuxuu yiri: Nabiga sallallaahu calayhi wasallam wuxuu galay Makka maalintii furashada isaga oo xiran cimaamad madow." [waxaa soo saaray Muslim].**

- Cimaamad: waa dhar madaxa lagu duubo.

**63. "عَنِ ابْنِ عُمَرَ رضي الله عنهما قَالَ: كَانَ النَّبِيُّ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ إِذَا اعْتَمَّ سَدَلَ عِمَامَتَهُ بَيْنَ كَتِفَيْهِ .قَالَ نَافِعٌ: وَكَانَ ابْنُ عُمَرَ، يَفْعَلُ ذَلِكَ .قَالَ عُبَيْدُ اللهِ: وَرَأَيْتُ الْقَاسِمَ بْنَ مُحَمَّدٍ، وَسَالِمًا يَفْعَلَانِ ذَلِكَ". [أخرجه الترمذي.]**

**63. "Laga soo weriyey Ibnu Cumar radiyallaahu canhumaa, wuxuu yiri: Nabiga sallallaahu calayhi wasallam marka uu cimaamadda xirto wuxuu daadin jiray cimaamaddiisa inta u dhexaysa labada garab. Naafic wuxuu yiri: Ibnu Cumarna sidaas ayuu samayn jiray. Cubaydullaah wuxuu yiri: Waxaan arkay Al-Qaasim bin Maxamed iyo Saalim oo sidaas samaynaya." [waxaa soo saaray At-Tirmidi].**

- Cimaamadda xirto: wuxuu cimaamadda saari jiray madaxiisa.

- Daadin jiray: wuxuu hoos u sii dayn jiray qayb ka mid ah cimaamadda inta u dhexaysa labada garab. Qaybtaas soo hartay waxay ahaan jirtay dhabarka inta u dhexaysa labada garab.

Cimaamaddu waxay leedahay laba nooc:

10. Wuxuu cunay qayb hilib duban ah.
11. Wuxuu jeclaan jiray hilibka garabka hore, wuuna ka qaniinay caarada ilkihiisa.
12. Wuxuu jeclaan jiray thariidka.
13. Wuxuu cunay caano qallalan oo adag.
14. Aroos-casuumaddiisa sayyidah Safiyyah ayuu ku bixiyey timir iyo sawiq.
15. Wuxuu cunay saxan timir bisil ah.
16. Wuxuu cunay xays, oo ah timir la cajiimay oo lagu daray subag iyo daqiiq ama caano qallalan.
17. Wuxuu jeclaan jiray thuflka, oo ah waxa ku hara gunta dheriga.

******************

## 26. Qaar ka mid ah wixii laga weriyey sifada waysaysiga Rasuulka sallallaahu calayhi wasallam marka cuntada la joogo

**103. "عَنِ ابْنِ عَبَّاسٍ رضي الله عنه، أَنَّ رَسُولَ اللهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ خَرَجَ مِنَ الْخَلاَءِ فَقُرِّبَ إِلَيْهِ الطَّعَامُ فَقَالُوا: أَلاَ نَأْتِيكَ بِوَضُوءٍ؟ قَالَ: إِنَّمَا أُمِرْتُ بِالْوُضُوءِ إِذَا قُمْتُ إِلَى الصَّلاَةِ ".[أخرجه أحمد وأبو داود والترمذي.]**

**103. "Waxaa laga soo weriyey Ibnu Cabbaas radiyallaahu canhu in Rasuulkii Allaah sallallaahu calayhi wasallam uu ka baxay meesha lagu xaajo guto, markaas ayaa cunto loo soo dhoweeyey. Waxay yiraahdeen: Ma kuu keennaa biyo waysaysi? Wuxuu yiri: Waxaa keliya la i faray inaan waysaysto marka aan salaadda u kaco." [waxaa soo saaray Axmed, Abuu Daawuud iyo At-Tirmidi].**

- Biyaha waysaysiga: waa biyaha lagu waysaysto.

- Waysaysi: waa ficilka waysaysiga laftiisa.

Xadiiskan waxaan ka fahmaynaa in waysaysiga cuntada ka dib uusan sunnad ahayn, balse qofku wuu waysaystaa marka uu cibaado u kacayo.

******************

## 27. Qaar ka mid ah wixii laga weriyey hadalkii Rasuulka sallallaahu calayhi wasallam ka hor cuntada iyo marka uu ka dhammeeyo

**104. "عَنْ عَائِشَةَ رضي الله عنها، قَالَتْ: قَالَ رَسُولُ اللهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ: إِذَا أَكَلَ أَحَدُكُمْ فَنَسِيَ أَنْ يَذْكُرَ اللَّهَ تَعَالَى عَلَى طَعَامِهِ فَلْيَقُلْ: بِسْمِ اللهِ أَوَّلَهُ وَآخِرَهُ". [أخرجه أبو داود.]**

**104. "Waxaa laga soo weriyey Caa'isha radiyallaahu canhaa inay tiri: Rasuulkii Allaah sallallaahu calayhi wasallam wuxuu yiri: Marka midkiin wax cuno oo uu illoobo inuu Allaah tabaaraka wa tacaalaa ku xuso cuntadiisa, ha yiraahdo: bismillaah bilowgeeda iyo dhammaadkeeda." [waxaa soo saaray Abuu Daawuud].**

**105. "عَنْ عُمَرَ بْنِ أَبِي سَلَمَةَ رضي الله عنه، أَنَّهُ دَخَلَ عَلَى رَسُولِ اللهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ وَعِنْدَهُ طَعَامٌ فَقَالَ: ادْنُ يَا بُنَيَّ فَسَمِّ اللَّهَ تَعَالَى وَكُلْ بِيَمِينِكَ وَكُلْ مِمَّا يَلِيكَ". [ أخرجه البخاري ومسلم.]**

**105. "Waxaa laga soo weriyey Cumar bin Abii Salamah radiyallaahu canhu inuu u galay Rasuulkii Allaah sallallaahu calayhi wasallam, iyadoo cunto agtiisa taal. Markaas ayuu yiri: Soo dhowow wiilkaygiiyow, Allaah tabaaraka wa tacaalaa magaciisa ku bilow, midigtaada ku cun, kana cun waxa ku xiga." [waxaa soo saaray Al-Bukhaari iyo Muslim].**

**106. "عَنْ أَبِي أُمَامَةَ رضي الله عنه قَالَ: كَانَ رَسُولُ اللهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ إِذَا رُفِعَتِ الْمَائِدَةُ مِنْ بَيْنِ يَدَيْهِ يَقُولُ: الْحَمْدُ لِلَّهِ حَمْدًا كَثِيرًا طَيِّبًا مُبَارَكًا فِيهِ غَيْرَ مُودَّعٍ وَلاَ مُسْتَغْنًى عَنْهُ رَبَّنَا". [ أخرجه أحمد وأبو داود والترمذي.]**

**106. "Waxaa laga soo weriyey Abuu Umaamah radiyallaahu canhu inuu yiri: Rasuulkii Allaah sallallaahu calayhi wasallam marka miiska cuntada laga qaado hortiisa wuxuu oran jiray: Alxamdulillaah, ammaan badan, wanaagsan, oo barakaysan; Rabbiyow, ma aha mahad la iska tagayo, mana aha mid laga maarmi karo." [waxaa soo saaray Axmed, Abuu Daawuud iyo At-Tirmidi].**

- Aan la iska tagayn: micnuhu waa in dalabkeeda aan la dayn, ee mar walba Allaah laga dalbado oo looga baahan yahay.

- Aan laga maarmi karin: micnuhu waa inaan laga tagayn rabitaanka waxa Allaah agtiisa yaal; waan dalbanaynaa oo waan rabnaa.

**107. "عَنْ عَائِشَةَ رضي الله عنها، قَالَتْ: كَانَ النَّبِيُّ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ يَأْكُلُ الطَّعَامَ فِي سِتَّةٍ مِنْ أَصْحَابِهِ فَجَاءَ أَعْرَابِيٌّ فَأَكَلَهُ بِلُقْمَتَيْنِ، فَقَالَ رَسُولُ اللهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ: لَوْ سَمَّى لَكَفَاكُمْ". [أخرجه الترمذي.]**

**107. "Waxaa laga soo weriyey Caa'isha radiyallaahu canhaa inay tiri: Nabiga sallallaahu calayhi wasallam wuxuu cunto la cunayay lix ka mid ah asxaabtiisa, markaas ayaa nin reer baadiye ahi yimid oo laba luqmo ku cunay. Rasuulkii Allaah sallallaahu calayhi wasallam wuxuu yiri: Haddii uu magaca Allaah ku bilaabi lahaa, way idinku filnaan lahayd." [waxaa soo saaray At-Tirmidi].**

- Wuxuu cunto la cunayay lix ka mid ah asxaabtiisa: micnuhu waa inay sallallaahu calayhi wasallam kula wadaageen cunidda cuntada.

- **Faa'iido:**

Saxaabadu cuntada waxay ku bilaabi jireen magaca Allaah, markaas cuntadu way ku filnaan jirtay. Laakiin ka tagidda magaca Allaah marka cuntada la cunayo waxay baabi'isaa barakadeeda.

Naftaada, carruurtaada, iyo reerkaaga ku tababar in magaca Allaah cod la maqli karo lagu bilaabo marka cuntada loo fariisto, si qofka illooba uu u xusuusto.

**108. "عَنْ أَنَسِ بْنِ مَالِكٍ رضي الله عنه قَالَ: قَالَ رَسُولُ اللهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ: إِنَّ اللَّهَ لَيَرْضَى عَنِ الْعَبْدِ أَنْ يَأْكُلَ الأَكْلَةَ فيحمده عليها أَوْ يَشْرَبَ الشَّرْبَةَ فَيَحْمَدَهُ عَلَيْهَا ". [أخرجه مسلم.]**

**108. "Waxaa laga soo weriyey Anas bin Maalik radiyallaahu canhu inuu yiri: Rasuulkii Allaah sallallaahu calayhi wasallam wuxuu yiri: Allaah wuu ka raalli noqdaa addoonka inuu cuno cunto oo uu uga mahadceliyo, ama cabo cabbid oo uu uga mahadceliyo." [waxaa soo saaray Muslim].**

- **Faa'iido:**

1. Ka hor intaadan cuntada bilaabin, magaca Allaah ku bilow, xusuusina dadka kugu xeeran; qofkii aan magaca Allaah ku bilaabin, shaydaanku wuu la cunaa.
2. Haddii aad cuntada bilowdo oo aad magaca Allaah ku bilaabiddiisa illowdo, dheh: bismillaah bilowgeeda iyo dhammaadkeeda.
3. Xafid ducada dhammaadka cuntada, hana fududaysan erayga "alxamdulillaah", waayo haddii uu qalbigaaga si daacad ah uga baxo miisaanka ayuu buuxinayaa, Allaahna adiga ayuu kugu raalli noqonayaa.

Marka aad cuntadaada ka dhammaato dheh:

Alxamdulillaah, ammaan badan, wanaagsan, oo barakaysan; Rabbiyow, ma aha mahad la iska tagayo, mana aha mid laga maarmi karo.

Ama dheh: Alxamdulillaah, Allaahii i quudiyey cuntadan, iguna arsaaqay anigoon lahayn xeelad iyo awood midna.

Haddii aad caano cabtona dheh: Allaahow, noogu barakee, noogana siyaadi.

*****************

## 28. Qaar ka mid ah wixii laga weriyey koobkii Rasuulka sallallaahu calayhi wasallam

**109. "عَنْ أَنَسٍ رضي الله عنه قَالَ: لَقَدْ سَقَيْتُ رَسُولَ اللهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ بِهَذَا الْقَدَحِ الشَّرَابَ كُلَّهُ، الْمَاءَ وَالنَّبِيذَ وَالْعَسَلَ وَاللَّبَنَ" [أخرجه مسلم].**

**109. "Waxaa laga soo weriyey Anas radiyallaahu canhu inuu yiri: Rasuulkii Allaah sallallaahu calayhi wasallam waxaan ku waraabiyey koobkan dhammaan cabbitaannada: biyaha, nabiidka, malabka, iyo caanaha." [waxaa soo saaray Muslim].**

- Koob: waa weel cabbid oo aan lahayn gacan-qabsi.

- Nabiid: waa timir ama sabiib ama wax la mid ah oo biyo lagu qooyey, dhadhankiisuna macaan yahay.

- **Faa'iido:**

Nabiidku waa biyo lagu rido timir, sabiib, ama wax kasta oo macaan. Waxaa lagu daayaa biyaha oo lagu qooyaa si biyuhu u qaataan dhadhanka waxa lagu riday. Laakiin haddii uu khamri noqdo, wuxuu noqonayaa khamri xaaraan ah haddii uu sakhraamiyo.

Maalmahan, miro ama liinno biyo lagu qooyo waxay noqotay arrin faafsan oo la yaqaan.

Cabbitaanka Nabiga sallallaahu calayhi wasallam wuxuu ahaa timir iyo sabiib biyo lagu qooyey.

******************

## 29. Wixii laga weriyey mirihii Rasuulka sallallaahu calayhi wasallam

**110. "عَنْ عَبْدِ اللهِ بن جعفر رضـــي الله عنه قَالَ: كَانَ النَّبِيُّ صَــلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَــلَّمَ يَأْكُلُ الْقِثَّاءَ بِالرُّطَبِ". [ أخرجه البخاري ومسلم.]**

**110. "Waxaa laga soo weriyey Cabdillaah bin Jacfar radiyallaahu canhu inuu yiri: Nabiga sallallaahu calayhi wasallam wuxuu cuni jiray wax khiyaarka u eg iyo timir bisil." [waxaa soo saaray Al-Bukhaari iyo Muslim].**

- Wax khiyaarka u eg: waxaa la yiri waa khiyaar, laakiin sida saxda ah waa wax khiyaarka u eg oo ka tirsan noociisa.

Sallallaahu calayhi wasallam wuxuu wax khiyaarka u eg la cuni jiray timir bisil. Cuntadani waxay isu keentay dhadhan caadi ah iyo dhadhan macaan.

**111. "عَنْ عَائِشَــةَ رضــي الله عنـها: أَنَّ النَّبِيَّ صَــلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَــلَّمَ كَانَ يَأْكُلُ الْبِطِّيخَ بِالرُّطَبِ" .[أخرجه أبو داود والترمذي.]**

**111. "Waxaa laga soo weriyey Caa'isha radiyallaahu canhaa in Nabiga sallallaahu calayhi wasallam uu qaraha jaallaha ah la cuni jiray timir bisil." [waxaa soo saaray Abuu Daawuud iyo At-Tirmidi].**

- Qaraha jaallaha ah: waa shamaam huruud ah oo la jaanqaada timirta bisil.

**112. "عَنْ أَنَسِ بْنِ مَالِكٍ رضـي الله عنه قَالَ: رَأَيْتُ رَسُولَ اللهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ يَجْمَعُ بَيْنَ الْخِرْبِزِ وَالرُّطَبِ" .[ أخرجه أحمد والنسائي.]**

**112. "Waxaa laga soo weriyey Anas bin Maalik radiyallaahu canhu inuu yiri: Waxaan arkay Rasuulkii Allaah sallallaahu calayhi wasallam oo isku daraya qaraha jaallaha ah iyo timir bisil." [waxaa soo saaray Axmed iyo An-Nasaa'i].**

- Qaraha jaallaha ah: waa shamaam.

- **Faa'iido:**

Mirihii Rasuulka sallallaahu calayhi wasallam:

- Timir bisil.
- Wax khiyaarka u eg, oo ka mid ah nooca khiyaarka.
- Qaraha jaallaha ah, oo ka mid ah nooca shamaamka.

Aan ku dadaalno ku dhaqanka sunnada Nabigeenna. Imaam Axmed raximahullaah wuxuu yiri: Ma aqaan sunnad ka sugnaatay Rasuulkii Allaah sallallaahu calayhi wasallam oo aanan ku dhaqmin, xitaa hal mar, marka laga reebo sunnada godka lagu dhuunto saddex maalmood. Markii imtixaanku yimid, god ayaan ku dhuuntay saddex maalmood, markaas ayaan Allaah tabaaraka wa tacaalaa ku mahadiyey.

Allaah agtiisa ajar uga niyeyso raadraacaaga barashada sunnada Rasuulka sallallaahu calayhi wasallam. Ajar uga niyeyso ku mashquulka caadooyinkiisa. Muslimku waa qof hammi sare leh, maxaa yeelay wuxuu raacayaa Nabi hormuud ah oo hammi sare leh. Waa lama huraan in adduunka lagu raaco si aan u helno quruxda la kulanka gacaliyaha la doortay sallallaahu calayhi wasallam. Allaah tabaaraka wa tacaalaa wuxuu yiri: dheh:

﴿قُلْ إِن كُنتُمْ تُحِبُّونَ اللَّهَ فَاتَّبِعُونِي يُحْبِبْكُمُ اللهُ﴾ [آل عمران: 31]

**﴿Haddaad Alle jeceshihiin, i soo raaca, Alle baa idin jeclaan oo idiin dhaafi dunuubtiinna. Alle waa Denbi Dhaaf Badane, Naxariis Badan﴾ [Aala Cimraan: 31]**

Marka aan niyadahan iyo dareennadan qalbiga ku soo celinno, Allaah cazza wa jall waa ka deeqsinimo badan yahay inuu innaga celiyo annagoo khasaaray. U hilowga iyo jacaylka Rasuulka sallallaahu calayhi wasallam waa maqaam sare oo mu'minka loogu qaado darajooyinka sare, ilaa jacaylkiisa Rasuulka sallallaahu calayhi wasallam uu gaarsiiyo derisnimadiisa iyo la joogistiisa weligiis.

******************

## 30. Qaar ka mid ah wixii laga weriyey sifada cabbidda Rasuulka sallallaahu calayhi wasallam

**113. "عَنْ عَائِشَةَ رضي الله عنها، قَالَتْ: كَانَ أَحَبّ الشَّرَابِ إِلَى رَسُولِ اللهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ الْحُلْوُ الْبَارِدُ". [أخرجه أحمد والترمذي].**

**113. "Waxaa laga soo weriyey Caa'isha radiyallaahu canhaa inay tiri: Cabbitaanka ugu jeclaa Rasuulkii Allaah sallallaahu calayhi wasallam wuxuu ahaa mid macaan oo qabow dhexdhexaad ah." [waxaa soo saaray Axmed iyo At-Tirmidi].**

- Macaan:

1. Biyo macaan oo nadiif ah; macaanka biyuhuna heerar ayuu leeyahay. Nabiga sallallaahu calayhi wasallam wuxuu jeclaa kuwa ugu macaan, waayo tusaale ahaan biyaha ceelasha qaarkood milix bay leeyihiin.
2. Macaanku wuxuu sidoo kale ka kooban yahay biyo lagu daray wax macaaneeya, sida sabiib ama malab.

- Qabow: dhexdhexaad ah.

******************

## 31. Qaybo ka mid ah waxa laga weriyey sifada cabbidda Rasuulka sallallaahu calayhi wasallam

**114 . "عَنِ ابْنِ عَبَّاسٍ رضي الله عنه: أَنَّ النَّبِيَّ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ شَرِبَ مِنْ زَمْزَمَ وَهُوَ قَائِمٌ" .[أخرجه الترمذي].**

**114. “Waxaa laga soo weriyey Ibnu Cabbaas radiyallaahu canhu: Nabiga sallallaahu calayhi wasallam wuxuu ka cabbay biyaha Zamzam isagoo taagan.” [waxaa soo saaray At-Tirmidi].**

**115 . "عَنْ عَمْرِو بْنِ شُعَيْبٍ، عَنْ أَبِيهِ، عَنْ جَدِّهِ رضي الله عنه قَالَ: رَأَيْتُ رَسُولَ اللهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ يَشْرَبُ قَائِمًا وَقَاعِدًا" .[أخرجه أحمد والترمذي.]**

**115. “Waxaa laga soo weriyey Camr bin Shucayb, isaga oo ka werinaya aabbihii, isaga oo ka werinaya awoowgii radiyallaahu canhu, wuxuu yiri: Waxaan arkay Rasuulkii Allaah sallallaahu calayhi wasallam isagoo cabbaya marna taagan marna fadhiya.” [waxaa soo saaray Axmad iyo At-Tirmidi].**

**116 . "عَنِ النَّزَّالِ بْنِ سَبْرَةَ قَالَ: أُتِيَ عَلِيٌّ رضي اللّه عنه بِكُوزٍ مِنْ مَاءٍ، وَهُوَ فِي الرَّحْبَةِ، فَأَخَذَ مِنْهُ كَفًّا فَغَسَلَ يَدَيْهِ، وَمَضْمَضَ وَاسْتَنْشَقَ، وَمَسَحَ وَجْهَهُ وَذِرَاعَيْهِ وَرَأْسَهُ، ثُمَّ شَرِبَ وَهُوَ قَائِمٌ، ثُمَّ قَالَ: هَذَا وُضُوءُ مَنْ لَمْ يُحْدِثْ، هَكَذَا رَأَيْتُ رَسُولَ اللهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ فَعَلَ" . [أخرجه أحمد.]**

**116. “Waxaa laga soo weriyey An-Nazzaal bin Sabrah, wuxuu yiri: Cali radiyallaahu canhu ayaa loo keenay koodh biyo ah isagoo jooga barxadda, markaas ayuu gacantiisa ku qaatay xoogaa biyo ah, wuuna ku dhaqay labadiisa gacmood, wuuna luqluqday wuuna sanka biyaha geliyey, wuxuuna masaxay wajigiisa iyo labadiisa gacmood iyo madaxiisa, dabadeedna wuu cabbay isagoo taagan, kadib wuxuu yiri: Tani waa waysaysiga qof aan wax jabin waysaysigiisa, sidan ayaan u arkay Rasuulkii Allaah sallallaahu calayhi wasallam isagoo sameeyey.” [waxaa soo saaray Axmad].**

- Koodh: weel leh gacan ama qabsato.

- Barxadda: barxadda masaajidka Kuufa oo ah meel ballaaran oo ku dhex taalla.

- **Faa’iido:**

Waysaysigu waa laba nooc:

1. Waysaysi shareeci ah oo salaadda loo sameeyo.
2. Waysaysi luqavi ah oo loola jeedo nadiifin.

**117. "عَنْ أَنَسِ بْنِ مَالِكٍ رضي الله عنه، أَنَّ النَّبِيَّ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ: كَانَ يَتَنَفَّسُ فِي الإِنَاءِ ثَلاَثًا إِذَا شَرِبَ، وَيَقُولُ: هُوَ أَمْرَأُ وَأَرْوَى". [أخرجه مسلم وأحمد والترمذي.]**

**117. “Waxaa laga soo weriyey Anas bin Maalik radiyallaahu canhu in Nabiga sallallaahu calayhi wasallam uu neefta ka qaadi jiray weelka saddex jeer marka uu cabbayo,**

**wuxuuna oran jiray: Waa ka fudud yahay cabbidda kana waraab badan.” [waxaa soo saaray Muslim, Axmad iyo At-Tirmidi].**

- Wuxuu neefta ka qaadi jiray weelka saddex jeer: micnaha wuxuu neefta ku sii dayn jiray bannaanka weelka saddex jeer, waxaana loola jeedaa in cabbidda Nabiga sallallaahu calayhi wasallam ay ahayd saddex qaybood.

- Ka fudud yahay cabbidda: biyuhu si sahlan ayay hunguriga ugu degayaan.

- Kana waraab badan: harraadka ayuu si fiican u bi’iyaa, qofka sidan u cabbana wuu dhergaa wuuna waraabaa.

Tani waxay ka mid tahay kaamilnimada diinta Islaamka.. Shareecadu waxay la timaaddaa wax hagaajinaya diinta dadka, adduunkooda, caafimaadkooda iyo badqabkooda. Daraasado ayaa xaqiijiyey in cabbidda hal mar lagu wada cabo ay waxyeello u leedahay caafimaadka qofka iyo xubnaha jirka.

**118.."عَنْ عَبْدِ الرَّحْمَنِ بْنِ أَبِي عَمْرَةَ، عَنْ جَدَّتِه كَبْشَةَ رضي الله عنها، قَالَتْ: دَخَلَ عَلَيَّ النَّبِيُّ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ فَشَرِبَ مِنْ فِي قِرْبَةٍ مُعَلَّقَةٍ قَائِمًا، فَقُمْتُ إِلَى فِيهَا فَقَطَعْتُه". [ أخرجه الترمذي وابن ماجه.]**

**118. “Waxaa laga soo weriyey Cabdurraxmaan bin Abii Camrah, isaga oo ka werinaya ayeeydiis Kabshah radiyallaahu canhaa, waxay tiri: Nabiga sallallaahu calayhi wasallam ayaa ii soo galay, markaas ayuu ka cabbay afka qirbah sudhan isagoo taagan, dabadeed waan istaagay oo waxaan jaray afkeedii.” [waxaa soo saaray At-Tirmidi iyo Ibnu Maajah].**

- Qirbah: weel lagu kaydiyo cabbidda si ay qabow u ahaato, qirbahuna noocyo ayay leedahay, qaarna waxay leeyihiin af sida dhalada biyaha, waxaana laga sameeyaa harag la dubay.

- Afkeeda: afka sare ee qirbaha.

Kabshah waxay goysay qaybtaas si ay ugu haysato barakada candhuufta sharafta leh ee Nabiga sallallaahu calayhi wasallam maadaama afka Nabigu taabtay qirbaha.
Werin kale waxaa ku yimid inay goysay oo ay ka dhigtay weel ay ka cabto oo u eg koob harag ah... Allaah ha ka raalli noqdee, waxay heshay qaybteedii raadkii Nabiga sallallaahu calayhi wasallam.

- **Faa’iido:**

Arrinta cabbidda iyadoo taagan ayay culimadu ku kala aragti duwanaadeen:

1. In la oggolyahay cabbidda iyadoo taagan.
2. In la raaco axaadiista ka reebaysa cabbidda iyadoo taagan.
3. In la qaato rukhsadda ku timid axaadiista sheegaysa in Nabiga sallallaahu calayhi wasallam uu cabbay isagoo taagan iyo isagoo fadhiya.

Culimadu waxay isu waafajiyeen nusuustan, qaarna waxay yiraahdeen:

- Asalku waa in la cabo iyadoo la fadhiya.
- Qaarna waxay yiraahdeen cabbidda isagoo taagan waxay ahayd bilowgii arrinta kadibna waa la nasakhay.
- Aragtida ugu xooggan, Allaah ayaana og, waa tan uu An-Nawawi doortay:
  • Asalku waa in la cabo iyadoo la fadhiya waana sunnada, hase yeeshee waa bannaan tahay in la cabo iyadoo taagan haddii loo baahdo.
  • Axaadiista ka reebaysa cabbidda iyadoo taagan waa karaaho ee ma aha xaaraan.
  • Waxaa la yiri axaadiista sheegaysa inuu sallallaahu calayhi wasallam cabbay isagoo taagan waxay u yimaadeen caddaynta bannaanida, hase yeeshee waxaa ka wanaagsan in la cabo iyadoo la fadhiya.

▪ Rasuulka sallallaahu calayhi wasallam wuxuu ku cabbay:
- Koob: weel cabbid oo aan lahayn gacan.
- Koodh: weel leh gacan.
- Qirbah: weel lagu kaydiyo cabbidda oo laga sameeyo harag.

▪ Cabbidda Rasuulka sallallaahu calayhi wasallam:
- Macaan oo qabow dhexdhexaad ah (sida biyo ama timir iyo sabiib la qooyey).
- Caano (kuwaas oo ka kaafinaya cunto iyo cabbid).
- Biyaha Zamzam.
- Malab.

Allaahow nagu arsaaq rafiiqnimo Nabigeenna iyo gacaliyahayaga Maxamed sallallaahu calayhi wasallam iyo saxaabadiisa janno saqafkeedu yahay Carshiga Ar-Raxmaan.

## Iftiin

**Thowbaan wuxuu ahaa nin si aad ah u jecel Rasuulka sallallaahu calayhi wasallam, aadna ugu samir yaraa maqnaanshihiisa.. Maalin ayuu Nabigu sallallaahu calayhi wasallam arkay isagoo midabkiisu is beddelay jirkiisuna caatoobay, markaas ayuu mooday inuu xanuunsan yahay, wuxuuna ku yiri: "Thowbaanow, maxaa beddelay midabkaaga?" Thowbaan wuxuu yiri: "Rasuulkii Allaahow, wax xanuun ah iyo dhib ah ima hayo, balse markaan ku waayo waan kuu xiisaa oo waxaan dareemaa cidlo daran ilaa aan ku arko.**

**Allaah baan ku dhaartaye adigu waxaad iiga jeceshahay naftayda, ehelkayga iyo carruurtayda. Mararka qaarkood waxaan joogaa gurigayga markaas ayaan ku xusuustaa, mana samri karo ilaa aan kuu imaado oo aan ku eego. Markaan xusuusto aakhiro waxaan garwaaqsadaa inaad jannada dhexdeeda la kor yeeli doono anbiyada, aniguna haddaan jannada galo waxaan ka baqayaa inaanan ku arag." Markaas ayuu Allaah soo dejiyey aayaddiisa:**

**﴿وَمَن يُطِعِ اللَّهَ وَالرَّسُولَ فَأُولَئِكَ مَعَ الَّذِينَ أَنْعَمَ اللَّهُ عَلَيْهِم مِّنَ النَّبِين وَالصِّدِّيقِينَ وَالشُّهَدَاءِ وَالصَّالِحِينَ وَحَسُنَ أُولَئِكَ رَفِيقًا﴾ [النساء: 69].**

**﴿Qofkii adeeca Alle iyo Rasuulka (Nabi Muxammad), kuwaa waxay ahaan la jirka kuwa uu u nicmeeyey Alle, ee leh Nabiyada iyo run badnayaasha iyo shuhadada iyo wanaagsanayaalka, wanaagsanaana kuwaas oo lala noqdo rafiiq﴿[An-nisaa: 69].**

**Saxiixul Bukhaari waxaa ku sugan xadiis ay culimadu ugu magac dareen xadiiska jacaylka, waana xadiiska bishaaradda leh. Nabigu sallallaahu calayhi wasallam wuxuu yiri: "Qofku wuxuu la jiri doonaa cidda uu jecel yahay." Waxaan Allaah marag uga dhigaynaa inaan jecelnahay Rasuulka sallallaahu calayhi wasallam iyo saxaabadiisa, sidoo kalena waxaan Allaah marag uga dhigaynaa inaan jecelnahay qof kasta oo weynaynaya Allaah iyo sunnada Rasuulkiisa isla markaana faafinaya diintan.**

**Jacaylkuna waa raacid:**

**﴿فَاتَّبِعُونِي يُحْبِبْكُمُ اللَّهُ﴾ [آل عمران: 31]**

**﴿Alle baa idin jeclaan oo idiin dhaafi dunuubtiinna﴿[Aala Cimraan: 31]**

**Allaahow qalbiyadeenna ka buuxi wixii aad ka buuxisay qalbiyada saxaabada, taabiciinta iyo addoomadaada suuban.**

******************

# 32. Qaybo ka mid ah waxa laga weriyey udgoonsiga Rasuulka sallallaahu calayhi wasallam

**119. "عَنْ مُوسَى بْنِ أَنَسِ بْنِ مَالِكٍ، عَنْ أَبِيهِ رضي الله عنه قَالَ: كَانَت لِرَسُولِ اللهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ سُكَّةٌ يَتَطَيَّبُ مِنْهَا". [أخرجه الترمذي وابن ماجه.]**

**119. "Waxaa laga soo weriyey Muusaa bin Anas bin Maalik isaga oo ka werinaya aabbihii radiyallaahu canhu, wuxuu yiri: Rasuulkii Allaah sallallaahu calayhi wasallam**

**wuxuu lahaa weel cadar oo uu ka udgoonsan jiray." [waxaa soo saaray At-Tirmidi iyo Ibnu Maajah].**

- Weel cadar: weel lagu rito cadarka.

**120. "عَنْ ثُمَامَةَ بْنِ عَبْدِ اللهِ قَالَ: كَانَ أَنَسُ بْنُ مَالِكٍ رضي الله عنه لاَ يَرُدُّ الطِّيبَ، وَقَالَ أَنَسٌ: إِنَّ النَّبِيَّ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ كَانَ لاَ يَرُدُّ الطِّيبَ".[أخرجه البخاري.]**

**120. "Waxaa laga soo weriyey Thumaamah bin Cabdillaah, wuxuu yiri: Anas bin Maalik radiyallaahu canhu ma diidi jirin cadarka, Anasna wuxuu yiri: Nabiga sallallaahu calayhi wasallam ma diidi jirin cadarka." [waxaa soo saaray Al-Bukhaari].**

**121. "عَنْ أَبِي هُرَيْرَةَ رضي الله عنه قَالَ: قَالَ رَسُولُ اللهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ: طِيبُ الرِّجَالِ مَا ظَهَرَ رِيحُهُ وَخَفِيَ لَوْنُهُ، وَطِيبُ النِّسَاءِ مَا ظَهَرَ لَوْنُهُ وَخَفِيَ رِيحُهُ". [أخرجه أحمد وأبو داود والترمذي والنسائي.]**

**121. "Waxaa laga soo weriyey Abuu Hurayrah radiyallaahu canhu, wuxuu yiri: Rasuulkii Allaah sallallaahu calayhi wasallam wuxuu yiri: Cadarka ragga waa kan urtiisu muuqato midabkiisuna qarsoon yahay, cadarka haweenkuna waa kan midabkiisu muuqdo urtiisuna qarsoon tahay." [waxaa soo saaray Axmad, Abuu Daawuud, At-Tirmidi iyo An-Nasaa'i].**

- Micnaha: quruxda raggu waxay ku jirtaa cadarka iyo udgoonka ee ma aha midabbo soo jiidasho leh, quruxda haweenkuna waxay ku jirtaa midabbada iyada oo aanay is udgoonin. Waxa kale oo laga fahmayaa in cadarka timaha iyo jirka lagu marsado uu habboon yahay inuu yeesho ur aan lahayn midab ragga. Haweenkuna cadarkoodu waa inuu yeeshaa midab muuqda iyo ur qarsoon. Haweeneyda waxaa ka xaaraan ah inay is udgooniso meel ka baxsan gurigeeda marka laga reebo iyadoo joogta maxramadeeda oo aanay ragga kale ag joogin.

******************

## 33. Qaybo ka mid ah waxa laga weriyey hadalka Rasuulka sallallaahu calayhi wasallam

**122. "عَنْ عَائِشَةَ رضي الله عنها ، قَالَتْ: مَا كَانَ رَسُولُ اللهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ يَسْرُدُ سرْدَكُمْ هَذَا، وَلَكِنَّهُ كَانَ يَتَكَلَّمُ بِكَلاَمٍ بَيِّنٍ فَصْلٍ، يَحْفَظُهُ مَنْ جَلَسَ إِلَيْهِ".[أخرجه أحمد والترمذي .]**

**122. "Waxaa laga soo weriyey Caa'isha radiyallaahu canhaa, waxay tiri: Rasuulkii Allaah sallallaahu calayhi wasallam uma hadli jirin si degdeg ah oo isku xiran sida hadalkiinnaan oo kale, balse wuxuu ku hadli jiray hadal cad oo kala soocan, qofkii la fadhiyaana wuu xafidi jiray." [waxaa soo saaray Axmad iyo At-Tirmidi].**

**123. "عَنْ أَنَسِ بْنِ مَالِكٍ رضي الله عنه قَالَ: كَانَ رَسُولُ اللهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ يُعِيدُ الْكَلِمَةَ ثَلاَثًا لِتُعْقَلَ عَنْهُ". [أخرجه الترمذي.]**

**123. "Waxaa laga soo weriyey Anas bin Maalik radiyallaahu canhu, wuxuu yiri: Rasuulkii Allaah sallallaahu calayhi wasallam wuxuu ku celin jiray ereyga saddex jeer si looga fahmo." [waxaa soo saaray At-Tirmidi].**

- Si looga fahmo: si loo garto loona fahmo.
Sallallaahu calayhi wasallam wuxuu ku hadli jiray hadal dhawaaqiisa iyo macnihiisuba cad yihiin, qofkii la fadhiyaana wuu xafidi jiray sababo la xiriira saamaynta uu ku yeeshay iyo koobnaantiisa.

- Wuxuu ku celin jiray ereyga saddex jeer, balse ma ahayn hadal kasta.

- Wuxuu ku hadli jiray jawaamicda kalimka, kuwaas oo ah ereyo gaaban oo leh macnayaal waaweyn.

******************

# 34. Qaybo ka mid ah waxa laga weriyey qosolka Rasuulka sallallaahu calayhi wasallam

**124. "عَنْ أَبِي ذَرٍّ رضي الله عنه قَالَ: قَالَ رَسُولُ اللهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ: إِنِّي لَأَعْلَمُ أَوَّلَ رَجُلٍ يَدْخُلُ الْجَنَّةَ وَآخِرَ رَجُلٍ يَخْرُجُ مِنَ النَّارِ يُؤْتَى بِالرَّجُلِ يَوْمَ الْقِيَامَةِ فَيُقَالُ: اعْرِضُوا عَلَيْهِ صِغَارَ ذُنُوبِهِ وَيُخَبَّأُ عَنْهُ كِبَارُهَا، فَيُقَالُ لَهُ: عَمِلْتَ يَوْمَ كَذَا وَكَذَا، كَذَا وكذا، وَهُوَ مُقِرٌّ لاَ يُنْكِرُ وَهُوَ مُشْفِقٌ مِنْ كِبَارِهَا فَيُقَالُ: أَعْطُوهُ مَكَانَ كُلِّ سَيِّئَةٍ عَمِلَهَا حَسَنَةً، فَيَقُولُ: إِنَّ لِي ذُنُوبًا لاَ أَرَاهَا هَهُنَا. قَالَ أَبُو ذَرٍّ رضي الله عنه: فَلَقَدْ رَأَيْتُ رَسُولَ اللهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ ضَحِكَ حَتَّى بَدَتْ نَوَاجِذُهُ" . [أخرجه أحمد.]**

**124. "Waxaa laga soo weriyey Abuu Dharr radiyallaahu canhu, wuxuu yiri: Rasuulkii Allaah sallallaahu calayhi wasallam wuxuu yiri: Anigu waan ogahay qofka ugu horreeya ee jannada geli doona iyo qofka ugu dambeeya ee naarta ka soo bixi doona. Nin ayaa la keeni doonaa maalinta qiyaamaha markaas ayaa lagu oran doonaa: U soo bandhiga dambiyadiisa yaryar, dambiyadiisa waaweynna waa laga qarin doonaa. Markaas ayaa lagu oran doonaa: Waxaad samaysay maalin hebel iyo hebel sidaas iyo sidaas, isaguna wuu qirayaa mana inkirayo, isagoo ka cabsanaya dambiyadiisa waaweyn. Markaas ayaa lagu oran doonaa: Halkii dambi kasta oo uu sameeyey sii xasanaad. Markaas ayuu oran doonaa: Waxaan leeyahay dambiyo kale oo aanan halkan ku arkayn." Abuu Dharr radiyallaahu canhu wuxuu yiri: Waxaan arkay Rasuulkii Allaah sallallaahu calayhi wasallam oo qoslay ilaa ay kasoo muuqdeen gowsihiisu." [waxaa soo saaray Axmad].**

- Ay kasoo muuqdeen gowsihiisu: waxaa muuqday ilkihiisa dambe ee ka dambeeya miciyaha, taasina waxay ahayd qosol.

**125. "عَنْ جَرِيرِ بْنِ عَبْدِ اللهِ رضي الله عنه قَالَ: مَا حَجَبَنِي رَسُولُ اللهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ مُنْذُ أَسْلَمْتُ وَلاَ رَآنِي إِلاَّ ضَحِكَ". [أخرجه البخاري ومسلم.]**

**125. "Waxaa laga soo weriyey Jariir bin Cabdillaah radiyallaahu canhu, wuxuu yiri: Tan iyo markii aan Islaamay, Rasuulkii Allaah sallallaahu calayhi wasallam igama uusan is qarin, mar kasta oo uu i arkana wuu ii dhoolla-caddayn jiray." [waxaa soo saaray Al-Bukhaari iyo Muslim].**

Sidee u qurux badan tahay akhlaaqdaadu gacaliyahayaga Rasuulkii Allaahow..

- Soo noolaynta sunnada:

Farxadda wajiga.. U dhoola-caddeeya ehelkiinna, carruurta, dadka tabarta yar iyo masaakiinta.. Ula dhaqma si dabacsan oo jilicsan.. Qalbiyadooda hagaajiya.. Tani waa sunnada Nabigiinna ee raaca.

**126. "عَنْ عَلِيِّ بْنِ رَبِيعَةَ قَالَ: شَهِدْتُ عَلِيًّا رضي الله عنه، أُتِيَ بِدَابَّةٍ لِيَرْكَبَهَا فَلَمَّا وَضَعَ رِجْلَهُ فِي الرِّكَابِ قَالَ: بِسْمِ اللهِ، فَلَمَّا اسْتَوَى عَلَى ظَهْرِهَا قَالَ: الْحَمْدُ لِلَّهِ، ثُمَّ قَالَ: {سُبْحَانَ الَّذِي سَخَّرَ لَنَا هَذَا وَمَا كُنَّا لَهُ مُقْرِنِينَ}، ثُمَّ قَالَ: الْحَمْدُ لِلَّهِ ثَلاَثًا، اللَّهُ أَكْبَرُ ثَلاَثًا، سُبْحَانَكَ إِنِّي قَدْ ظَلَمْتُ نَفْسِي، فَاغْفِرْ لِي فَإِنَّهُ لاَ يَغْفِرُ الذُّنُوبَ إِلاَّ أَنْتَ، ثُمَّ ضَحِكَ. قُلْتُ : مِنْ أَيِّ شَيْءٍ ضَحِكْتَ يَا أَمِيرَ الْمُؤْمِنِينَ؟ قَالَ: رَأَيْتُ رَسُولَ اللَّهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ صَنَعَ كَمَا صَنَعْتُ ثُمَّ ضَحِكَ فَقُلْتُ: مِنْ أَيِّ شَيْءٍ ضَحِكْتَ يَا رَسُولَ اللَّهِ؟ قَالَ: إِنَّ رَبَّكَ لَيَعْجَبُ مِنْ عَبْدِهِ إِذَا قَالَ: رَبِّ اغْفِرْ لِي ذُنُوبِي، إِنَّهُ لاَ يَغْفِرُ الذُّنُوبَ غيرك ". [أخرجه الترمذي.]**

**126. "Waxaa laga soo weriyey Cali bin Rabiiacah, wuxuu yiri: Waxaan goob joog u ahaa Cali radiyallaahu canhu iyadoo loo keenay neef uu fuulo. Markuu cagtiisa geliyey rikabka wuxuu yiri: bismillaahir raxmaanir raxiim. Markuu si fiican ugu fariistay dhabarkiisana wuxuu yiri: alxamdulillaah, kadib wuxuu yiri: subxaanallaah kii noo sakhiray kan annaguna aynaan awood u lahayn, kadib wuxuu yiri: alxamdulillaah saddex jeer, Allaahu akbar saddex jeer, subxaanallaahow waxaan dulmiyey naftayda ee ii dambi dhaaf, waayo dambiyada cid aan adiga ahayn ma dhaafto. Dabadeed wuu qoslay. Waxaan iri: Maxaad ka qososhay Amiirka mu'miniintow? Wuxuu yiri: Waxaan arkay Rasuulkii Allaah sallallaahu calayhi wasallam isagoo sameeyey sidaan sameeyey dabadeedna qoslay. Markaas ayaan iri: Maxaad ka qososhay Rasuulkii Allaahow? Wuxuu yiri: Rabbigaagu wuxuu la yaabaa addoonkiisa marka uu yiraahdo: Rabbiyow ii dambi dhaaf, isagoo og inaysan jirin cid dambiyada dhaafaysa adiga mooyee." [waxaa soo saaray At-Tirmidi].**

## Iftiin

**Waxaan joognaa waqti ay bateen shakiga laga gelinayo sunnada Nabiga sallallaahu calayhi wasallam iyo axaadiista saxiixa ah ee ku sugan Saxiixul Bukhaari.. Aan ku dhaqanno sunnad kasta oo aan maqalno, aanan soo noolaynno sunnooyinka Rasuulka sallallaahu calayhi wasallam annagoo ajar ka rajaynayna faafinta sunnada iyo difaacidda Rasuulka sallallaahu calayhi wasallam.. Nabigu sallallaahu calayhi wasallam wuxuu Xasan bin Thaabit oo ahaa gabyaagii Rasuulka ku yiri:**

**"إن روح القدس لا يزال يؤيدك ما نافحت عن الله ورسوله"[أخرجه مسلم]**

**"Ruuxul Qudus weli wuu ku taageerayaa inta aad Allaah iyo Rasuulkiisa difaacayso." [waxaa soo saaray Muslim.]**

**Difaacayso: u dooddayso.. Aan ku dhiirrigelinno dadka nagu hareeraysan inay ku daydaan sallallaahu calayhi wasallam, annagoo niyeysanayna inaan kor u qaadno xuska Maxamed sallallaahu calayhi wasallam.**
**Haddii ay iyagu ku faanaan astaamo ay leeyihiin, annagu waxaan ku faanaynaa ninka ugu weyn.. Allaahow nagu sugee xaqa kana dhig kuwa maqla hadalka dabadeedna raaca kan ugu wanaagsan.**

******************

# 35. Qaybo ka mid ah waxa laga weriyey sifada kaftanka Rasuulka sallallaahu calayhi wasallam

**127. "عَنْ أَنَسِ بْنِ مَالِكٍ رضـي الله عنه قال: إنَّ النَّبِيَّ صَـلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَـلَّمَ قَالَ لَـهُ: يَا ذَا الأُذُنَيْنِ، قَالَ أَبُو أُسَـامَةَ: يَعْنِي يُمَازِحُهُ". [أَخرجه الترمذي.]**

**127. "Waxaa laga soo weriyey Anas bin Maalik radiyallaahu canhu, wuxuu yiri: Nabiga sallallaahu calayhi wasallam wuxuu ku yiri: Labada dhegoodleeyow. Abuu Usaamah wuxuu yiri: wuxuu ula jeeday inuu la kaftamayay." [waxaa soo saaray At-Tirmidi].**

- Labada dhegoodleeyow: wuxuu sallallaahu calayhi wasallam u yiri ama si kaftan ah, ama si uu ugu dhiirrigeliyo dhagaysiga.

**128. "عَنْ أَنَسِ بْنِ مَالِكٍ رضـي الله عنه قَالَ: إِنْ كَانَ رَسُـولُ اللهِ صَـلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَـلَّمَ لَيُخَالِطُنَا حَتَّى يَقُولَ لأَخٍ لِي صَغِيرٍ: يَا أَبَا عُمَيْرٍ، مَا فَعَلَ النُّغَيْرُ؟ قَالَ أَبُو عِيسَى: وَفِقْهُ هَذَا الْحَدِيثِ أَنَّ النَّبِيَّ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ :كَانَ يُمَازِحُ، وفِيهِ أَنَّهُ كَنَّى غُلاَمًا صَـغِيرًا فَقَالَ لَهُ: يَا أَبَا عُمَيْرٍ .وَفِيهِ أَنَّهُ لاَ بَأْسَ أَنْ يُعْطَى الصَّـبِيُّ الطَّيْرَ لِيَلْعَبَ بِهِ .وَإِنَّمَا قَالَ لَهُ النَّبِيُّ صَـلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَـلَّمَ: يَا أَبَا عُمَيْرٍ، مَا فَعَلَ النُّغَيْرُ؟ لأَنَّهُ كَانَ لَهُ نُغَيْرٌ يَلْعَبُ بِهِ فَمَاتَ، فَحَزِنَ الْغُلاَمُ عَلَيْهِ فَمَازَحَهُ النَّبِيُّ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ فقال: يا أَبَا عُمَيْرٍ، مَا فَعَلَ النُّغَيْرُ؟". [أخرجه البخاري ومسلم.]**

**128. “Waxaa laga soo weriyey Anas bin Maalik radiyallaahu canhu, wuxuu yiri: Rasuulkii Allaah sallallaahu calayhi wasallam wuu nala dhex geli jiray ilaa uu walaal yar oo aan lahaa ku oran jiray: Abuu Cumayrow, maxaa ku dhacay Nughayrkii? Abuu Ciisaa wuxuu yiri: Fiqiga xadiiskan waxaa ka mid ah in Nabiga sallallaahu calayhi wasallam uu kaftami jiray. Waxa kale oo ku jira inuu wiil yar kunyo u bixiyey, wuxuuna ku yiri: Abuu Cumayrow. Waxa kale oo ku jira in aysan dhib lahayn in ilmaha yar la siiyo shimbir uu ku ciyaaro. Nabiga sallallaahu calayhi wasallam wuxuu ku yiri: Abuu Cumayrow, maxaa ku dhacay Nughayrkii? Sababtoo ah wuxuu lahaa Nughayr uu ku ciyaaro, wuuna dhintay, wiilkiina wuu ka murugooday, markaas ayuu Nabigu sallallaahu calayhi wasallam la kaftamay oo yiri: Abuu Cumayrow, maxaa ku dhacay Nughayrkii?” ]waxaa soo saaray Al-Bukhaari iyo Muslim].**

- Wuu nala dhex geli jiray: wuu nala kaftami jiray wuuna noo dabacsanaan jiray.

- Nughayr: waa shimbir la yaqaan oo u eg shimbirta yar.

**129. "عَنْ أَبِي هُرَيْرَةَ رضـــي الله عنه قَالَ: قَالُوا: يَا رَسُـــولَ اللهِ! إِنَّكَ تُدَاعِبُنَا قَالَ: إِنِّي لاَ أَقُولُ إِلاَ حَقًّا". [ أخرجه الترمذي.]**

**129. “Waxaa laga soo weriyey Abuu Hurayrah radiyallaahu canhu, wuxuu yiri: Waxay yiraahdeen: Rasuulkii Allaahow, adigu waad nala kaftantaa. Wuxuu yiri: Anigu ma iraahdo wax aan xaq ahayn.” [waxaa soo saaray At-Tirmidi].**

**130. "عَنْ أَنَسِ بْنِ مَالِكٍ رضي الله عنه، أَنَّ رَجُلاً مِنْ أَهْلِ الْبَادِيَةِ كَانَ اسْمُهُ زَاهِرًا وَكَانَ يُهْدِي إِلَى النَّبِيِّ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ هَدِيَّةً مِنَ الْبَادِيَةِ، فَيُجَهِّزُهُ النَّبِيُّ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ إِذَا أَرَادَ أَنْ يَخْرُجَ، فَقَالَ النَّبِيُّ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ: إِنَّ زَاهِرًا بَادِيَتُنَا وَنَحْنُ حَاضِرُوهُ. وَكَانَ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ يُحِبُّهُ وَكَانَ رَجُلاً دَمِيمًا فَأَتَاهُ النَّبِيُّ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ يَوْمًا وَهُوَ يَبِيعُ مَتَاعَهُ فَاحْتَضَنَهُ مِنْ خَلْفِهِ وَهُوَ لاَ يُبْصِرُهُ، فَقَالَ: مَنْ هَذَا؟ أَرْسِلْنِي. فَالْتَفَتَ فَعَرَفَ النَّبِيَّ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ فَجَعَلَ لاَ يَأْلُو مَا أَلْصَقَ ظَهْرَهُ بِصَدْرِ النَّبِيِّ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ حِينَ عَرَفَهُ، وَجَعَلَ النَّبِيُّ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ يَقُولُ: مَنْ يَشْتَرِي هَذَا الْعَبْدَ؟ فَقَالَ: يَا رَسُولَ اللَّهِ، إِذًا وَاللَّهِ تَجِدُنِي كَاسِدًا، فَقَالَ النَّبِيُّ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ: لَكِنْ عِنْدَ اللهِ لَسْتَ بِكَاسِدٍ - أَوْ قَالَ-: أَنْتَ عِنْدَ اللهِ غَالٍ" .[أخرجه أحمد.]**

**130. “Waxaa laga soo weriyey Anas bin Maalik radiyallaahu canhu in nin reer baadiye ah oo magaciisu ahaa Zaahir uu Nabiga sallallaahu calayhi wasallam hadiyad uga keeni jiray baadiyaha, Nabiguna sallallaahu calayhi wasallam wuu u diyaarin jiray wixii uu u baahnaa marka uu doonayo inuu baxo. Nabiga sallallaahu calayhi wasallam wuxuu yiri: Zaahir waa baadiyaheenna, annaguna waxaan nahay reer magaaladiisa. Sallallaahu calayhi wasallam wuu jeclaa, wuxuuna ahaa nin muuqaal ahaan aan qurux badnayn. Maalin ayuu Nabigu sallallaahu calayhi wasallam u yimid isagoo alaabtiisa iibinaya, markaas ayuu gadaashiisa ka qabsaday isagoon arkayn. Wuxuu yiri: Waa kuma kan? I sii daa. Markaas ayuu soo jeestay oo gartay Nabiga sallallaahu calayhi wasallam, wuxuuna bilaabay inuusan waxba ka reebin**

**ku dhejinta dhabarkiisa laabta Nabiga sallallaahu calayhi wasallam markii uu gartay. Nabiguna sallallaahu calayhi wasallam wuxuu yiri: Yaa iibsanaya addoonkan? Wuxuu yiri: Rasuulkii Allaahow, haddii sidaas tahay, Allaah baan ku dhaartaye waxaad iga heli doontaa mid aan qiimo lahayn. Nabiga sallallaahu calayhi wasallam wuxuu yiri: Laakiin agta Allaah adigu qiimo la'aan ma tihid, ama wuxuu yiri: Adigu agta Allaah qaali ayaad ka tahay." [waxaa soo saaray Axmad].**

- Baadiyaheenna: marka aan wax uga baahanno baadiyaha, Zaahir ayaa noo keena.

- Annaguna waxaan nahay reer magaaladiisa: annagu waxaan u diyaarinnaa waxa uu uga baahan yahay magaalada, taas oo ah Madiina, magaaladuna waa lidka baadiyaha.

******************

# 36. Qaybo ka mid ah waxa laga weriyey hadalka Rasuulka sallallaahu calayhi wasallam ee gabayga

**131. "عَنْ عَائِشَةَ رِضِي الله عنها، قَالَ: قِيلَ لَهَا: هَلْ كَانَ النَّبِيُّ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ يَتَمَثَّلُ بِشَيْءٍ مِنَ الشِّعْرِ؟ قَالَتْ: كَانَ يَتَمَثَّلُ بِشِعْرِ ابْنِ رَوَاحَةَ، وَيَتَمَثَّلُ بقوله: ويَأْتِيكَ بِالأَخْبَارِ مَنْ لَمْ تُزَوِّدِ". [أخرجه أحمد والترمذي.]**

**131. "Waxaa laga soo weriyey Caa'isha radiyallaahu canhaa, waxaa lagu yiri: Nabiga sallallaahu calayhi wasallam ma ku halqabsan jiray wax gabay ah? Waxay tiri: Wuxuu ku halqabsan jiray gabayga Ibnu Rawaaxah, wuxuuna ku halqabsan jiray hadalkiisa: Wararka waxaa kuu keeni doona qof aadan sahay u diyaarin." [waxaa soo saaray Axmad iyo At-Tirmidi].**

- Ku halqabsan jiray: wuxuu akhrin jiray qaybo ka mid ah gabayga Ibnu Rawaaxah, Ibnu Rawaaxahna waa saxaabi Ansaari ah.

**132. "عَنْ أَبِي هُرَيْرَةَ رضي الله عنه قَالَ: قَالَ رَسُولُ اللهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ: إِنَّ أَصْدَقَ كَلِمَةٍ قَالَهَا شَاعِر كَلِمَةُ لَبِيدٍ :أَلاَ كُلُّ شَيْءٍ مَا خَلاَ اللَّهَ بَاطِلٌ ، وكَادَ أُمَيَّةُ بْنُ أَبِي الصَّلْتِ أَنْ يُسْلِمَ". [أخرجه البخاري ومسلم].**

**132. "Waxaa laga soo weriyey Abuu Hurayrah radiyallaahu canhu, wuxuu yiri: Rasuulkii Allaah sallallaahu calayhi wasallam wuxuu yiri: Hadalka ugu runta badan ee gabayaa yiri waa hadalkii Labiid: Ogaada, wax kasta oo Allaah ka sokow jira waa baadil. Umayyah bin Abii As-Saltna wuxuu ku dhowaaday inuu Islaamo." [waxaa soo saaray Al-Bukhaari iyo Muslim].**

Rasuulka sallallaahu calayhi wasallam wuxuu arrintaas uga yiri waxa ku jiray gabaygiisa oo tawxiid ah iyo u dhowaanshaha xaqa.. Umayyah wuxuu cibaadaysan jiray xilligii

jaahiliyadda, wuxuuna rumaysnaa soo bixinta qiyaamaha.. Islaamkana wuu gaaray.. Hase yeeshee looma waafajin Islaamka.

**133. "عَنْ جُنْدُبِ بْنِ سُفْيَانَ الْبَجَلِيِّ رضي الله عنه قَالَ: أَصَابَ حَجَرٌ أُصْبُعَ رَسُولِ اللهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ فَدَمِيَتْ، فَقَالَ :هَلْ أَنْتِ إِلاَ أُصْبُعٌ دَمِيتِ، وَفِي سَبِيلِ اللهِ مَا لَقِيتِ". [أخرجه مسلم والترمذي.]**

**133. "Waxaa laga soo weriyey Jundub bin Sufyaan Al-Bajali radiyallaahu canhu, wuxuu yiri: Dhagax ayaa ku dhacay far ka mid ah faraha Rasuulka sallallaahu calayhi wasallam, markaas ayay dhiig baxday, wuxuuna yiri: Adigu miyaanad ahayn far dhiig baxday, wixii ku gaarayna jidka Allaah ayay ku gaareen." [waxaa soo saaray Muslim iyo At-Tirmidi].**

- Dhiig baxday: way dhaawacantay oo dhiig ayaa ka baxay.

**134. "عَنِ الْبَرَاءِ بْنِ عَازِبٍ رضي الله عنه قَالَ: قَالَ لَهُ رَجُلٌ: أَفَرَرْتُمْ عَنْ رَسُولِ اللهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ يَا أَبَا عُمَارَةَ؟ فَقَالَ: لاَ وَاللَّهِ مَا وَلَّى رَسُولُ اللهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ، وَلَكِنْ وَلَّى سَرَعَانُ النَّاسِ تَلَقَّتْهُمْ هَوَازِنُ بِالنَّبْلِ وَرَسُولُ اللهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ عَلَى بَغْلَته، وَأَبُو سُفْيَانَ بْنُ الْحَارِثِ بْنِ عَبْدِ الْمُطَّلِبِ آخِذٌ بِلِجَامِهَا، وَرَسُولُ اللهِ صلى الله عليه وسلم يَقُولُ: أَنَا النَّبِيُّ لاَ كَذِبْ * أَنَا ابْنُ عَبْدِ الْمُطَّلِبْ". [ أخرجه البخاري ومسلم.]**

**134. "Waxaa laga soo weriyey Al-Baraa bin Caazib radiyallaahu canhu, wuxuu yiri: Nin ayaa ku yiri: Ma ka cararteen Rasuulka sallallaahu calayhi wasallam, Abuu Cumaarahow? Wuxuu yiri: Maya, Allaah baan ku dhaartaye, Rasuulkii Allaah sallallaahu calayhi wasallam ma uusan jeesan, laakiin dadkii degdegsanaa ayaa jeestay. Hawaazin ayaa fallaaro ku qaabbishay, Rasuulkii Allaah sallallaahu calayhi wasallamna wuxuu saarnaa baqashiisa, Abuu Sufyaan bin Al-Xaarith bin Cabdil-Muddalibna wuxuu hayay xakamaha baqasha. Rasuulkii Allaah sallallaahu calayhi wasallam wuxuu oranayay: Anigu waxaan ahay Nabiga, been ma aha * waxaan ahay ina Cabdil-Muddalib." [waxaa soo saaray Al-Bukhaari iyo Muslim].**

- Ma ka cararteen: micnaha ma dadku maalintii Xunayn ayay ka carareen Rasuulka sallallaahu calayhi wasallam?

- Dadkii degdegsanaa: kuwii iyaga ka mid ahaa ee degdega badnaa.

- Fallaaro ku qaabbishay: waxay ku rideen fallaadhaha.

**135. "عَنْ أَنَسٍ رضي الله عنه: أَنَّ النَّبِيَّ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ دَخَلَ مَكَّةَ فِي عُمْرَةِ الْقَضَاءِ، وَابْنُ رَوَاحَةَ يمشي بَيْنَ يَدَيْه، وَهُوَ يَقُولُ: خَلُّوا بَنِي الْكُفَّارِ عَنْ سَبِيلِهْ * الْيَوْمَ نَضْرِبُكُمْ عَلَى تَنْزِيلِهْ ضَرْبًا يُزِيلُ الْهَامَ عَنْ مَقِيلِهْ * وَيُذْهِلُ الْخَلِيلَ عَنْ خَلِيلِهْ فَقَالَ لَهُ عُمَرُ رضي الله عنه: يَا ابْنَ رَوَاحَةَ! بَيْنَ يَدَيِ رَسُولِ اللَّهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ وَفِي حَرَمِ اللهِ تَقُولُ شَعرا ! فَقَالَ النبي صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ: خَلِّ عَنْهُ يَا عُمَرُ، فَلَهِيَ أَسْرَعُ فِيهِمْ مِنْ نَضْحِ النَّبْلِ". [أخرجه الترمذي والنسائي.]**

**135. “Waxaa laga soo weriyey Anas radiyallaahu canhu in Nabiga sallallaahu calayhi wasallam uu galay Makka xilligii Cumratul-Qadaa’, Ibnu Rawaaxahna wuxuu socday hortiisa, isagoo leh: Ka banneeya jidkiisa, ilmaha gaaladaow * maanta waxaan idinku garaacaynaa soo dejintiisa, garaac madaxda ka qaadaya meelahooda * oo saaxiibka ka hilmaamsiinaya saaxiibkiis. Cumar radiyallaahu canhu ayaa ku yiri: Ibnu Rawaaxow, ma hortiisa Rasuulka sallallaahu calayhi wasallam iyo xaramka Allaah dhexdiisa ayaad gabay ku leedahay? Nabiga sallallaahu calayhi wasallam wuxuu yiri: Iska daa Cumarow, waayo gabaygani iyaga ayuu uga saamayn badan yahay xawaaraha fallaaraha.” [waxaa soo saaray At-Tirmidi iyo An-Nasaa’i].**

- Gabaygani iyaga ayuu uga saamayn badan yahay xawaaraha fallaaraha: micnaha meerisyadani waxay qalbiyadooda uga saamayn dhaqso badan yihiin xawaaraha lagu rido fallaadhaha. Gabayguna xilligoodii wuxuu ahaa sida warbaahinta xilligeenna, wuxuuna lahaa hormuudnimo iyo saamayn uu ku yeesho qalbiyada iyo caqliga dadka guud.

**136. "عَنْ جَابِرِ بْنِ سَمُرَةَ رضي الله عنه قَالَ: جَالَسْتُ النَّبِيَّ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ أَكْثَرَ مِنْ مِائَةِ مَرَّةٍ وَكَانَ أَصْحَابُهُ يَتَنَاشَدُونَ الشِّعْرَ وَيَتَذَاكَرُونَ أَشْيَاءَ مِنْ أَمْرِ الْجَاهِلِيَّةِ وَهُوَ سَاكِتٌ وَرُبَّمَا تَبَسَّمَ مَعَهُمْ" .[أخرجه الترمذي.]**

**136. “Waxaa laga soo weriyey Jaabir bin Samurah radiyallaahu canhu, wuxuu yiri: Waxaan la fariistay Nabiga sallallaahu calayhi wasallam in ka badan boqol jeer. Asxaabtiisu waxay isu akhrin jireen gabay, waxayna xusuusan jireen arrimo ka mid ah xilligii jaahiliyadda, isaguna wuu aamusi jiray, mararka qaarkoodna wuu la dhoolla-caddayn jiray.” [waxaa soo saaray At-Tirmidi].**

**137. "عن عمرو بن الشريد عن أبيه قال : كنت ردف النبي صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ فَأَنْشَدْتُهُ مِائَةَ قَافِيَةٍ مِنْ قَوْلِ أُمَيَّةَ بْنِ أَبِي الصَّلْتِ الثَّقَفِيِّ كُلَّمَا أَنْشَدْتُهُ بَيْتًا قَالَ لِيَ النَّبِيُّ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ : هِيهْ، حَتَّى أَنْشَدْتُهُ مِائَةً. يَعْنِي بَيْتًا. فَقَالَ النَّبِيُّ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ : إن كاد ليُسلم". [أخرجه مسلم.]**

**137. “Waxaa laga soo weriyey Camr bin Ash-Shariid, isaga oo ka werinaya aabbihii, wuxuu yiri: Waxaan ahaa qof saaran gadaasha Nabiga sallallaahu calayhi wasallam, markaas ayaan u tiriyey boqol qaafiyadood oo ka mid ah hadalkii Umayyah bin Abii As-Salt Ath-Thaqafi. Mar kasta oo aan u tiriyo hal bayt, Nabigu sallallaahu calayhi wasallam wuxuu igu oran jiray: sii wad, ilaa aan boqol u tiriyey, micnaha boqol bayt. Markaas Nabigu sallallaahu calayhi wasallam wuxuu yiri: Wuxuu ku dhowaaday inuu Islaamo.” [waxaa soo saaray Muslim].**

- Gadaal-saar: qof gadaashiisa ka saaran neefka.

- Sii wad: ii kordhi akhrinta gabaygaaga.

- Wuxuu ku dhowaaday inuu Islaamo: Umayyah bin Abii As-Salt Ath-Thaqafi looma waafajin Islaamka, inkastoo gabaygiisu uu dhaliili jiray sanam-caabudidda isla markaana ammaani jiray Islaamka.

**138. "عَنْ عَائِشَـةَ رِضـي الله عنها، قَالَتْ: كَانَ رَسُـولُ اللهِ صَـلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَـلَّمَ يَضَـعُ لِحَسَّـانَ بْنِ ثَابِتٍ مِنْبَرًا فِي الْمَسْجِدِ يَقُومُ عَلَيْهِ قَائِمًا يُفَاخِرُ عَنْ رَسُولِ اللهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ ـ أَوْ قَالَ: يُنَافِحُ عَنْ رَسُولِ اللهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ ـ وَيَقُولُ رسول الله صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ: إِنَّ اللَّهَ يُؤَيِّدُ حَسَّانَ بِرُوحِ الْقُدُسِ مَا يُنَافِحُ أَوْ يُفَاخِرُ عَنْ رَسُولِ اللهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ". [أخرجه أحمد و الترمذي.]**

**138. "Waxaa laga soo weriyey Caa'isha radiyallaahu canhaa, waxay tiri: Rasuulkii Allaah sallallaahu calayhi wasallam wuxuu Xasan bin Thaabit u dhigi jiray minbar masaajidka dhexdiisa, wuuna ku istaagi jiray isagoo uga faanaya Rasuulka sallallaahu calayhi wasallam, ama wuxuu yiri: isagoo difaacaya Rasuulka sallallaahu calayhi wasallam. Rasuulkii Allaah sallallaahu calayhi wasallamna wuxuu oran jiray: Allaah wuxuu Xasan ku taageeraa Ruuxul Qudus inta uu difaacayo ama ku faanayo Rasuulka sallallaahu calayhi wasallam." [waxaa soo saaray Axmad iyo At-Tirmidi].**

- Difaacayo: u doodaya.

- Ruuxul Qudus: waa Jibriil calayhis salaam, wuxuu Xasan bin Thaabit ku taageerayay difaaciisa Rasuulka sallallaahu calayhi wasallam.

- **Faa'iido:**

Arrintani waxay khusaysaa qof kasta oo difaacaya diinta, caqiidada, Qur'aanka iyo Nabiga sallallaahu calayhi wasallam.. Qof kasta oo difaaca Allaah iyo Rasuulkiisa, Allaah cazza wa jall wuxuu ku taageeraa Jibriil calayhis salaam.. Taasina waa fadliga Allaah, wuxuuna siiyaa cidduu doono.

Eeg Xasan bin Thaabit radiyallaahu canhu, wuxuu ahaa gabayaa, hase yeeshee hibadiisa gabayga ayuu u adeegsaday difaaca Islaamka..

Haddaba eeg awoodahaaga iyo waxyaabaha aad ku wanaagsan tahay, kuna shaqee waxa aad haysato difaaca diintan.. Allaah baan ku dhaartaye, waa sharaf weyn.

Soo noolee sunnada Nabiga, dadka kugu xeeranna bar waxa aad baratay.. Una niyeyso inaad ka difaacdo sallallaahu calayhi wasallam, inaad isaga iyo sunnadiisana difaacdo, si laga yaabo inaad ku guulaysato taageerada Jibriil calayhis salaam.

Waxaa laga yaabaa inaad ka mid noqoto kuwa uu Rasuulku sallallaahu calayhi wasallam ummadaha ugu faano maalinta qiyaamaha.. Waxaana laga yaabaa inaad indhihiisa qaboojiso sallallaahu calayhi wasallam oo aad hesho sharafka la joogistiisa Firdowsa sare.

*********************

## 37. Xadiiska Ummu Zarc

139. "عَنْ عَائِشَةَ، قَالَتْ: جَلَسَتْ إِحْدَى عَشْرَةَ امْرَأَةً فَتَعَاهَدْنَ وَتَعَاقَدْنَ أَنْ لاَ يَكْتُمْنَ مِنْ أَخْبَارِ أَزْوَاجِهِنَّ شَيْئًا .قَالَتِ الأُولَى: زَوْجِي لَحْمُ جَمَلٍ غَثٍّ عَلَى رَأْسِ جَبَلٍ وَعْرٍ، لاَ سَهْلٍ فَيُرْتَقَى، وَلاَ سَمِينٍ فَيُنْتَقَلُ .قَالَتِ الثَّانِيَةُ: زَوْجِي لاَ أَبُثُّ خَبَرَهُ، إِنِّي أَخَافُ أَنْ لاَ أَذَرَهُ، إِنْ أَذْكُرْهُ أَذْكُرْ عُجَرَهُ وَبُجَرَهُ .قَالَتِ الثَّالِثَةُ: زَوْجِي الْعَشَنَّقُ، إِنْ أَنْطِقْ أُطَلَّقْ، وَإِنْ أَسْكُتْ أُعَلَّقْ .قَالَتِ الرَّابِعَةُ: زَوْجِي كَلَيْلِ تِهَامَةَ، لاَ حَرٌّ وَلاَ قُرٌّ، وَلاَ مَخَافَةَ وَلاَ سَآمَةَ .قَالَتِ الْخَامِسَةُ: زَوْجِي إِنْ دَخَلَ فَهِدَ، وَإِنْ خَرَجَ أَسِدَ، وَلاَ يَسْأَلُ عَمَّا عَهِدَ .قَالَتِ السَّادِسَةُ: زَوْجِي إِنْ أَكَلَ لَفَّ، وَإِنْ شَرِبَ اشْتَفَّ، وَإِنِ اضْطَجَعَ الْتَفَّ، وَلاَ يُولِجُ الْكَفَّ لِيَعْلَمَ الْبَثَّ . قَالَتِ السَّابِعَةُ: زَوْجِي عَيَايَاءُ أَوْ غَيَايَاءُ طَبَاقَاءُ كُلُّ دَاءٍ لَهُ دَاءٌ، شَجَّكِ أَوْ فَلَّكِ أَوْ جَمَعَ كُلًّا لَكِ .قَالَتِ الثَّامِنَةُ: زَوْجِي الْمَسُّ مَسُّ أَرْنَبٍ وَالرِّيحُ رِيحُ زَرْنَبٍ .قَالَتِ التَّاسِعَةُ: زَوْجِي رَفِيعُ الْعِمَادِ [عَظِيمُ الرَّمَادِ طَوِيلُ النِّجَادِ] قَرِيبُ الْبَيْتِ مِنَ النَّادِ .قَالَتِ الْعَاشِرَةُ: زَوْجِي مَالِكٌ وَمَا مَالِكٌ مَالِكٌ خَيْرٌ مِنْ ذَلِكِ، لَهُ إِبِلٌ كَثِيرَاتُ الْمَبَارِكِ، قَلِيلاَتُ الْمَسَارِحِ، إِذَا سَمِعْنَ صَوْتَ الْمِزْهَرِ أَيْقَنَّ أَنَّهُنَّ هَوَالِكُ.قَالَتِ الْحَادِيَةَ عَشْرَةَ: زَوْجِي أَبُو زَرْعٍ وَمَا أَبُو زَرْعٍ؟ أَنَاسَ مِنْ حُلِيٍّ أُذُنَيَّ، وَمَلأَ مِنْ شَحْمٍ عَضُدَيَّ، وَبَجَّحَنِي فَبَجِحَتْ إِلَيَّ نَفْسِي، وَجَدَنِي فِي أَهْلِ غُنَيْمَةٍ بِشِقٍّ فَجَعَلَنِي فِي أَهْلِ صَهِيلٍ وَأَطِيطٍ وَدَائِسٍ وَمُنَقٍّ، فَعِنْدَهُ أَقُولُ فَلاَ أُقَبَّحُ، وَأَرْقُدُ فَأَتَصَبَّحُ وَأَشْرَبُ فَأَتَقَمَّحُ، أُمُّ أَبِي زَرْعٍ فَمَا أُمُّ أَبِي زَرْعٍ، عُكُومُهَا رَدَاحٌ، وَبَيْتُهَا فَسَاحٌ، ابْنُ أَبِي زَرْعٍ، فَمَا ابْنُ أَبِي زَرْعٍ، مَضْجَعُهُ كَمَسَلِّ شَطْبَةٍ، وَتُشْبِعُهُ ذِرَاعُ الْجَفْرَةِ، بِنْتُ أَبِي زَرْعٍ، فَمَا بِنْتُ أَبِي زَرْعٍ، طَوْعُ أَبِيهَا وَطَوْعُ أُمِّهَا، مِلْءُ كِسَائِهَا، وَغَيْظُ جَارَتِهَا، جَارِيَةُ أَبِي زَرْعٍ، فَمَا جَارِيَةُ أَبِي زَرْعٍ، لاَ تَبُثُّ حَدِيثَنَا تَبْثِيثًا، وَلاَ تُنَقِّثُ مِيرَتَنَا تَنْقِيثًا، وَلاَ تَمْلأُ بَيْتَنَا تَعْشِيشًا، قَالَتْ: خَرَجَ أَبُو زَرْعٍ وَالأَوْطَابُ تُمْخَضُ، فَلَقِيَ امْرَأَةً مَعَهَا وَلَدَانِ لَهَا كَالْفَهْدَيْنِ، يَلْعَبَانِ مِنْ تَحْتِ خَصْرِهَا بِرُمَّانَتَيْنِ، فَطَلَّقَنِي وَنَكَحَهَا، فَنَكَحْتُ بَعْدَهُ رَجُلاً سَرِيًّا، رَكِبَ شَرِيًّا، وَأَخَذَ خَطِّيًّا، وَأَرَاحَ عَلَيَّ نَعَمًا ثَرِيًّا، وَأَعْطَانِي مِنْ كُلِّ رَائِحَةٍ زَوْجًا، وَقَالَ: كُلِي أُمَّ زَرْعٍ، وَمِيرِي أَهْلَكِ، فَلَوْ جَمَعْتُ كُلَّ شَيْءٍ أَعْطَانِيهِ، مَا بَلَغَ أَصْغَرَ آنِيَةِ أَبِي زَرْعٍ. قَالَتْ عَائِشَةُ: فَقَالَ لِي رَسُولُ اللَّهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ: كُنْتُ لَكِ كَأَبِي زَرْعٍ لِأُمِّ زَرْعٍ". [أخرجه البخاري ومسلم.]

**170. "عَنْ عَائِشَةَ رضي الله عنها قَالَتْ: دَخَلَ عَلَيَّ رَسُولُ اللَّهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ وَعِنْدِي امْرَأَةٌ فَقَالَ: مَنْ هَذِهِ؟ قُلْتُ: فُلَانَةٌ لَا تَنَامُ اللَّيْلَ فَقَالَ رَسُولُ الله صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ: عَلَيْكُمْ مِنَ الْأَعْمَالِ مَا تُطِيقُونَ فَوَاللَّهِ لَا يَمَلُّ اللَّهُ حَتَّى تَمَلُّوا، وَكَانَ أَحَبَّ ذَلِكَ إِلَى رَسُولِ الله صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ الَّذِي يَدُومُ عَلَيْهِ صَاحِبُهُ".[أخرجه البخاري ومسلم.]**

**170. "Waxaa laga soo weriyey Caa'isha radiyallaahu canhaa, waxay tiri: Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam ayaa ii soo galay iyadoo agtayda ay joogto haweeney. Wuxuu yiri: Tani waa tuma? Waxaan iri: Heblaayo, habeenkii ma seexato. Rasuulka Allaah**

**sallallaahu calayhi wasallam wuxuu yiri: Ku dadaala camallada aad awooddaan, Allaah baan ku dhaartaye Allaah ma daalo ilaa aad idinku daashaan. Camalka ugu jeclaa Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam wuxuu ahaa kan qofkiisu joogteeyo." [waxaa soo saaray Al-Bukhaari iyo Muslim].**

- **Faa'iido:**

Manhajka nabiyeed wuxuu ku dhisan yahay dheellitir iyo joogteyn, ee kuma dhisna badnaan daal badan keenta, taasina waxay khusaysaa dhammaan cibaadooyinka.. Salaadda.. Soonka.. Sadaqada.. Qur'aanka.. Waxa la rabo waa awraad joogto ah oo aan yaraannin balse si tartiib ah oo raaxo leh u kordha.. Joogteynta wax yar ayaa ka wanaagsan badinta camal goos-goos ah.

**171."عَنْ أَبِي صَالِحٍ قَالَ: سَأَلْتُ عَائِشَةَ وَأُمَّ سَلَمَةَ: أيُّ الْعَمَلِ كَانَ أَحَبَّ إِلَى رَسُولِ اللَّهِ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ؟ قَالَتَا: ما دِيمَ عَلَيْهِ وَإِنْ قَلَّ". [أخرجه الترمذي].**

**171. "Waxaa laga soo weriyey Abuu Saalix, wuxuu yiri: Waxaan Caa'isha iyo Ummu Salamah weydiiyey: Camalkee ayaa ugu jeclaa Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam? Labadooduba waxay yiraahdeen: Kan la joogteeyo, xitaa haddii uu yar yahay." [waxaa soo saaray At-Tirmidi].**

- **Faa'iidooyin:**
- Hooyooyinka mu'miniintu kuma jawaabin in camalka ugu jeclaa sallallaahu calayhi wasallam uu ahaa salaad, soon, sadaqo ama wax kale.. Sababtoo ah waxa la rabaa waa joogteynta adeecidda.
- Soo noolaynta sunnooyinka Rasuulka Allaah:

- Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam bil dhammeystiran ma soomin marka laga reebo Ramadaan.
- Soonka ugu badan ee Nabiga sallallaahu calayhi wasallam wuxuu ahaa Shacbaan.
- Sallallaahu calayhi wasallam wuxuu soomi jiray saddex maalmood bil kasta.. Dhif ayuuna afuri jiray maalinta Jimcaha, isagoo la socda maalin ka horreysa ama maalin ka dambeysa.
- Sallallaahu calayhi wasallam wuxuu soomi jiray Isniinta iyo Khamiista.. Sababtoo ah labadaas maalmood camallada ayaa Allaah tacaalaa loo bandhigaa.
- Camalka Nabiga sallallaahu calayhi wasallam wuxuu ahaa mid joogto ah.. Haddii uu bilaabo cibaado wuu joogteyn jiray kamana tegi jirin, iyadoo ay jirto dheellitir iyo dhexdhexaadnimo cibaadada dhexdeeda.

**Iftiin**

**Marka Allaah kugu mannaysto oo aad booqato Madiinada iftiinka leh.. Marka taabashada cagtaadu waafaqdo taabashada cagta Nabiga sallallaahu calayhi wasallam, waxaad dareemaysaa inaad rabto inaad ku socoto waddo kasta oo ka mid ah waddooyinka Madiinada iftiinka leh si talaabooyinkiisu ay raad kuugu noqdaan.. Waxaadna rabtaa inaad fariisato meel kasta, laga yaabee in Rasuulka sallallaahu calayhi wasallam maalin ku fariistay.**

**Ku dadaal in tallaabooyinka Rasuulka sallallaahu calayhi wasallam ay noqdaan raadadkaaga.**

**Adkaarta subaxa iyo fiidka: maalin kasta waxaad ku dhawaaqdaa wixii uu sallallaahu calayhi wasallam ku dhawaaqay, waxaadna tiraahdaa wixii uu yiri.. Marka aad adkaarta akhrinayso dareen in tani tahay fadhi nabiyeed.. Marka aad akhrinayso aayadaha, dareen inaad samaynayso wixii uu sallallaahu calayhi wasallam sameeyey..**

**Raac gadaashiisa tallaabo tallaabo, kuna celceli naftaada: ballantii ayaan ku sugannahay, sayyidka rusushow, ruux xooggan iyo jir daciif ah ayaan kugu raacaynaa. Waxaan daba socon doonnaa sannado badan, soo noqosho la’aan, wax kasta ha dhaceene.. Allaah ayaa la kaashanayaa.. Awood iyo xoogna ma jiro Allaah mooyee.**

******************

# 43. Qaar ka mid ah waxa ka yimid akhriska Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam

**172. "عن يعلى بن مملك أنه سأل أم سلمة عن قراءة رسول الله ﷺ: فَإِذَا هِيَ تَنْعَتُ قِرَاءَةً مُفَسَّرَةً حَرْفًا حَرْفًا". [أخرجه أحمد وأبو داود والترمذي والنسائي.]**

**172. "Waxaa laga soo weriyey Yaclaa bin Mamlak inuu Ummu Salama ka weydiiyey akhriska Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam: markaasay ku tilmaantay akhris caddeysan, xaraf xaraf ah". [waxaa soo saaray Axmad, Abuu Daawuud, At-Tirmidi iyo An-Nasaa’i].**

- Ku tilmaantay: sharaxday.

- Caddeysan, xaraf xaraf ah: waxaa loola jeedaa akhris muuqda oo cad. Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam wuxuu akhrin jiray si xarfaha uu akhrinayo loo tirin karo, waxaana loola jeedaa wanaagga tartiilka iyo akhrinta. Ibnu Cabbaas wuxuu yiri: inaan akhriyo suurad aan si tartiil ah u akhriyo ayaa iiga jecel inaan Qur’aanka oo dhan akhriyo tartiil la’aan.

**173. "عَنْ قَتَادَةَ قَالَ : قلتُ لِأَنَسِ بْنِ مَالِكٍ كَيْفَ كَانَتْ قِرَاءَةُ رَسُولِ اللَّهِ قال: مدّاً" [أخرجه أحمد والنسائي.]**

**173. "Waxaa laga soo weriyey Qataadah inuu yiri: waxaan Anas bin Maalik ku iri: sidee buu ahaa akhriska Rasuulka Allaah? Wuxuu yiri: wuxuu ahaa mid la dheereeyo". [waxaa soo saaray Axmad iyo An-Nasaa'i].**

- Dheereyn: wuxuu xarfaha mudan in la dheereeyo u dheereyn jiray akhriskiisa si ay uga caawiso tadabbur iyo fikir. Wuxuu akhrin jiray akhris cad oo xaraf kasta oo erayga ku jira muuqanayo, taasna waxaa la yiraahdaa tartiil.

- **Faa'iido:**

Bal eeg saxaabada, waxay weydiin jireen faahfaahinta ugu yar ee Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam, xitaa habkii uu Qur'aanka kariimka ah u akhrin jiray. Sidaas darteed ku dadaal inaad raacdo sunnooyinka Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam.

- Soo noolaynta sunnada:

Tartiilka Qur'aanka.

**174. "عَنْ أُمِّ سَـلَمَةَ قَالَتْ: كان النبي يُقَطّعُ قِرَاءَتَهُ يَقُولُ: الْحَمْدُ لِلَّهِ رَبِّ الْعَالَمِينَ، ثُمَّ يَقِفُ ثُمَّ يَقُولُ: الرحمن الرحيم، ثُمَّ يَقِفُ وَكَانَ يَقْرَأُ : مَلِكِ يَوْمِ الدِّين"[أخرجه أحمد و أبو داود والترمذي.]**

**174. "Waxaa laga soo weriyey Ummu Salama inay tiri: Nabigu wuxuu kala goyn jiray akhriskiisa. Wuxuu dhihi jiray: alxamdulillaahi rabbil caalamiin, markaasuu istaagi jiray, dabadeed wuxuu dhihi jiray: ar-raxmaanir raxiim, markaasuu istaagi jiray, wuxuuna akhrin jiray: maaliki yawmid-diin"].Waxaa soo saaray Axmad, Abuu Daawuud iyo At-Tirmidi].**

- Wuxuu kala goyn jiray akhriskiisa: wuxuu ku istaagi jiray dhammaadka aayadaha.

- Soo noolaynta sunnada:

Ku istaagidda dhammaadka aayadaha, iyadoo lagu dayanayo Nabiga sallallaahu calayhi wasallam.

**175. "عن عبد الله بْنِ أَبِي قَيْسٍ قَالَ: سـألت عائشـة رَضِـيَ اللَّهُ عَنْها عن قراءة النبي أَكَانَ يُسِـرُّ بِالْقِرَاءَةِ أَمْ يَجْهَرُ قَالَتْ كُلُّ ذَلِكَ قَدْ كَانَ يَفْعَلُ قَدْ كَانَ رُبَّمَا أَسَـرَّ وَرُبَّمَا جَهَرَ فَقُلْتُ الْحَمْدُ لِلَّهِ الَّذِي جَعَلَ فِي الْأَمْرِ سـعة". [أخرجه أحمد وأبو داود والترمذي.]**

**175. "Waxaa laga soo weriyey Cabdullaah bin Abii Qays inuu yiri: waxaan Caa'isha radiyallaahu canhaa ka weydiiyey akhriska Nabiga: ma hoos buu u akhrin jiray mise cod dheer buu ku akhrin jiray? Waxay tiri: labadaba wuu samayn jiray. Mararka qaar hoos buu u**

**akhrin jiray, mararka qaarna cod dheer buu ku akhrin jiray. Markaasaan iri: alxamdulillaah, kan arrinka waasic ka dhigay". [Waxaa soo saaray Axmad, Abuu Daawuud iyo At-Tirmidi].**

- **Faa'iido:**

Saxaabigan sharafta leh wuxuu weydiinayey sida uu Nabigu sallallaahu calayhi wasallam u akhrin jiray tahajjudkiisa habeenkii. Jawaabtii waxay noqotay inuu mararka qaar hoos u akhrin jiray. Akhriska hoose waa in uusan ku maqlin qofka kuu dhow. Mararka qaarna cod dheer buu ku akhrin jiray, akhriska codka dheerna waa inuu qofku codkiisa kor u qaado intii ay maqli karaan dadka ku hareeraysan.

Waxa mudan inaad labada akhrisba kala beddesho, adigoo eegaya midka qalbigaaga u khushuuc badan.

**176. "عن أم هانىء قالت: كُنْتُ أَسْمَعُ قِرَاءَةَ النبي بِاللَّيْلِ وَأَنَا عَلَى عَرِيشِي". [أخرجه أحمد والنسائي وابن ماجه].**

**176. "Waxaa laga soo weriyey Ummu Haani' inay tiri: waxaan maqli jiray akhriska Nabiga habeenkii, anigoo sariirtayda saaran". [waxaa soo saaray Axmad, An-Nasaa'i iyo Ibnu Maajah].**

- Sariirtayda: gogoshayda sare, xadiiskana wuxuu caddaynayaa akhriska codka dheer ee salaadda habeenkii.

- **Faa'iidooyin:**

Hanuunka Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam ee akhrinta Qur'aanka:

- Akhriska Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam wuxuu ahaa mid la dheereeyo oo caddeysan, xaraf xaraf ah.
- Wuxuu sallallaahu calayhi wasallam kala goyn jiray akhriskiisa, taas oo ah inuu ku istaagi jiray dhammaadka aayadaha.
- Salaaddiisu sallallaahu calayhi wasallam mararka qaar waxay ahayd mid hoose, mararka qaarna mid cod dheer.
- Nabigu sallallaahu calayhi wasallam wuxuu codkiisa ku qurxin jiray akhriska.

******************

## 44. Qaar ka mid ah waxa ka yimid oohinta Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam

177. "عن مُطرّف وهو ابن عبد الله بن الشّـــخّير عن أبيه قال: أَتَيْتُ رَسُـــولَ اللَّهِ وَهُوَ يُصَـــلِّي وَلِجَوْفِهِ أَزِيزٌ كَأَزِيزِ الْمِرْجَلِ مِنَ الْبُكَاءِ". [أخرجه أحمد والنسائي.]

**177. "Waxaa laga soo weriyey Mutarrif, oo ah Ibnu Cabdullaah bin Ash-Shikhkhiir, aabbihiis inuu yiri: waxaan u imid Rasuulka Allaah isagoo tukanaya, waxaana calooshiisa hoose ka yeerayey guux la mid ah guuxa dheri karkaraya, oohin darteed". [waxaa soo saaray Axmad iyo An-Nasaa'i].**

- Dheri karkaraya: digsi.

Waxaa loola jeedaa in oohinta Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam isagoo Qur'aanka tartiilaya ay ahayd sida codka karkarinta digsiga.

178. "عن عبد الله بن مســعود رَضِــيَ اللَّهُ عَنْه قَالَ: قالَ لِي رَسُــولُ الله : اقْرَأْ عَلَيَّ فَقُلْتُ يَا رَسُــولَ اللَّهِ أَقْرَأُ عَلَيْكَ وَعَلَيْكَ أُنْزِلَ قَالَ: إِنِّي أُحِبُّ أَنْ أَسْــمَعَهُ مِنْ غَيْرِي فقرَأْتُ سُــورَةَ النِّسَــاءِ حَتَّى بَلَغْتُ: وَجِئْنَا بِكَ على هؤلاء شــهيدا، قَالَ فَرَأَيْتُ عَيْنَيْ رَسُولِ الله تهملان". [أخرجه البخاري ومسلم.]

**178. "Waxaa laga soo weriyey Cabdullaah bin Mascuud radiyallaahu canhu inuu yiri: Rasuulka Allaah wuxuu igu yiri: ii akhri. Waxaan iri: Rasuulkii Allaahow, ma anigaa kuu akhrinaya adigoo adiga lagugu soo dejiyey? Wuxuu yiri: waxaan jeclahay inaan ka maqlo qof aan aniga ahayn. Markaasaan akhriyey suuradda An-Nisaa' ilaa aan gaaray: oo aan adiga uga keenno kuwaas markhaati. Wuxuu yiri: markaasaan arkay labada indhood ee Rasuulka Allaah oo ilmo ka qulqulayso". [Waxaa soo saaray Al-Bukhaari iyo Muslim].**

- Ilmo ka qulqulayso: ilmo ayaa ka buuxsamaysay oo ka socotay.

- **Soo noolaynta sunnada:**

Qur'aanka oo lagu dhageysto tadabbur. Sameyso wird maalinle ah oo aad ku dhammeystirto Qur'aanka adigoo dhageysanaya, maxaa yeelay dhageysiga tadabburka leh wuxuu qalbiga ku leeyahay saameyn weyn.

179. "عن عبد الله بْنِ عَمْرٍو قَالَ : انْكَسفَتِ الشَّـمْسُ يَوْمًا عَلَى عَهْدِ رسـول الله فقام رسـول الله يُصَـلِّي حَتَّى لَمْ يَكَدْ يَرْكَعُ ثُمَّ رَكَعَ فَلَمْ يَكَدْ يَرْفَعُ رَأْسَهُ ثُمَّ رَفَعَ رَأْسَهُ فَلَمْ يَكَدْ أَنْ يَسْجُدَ ثُمَّ سَجَدَ فَلَمْ يَكَدْ أَنْ يَرْفَعَ رَأْسَهُ ثُمَّ رَفَعَ رَأْسَهُ فَلَمْ يَكَدْ أَنْ يَسْجُدَ ثُمَّ سَجَدَ فَلَمْ يَكَدْ أَنْ يَرْفَعَ رَأْسَهُ فَجَعَلَ يَنْفُخُ وَيَبْكِي وَيَقُولُ: رَبِّ أَلَمْ تَعِدْنِي أَنْ لَا تُعَذِّبَهُمْ وَأَنَا فِيهِمْ رَبِّ أَلَمْ تَعِدْنِي أَنْ لَا تُعَذِّبَهُمْ وَهُمْ يَسْـتَغْفِرُونَ وَنَحْنُ نَسْـتَغْفِرُكَ فَلَمَّا صَـلَّى رَكْعَتَيْنِ انْجَلَتِ الشَّـمْسُ فَقَامَ فَحَمِدَ اللَّهَ تَعَالَى وَأَثْنَى عَلَيْهِ ثُمَّ قَالَ: إِنَّ الشَّـمْسَ وَالْقَمَرَ آيَتَانِ مِنْ آيَاتِ الله لا ينكسـفان لِمَوْتِ أَحَدٍ وَلَا لِحَيَاتِهِ فَإِذَا انْكَسَـفَا فَافْزَعُوا إِلَى ذكر الله تعالى". [أخرجه البخاري ومسلم وفيهما ركوعان في كل ركعة.]

**179. "Waxaa laga soo weriyey Cabdullaah bin Camr inuu yiri: qorraxdu way madoobaatay maalin ka mid ah xilligii Rasuulka Allaah. Markaas Rasuulka Allaah wuxuu u istaagay salaad ilaa uu ku dhowaaday inuusan rukuuceyn. Kadib wuu rukuucey ilaa uu ku dhowaaday inuusan madaxa kor u qaadin. Kadib madaxa ayuu kor u qaaday ilaa uu ku dhowaaday inuusan sujuudin. Kadib wuu sujuuday ilaa uu ku dhowaaday inuusan madaxa kor u qaadin. Kadib madaxa ayuu kor u qaaday ilaa uu ku dhowaaday inuusan sujuudin. Kadib wuu sujuuday ilaa uu ku dhowaaday inuusan madaxa kor u qaadin. Markaas wuxuu bilaabay inuu neefsado oo ooyo, wuxuuna lahaa: Rabbiyow, miyaanad ii ballanqaadin inaadan cadaabin iyagoo aan dhex joogo? Rabbiyow, miyaanad ii ballanqaadin inaadan cadaabin iyagoo dambi dhaaf weydiisanaya? Annaguna dambi dhaaf ayaan kaa weydiisanaynaa. Markuu tukaday labo rakcadood, qorraxdii way iftiintay. Markaasuu istaagay, Allaah ayuu mahadiyey oo ammaanay, dabadeed wuxuu yiri: qorraxda iyo dayaxu waa laba calaamadood oo ka mid ah calaamadaha Allaah. Uma madoobaadaan geerida qof iyo noloshiisa midna. Haddii ay madoobaadaan, u carara dikriga Allaah tacaalaa". [Waxaa soo saaray Al-Bukhaari iyo Muslim, waxaana labadooda ku jira labo rukuucood rakcad kasta].**

- Laba calaamadood: laba astaan oo ka mid ah calaamadaha qiyaamaha oo dhow, ama laba astaan oo cadaabka Allaah ah, ama qorraxda iyo dayaxu waa kuwo loo sakhiray awoodda Allaah.

- **Faa'iido:**

Marka qofku arko qorrax madoobaad ama dayax madoobaad, waa inuu Allaah hortiisa ku jabo oo u baryo, maxaa yeelay dhacdooyinkan waa khalkhal ku yimaada nidaamka koonka, waxaana suurtagal ah inay ku beegmaan waqtiga qiyaamuhu dhacayo. Nabigu sallallaahu calayhi wasallam wuxuu neefsanayey oo ooyey, isagoo u naxaya ummaddan, kana cabsanaya argagaxa maalinta qiyaamaha.

Xadiiskan waxaa ku jira faa'iido weyn: dambi dhaaf weydiisashadu waa sabab cadaabka lagu celiyo. Allaah cazza wa jall cadaabkiisa kuma dejiyo qof dambi dhaaf weydiisanaya, ha ahaado cadaab jireed ama nafsiyeed, adduun iyo aakhiraba. Dambi dhaaf weydiisashadu waa ammaan weyn oo qofka u ah. Axaadiis badan ayaa ku timid dhiirrigelinta dambi dhaaf weydiisashada, ee sameyso wird aad ka yeelato.

- **Soo noolaynta sunnada:**

Xadiiskan waxaa ku jira sunnooyin kale oo ka sokow dambi dhaaf weydiisashada. Qor si aad ugu dadaasho ku dhaqankooda, waxaana ka mid ah: sunnada salaadda qorrax

madoobaadka marka qorraxdu madoobaato, sunnada istaagga dheer, sunnada rukuucca dheer iyo sujuudda dheer.

**180. "عَنِ ابْنِ عَبَّاسٍ قَالَ : أَخَذَ رَسُـولُ اللهِ ابْنَةً لَهُ تَقْضِـي فَاحْتَضَـنَهَا فَوَضَـعَهَا بَيْنَ يَدَيْهِ فَمَاتَتْ وَهِيَ بَيْنَ يَدَيْهِ وَصَاحَتْ أُمُّ أَيْمَنَ فَقَالَ -يَعْنِي النبي-: أَتَبْكِينَ عِنْدَ رَسُولِ اللهِ؟ فَقَالَتْ أَلَسْتُ أَرَاكَ تَبْكِي قَالَ: إِنِّي لَسْتُ أَبْكِي إِنَّمَا هِيَ رَحْمَةٌ إِنَّ الْمُؤْمِنَ بِكُلِّ خَيْرٍ عَلَى كُلِّ حَالٍ إِنَّ نَفْسَهُ تُنْزَعُ مِنْ بَيْنِ جَنْبَيْهِ وهو يحمد الله عَزَّ وَجَلَّ". [أخرجه أحمد.]**

**180. "Waxaa laga soo weriyey Ibnu Cabbaas inuu yiri: Rasuulka Allaah wuxuu qaaday gabadh ka mid ah faraciisa oo geeri ku dhow, wuuna laabta geliyey, dabadeed hortiisa ayuu dhigay, wayna dhimatay iyadoo hortiisa joogta. Ummu Ayman way qaylisay. Markaas ayuu yiri - waxaa loola jeedaa Nabiga -: ma Rasuulka Allaah agtiisa ayaad ku ooyaysaa? Waxay tiri: miyaanan ku arkayn adigoo ooyaya? Wuxuu yiri: anigu ma ooyayo, ee waa naxariis. Mu'minku xaalad kasta wuxuu ku sugan yahay khayr, naftiisana waxaa laga bixinayaa labada dhinac ee jirkiisa isagoo Allaah cazza wa jall mahadinaya". [Waxaa soo saaray Axmad].**

- Gabadh ka mid ah faraciisa: waxaa loola jeedaa tafiirtiisa, waana Umaamah bint Zaynab, gabadhiisa.

- Geeri ku dhow: waxay ku dhowdahay dhimasho, iyadoo naftu ka baxeyso.

- Ma Rasuulka Allaah agtiisa ayaad ku ooyaysaa?: oohinta Ummu Ayman way ka duwanayd oohinta Nabiga sallallaahu calayhi wasallam. Oohinta Nabiga sallallaahu calayhi wasallam waxay ahayd oohin naxariis, ma ahayn oohin argagax iyo samir la'aan ah. Oohinta Ummu Aymanse waxay ahayd oohin cod dheer iyo qaylo ah, sida inuu leeyahay: farqi ayaa u dhexeeya oohintayda oo sababteedu tahay naxariis iyo oohintaada oo sababteedu tahay argagax.

- Laga bixinayaa: naftiisa ayaa la qabtaa.

- **Faa'iido:**

Xadiiska waxaa ku jira in magdhowga ugu weyn ee muslimka ku jira balaayada uu yahay inuu ogaado in noloshan adduunku ku xaddidan tahay waqti iyo meel, aayihiisuna yahay janno ballaceedu yahay samooyinka iyo dhulka, isagoo ku waari doona. Sidaas darteed ayuu Allaah ugu mahadiyaa xaaladihiisa oo dhan. Maqaamka mahaddu Allaah agtiisa waa mid sarreeya. Sida ku timid xadiis saxiix ah: "alxamdulillaah waxay buuxisaa miisaanka".

**181. "عنْ أَنَسِ بْنِ مَالِكٍ قَالَ: شَـهِدْنَا ابْنَةً لِرَسُـولِ الله وَرَسُـولُ اللَّهِ جَالِسٌ عَلَى الْقَبْرِ فَرَأَيْتُ عَيْنَيهِ تَدمَعَانِ فقال ﷺ: أفيكم رجل لَمْ يُقَارِفِ اللَّيْلَةَ؟ قَالَ أَبُو طَلْحَةَ : أَنَا، قَالَ: انْزِلْ ، فَنَزَلَ فِي قَبْرِهَا" .[أخرجه البخاري.]**

**181. "Waxaa laga soo weriyey Anas bin Maalik inuu yiri: waxaan ka qaybgalnay gabadh Rasuulka Allaah leeyahay, Rasuulka Allaahna wuxuu fadhiyey qabriga agtiisa. Waxaan arkay labadiisa indhood oo ilmo ka socoto. Markaas sallallaahu calayhi wasallam wuxuu yiri: ma idinku jiraa nin aan xalay galmo samayn? Abuu Dalxah wuxuu yiri: aniga. Wuxuu yiri: deg. Markaas ayuu qabrigii u degay". [Waxaa soo saaray Al-Bukhaari].**

- Waxaan ka qaybgalnay gabadh Rasuulka Allaah leeyahay: waana dhacdadii geerida Ummu Kulthuum, xaaskii Cusmaan bin Caffaan radiyallaahu canhu.

- Aan xalay galmo samayn: aan xalay xaaskiisa u tegin.

Tani waxay daliil u tahay in qofkii habeenkii xaaskiisa u tagay aan subaxdaas loo sharciyeyn inuu meydka qabri geliyo.

- **Faa'iido:**

Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam wuu ooyey sida sunnada ku timid:

- Cabsida Allaah darteed isagoo salaaddiisa ku jira.
- Ummaddiisa oo uu uga cabsanayo.
- Marka uu Qur'aanka maqlo.
- Jacayl iyo hilow uu Allaah iyo janno u qabo.
- Murugada gabadhiisa Ummu Kulthuum markii ay dhimatay.
- Murugada wiilkiisa markii uu dhintay.
- Murugada tafiirtiisa markii ay dhimatay.
- Markii Cusmaan bin Madhcuun dhintay.
- Markii qorraxdu madoobaatay, cabsi Allaah iyo haybad uu u hayo cazza wa jall darteed.

## Iftiin

**Abuu Al-Cabbaas Ibnu Cataa' raximahullaah wuxuu yiri: qofkii naftiisa ku waajibiyey anshaxa sunnada, Allaah qalbigiisa wuxuu ku iftiimiyaa nuurka macrifada. Mana jiro maqaam ka sharaf badan maqaamka raacidda gacaliyaha sallallaahu calayhi wasallam ee amarradiisa, ficilladiisa, akhlaaqdiisa, iyo ku edbinta edebtiisa hadal, ficil, go'aan, rumayn iyo niyad.**
**Ha yaraysan barashada sunno kasta oo ka mid ah sunnooyinka Nabiga sallallaahu calayhi wasallam. Ogaanshaha sunnooyinku caadooyin ma noqdaan, ee waxay isu beddelaan cibaadooyin. Barashadaadu lafteedu waa sunno, niyaddaada inaad samaysana waa sunno. Sidaas darteed ardayga cilmiga raadinaya kalluunka biyaha ku jira ayaa dambi dhaaf u**

**weydiiya, qudhaanjada godkeeda ku jirtana dambi dhaaf bay u weydiisaa. Allaah cazza wa jall ku mahadi inaad cilmi raadinayso.**
**Bishaaro ayaa u sugnaatay qof kasta oo naftiisa kula jihaada barashada sunnada iyo soo noolaynteeda. Allaah tacaalaa wuxuu sunnada u doortaa dad uu jeclaysiiyo sunnada. Barashada sunnadu waxay ku xirtaa sunnada, waxayna u fududaysaa jacaylka dadka sunnada ee weynaynaya sunnada. Allaahna wuxuu sunnada ugu furaa laabahooda, markaas sunnadu waxay noqotaa raaxadooda. Waxaan Allaah ka baryaynaa inuu nagu arsaaqo nicmadaas. Nicmadaasna laguma helo rajo madhan, ee waxay u baahan tahay ikhlaaska niyadda, u baahnaansho iyo isu-dullayn Allaah cazza wa jall hortiisa ah, dadaal, iyo inaan lagu degdegin gurashada miraha.**

******************

## 45. Qaar ka mid ah waxa ka yimid gogosha Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam

**182. "عن عائشـة رَضِـيَ اللَّهُ عَنْها قَالَتْ : إنمَا كَانَ فِرَاشُ رسـول الله الَّذِي يَنَامُ عَلَيْهِ مِنْ أَدَمٍ حَشْوُهُ لِيف". [أخرجه مسلم.]**

**182. "Waxaa laga soo weriyey Caa'isha radiyallaahu canhaa inay tiri: gogosha Rasuulka Allaah ee uu ku seexan jiray waxay ahayd harag la magdiyay, waxaana lagu buuxiyey liif". [Waxaa soo saaray Muslim].**

- Harag la magdiyay: harag la jilciyey oo la diyaariyey.

- Liif: qolofta geedka timirta.

******************

## 46. Qaar ka mid ah waxa ka yimid is-hoosaysiinta Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam

**183. "عنْ عُمَرَ بْنِ الْخَطَّابِ قَالَ : قَالَ رَسُولُ اللَّهِ ﷺ: لَا تُطْرُونِي كَمَا أَطْرَتِ النصـارى عيسـى ابْنَ مَرْيَمَ إِنَّمَا أَنَا عبد فقولوا عبد الله ورسوله". [ أخرجه البخاري.]**

**183. "Waxaa laga soo weriyey Cumar bin Al-Khattaab inuu yiri: Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam wuxuu yiri: ha igu xadgudbina ammaanta sida Nasaaradu ugu xadgudbeen ammaanta Ciise bin Maryam. Anigu waxaan ahay addoon, ee dhaha: addoonka Allaah iyo Rasuulkiisa". [waxaa soo saaray Al-Bukhaari].**

- Ha igu xadgudbina ammaanta: ha dhaafina xadka ammaantayda.

**184. "عن أنس بن مالك رَضِيَ اللَّهُ عَنْه أن امْرَأَةً جَاءَتْ إِلَى النبي فَقَالَتْ لَهُ إِنَّ لِي إِلَيْكَ حَاجَةً فَقَالَ : اجْلِسِي فِي أَيِّ طَرِيقِ الْمَدِينَةِ شِئْتِ أَجْلِسْ إليك". [ أخرجه مسلم.]**

**184. "Waxaa laga soo weriyey Anas bin Maalik radiyallaahu canhu in haweeney u timid Nabiga, kuna tiri: waxaan kuu leeyahay baahi. Markaasuu yiri: fariiso jid kasta oo Madiina ka mid ah oo aad doonto, waan kula fariisanayaa". [waxaa soo saaray Muslim.]**

Akhlaaqdaadu sidee bay u qurux badan tahay, Rasuulkii Allaahow.

**185. "عن أنس بن مالك رَضِيَ اللَّهُ عَنْه قال: كان رسول الله يُدْعَى إِلَى خُبْزِ الشَّعِيرِ وَالْإِهَالَةِ السَّنِخَةِ فَيُجِيبُ وَلَقَدْ كَانَ لَهُ دِرْعٌ عِنْدَ يَهُودِيٍّ فَمَا وَجَدَ مَا يفكها حتى مات". [أخرجه أبو يعلى.]**

**185. "Waxaa laga soo weriyey Anas bin Maalik radiyallaahu canhu inuu yiri: Rasuulka Allaah waxaa loogu yeeri jiray rooti shaciir ah iyo iidaan dufan ah oo dhadhankiisa ama urtiisu is beddeshay, wuuna aqbali jiray. Wuxuu lahaa gaashaan ag yaallay nin Yuhuudi ah, mana helin wax uu ku furto ilaa uu dhintay". [Waxaa soo saaray Abuu Yaclaa].**

- Iidaan dufan ah: dufan kasta oo aan ka dhiganno iidaan.
Wax kasta oo dufan leh waxaa la yiraahdaa iidaan. Sida hore loo sheegay, iidaanku waa wax kasta oo rooti lala cuno.

- Dhadhankiisa ama urtiisu is beddeshay: wax muddo dheer yaallay darteed wax yar dhadhankiisa ama urtiisu isu beddeshay.

**186. "عن أنس بن مالك رَضِيَ اللَّهُ عَنْه قال: لم يكن شَخْصٌ أَحَبَّ إِلَيْهِمْ مِنْ رسول الله قَالَ: وَكَانُوا إِذَا رَأَوْهُ لَمْ يَقُومُوا لِمَا يَعْلَمُونَ من كراهته لذلك". [أخرجه أحمد والترمذي.]**

**186. "Waxaa laga soo weriyey Anas bin Maalik radiyallaahu canhu inuu yiri: ma jirin qof ay ka jeclaayeen Rasuulka Allaah. Wuxuu yiri: marka ay arkaan uma istaagi jirin, sababtoo ah waxay ogaayeen inuu taas neceb yahay". [waxaa soo saaray Axmad iyo At-Tirmidi.]**

Jacaylka saxaabada radiyallaahu canhum ee Nabiga sallallaahu calayhi wasallam wuxuu ahaa mid shareecada ku xiran. Uma istaagi jirin marka ay arkaan, iyagoo og in Nabigu sallallaahu calayhi wasallam uusan jeclayn taas.

Arrintan waxaa ku jira xiritaanka albaabka kibirka iyo islaweynaanta si aysan nafta ugu soo dhuuman.

**187. "عن جابر رَضِيَ اللَّهُ عَنْه قَالَ: جاءَنِي رَسُولُ اللَّهِ لَيْسَ بِرَاكِبِ بَغْلٍ وَلَا بِرْذَوْنٍ". [ أخرجه البخاري.]**

**187. "Waxaa laga soo weriyey Jaabir radiyallaahu canhu inuu yiri: Rasuulka Allaah ayaa ii yimid isagoo aan fuushanayn baqal iyo faras midna". [waxaa soo saaray Al-Bukhaari].**

- Isagoo aan fuushanayn: Nabigu sallallaahu calayhi wasallam wuxuu u yimid isagoo lugihiisa ku socda, saxaabiga Jaabirna markaas wuu xanuunsanaa.

- Faras: faras aan Carab ahayn oo la yiraahdo birdhawn.

**188. "عن أنس بن مالك رضـي الله عنه :أنّ رسـولِ الله صـلى الله عليه وسـلم حجّ على رحل رثّ وقطيفة كنّا نرى ثمنها أربعة دراهم، فلمّا استوت به راحلته قال: لبّيك بِحجّةٍ لَا سُمْعةَ فِيهَا ولا رِياءْ". [أخرجه ابن ماجه والترمذي].**

**188. "Waxaa laga soo weriyey Anas bin Maalik radiyallaahu canhu: Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam wuxuu xajay isagoo saaran qalab geel oo duugoobay iyo maro yar oo aan u malaynaynay qiimaheedu afar dirham. Markii neefkiisii si toos ah u istaagay ayuu yiri: waan kuu hoggaansamay xaj aan sumcad doon ku jirin, ismuujinna ku jirin". [Waxaa soo saaray Ibnu Maajah iyo At-Tirmidi[.**

- Qalab geel: waa waxa dhabarka geela la saaro si loogu fuulo, badanaana qoryo ayuu ka samaysan yahay. Qalabkaasina wuxuu ahaa mid muuqaal ahaan aad u hooseeya.

- Maro yar: gabal maro ah oo lagu dul saaro qalabka geela si uu u noqdo mid jilicsan, qiimaheeduna wuu yaraa. Tani waxay ka mid ahayd is-hoosaysiinta Nabiga sallallaahu calayhi wasallam.

- **Faa'iido:**

Nabigu sallallaahu calayhi wasallam hal mar ayuu xajay. Wuxuuna Rabbigiis ka baryey inuu noqdo xaj la aqbalay oo aan riyaa iyo sumcad doon midna lahayn.

Xadiiskan waxaa ku jira faa'iidooyin u yaalla ummaddan Muxammadiyada ah. Ikhlaaska iyo runnimada niyaddu waa saldhigga camal kasta, la'aantiisna camalka lama aqbalo. Ku dadaal ikhlaaska, ilaali oo dib u cusboonaysii, waayo abaalmarinta iyo xisaabtu isaga ayay ku xiran yihiin.

Sida Imaam Ibnu Al-Qayyim yiri: haddii aadan ikhlaas lahayn, ha daalin. Qalbiga ku soo xusuuso haybadda, weynaanta iyo kaamilnimada Kan aad u shaqaynayso. Naftaada uga cabso sumcad doonka iyo ismuujinta, kana magan gal Allaah, maxaa yeelay labaduba waxay ka mid yihiin waxyaabaha camalka buriya.

Xitaa Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam, isagoo ah kan ugu khayr badan dadka uguna nadiifsan qalbiga, Rabbigiis ayuu ka baryey in xajkiisu ka nadiif noqdo sumcad doon iyo ismuujin.

Qariya wanaaggiinna sida aad u qarisaan xumaantiinna.

Niyadda soo xusuusta ka hor hadal kasta iyo camal kasta. Ma Allaah bay si daacad ah ugu socotaa?

Niyaddu waxay camallada ugu yar uguna fudud gaarsiisaa darajooyinka ugu sarreeya. Waxaa dhici karta camalku inuu aad u fudud yahay, balse Allaah agtiisa ka mid yahay camallada ugu waaweyn adigoon ogayn. Niyadda muslimku way ka gaarsiin badan tahay camalkiisa.

Weyneynta niyaddaadu waa weynaynta diinta, Allaah iyo Rasuulkiisa. Allaahow nagu arsaaq raacid wanaagsan, nagana dhig addoommadaada kuwa ugu run badan uguna ikhlaaska badan.

**189. "عنْ يحيى بن سَعيد عنْ عَمْرَةَ قَالَتْ : قِيلَ لِعَائِشَةَ مَاذَا كَانَ يَعْمَلُ رسول الله فِي بَيْتِهِ قَالَتْ كَانَ بَشَرًا مِنَ الْبَشَرِ يَفْلِي ثَوْبَهُ وَيَحْلُبُ شَاتَهُ وَيَخْدُمُ نَفْسَهُ" .[أخرجه أحمد.]**

**189. "Waxaa laga soo weriyey Yaxyaa bin Saciid, Camrah inay tiri: waxaa Caa'isha lagu yiri: muxuu Rasuulka Allaah ku samayn jiray gurigiisa? Waxay tiri: wuxuu ahaa bini'aadam ka mid ah bini'aadamka; dharkiisa ayuu iska baari jiray, ariitiisa ayuu lisi jiray, naftiisana wuu u adeegi jiray". [Waxaa soo saaray Axmad].**

- Iska baari jiray: dharkiisa ayuu hubin jiray, isaga laftiisa.

******************

# 47. Qaar ka mid ah waxa ka yimid akhlaaqda Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam

**190."عَنْ عَمْرِو بْنِ الْعَاصِ قَالَ :كَانَ رَسُولُ الله صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ يُقْبِلُ بِوَجْهِهِ وَحَدِيثِهِ عَلَى أَشَرِّ الْقَوْمِ يَتَأَلَّفُهُمْ بِذَلِكَ فَكَانَ يُقْبِلُ بِوَجْهِهِ وَحَدِيثِهِ عَلَيَّ حَتَّى ظَنَنْتُ أَنِّي خَيْرُ الْقَوم فَقُلْتُ يَا رَسُولَ اللَّهِ أَنَا خَيْرٌ أَوْ أَبُو بَكْرٍ؟ قَالَ: أَبُو بَكْرٍ فَقُلْتُ: يَا رَسُولَ اللَّهِ أَنَا خَيْرٌ أو عمر؟ قال: عُمَرُ ، فَقُلْتُ: يَا رَسُولَ اللَّهِ أَنَا خَيْرٌ أَوْ عُثْمَانُ؟ قَالَ: عُثْمَانُ. فَلَمَّا سَأَلْتُ رَسُولَ الله صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ فَصَدَقَنِي فَلَوَدِدْتُ أَنِّي لَمْ أكن سألته". [ أخرجه الترمذي.]**

**190. "Waxaa laga soo weriyey Camr bin Al-Caas inuu yiri: Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam wuxuu wejigiisa iyo hadalkiisa ugu jeedin jiray kuwa dadka ugu shar badan, isagoo taas ku kasbanaya qalbiyadooda. Wuxuu wejigiisa iyo hadalkiisa ii jeedin jiray**

**ilaa aan mooday inaan ahay kan dadka ugu khayr badan. Markaasaan iri: Rasuulkii Allaahow, ma anigaa ka khayr badan mise Abuu Bakar? Wuxuu yiri: Abuu Bakar. Waxaan iri: Rasuulkii Allaahow, ma anigaa ka khayr badan mise Cumar? Wuxuu yiri: Cumar. Waxaan iri: Rasuulkii Allaahow, ma anigaa ka khayr badan mise Cusmaan? Wuxuu yiri: Cusmaan. Markii aan Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam weydiiyey, run buu ii sheegay, markaas waxaan jeclaan lahaa inaanan weydiin". [waxaa soo saaray At-Tirmidi].**

- Wejigiisa ugu jeedin jiray: wuxuu kula kulmi jiray weji furan, hadal wanaagsan iyo la macaamil wanaagsan.

- Waxaan jeclaan lahaa inaanan weydiin: Camr bin Al-Caas wuxuu leeyahay: waxaan jeclaan lahaa inaanan weydiin. Annaguna waxaan leenahay: waad fiicnayd Camrow markii aad weydiisay, waadna fiicnayd markii aad werisay, intee baynu ka faa'iidnay xadiiskan weyn.

- **Faa'iido:**

Bal eeg weynaanta hoggaamiyahan tarbiyeynta leh ee saameynta xooggan leh, Maxamed sallallaahu calayhi wasallam, kaas oo aan ka barannay sida loola dhaqmo dadka daciifka ah, carruurteenna, iyo qof kasta oo arrintiisa naloo xil saaray, si wanaagsan oo qurux badan, jilicsanaan, is-hoosaysiin iyo naxariis leh. Akhlaaq wanaaggu waa inaad dadka oo dhan dareensiiso inaad jeceshahay, xitaa in mid kasta oo iyaga ka mid ahi dareemo inuu yahay kan dadka ugu jecel qalbigaaga.

Isla waqtigaasna ku dadaal in carruurtaadu fahmaan inaad iyaga ka jeceshahay dadka kale, hana muujin adigoo tarbiye ah inaad qof qof kale ka hor marinayso.

**191. "عن أنس بن مالك رَضِيَ اللَّهُ عَنْه قَالَ: خدَمْتُ رَسُولَ اللَّهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ عَشْرَ سِنِينَ فَمَا قَالَ لِي أُفٍّ قَطُّ وَمَا قَالَ لي لِشَيْءٍ صَنَعْتُهُ: لِمَ صَنَعْتَهُ وَلَا لِشَيْءٍ تَرَكْتُهُ: لِمَ تَرَكْتَهُ وَكَانَ رسول الله صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ مِنْ أَحْسَنِ النَّاسِ خُلُقًا وَلَا مَسَسْتُ خَزًّا وَلَا حَرِيرًا وَلَا شَيْئًا كَانَ أَلْيَنَ مِنْ كَفِّ رَسُولِ الله صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ وَلَا شَمَمْتُ مِسْكًا قَطُّ وَلَا عِطْرًا كَانَ أَطْيَبَ من عرق النبي صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ". [أخرجه البخاري ومسلم.]**

**191. "Waxaa laga soo weriyey Anas bin Maalik radiyallaahu canhu inuu yiri: waxaan u adeegi jiray Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam toban sano, weligiisna iguma oran uff, wax aan sameeyeyna iguma oran: maxaad u samaysay? Wax aan ka tagayna iguma oran: maxaad uga tagtay? Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam wuxuu ka mid ahaa dadka ugu akhlaaqda wanaagsan. Mana taaban maro khaz ah, xariir, ama wax ka jilicsan baabacada Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam. Mana urin miski ama cadar ka udgoon dhididka Nabiga sallallaahu calayhi wasallam". [Waxaa soo saaray Al-Bukhaari iyo Muslim].**

- Khaz: waa maro isku dhafan oo ka kooban xariir iyo wax kale.

-Ka jilicsan baabacada Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam: taabashada baabacadiisu waxay ahayd mid jilicsan.

- Ka udgoon dhididka Nabiga sallallaahu calayhi wasallam: dhididkiisu wuxuu ahaa mid udgoon, taasina waxay ka mid tahay waxyaabaha isaga u gaarka ah sallallaahu calayhi wasallam.

- **Faa'iido:**

Sidee ayuu Rasuulku sallallaahu calayhi wasallam u lahaa baabacooyin adag, isla waqtigaasna u lahaayeen jilicsanaan?
Jilicsanaanta iyo dabacsanaantu waxay ahayd taabashada maqaarka, adkaantuna waxay ahayd lafaha, taas oo macnaheedu yahay in lafihiisu waaweynaayeen, maqaarkiisuna jilicsanaa.

**192. "عَنْ عَائِشَةَ أَنَّهَا قَالَتْ: لم يَكُنْ رَسُولُ اللَّهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ فاحشاً ولا متفحشاً ولا صَخَّابًا فِي الْأَسْوَاقِ وَلَا يجزيء بالسيئة ولكن يعفو ويصفح". [أخرجه أحمد والترمذي.]**

**192. "Caa'isha waxay tiri: Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam ma ahayn mid hadal xun ku hadla, mana ahayn mid hadal xun iska dhiga, mana ahayn mid suuqyada qaylo badan ku sameeya, xumaanna kuma abaalmarin jirin xumaan, balse wuu cafin jiray oo saamixi jiray". [Waxaa soo saaray Axmad iyo At-Tirmidi].**

- Hadal xun ku hadla: ma ahayn mid afxumo ku hadla, taasina waxay ahayd dabeecad ku jirta sallallaahu calayhi wasallam.

- Hadal xun iska dhiga: ma ahayn mid si iska yeelyeel ah afxumo u sameeya.

- Qaylo badan: qof qaylo badan.

Waxaas oo dhan waxay dhaawacaan haybadda ninka iyo muruwwadiisa.

**193. "عن عائشة رَضِيَ اللَّهُ عَنْها قَالَتْ :مَا ضَرَبَ رَسُولُ الله صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ بِيَدِهِ شَيْئًا قَطُّ إِلَا أَنْ يُجَاهِدَ فِي سَبِيلِ اللَّهِ وَلَا ضَرَبَ خَادِمًا وَلا امرأة". [أخرجه أحمد.]**

**193. "Waxaa laga soo weriyey Caa'isha radiyallaahu canhaa inay tiri: Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam weligiis gacantiisa wax kuma dhufan, marka laga reebo inuu**

**jihaad ku jiro jidka Allaah. Mana dhufan adeege ama haweeney". [Waxaa soo saaray Axmad.]**

Rasuulkeenna Maxamed sallallaahu calayhi wasallam gacantiisa uma adeegsan jirin fahamsiinta dadka.

**194. "عن عائشة رضي الله عنها قَالَتْ :مَا رَأَيْتُ رَسُولَ الله صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ مُنْتَصِرًا مِنْ مَظْلَمَةٍ ظُلِمَهَا قَطُّ مَا لَمْ يُنْتَهَكْ مِنْ مَحَارِمِ اللَّهِ شَيْءٌ فَإِذَا انْتُهِكَ مِنْ مَحَارِمِ الله تعالى شَيْءٌ كَانَ مِنْ أَشَدِّهِمْ فِي ذَلِكَ غَضَبًا وَمَا خُيِّرَ بَيْنَ أَمْرَيْنِ إِلَّا اخْتَارَ أَيْسَرَهُمَا مَا لَمْ يكن مأثما". [ أخرجه الحميدي وأخرجه اسحق بن راهويه.]**

**194. "Waxaa laga soo weriyey Caa'isha radiyallaahu canhaa inay tiri: weligay ma arag Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam oo naftiisa uga aargudanaya dulmi loo geystay, ilaa wax ka mid ah waxyaabaha Allaah xurmada siiyey la jebiyo mooyee. Haddii wax ka mid ah xurmada Allaah tacaalaa la jebiyo, wuxuu ka mid noqon jiray kuwa ugu caro badan arrintaas. Mana la kala dooransiin laba arrimood, ilaa uu doorto midka ugu fudud, haddii uusan dambi ahayn". [waxaa soo saaray Al-Xumaydi, waxaana sidoo kale soo saaray Isxaaq bin Raahawayh].**

- Ilaa uu doorto midka ugu fudud: midka ugu sahlan. Fududeyntu waa ujeeddo weyn oo ka mid ah ujeeddooyinka shareecada, dhammaanteenna Rasuulkeenna Maxamed sallallaahu calayhi wasallam ayuu tusaale wanaagsan inoo yahay.

- **Faa'iido:**

Cafi oo saamax haddii qaladku yahay mid xuquuqdaada ku dhacay, xisaabina haddii xurmada Allaah la jebiyo.
U istaag qaladka ka dhacay xaqa Allaah, hana u istaagin qaladka ka dhacay xaqaaga.

**195. "وعنها رَضِيَ اللَّهُ عَنْها قَالَت :استَأْذَنَ رَجُلٌ عَلَى رسول الله صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ وَأَنَا عِنْدَهُ فَقَالَ :بِئْسَ ابْنُ الْعَشِيرَةِ (أَوْ) أَخُو الْعَشِيرَةِ، ثُمَّ أَذِنَ لَهُ فلما دخل ألان لَهُ الْقَوْلَ فَلَمَّا خَرَجَ قُلْتُ: يَا رَسُولَ اللَّهِ قُلْتَ مَا قُلْتَ ثُمَّ أَلَنْتَ لَهُ الْقَوْلَ. فَقَالَ: يَا عَائِشَةُ إِنَّ مِنْ شَرِّ النَّاسِ مَنْ تَرَكَهُ النَّاسُ أَوْ وَدَعَهُ النَّاسُ اتقاء فحشه". [أخرجه البخاري ومسلم.]**

**195. "Iyadana radiyallaahu canhaa waxaa laga soo weriyey inay tiri: nin ayaa Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam fasax weydiistay, anigoo agtiisa jooga. Wuxuu yiri: waa nin xun oo qabiilkiisa ka mid ah, ama waa walaal qabiil oo xun. Kadib wuu u fasaxay. Markii uu soo galay, hadalka ayuu u jilciyey. Markii uu baxay ayaan iri: Rasuulkii Allaahow, waxaad tiri wixii aad tiri, kadibna hadalka ayaad u jilcisay. Wuxuu yiri: Caa'ishoy, dadka ugu shar badan waxaa ka mid ah qof ay dadku ka tagaan ama iska daayaan, iyagoo ka dhowrsanaya afxumadiisa". [Waxaa soo saaray Al-Bukhaari iyo Muslim].**

- Waa nin xun oo qabiilkiisa ka mid ah: waxaa loola jeedaa ninkani waa mid xun oo qabiilkan ka tirsan, akhlaaq ahaanna wuxuu ka mid yahay kuwa ugu xun.

- **Faa'iido:**

Haddii qof shar leeyahay, hadalka u jilci, laakiin ha ammaanin, maxaa yeelay ammaantiisu waxay noqotaa munaafaqad iyo dufsi.

Waxa Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam sameeyeyna waa mudaaro. Wuxuu ka dhowrsanayey sharkiisa. Taasina waa habka ku habboon ee lagula macaamilo dadka noocaas ah: mudaaro iyo jilicsanaan, laakiin ammaan la'aan.

Si wanaagsan ula kulma, idinkoo ka dhowrsanaya shartooda. Taasina waxay ka mid tahay akhlaaqda qofka muruwwada leh iyo garashada qofka caqliga badan.

**196. "عن محمد بن المنكدر قال سمعت جابر بن عبد الله يقول: ما سُئِلَ رَسُولُ اللَّهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ شَيْئًا قَطُّ فَقَالَ: لَا". [أخرجه البخاري ومسلم.]**

**196. "Waxaa laga soo weriyey Maxamed bin Al-Munkadir inuu yiri: waxaan maqlay Jaabir bin Cabdullaah oo leh: Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam weligiis wax lama weydiin, markaasna ma oran: maya". [Waxaa soo saaray Al-Bukhaari iyo Muslim.]**

Sidee baad u jilicsan tahay, sidee baad u yaab badan tahay, sayidka dhammaan makhluuqaadkow. Ku dayo Nabigaaga sallallaahu calayhi wasallam, oo dadka u roonow, qalbiyadana u kab.

**197."عن أنس بن مالك رضي الله عنه قال: كان النبي صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ لَا يَدَّخِرُ شَيْئًا لِغَدٍ". [أخرجه الترمذي.]**

**197. "Waxaa laga soo weriyey Anas bin Maalik radiyallaahu canhu inuu yiri: Nabigu sallallaahu calayhi wasallam waxba uma keydsan jirin berrito". [Waxaa soo saaray At-Tirmidi].**

- **Faa'iido:**

Wuxuu sallallaahu calayhi wasallam naftiisa waxba uma keydsan jirin, balse qoyskiisa wuxuu u keydin jiray quud sanad ah, maxaa yeelay isaga ayaa mas'uul ka ahaa. Rizqiga berrina Allaah ayaa haya.

**198. "عن عائشـــة رَضِـــيَ اللَّهُ عَنْها: أنّ النبي صَـــلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَـــلَّمَ كَانَ يَقْبَلُ الْهَدِيَّةَ وَيُثِيبُ عَلَيْهَا". [أخرجه البخاري.]**

**198. "Waxaa laga soo weriyey Caa'isha radiyallaahu canhaa: Nabigu sallallaahu calayhi wasallam wuxuu aqbali jiray hadiyadda, wuuna ka abaalmarin jiray". [Waxaa soo saaray Al-Bukhaari.]**

Nabigu sallallaahu calayhi wasallam wuxuu ahaa heerka ugu sarreeya ee akhlaaqda. Wuxuu hadiyadda ka aqbali jiray fuqarrada iyo masaakiinta, isagoo u is-hoosaysiinaya, qalbiyadoodana u jilcinaya. U muuji farxad qofkii kuu keena hadiyad si aad qalbigiisa u kabto. **Wuxuu yiri sallallaahu calayhi wasallam**:

**"إن أحبِّكم إليَّ وأقربكم مني في الآخرة محاسنكم أخلاقاً". [أخرجه أحمد وابن حبان].**

**"Kuwa iigu jecel, iiguna dhow aakhiro waa kuwa idinka mid ah ee akhlaaqdoodu ugu qurux badan tahay". [waxaa soo saaray Axmad iyo Ibnu Xibbaan[.**

- **Faa'iidooyin:**

- Wuxuu sallallaahu calayhi wasallam ahaa mid sahlan, dhinaciisuna jilicsan yahay, aan qaylo badnayn, aan afxumo badnayn, aan ceebayn badanayn, aan muran iyo colaad badnayn.
- Wuxuu sallallaahu calayhi wasallam wejigiisa ugu jeedin jiray kuwa dadka ugu shar badan, isagoo qalbiyadooda kasbanaya.
- Wuxuu sallallaahu calayhi wasallam rajaynayaashiisa kama rajo goyn jirin.
- Wuxuu sallallaahu calayhi wasallam weligiis naftiisa uma caroon jirin, ilaa xurmada Allaah la jebiyo mooyee.
- Haddii sallallaahu calayhi wasallam la kala dooransiiyo laba arrimood, wuxuu dooran jiray midka ugu fudud, haddii uusan dambi ahayn.
- Wuxuu sallallaahu calayhi wasallam aqbali jiray hadiyadda, wuuna ka abaalmarin jiray.
- Wuxuu sallallaahu calayhi wasallam ahaa mid mar walba weji furan.
- Nabigu sallallaahu calayhi wasallam weligiis gacantiisa cid kuma dhufan, marka laga reebo inuu jihaad ku jiro jidka Allaah.
- Wuxuu sallallaahu calayhi wasallam mudaaro u samayn jiray dadka sharka leh, taas oo ah inuu wanaag kula kulmo si uu uga dhowrsado shartooda, hadalkana u jilciyo, laakiin ammaan la'aan.
- Wuxuu sallallaahu calayhi wasallam ka tagi jiray waxa aan dan u ahayn, mana hadli jirin ilaa waxa uu ajarkiisa rajaynayo mooyee.
- Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam weligiis wax lama weydiin, markaasna ma oran maya.
- Wuxuu sallallaahu calayhi wasallam cidna si toos ah uguma wajihi jirin wax ay neceb tahay.

- Wuxuu sallallaahu calayhi wasallam cidna ma caayi jirin, mana ceebayn jirin, mana raadin jirin ceebtiisa.
- Wuxuu sallallaahu calayhi wasallam naftiisa waxba uma keydsan jirin weligiis, marka laga reebo inuu qoyskiisa u keydiyo quud sanad ah, maxaa yeelay isaga ayaa mas'uul ka ahaa.
- Wuxuu sallallaahu calayhi wasallam ahaa dadka ugu deeqsisan khayrka.

Kuwaas oo dhan waa sifooyinkii Nabigeenna Maxamed sallallaahu calayhi wasallam. Si wanaagsan u raac, waxaad gaari doontaa darajooyinka sare. Qofkii qof jeclaadana wuxuu raadraacaa wax kasta oo isaga khuseeya, jacayl uu u qabo darteed.

******************

## 48. Qaar ka mid ah waxa ka yimid xishoodka Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam

**199. "عَنْ أَبِي سَعِيدٍ الْخُدْرِيِّ قَالَ: كانَ رَسُولُ الله صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ أَشدَّ حَيَاءً مِنَ الْعَذرَاءِ فِي خِدْرِهَا وَكَانَ إِذَا كره شيئا عرف في وجهه". [ أخرجه البخاري ومسلم.]**

**199. "Waxaa laga soo weriyey Abuu Saciid Al-Khudri inuu yiri: Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam wuxuu ka xishood badnaa gabadh bikro ah oo ku jirta qolkeeda asturan. Haddii uu wax necbaadana wejigiisa ayaa laga garan jiray". [waxaa soo saaray Al-Bukhaari iyo Muslim.]**

Xishoodkiisa sallallaahu calayhi wasallam wuxuu ka muuqday dabeecad jilicsan iyo naxariis, ma ahayn inuu dadka la hadli waayo.

Waxaa nagu filan in laga reebay la joogista Rasuulka sallallaahu calayhi wasallam adduunka, sidee baynu uga kaaftoomi karnaa la joogistiisa aakhiro?

Badi salaadda korkiisa, kuna dadaal raacid wanaagsan iyo ku dayasho isaga sallallaahu calayhi wasallam.

******************

## 49. Qaar ka mid ah waxa ka yimid xijaamada Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam

**200."عن جابر بن الشعبي عن ابن عباس أظنه قال: إن النبي صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ احتجم على الأَخْدَعَيْنِ وَبَيْنَ الْكَتِفَيْنِ وَأَعْطَى الْحَجَّامَ أَجْرَهُ وَلَوْ كَانَ حراما لم يعطه" .[أخرجه أحمد.]**

**200. "Waxaa laga soo weriyey Jaabir bin Ash-Shacbi, kana soo weriyey Ibnu Cabbaas, waxaan u malaynayaa inuu yiri: Nabigu sallallaahu calayhi wasallam wuxuu xijaamay**

**labada xidid ee qoorta iyo inta u dhexeysa labada garab, wuxuuna siiyey xijaamiyaha ujradiisa. Haddii ay xaaraan ahaan lahayd, ma uu siiyeen". [Waxaa soo saaray Axmad].**

- Labada xidid ee qoorta: labada xidid ee qoorta ku hareeraysan, dhegaha gadaashooda ama hoostooda.

- Inta u dhexeysa labada garab: waa meel u dhexeysa labada garab, xagga sare ee laf-dhabarta, hoosta lafta soo baxda.

- **Faa'iido:**

Meelaha ugu wanaagsan ee dhiigga xun laga soo saaro waa meelahan. Taasina waa xijaamo ka hortag ah.

**201. "عن أنس بنِ مالك رضــيِ الله عنه قال: كانِ رســول الله صَــلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَــلَّمَ يَحْتَجِمُ فِي الْأَخْدَعَيْنِ وَالْكَاهِلِ وَكَانَ يَحْتَجِمُ لِسَبْعَ عَشْرَةَ وَتِسْعَ عَشْرَةَ وَإِحْدَى وَعِشْرِينَ". [أخرجه الترمذي.]**

**201. "Waxaa laga soo weriyey Anas bin Maalik radiyallaahu canhu inuu yiri: Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam wuxuu xijaaman jiray labada xidid ee qoorta iyo kaahilka, wuxuuna xijaaman jiray maalinta toddoba iyo tobnaad, sagaal iyo tobnaad, iyo kow iyo labaatanaad". [Waxaa soo saaray At-Tirmidi].**

- Kaahilka: meesha uu ku yaal waa inta u dhexeysa labada garab, xagga sare ee laf-dhabarta.

Xadiis kale oo ka yimid Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam waxaa ku sugan:

**"الشفاء في ثلاثة: شربة عسل و شرطة محجم وكيَّة نار وأنهى أمتي عن الكي".** [أخرجه البخاري]

**"Daawadu waxay ku jirtaa saddex: cabbid malab ah, jeexidda qalabka xijaamada, iyo gubid dab ah, waxaana ummaddayda ka reebayaa gubidda". [waxaa soo saaray Al-Bukhaari].**

Maalmaha ugu wanaagsan ee xijaamada waa toddoba iyo tobnaad, sagaal iyo tobnaad, iyo kow iyo labaatanaad ee bil kasta oo Hijri ah.
Xijaamaduna waa dardaarankii malaa'igta ee Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam. Waxay ugu dardaarmeen habeenkii Israa' iyo Micraajka.

**Wuxuu yiri sallallaahu calayhi wasallam:**

**"ما مررت ليلة أُسري بي بملأ من الملائكة إلا قالوا: يا محمد مُر أمتك بالحجامة". [صححه الألباني].**

**"Habeenkii la i dheelmiyey, koox kasta oo malaa’ig ah oo aan maray waxay igu yiraahdeen: Maxamedow, ummaddaada far xijaamada". [wuxuu saxiixiyey Al-Albaani].**

Meelaha uu Nabigu sallallaahu calayhi wasallam ka xijaamay sida axaadiista ku timid:

1. Madaxa.
2. Labada xidid ee qoorta, oo ah labada xidid ee qoorta ku hareeraysan, dhegta gadaasheeda ama hoosteeda.
3. Kaahilka, oo ah inta u dhexeysa labada garab.
4. Garabka dushiisa.
5. Dushooda labada cagood, wuxuuna sallallaahu calayhi wasallam ka xijaamay isagoo ixraam ku jira meel la yiraahdo Malal, oo ah deegaan ku yaal Madiina.

******************

# 50. Qaar ka mid ah waxa ka yimid magacyada Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam

**202."عن جبير بن مطعم قَالَ: قَالَ رَسُولُ اللَّهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ :إِنَّ لِي أَسْمَاءً: أَنَا مُحَمَّدٌ وَأَنَا أَحْمَدُ وَأَنَا الْمَاحِي الَّذِي يَمْحُو اللَّهُ بِيَ الْكُفْرَ وَأَنَا الْحَاشِرُ الَّذِي يُحْشَرُ النَّاسُ عَلَى قَدَمِي وَأَنَا الْعَاقِبُ وَالْعَاقِبُ الَّذِي لَيْسَ بَعْدَهُ نَبِيٌّ". [أخرجه البخاري ومسلم].**

**202. "Waxaa laga soo weriyey Jubayr bin Mudcim inuu yiri: Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam wuxuu yiri: anigu waxaan leeyahay magacyo: waxaan ahay Maxamed, waxaan ahay Axmad, waxaan ahay Al-Maaxi, kan Allaah igu tirtiro gaalnimada, waxaan ahay Al-Xaashir, kan dadka lagu kulmin doono cagahayga ka dib, waxaan ahay Al-Caaqib, Al-Caaqibna waa kan uusan nabi ka dambayn". [waxaa soo saaray Al-Bukhaari iyo Muslim].**

- Dadka lagu kulmin doono cagahayga ka dib: waxaa loola jeedaa isaga ayaa dadka ka hor la soo kulmin doonaa, dadkuna raadkiisa ayay ku xigi doonaan, isaga ka dib sallallaahu calayhi wasallam.

**203. "عَنْ حُذَيْفَةَ قَالَ: لقِيتُ النبي صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ فِي بَعْضِ طُرُقِ الْمَدِينَةِ فَقَالَ: أنَا مُحَمَّدٌ وَأَنَا أَحْمَدُ وَأَنَا نَبِيُّ الرَّحْمَةِ وَنَبِيُّ التَّوْبَةِ وَأَنَا الْمُقَفَّى وَأَنَا الْحَاشِرُ وَنَبِيُّ الْمَلَاحِمِ". [أخرجه أحمد].**

**203. "Waxaa laga soo weriyey Xudhayfah inuu yiri: waxaan Nabiga sallallaahu calayhi wasallam kula kulmay qaar ka mid ah jidadka Madiina, markaasuu yiri: waxaan ahay Maxamed, waxaan ahay Axmad, waxaan ahay Nabiga naxariista, Nabiga towbadka, waxaan ahay Al-Muqaffaa, waxaan ahay Al-Xaashir, iyo Nabiga dagaallada waaweyn". [waxaa soo saaray Axmad].**

- Al-Muqaffaa: waa kan ugu dambeeya anbiyada, sida Al-Caaqib, waayo wuxuu daba socdaa anbiyada, jidkoodana raacayaa.

- Nabiga dagaallada waaweyn: Nabiga dagaalka, isaga oo haddana ah Nabiga naxariista; naxariista wuxuu dhigayaa meesheeda, dagaalkana wuxuu dhigayaa meeshiisa.

- **Faa'iido:**

Magacyada Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam ee ku yimid sunnada:

- Maxamed sallallaahu calayhi wasallam.
- Axmad sallallaahu calayhi wasallam.
- Al-Maaxi: kan Allaah ku tirtiro gaalnimada.
- Al-Xaashir: kan dadka lagu kulmin doono cagihiisa ka dib.
- Al-Caaqib/Al-Muqaffaa: kan uusan nabi ka dambayn.
- Nabiga naxariista:

**﴿وَمَا أَرْسَلْنَاكَ إِلَّا رَحْمَةً لِلْعَالَمِينَ﴾ [الأنبياء: 107].**

**﴿Kuuma aanu soo dirin waxaan aheyn Naxariis aad u ahaato uumanka oo idil﴾ [Al-anbiyaa:107]**

- Nabiga towbadka.
- Nabiga dagaallada waaweyn, Nabiga dagaalka.

******************

# 51. Qaar ka mid ah waxa ka yimid nolosha Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam

**204. "عَنْ سِمَاكِ بْنِ حَرْبٍ قَالَ: سَمِعْتُ النُّعْمَانَ بْنَ بَشِيرٍ يَقُولُ: أَلَسْتُمْ فِي طَعَامٍ وَشَرَابٍ مَا شِئْتُمْ؟ لقد رأيت نبيكم صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ وَمَا يَجِدُ مِنَ الدَّقَلِ مَا يَمْلَأُ بَطْنَهُ". [أخرجه مسلم].**

**204. "Waxaa laga soo weriyey Simaak bin Xarb inuu yiri: waxaan maqlay An-Nucmaan bin Bashiir oo leh: miyaanad haysan cunto iyo cabbid waxaad doontaan ah? Waxaan arkay Nabigiinna sallallaahu calayhi wasallam isagoo aan helin timir xun oo calooshiisa buuxisa". [Waxaa soo saaray Muslim].**

- Timir xun: timirta tayadeedu liidato.

205. "عن عائشــة رضــي الله عنها قالت :إِنْ كُنَّا آلَ مُحَمَّدٍ نَمكُثُ شَــهْرًا مَا نَسْـتَوْقِدُ بِنَارٍ إِنْ هُوَ إِلَا التَّمْرُ وَالْمَاءُ". [أخرجه البخاري ومسلم] وزاد البخاري: "إلا أنه قد كان لرسول الله صلى الله عليه وسلم جيران من الأنصـار كانت لهم منائح وكانوا يمنحون رسول الله صلى الله عليه وسلم من ألبانهم فيسقينا".

**205. "Waxaa laga soo weriyey Caa'isha radiyallaahu canhaa inay tiri: annaga reer Maxamed waxaan joogi jirnay bil aan dab shidin, mana jirin wax aan ahayn timir iyo biyo". [waxaa soo saaray Al-Bukhaari iyo Muslim.] Al-Bukhaari wuxuu ku daray: "hase yeeshee Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam wuxuu lahaa deris Ansaarta ka mid ah oo lahaa xoolo caano leh, waxayna Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam siin jireen caanahooda, markaas ayuu na waraabin jiray".**

- Xoolo caano leh oo la amaahiyo: waa ari ama geel caano leh oo qof kale la siiyo si uu u liso ugana faa'iidaysto caanihiisa, dabadeedna uu ugu celiyo milkiilihiisa.

206. "عنْ أَبِي هُرَيْرَةَ رضي الله عنه قَالَ: خرَجَ رَسُولُ اللَّهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ فِي سَاعَةٍ لَا يَخْرُجُ فِيهَا وَلَا يَلْقَاهُ فِيهَا أَحَدٌ فأتاه أَبُو بَكْرٍ فَقَالَ: مَا جَاءَ بِكَ يَا أَبَا بَكْرٍ؟ قَالَ: خَرَجْتُ أَلْقَى رَسُولَ اللَّهِ ﷺ وَأَنْظُرُ فِي وَجْهِهِ وَالتَّسْلِيمَ عَلَيْهِ. فَلَمْ يَلْبَثْ أَنْ جَاءَ عُمَرُ فَقَالَ: مَا جَاءَ بِكَ يَا عُمَرُ؟ قَالَ: الْجُوعُ يَا رَسُـــولَ اللَّهِ قال ﷺ :وَأَنَا قَدْ وَجَدْتُ بَعْضَ ذَلِكَ فَانْطَلَقُوا إِلَى مَنْزِلِ أَبِي الْهَيْثَمِ بْنِ التَّيْهَانِ الْأَنْصَـــارِيِّ وَكَانَ رَجُلًا كَثِيرَ النَّخْلِ وَالشَّـــاءِ وَلَمْ يَكُنْ لَهُ خَدَمٌ فَلَمْ يَجِدُوهُ فَقَالُوا لِامْرَأَتِهِ: أَيْنَ صَاحِبُكِ؟ فَقَالَتِ: انْطَلَقَ يَسْتَعْذِبُ لَنَا الْمَاءَ. فَلَمْ يَلْبَثُوا أَنْ جَاءَ أَبُو الْهَيْثَمِ بِقِرْبَةٍ يَزْعَبُهَا فَوَضَعَهَا ثُمَّ جَاءَ يلتزم النبي صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ وَيُفَدِّيهِ بِأَبِيهِ وَأُمِّهِ ثُمَّ انْطَلَقَ بِهِمْ إِلَى حَدِيقَتِه فَبَسَطَ لَهُمْ بِسَاطًا ثُمَّ انْطَلَقَ إِلَى نَخْلَةٍ فَجَاءَ بِقِنْوٍ فَوَضَعَهُ فَقَالَ النبي صَـلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَـلَّمَ :أَفَلَا تَنَقَّيْتَ لَنَا مِنْ رُطَبِهِ؟ فَقَالَ: يَا رَسُـولَ اللَّهِ إِنِّي أَرَدْتُ أَنْ تَخْتَارُوا أَوْ تَخَيَّرُوا مِنْ رُطَبِهِ وَبُسْرِهِ فَأَكَلُوا وَشَرِبُوا مِنْ ذَلِكَ الْمَاءِ فَقَالَ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ :هَذَا وَالَّذِي نَفْسِي بِيَدِهِ مِنَ النَّعِيمِ الَّذِي تُسْأَلُونَ عَنْهُ يَوْمَ الْقِيَامَةِ ظِلٌّ بَارِدٌ وَرُطَبٌ طَيِّبٌ وَمَاءٌ بَارِدٌ ، فَانْطَلَقَ أَبُو الْهَيْثَمِ لِيَصْنَعَ لَهُمْ طَعَامًا فَقَالَ النَبِي صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ :لا تذبحن لنا ذَاتَ دَرٍّ. فَذَبَحَ لَهُمْ عَنَاقًا أَوْ جَدْيًا فَأَتَاهُمْ بِها فأكلوا فقال صَـلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَـلَّمَ :هَلْ لَكَ خَادِمٌ؟ قَالَ: لَا. قَالَ: فَإِذَا أَتَانَا سبي فأتنا فأتي صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ بِرَأْسَيْنِ لَيْسَ مَعَهُمَا ثَالِثٌ. فَأَتَاهُ أَبُو الْهَيْثَمِ فَقَالَ النبي صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ : اخْتَرْ مِنْهُمَا فَقَالَ: يَا رَسُولَ اللَّهِ اخْتَرْ لِي. فقال النبي صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ : إِنَّ الْمُسْتَشَارَ مُؤْتَمَنٌ خُذْ هَذَا فَإِنِّي رَأَيْتُهُ يُصَلِّي وَاسْتَوْصِ بِهِ مَعْرُوفًا فَانْطَلَقَ أَبُو الْهَيْثَمِ إِلَى امْرَأَتِه فَأَخْبَرَهَا بِقَوْلِ رَسُولِ اللَّهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ فَقَالَتِ امْرَأَتُهُ: مَا أَنْتَ بِبَالِغٍ حَقَّ مَا قَالَ فِيهِ النبِي صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ إِلَّا بِأَنْ تَعْتِقَهُ قَالَ: فَهُوَ عَتِيقٌ فَقَالَ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ : إِنَّ اللَّهَ لَمْ يَبْعَثْ نَبِيًّا وَلَا خَلِيفَةً إِلَّا وَلَهُ بِطَانَتَانِ: بِطَانَةٌ تَأْمُرُهُ بِالْمَعْرُوفِ وَتَنْهَاهُ عَنِ الْمُنْكَرِ وَبِطَانَةٌ لَا تَأْلُوهُ خَبَالًا وَمَنْ يُوقَ بِطَانَةَ السُّـــوءِ فَقَدْ وقي". [أخرجه الترمذي].

**206. "Waxaa laga soo weriyey Abuu Hurayrah radiyallaahu canhu inuu yiri: Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam wuxuu baxay saacad uusan bixi jirin, qofna uusan kula kulmi jirin. Markaas waxaa u yimid Abuu Bakar. Wuxuu yiri: maxaa ku keenay, Abuu Bakarow? Wuxuu yiri: waxaan u baxay inaan la kulmo Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam, wejigiisana eego, kuna salaamo. Wax yar ka dib waxaa yimid Cumar. Wuxuu yiri: maxaa ku keenay, Cumarow? Wuxuu yiri: gaajo, Rasuulkii Allaahow. Wuxuu sallallaahu calayhi wasallam yiri: aniguna wax ka mid ah taas waan dareemay. Markaasay u dhaqaaqeen guriga Abuu Al-Haytham bin At-Tayhaan Al-Ansaari, wuxuuna ahaa nin timir iyo ari badan leh, adeege se ma lahayn. Way waayeen, markaasay xaaskiisa ku yiraahdeen: meeday ninkaagii? Waxay tiri: wuxuu u baxay inuu noo raadiyo biyo macaan. Wax yar ka dib Abuu Al-Haytham ayaa yimid isagoo qirbah sidda, markaasuu dhigay, dabadeed wuxuu**

**yimid isagoo Nabiga sallallaahu calayhi wasallam laabta gelinaya, kuna furayo aabbihiis iyo hooyadiis. Kadib wuxuu u kaxeeyey beertiisa, wuxuuna u fidiyey gogol ay ku fadhiistaan. Markaasuu u tegay geed timir ah, wuxuuna keenay rucub timir ah oo uu dhigay. Nabigu sallallaahu calayhi wasallam wuxuu yiri: maxaad noogu doori weyday timirta bisil? Wuxuu yiri: Rasuulkii Allaahow, waxaan rabay inaad idinku ka doorataan timirta bisil iyo busurka. Markaasay cuneen, kana cabbeen biyahaas. Wuxuu sallallaahu calayhi wasallam yiri: kan, kan naftaydu gacantiisa ku jirto ayaan ku dhaartaye, waa nicmo ka mid ah nicmooyinka la idin weydiin doono maalinta qiyaamaha: hoos qabow, timir bisil oo wanaagsan, iyo biyo qabow. Markaas Abuu Al-Haytham wuxuu u baxay inuu cunto u sameeyo. Nabigu sallallaahu calayhi wasallam wuxuu yiri: ha noo qalin neef caano leh. Markaasuu u qalay ido yar oo dheddig ah ama ari yar, wuuna u keenay, wayna cuneen. Markaas wuxuu sallallaahu calayhi wasallam yiri: adeege ma leedahay? Wuxuu yiri: maya. Wuxuu yiri: haddii maxaabiis noo yimaadaan noo imow. Markaas Nabiga sallallaahu calayhi wasallam waxaa loo keenay laba qof oo maxaabiis ah, mid saddexaadna lama socon. Abuu Al-Haytham ayaa u yimid. Nabigu sallallaahu calayhi wasallam wuxuu yiri: midkood dooro. Wuxuu yiri: Rasuulkii Allaahow, adigu ii door. Nabigu sallallaahu calayhi wasallam wuxuu yiri: qofka talo laga dalbado waa aamin. Qaado kan, maxaa yeelay waxaan arkay isagoo tukanaya, wanaagna kula dhaqan. Abuu Al-Haytham wuxuu u tegay xaaskiisa, wuxuuna u sheegay hadalkii Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam. Xaaskiisii waxay tiri: ma gaari kartid xaqa waxa Nabigu sallallaahu calayhi wasallam kaa yiri ilaa aad xorayso. Wuxuu yiri: isagu waa xor. Markaas wuxuu sallallaahu calayhi wasallam yiri: Allaah ma soo dirin nabi ama khaliif midna ilaa uu leeyahay laba kooxood oo sir u dhow: koox ku amarta wanaagga kana reebta xumaanta, iyo koox aan ka gaabin halaaggiisa iyo fasaadintiisa. Qofkii laga ilaaliyo kooxda xun, waa la ilaaliyey". [waxaa soo saaray At-Tirmidi].**

- Wuxuu noo raadinayaa biyo macaan: wuxuu noo doonayaa biyo macaan oo wanaagsan.

- Wuu sidday: wuu qaaday.

- Laabta gelinaya: wuu duubay oo laabta geliyey, maadaama uu ku farxay martidan weyn ee u timid.

- Gogol: wax lagu fadhiisto.

- Tani waa nicmo ka mid ah nicmooyinka la idin weydiin doono maalinta qiyaamaha: nicmo waa wax kasta oo qofku ku raaxaysto, cunto, cabbid, dhar, ama wax la mid ah. Waxaas oo dhan waa la weydiin doonaa maalinta qiyaamaha: xaggee ka heshay? Maxaad ku samaysay?

**﴿ثم لتسئَلُنَّ يَوْمَئِذٍ عَنِ النَّعِيمِ﴾ [التكاثر:8]**

**﴿Waxaana Maalintaa la idin weydiin Nicmooyinkii﴾ [At-takaathur: 8]**

- Neef caano leh: neef caano leh oo caano soo daaya. Jilicsanaanta iyo naxariista Nabiga sallallaahu calayhi wasallam awgeed ayuu uga reebay inuu qalo.

- Ido yar oo dheddig ah: neef dheddig ah oo ka mid ah dhasha ariga.

- Maxaabiis: addoommo rag iyo dumar ah.

- Ma gaari kartid xaqa waxa Nabigu sallallaahu calayhi wasallam kaa yiri: ma gaari kartid xaqa waxa Nabigu sallallaahu calayhi wasallam kugu dardaarmay ilaa aad xorayso. Wanaag kula dhaqan, wanaagga ugu wanaagsanna waa inaad u xorayso wejiga Allaah.

- Koox sir u dhow: dadka gaarka ah ee u dhow oo uu sirtiisa u sheego.

- Aan ka gaabin halaaggiisa iyo fasaadintiisa: kama gaabato inay kharribto oo lumiso.

- **Faa'iido:**

Xadiiskan, markii Abuu Al-Haytham martigeliyey Nabiga sallallaahu calayhi wasallam oo ku sharfay wixii uu awooday, Nabigu sallallaahu calayhi wasallam wuxuu rabay inuu wanaagga u celiyo. Caadadiisuna waxay ahayd inuu sharfayo qofkii sharfay.

Abuu Al-Haytham adeege ma lahayn, markaas Nabigu sallallaahu calayhi wasallam wuxuu siiyey qof ka mid ah maxaabiista si uu ugu adeego, wuuna kula dardaarmay. Markii xaaska Abuu Al-Haytham ogaatay dardaarankii Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam ee ku saabsanaa adeegahan, waxay ninkeeda kula talisay inuu u xorayo wejiga Allaah tacaalaa, iyadoo ilaalinaysa dardaarankii Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam ee ku saabsanaa adeegahan. Abuu Al-Haythamna wuu xorayey, isaga oo aan ka labalabayn.

Markii Rasuulka Allaah ogaaday arrintaas, wuxuu ka helay talada haweeneydan wanaagsan ee ay siisay ninkeeda. Markaas ayuu xusay arrinta kooxda sirta u dhow iyo muhiimaddeeda qofka, maxaa yeelay qofku wuxuu saameyn ka qaataa dadka ku hareeraysan, gaar ahaan kuwa u dhow iyo saaxiibbada uu naftiisa u doorto. Haddii ay yihiin dad wanaag leh, way hagaajiyaan; haddii ay yihiin dad fasaad lehna, way kharribaan.

**207. "عن قيس بن أبي حازم قال : سمعت سعد بن أبِي وقاص يقول: إِنِّي لَأَوَّلُ رَجُلٍ أَهْرَاقَ دَمًا فِي سَبِيلِ اللَّهِ عَزَّ وَجَلَّ وَإِنِّي لَأَوَّلُ رَجُلٍ رَمَى بِسَهْمٍ فِي سَبِيلِ اللَّهِ لَقَدْ رَأَيْتُنِي أَغْزُو فِي الْعِصَابَةِ مِنْ أَصْحَابِ محمد عَلَيْهِ الصَّلَاةُ وَالسَّلَامُ مَا نَأْكُلُ إِلَّا وَرَقَ الشَّجَرِ وَالْحُبْلَةَ حَتَّى تَقَرَّحَتْ أَشْدَاقُنَا وَإِنَّ أَحَدَنَا لَيَضَعُ كَمَا تَضَعُ الشَّاةُ وَالْبَعِيرُ وأصبحتْ بنو أسد يعزرونني فِي الدِّينِ لَقَدْ خِبْتُ وَخَسِرْتُ إِذًا وَضَلَّ عَمَلِي". [أخرجه الترمذي].**

**207. "Waxaa laga soo weriyey Qays bin Abii Xaazim inuu yiri: waxaan maqlay Sacad bin Abii Waqqaas oo leh: anigu waxaan ahay ninkii ugu horreeyey ee dhiig ku daadiyey jidka Allaah cazza wa jall, waxaana ahay ninkii ugu horreeyey ee fallaar ku ganay jidka Allaah. Waxaan is arkay anigoo la duulaya koox ka mid ah asxaabta Maxamed sallallaahu calayhi wasallam, mana cuni jirnay wax aan ahayn caleenta geedaha iyo xublah, ilaa geesaha afkeenna nabarro noqdeen. Midkeen wuxuu saxaroon jiray sida ay u saxaroodaan ariga iyo geelu. Haddana reer Banu Asad waxay igu canaananayaan diinta. Haddii sidaas tahay, waan khasaaray, camalkayguna wuu lumay". [waxaa soo saaray At-Tirmidi].**

- Dhiig ku daadiyey: dhiig ku shubay jidka Allaah.

- Koox: jamaaco dad ah oo tiradoodu u dhexeyso toban ilaa afartan qof.

- Xublah: nooc ka mid ah geedaha saxaraha oo aan la cunin, xoolaha mooyee.

- Geesaha afkeenna nabarro noqdeen: dhinacyada afka ayaa dhaawacmay.

- Wuxuu saxaroon jiray sida ariga iyo geelu u saxaroodaan: cunista cuntadan waxay keentay in saxaradu u ekaato saxarada xoolaha.

- Waxay igu canaananayaan: way i eedeynayaan.

- **Faa'iido:**

Sacad bin Abii Waqqaas, Cumar radiyallaahu canhumaa ayaa u magacaabay Kuufa. Qaar ka mid ah dadkeedii ayaa Cumar uga dacwooday, waxayna ku andacoodeen inuusan si fiican ugu tukan.

Markaas ayuu yiri xadiiskan, sida inuu leeyahay: sideen salaadda u hagaajin waayaa anigoo ah ninkii ugu horreeyey ee dhiig ku daadiyey jidka Allaah, ilaa dhammaadka xadiiska.

**208. "عن أنس بن مالك رضي الله عنه: أن النبي صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ لَمْ يَجْتَمِعْ عِنْدَهُ غَدَاءٌ وَلَا عَشَاءٌ مِنْ خُبْزٍ وَلَحْمٍ إِلَّا عَلَى ضَفَفٍ .قَالَ عَبْدُ اللَّهِ: قَالَ بَعْضُهُمْ: هُوَ كَثْرَةُ الْأَيْدِي". [أخرجه أحمد].**

**208. "Waxaa laga soo weriyey Anas bin Maalik radiyallaahu canhu: in Nabiga sallallaahu calayhi wasallam aysan agtiisa isugu iman qado iyo casho ka kooban rooti iyo hilib, ilaa ay ahaato cunto lala wadaago dad badan. Cabdullaah wuxuu yiri: qaarkood waxay yiraahdeen: waxaa loola jeedaa gacmo badan". [Waxaa soo saaray Axmad].**

- Cunto lala wadaago dad badan: cunto lala cuno jamaaco.

- **Faa'iido:**

Salafku waxay ka baqi jireen badnaanta nicmada, sidoo kale caannimada, ammaanta, bogaadinta iyo in meelaha sare ee fadhiyada lagu hormariyo. Waxay rumaysnaayeen in arrintaasi laga yaabo inay tahay istidraaj ama in wanaaggooda adduunka loogu soo hormariyey, iyagoo doonaya in abaalmarintoodu dhammaanteed aakhiro ahaato. Midkoodna kama caban jirin cidhiidhiga noloshiisa ama faqrigiisa.

******************

## 52. Qaar ka mid ah waxa ka yimid da'da Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam

**209."عَنِ ابْنِ عَبَّاسٍ قَالَ : مكث النبي صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ بِمَكَّةَ ثَلَاثَ عَشْرَةَ سَنَةً يُوحَى إِلَيْهِ وَبِالْمَدِينَةِ عَشْرًا وَتُوُفِّيَ وَهُوَ ابْنُ ثَلَاثٍ وستين".[أخرجه البخاري ومسلم].**

**209. "Waxaa laga soo weriyey Ibnu Cabbaas inuu yiri: Nabigu sallallaahu calayhi wasallam wuxuu joogay Makka saddex iyo toban sano, waxyi ayaa loogu soo dejinayey, Madiinana toban sano, waxaana la oofsaday isagoo jira saddex iyo lixdan sano". [Waxaa soo saaray Al-Bukhaari iyo Muslim].**

**210. "عَنْ جَرِيرٍ عَنْ مُعَاوِيَةَ أَنَّهُ سَمِعَهُ يَخْطُبُ قَالَ: مات رسول الله صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ وَهُوَ ابْنُ ثَلَاثٍ وَسِتِّينَ وَأَبُو بَكْرٍ وَعُمَرُ وَأَنَا ابن ثلاث وستين". [أخرجه مسلم].**

**210. "Waxaa laga soo weriyey Jariir, kana soo weriyey Mucaawiyah inuu maqlay isagoo khudbadeynaya, wuxuu yiri: Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam wuxuu dhintay isagoo jira saddex iyo lixdan sano, Abuu Bakar iyo Cumarna sidaas oo kale, aniguna waxaan jiraa saddex iyo lixdan sano". [waxaa soo saaray Muslim].**

**Iftiin**

**Nabigu sallallaahu calayhi wasallam wuxuu lahaa dareen xooggan sida dadka kale; wuu farxi jiray, wejigiisuna wuu ifi jiray. Wuu caroon jiray, labada dhabanna way casaadaan. Wuu ooyi jiray ilaa garkiisu qoyaan. Wuu qosli jiray ilaa gowsihiisu muuqdaan. Laakiin arrimahaas oo dhan wuxuu ku ahaa mid dheellitiran. Farxaddu kuma kibrin jirin, murugaduna ma hilmaansiin jirin, caraduna kama siiban jirin hoggaanka naftiisa. Sidaas ayuu ku noqday dadka ugu dulqaadka badan, ugu caddaaladda badan, uguna nadiifsan. " Qoraal la soo xigtay "**

**Allaahow, naxariis, nabadgelyo iyo barako ku shub Nabigeenna Maxamed, ehelkiisa iyo asxaabtiisa dhammaantood.**

******************

## 53. Qaar ka mid ah waxa ka yimid geerida Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam

Waana musiibada weyn ee ummadda Islaamka ku dhacday.

**211. "عَنْ أَنَسِ بْنِ مَالِكٍ قَالَ : آخِرُ نَظْرَةٍ نَظَرْتُهَا إلي رسول الله صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ كَشْفُ السِّتَارَةِ يَوْمَ الِاثْنَيْنِ فَنَظَرْتُ إِلَى وَجْهِهِ كَأَنَّهُ وَرَقَةُ مُصْحَفٍ وَالنَّاسُ خَلْفَ أَبِي بَكْرٍ فكاد الناس أن يضطربوا فَأَشَارَ إِلَى النَّاسِ أَنِ اثْبُتُوا وَأَبُو بَكْرٍ يَؤُمُّهُمْ وَأَلْقَى السِّجْفَ وَتُوُفِّيَ رَسُولُ اللَّهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ مِنْ آخِرِ ذَلِكَ الْيَوْمِ". [أخرجه أحمد والنسائي].**

**211. "Waxaa laga soo weriyey Anas bin Maalik inuu yiri: araggii ugu dambeeyey ee aan ku arkay Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam wuxuu ahaa markii daaha la qaaday maalintii Isniinta. Waxaan eegay wejigiisa, wuxuuna u ekaa bog Musxaf ah. Dadkuna waxay ka dambeeyeen Abuu Bakar, waxayna ku dhowaadeen inay dhaqaaqaan. Markaas ayuu dadka u ishaaray inay sugnaadaan, Abuu Bakarna wuu tujinayey. Kadib daahii ayuu sii daayey, Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallamna wuxuu geeriyooday dhammaadka maalintaas". [Waxaa soo saaray Axmad iyo An-Nasaa'i].**

- Wuxuu u ekaa bog Musxaf ah: nadiifnimadiisa, daahirsanaantiisa, nuurkiisa iyo quruxdiisa sallallaahu calayhi wasallam awgeed.

- Waxay ku dhowaadeen inay dhaqaaqaan: farxad xooggan oo ay araggiisa ku farxeen darteed.

- Daaha: daah.

- **Faa'iido:**

Wejigiisu sallallaahu calayhi wasallam wuxuu ahaa mid nuuraya oo ifaya, maxaa yeelay wuxuu la kulmi lahaa Allaah cazza wa jall. Muuqaalkaasina wuxuu ahaa salaadda fajarka, geeridiisuna sallallaahu calayhi wasallam waxay ahayd duxada maalintaas.

Waxaa la oofsaday sallallaahu calayhi wasallam isagoo ku tiirsan laabta Caa'isha radiyallaahu canhaa.

Waxay tiri: wuxuu ku geeriyooday inta u dhexeysa laabtayda iyo dhuuntayda.

**212. "عَنْ عَائِشَةَ رضي الله عنها قَالَتْ :كُنْتُ مسندة النبي صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ إِلَى صَدْرِي أَوْ قَالَتْ: إِلَى حِجْرِي فَدَعَا بِطَسْتٍ لِيَبُولَ فِيهِ ثُمَّ بَالَ فمات". [أخرجه أبو عوانة في المستخرج] .**

**212. "Waxaa laga soo weriyey Caa'isha radiyallaahu canhaa inay tiri: waxaan Nabiga sallallaahu calayhi wasallam ku tiirinayey laabtayda, ama waxay tiri: dhabta, markaasuu dalbaday weel si uu ugu kaadiyo, dabadeed wuu kaadiyey, kadibna wuu geeriyooday". [Waxaa soo saaray Abuu Cawaanah kitaabkiisa Al-Mustakhraj.]**

**Werin kalena waxay leedahay:**

**"توفي النبي ﷺ في بيتي وفي نوبتي وبين سحري ونحري". [أخرجه البخاري].**

**"Nabigu sallallaahu calayhi wasallam wuxuu ku geeriyooday gurigayga, maalintaydii, iyo inta u dhexeysa laabtayda iyo dhuuntayda". [waxaa soo saaray Al-Bukhaari].**

- Weel naxaas ah: weel ka samaysan naxaas.

- **Faa'iido:**

Al-Qurdubi wuxuu leeyahay: adkaynta geerida ee anbiyada waxaa ku jira laba faa'iido:

1. In lagu dhammaystiro fadligooda, laguna kor yeelo darajooyinkooda; taasina ma aha nusqaan ama cadaab.
2. In makhluuqu ogaado qiyaasta xanuunka geerida. Qofku wuxuu mararka qaar arkaa qaar ka mid ah dadka dhintay, mana arko dhaqaaq ama xanuun ka muuqda, markaas wuxuu moodaa in naftu si fudud uga baxdo, wuxuuna u malaynayaa in arrintu sahlan tahay, isagoo aan garanayn waxa meydku ku jiro.

**213. "عن عائشة رضي الله عنها قالت :لَمَّا قُبِضَ رَسُولُ اللَّهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ اخْتَلَفُوا فِي دَفْنِهِ فَقَالَ أَبُو بَكْرٍ: سَمِعْتُ مِنْ رسول الله صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ شَيْئًا مَا نَسِيتُهُ قَالَ: ما قَبَضَ اللَّهُ نَبِيًّا إِلَا فِي الْمَوْضِعِ الَّذِي يُحِبُّ أَنْ يُدْفَنَ فِيهِ. ادْفِنُوهُ فِي مَوْضِعِ فِرَاشِهِ".[أخرجه الترمذي].**

**213. "Waxaa laga soo weriyey Caa'isha radiyallaahu canhaa inay tiri: markii Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam la oofsaday, waxay isku khilaafeen halka lagu aasi lahaa. Markaas Abuu Bakar wuxuu yiri: waxaan Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam ka maqlay arrin aanan hilmaamin. Wuxuu yiri: Allaah nabi kama oofsado meel aan ahayn meesha uu jecel yahay in lagu aaso. Ku aasa meesha gogoshiisu taallay". [Waxaa soo saaray At-Tirmidi].**

- Meesha uu jecel yahay in lagu aaso: Nabiga waxaa lagu aasay hoosta gogosha hooyadeen Caa'isha radiyallaahu canhaa, qolkeeda dhexdiisa, Abuu Dalxahna wuxuu qoday hoosta gogosha.

- **Faa'iido:**

Taas ayaa ahayd meesha Allaah cazza wa jall jeclaa in Nabiga sallallaahu calayhi wasallam lagu aaso. Gacaliyaheenna Maxamed sallallaahu calayhi wasallam waxaa lagu aasay hoosta gogosha hooyadeen Caa'isha.

Aabbahay iyo hooyaday ha laguu hibeeyo, Rasuulkii Allaahow.

Abuu Bakar radiyallaahu canhu wuxuu joogay gurigiisa. Markaas baa loo diray, dadkuna waxay ku urursanaayeen hareeraha guriga Caa'isha radiyallaahu canhaa. Wuxuu dalbaday in jidka loo banneeyo. Markii uu yimid, Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam wuu daboolnaa, markaas ayuu wejigiisa ka qaaday daboolka, wuxuuna ogaaday inuu geeriyooday sallallaahu calayhi wasallam.

**214. "عن عائشة رضي الله عنها قالت : أن أبا بكر دخل على النبي صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ بَعْدَ وَفَاتِهِ فَوَضَعَ فَمَهُ بَيْنَ عَيْنَيْهِ وَوَضَعَ يَدَيْهِ عَلَى سَاعِدَيْهِ وَقَالَ: وَانَبِيَّاهُ وَاصَفِيَّاهُ وَاخَلِيلَاهُ". [أخرجه أحمد].**

**214. "Waxaa laga soo weriyey Caa'isha radiyallaahu canhaa inay tiri: Abuu Bakar ayaa Nabiga sallallaahu calayhi wasallam u galay geeridiisa ka dib, markaasuu afkiisa dhigay inta u dhexeysa labada indhood, gacmihiisana wuxuu saaray labada cududood, wuxuuna yiri: hoogay Nabigaygii, hoogay kii la doortay, hoogay gacaliyahaygii". [Waxaa soo saaray Axmad[.**

- Gacantiisa ayuu saaray labada cududood: sidii inuu laabta gelinayo, wuxuuna yiri waxa uu yiri gubashada qalbigiisa darteed.

Allaahow, waxaan ka qaddarnay la joogistiisa adduunka, ee ha naga qaddarin wehelkiisa Firdowsa sare.

Abuu Bakar radiyallaahu canhu wuxuu ahaa saaxiibka ugu dhow qalbiga Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam. Nabiguna sallallaahu calayhi wasallam wuxuu oran jiray:

**"ما نفعني مالٌ قط ما نفعني مال أبو بكر. فبكى أبو بكر رضي الله عنه وقال: يا رسول الله هل أنا ومالي إلا لك يا رسول الله؟" [أخرجه أحمد].**

**"Maal igama faa'iidin sida uu iiga faa'iiday maalka Abuu Bakar". Markaas Abuu Bakar radiyallaahu canhu wuu ooyey, wuxuuna yiri: Rasuulkii Allaahow, aniga iyo maalkaygu ma wax aan adiga ahayn baa?" . [waxaa soo saaray Axmad].**

**215. "عن أنس قال : لَمَّا كَانَ الْيَوْمُ الَّذِي دَخَلَ فِيهِ رَسُولُ الله صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ الْمَدِينَةَ أَضَاءَ مِنْهَا كُلُّ شَيْءٍ فَلَمَّا كَانَ الْيَوْمُ الَّذِي مَاتَ فِيهِ أَظْلَمَ مِنْهَا كُلُّ شَيْءٍ وَمَا نَفَضْنَا أَيْدِينَا مِنَ التُّرَابِ وَإِنَّا لَفِي دفنه حتى أنكرنا قلوبنا". [أخرجه الترمذي وأحمد وابن ماجه].**

**215. "Waxaa laga soo weriyey Anas inuu yiri: maalintii Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam Madiina soo galay, wax kasta oo ku jiray way iftiimeen. Maalintii uu geeriyoodayna, wax kasta oo ku jiray way madoobaadeen. Gacmahayaga weli kama aannaan jafan ciidda, annagoo ku jirna aaskiisa, ilaa aan qalbiyadeenna garan weynay". [waxaa soo saaray At-Tirmidi, Axmad iyo Ibnu Maajah].**

- **Faa'iido:**

Tani waxay ka mid ahayd gubashada qalbiga ee ka dhalatay waayidda kan ugu sharafta badan makhluuqa. Waxay is garan waayeen murugada daran, go'idda waxyiga, iyo waayidda wehelkiisa darteed.

Waxay waayeen Nabiga sallallaahu calayhi wasallam, waxay waayeen codkiisa, waxay waayeen joogitaankiisa.

**216 . "عَنْ عَائِشَةَ رضي الله عنها قَالَتْ :تُوُفِّيَ رسول الله صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ يوم الاثنين" .[أخرجه البخاري]**

**216. "Waxaa laga soo weriyey Caa'isha radiyallaahu canhaa inay tiri: Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam wuxuu geeriyooday maalintii Isniinta". [Waxaa soo saaray Al-Bukhaari].**

**217. "عَنْ جَعْفَرِ بْنِ مُحَمَّدٍ عَنْ أَبِيهِ قَالَ :قبض رسول الله صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ يَوْمَ الِاثْنَيْنِ فَمَكَثَ ذَلِكَ الْيَوْمَ وَلَيْلَةَ الثُّلَاثَاءِ وَدُفِنَ من الليل. قال سُفْيَانُ : وَقَالَ غَيْرُهُ: يُسْمَعُ صَوْتُ الْمَسَاحِي مِنْ آخِرِ الليل". [أخرجه ابن سعد].**

**217. "Waxaa laga soo weriyey Jacfar bin Maxamed, kana soo weriyey aabbihiis inuu yiri: Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam waxaa la oofsaday maalintii Isniinta. Wuxuu joogay maalintaas iyo habeenkii Talaadada, waxaana la aasay habeenkii. Sufyaan wuxuu yiri: qof kale ayaa yiri: waxaa dhammaadka habeenka la maqlayey codka qalabka ciidda lagu qodo". [Waxaa soo saaray Ibnu Sacad].**

Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam waxaa la aasay habeenkii Arbacada.

- Qalabka ciidda lagu qodo: waa qalab ciidda lagu xoqo ama lagu qaado. Taas oo ah in dadku ogaadeen aaska Nabiga sallallaahu calayhi wasallam markii ay habeenkii maqleen codka qalabkaas.

- **218. "عن سالم بن عبيد وكانت له صحبة قال: أُغْمِيَ عَلَى رَسُولِ اللَّهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ فِي مَرَضِهِ فَأَفَاقَ فَقَالَ: حَضَرَتِ الصَّلَاةُ؟ فَقَالُوا: نَعَمْ. فَقَالَ: مُرُوا بِلَالًا فَلْيُؤَذِّنْ وَمُرُوا أَبَا بَكْرٍ أَنْ يُصَلِّيَ لِلنَّاسِ، أَوْ قَالَ: بِالنَّاسِ، قَالَ: ثُمَّ أُغْمِيَ عَلَيْهِ فَأَفَاقَ فَقَالَ: حضَرَتِ الصَّلَاةُ؟. فَقَالُوا: نَعَمْ فَقَالَ: مُرُوا بِلَالًا فَلْيُؤَذِّنْ وَمُرُوا أَبَا بَكْرٍ فَلْيُصَلِّ بِالنَّاسِ فَقَالَتْ عَائِشَةُ: إِنَّ أَبِي رَجُلٌ أَسِيفٌ إِذَا قَامَ ذَلِكَ الْمَقَامَ بَكَى فَلَا يَسْتَطِيعُ فَلَوْ أَمَرْتَ غَيْرَهُ. قَالَ: ثُمَّ أُغْمِيَ عَلَيْهِ فَأَفَاقَ فَقَالَ : مُرُوا بِلَالًا فَلْيُؤَذِّنْ وَمُرُوا أَبَا بَكْرٍ فَلْيُصَلِّ بِالنَّاسِ فَإِنَّكُنَّ صَوَاحِبُ أَوْ صَوَاحِبَاتُ يُوسُفَ. قَالَ: فَأُمِرَ بِلَالٌ فَأَذَّنَ وَأُمِرَ أَبُو بَكْرٍ فَصَلَّى بِالنَّاسِ ثُمَّ إِنَّ رَسُولَ اللَّهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ وَجَدَ خِفَّةً فَقَالَ: انْظُرُوا لِي مَنْ أَتَّكِئُ عَلَيْهِ ، فَجَاءَتْ بَرِيرَةُ وَرَجُلٌ آخَرُ فَاتَّكَأَ عَلَيْهِمَا فَلَمَّا رَآهُ أَبُو بَكْرٍ ذَهَبَ لِيَنْكُصَ فَأَوْمَأَ إِلَيْهِ أَنْ يَثْبُتَ مَكَانَهُ حَتَّى قَضَى أَبُو بَكْرٍ صَلَاتَهُ. ثُمَّ إِنَّ رسول الله صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ قُبِضَ. فَقَالَ عُمَرُ: وَاللَّهِ لَا أَسْمَعُ أَحَدًا يَذْكُرُ أن رسول الله صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ قُبِضَ إلا ضَرَبْتُهُ بِسَيْفِي هَذَا. قَالَ: وَكَانَ النَّاسُ أُمِّيِّينَ لَمْ يَكُنْ فِيهِمْ نَبِيٌّ قَبْلَهُ فَأَمْسَكَ النَّاسُ فَقَالُوا: يَا سَالِمُ انْطَلِقْ إِلَى صَاحِبِ رسول الله صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ فَادْعُهُ فَأَتَيْتُ أَبَا بَكْرٍ وَهُوَ فِي الْمَسْجِدِ فَأَتَيْتُهُ أَبْكِي دَهِشًا فَلَمَّا رَآنِي قال -لِي-: أَقُبِضَ رسول الله صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ؟ قُلْتُ: إِنَّ عُمَرَ يَقُولُ: لَا أَسْمَعُ أَحَدًا يَذْكُرُ أن رسول الله صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ قُبِضَ إِلَا ضَرَبْتُهُ بِسَيْفِي هَذَا فَقَالَ لِي: انْطَلِقْ. فانطلقت معه فجاء وَالنَّاسُ قَدْ دَخَلُوا عَلَى رسول الله صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ فَقَالَ: يَا أَيُّهَا النَّاسُ أَفْرِجُوا لِي. فَأَفْرَجُوا لَهُ. فَجَاءَ حَتَّى أَكَبَّ عَلَيْهِ وَمَسَّهُ فَقَالَ: إِنَّكَ مَيِّتٌ وإنهم ميتون . ثُمَّ قَالُوا: يَا صَاحِبَ رسول الله أقبض رَسُولُ اللَّهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ؟ قَالَ: نَعَمْ. فَعَلِمُوا أَنْ قَدْ صَدَقَ. قَالُوا: يَا صَاحِبَ رَسُولِ اللهِ أَيُصَلَّى عَلَى رَسُولِ اللَّهِ؟ قَالَ: نَعَمْ قَالُوا: وَكَيْفَ؟ قَالَ: يَدْخُلُ قَوْمٌ فَيُكَبِّرُونَ وَيُصَلُّونَ وَيَدْعُونَ ثُمَّ يَخْرُجُونَ ثُمَّ يَدْخُلُ قَوْمٌ فَيُكَبِّرُونَ وَيُصَلُّونَ وَيَدْعُونَ ثُمَّ يَخْرُجُونَ حَتَّى يَدْخُلَ النَّاسُ قَالُوا: يَا صَاحِبَ رَسُولِ اللَّهِ أيدفن رَسُولُ اللَّهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ؟ قَالَ: نَعَمْ. قَالُوا: أَيْنَ؟ قَالَ: فِي الْمَكَانِ الَّذِي قَبَضَ اللَّهُ فِيهِ رُوحَهُ فَإِنَّ اللَّهَ لَمْ يَقْبِضْ رُوحَهُ إِلَا فِي مَكَانٍ طَيِّبٍ. فَعَلِمُوا أَنْ قَدْ صَدَقَ ثُمَّ أَمَرَهُمْ أَنْ يَغْسِلَهُ بَنُو أَبِيهِ. وَاجْتَمَعَ الْمُهَاجِرُونَ يَتَشَاوَرُونَ فَقَالُوا: انْطَلِقْ بِنَا إِلَى إِخْوَانِنَا مِنَ الْأَنْصَارِ نُدْخِلُهُمْ مَعَنَا فِي هَذَا الْأَمْرِ. فَقَالَتِ الْأَنْصَارُ: مِنَّا أَمِيرٌ وَمِنْكُمْ أَمِيرٌ. فَقَالَ عُمَرُ بْنُ الْخَطَّابِ: مَنْ لَهُ مِثْلُ هذه الثلاثة: ثَانِيَ اثْنَيْنِ إِذْ هُمَا فِي الْغَارِ إِذْ يَقُولُ لِصَاحِبِهِ لَا تَحْزَنْ إِنَّ اللَّهَ مَعَنَا، مَنْ هُمَا؟ قَالَ: ثُمَّ بَسَطَ يَدَهُ فَبَايَعَهُ وَبَايَعَهُ النَّاسُ بَيْعَةً حَسَنَةً جَمِيلَةً". [أخرجه ابن أبي عاصم في الآحاد والمثاني].**

**218. "Waxaa laga soo weriyey Saalim bin Cubayd, oo saxaabi ahaa, inuu yiri: Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam ayaa suuxay xanuunkiisa dhexdiisa. Markuu soo miyirsaday wuxuu yiri: salaaddii ma timid? Waxay yiraahdeen: haa. Wuxuu yiri: Bilaal fara inuu addimo, Abuu Bakarna fara inuu dadka tukiyo, ama wuxuu yiri: dadka la tukado. Kadib wuu suuxay. Markuu soo miyirsaday wuxuu yiri: salaaddii ma timid? Waxay yiraahdeen: haa. Wuxuu yiri: Bilaal fara inuu addimo, Abuu Bakarna fara inuu dadka tukiyo. Caa'isha waxay tiri: aabbahay waa nin qalbi jilicsan, haddii uu istaago meeshaas wuu ooyi doonaa, mana awoodi doono, ee qof kale amri lahayd. Kadib wuu suuxay. Markuu soo miyirsaday wuxuu yiri: Bilaal fara inuu addimo, Abuu Bakarna fara inuu dadka tukiyo, idinku waxaad tihiin haweenkii Yuusuf oo kale. Wuxuu yiri: Bilaal waa la amray, wuuna addimay; Abuu Bakarna waa la amray, dadka ayuu tukiyey. Kadib Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam wuxuu dareemay xoog yar, wuxuuna yiri: ii eega qof aan ku tiirsado. Markaas Bariirah iyo nin kale ayaa yimid, wuuna ku tiirsaday labadoodii. Markii Abuu Bakar arkay, wuxuu damcay inuu dib u gurto, markaasuu u ishaaray inuu meeshiisa ku sugnaado ilaa Abuu Bakar salaaddiisa dhammaystiray. Kadib Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam waa la oofsaday. Markaas Cumar wuxuu yiri: wallaahi, ma maqli doono qof sheegaya in Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam la oofsaday, haddii kale seeftan ayaan ku dhufanayaa. Wuxuu yiri: dadku waxay ahaayeen ummiyiin, nabi ka horreeyeyna ma dhex**

**joogin, markaas dadkii way aamuseen. Waxay yiraahdeen: Saalimow, u tag saaxiibka Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam oo u yeer. Waxaan u tegay Abuu Bakar isagoo masaajidka jooga. Waxaan ugu imid anigoo ooyaya oo wareersan. Markuu i arkay wuxuu igu yiri: Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam ma la oofsaday? Waxaan iri: Cumar wuxuu leeyahay: ma maqli doono qof sheegaya in Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam la oofsaday, haddii kale seeftan ayaan ku dhufanayaa. Wuxuu igu yiri: soco. Markaasaan la socday. Wuxuu yimid iyadoo dadku ay u galeen Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam. Wuxuu yiri: dadkow, ii banneeya. Way u banneeyeen. Markaasuu yimid ilaa uu ku foorarsaday, taabtay, wuxuuna yiri: adigu waad dhimanaysaa, iyaguna way dhimanayaan. Kadib waxay yiraahdeen: saaxiibkii Rasuulka Allaahow, Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam ma la oofsaday? Wuxuu yiri: haa. Markaasay ogaadeen inuu run sheegay. Waxay yiraahdeen: saaxiibkii Rasuulka Allaahow, ma lagu tukanayaa Rasuulka Allaah? Wuxuu yiri: haa. Waxay yiraahdeen: sidee? Wuxuu yiri: koox ayaa galaysa, takbiir bay dhahaysaa, way ku tukanayaan oo u duceynayaan, kadib way baxayaan. Kadib koox kale ayaa galaysa, takbiir bay dhahaysaa, way ku tukanayaan oo u duceynayaan, kadib way baxayaan, ilaa dadka oo dhan galaan. Waxay yiraahdeen: saaxiibkii Rasuulka Allaahow, Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam ma la aasayaa? Wuxuu yiri: haa. Waxay yiraahdeen: halkee? Wuxuu yiri: meesha Allaah naftiisa ku oofsaday, maxaa yeelay Allaah naftiisa kuma oofsado meel aan ahayn meel wanaagsan. Markaasay ogaadeen inuu run sheegay. Kadib wuxuu amray inay mayraan qaraabadiisa aabbihiis dhiniciisa ah. Muhaajiriintiina way isu yimaadeen iyagoo tashanaya. Waxay yiraahdeen: aan u tagno walaalaheenna Ansaarta ah, si aan uga qaybgelinno arrintan. Ansaartii waxay tiri: annaga amiir baan leenahay, idinkuna amiir baad leedihiin. Markaas Cumar bin Al-Khattaab wuxuu yiri: yaa leh saddexdan oo kale: midka labaad ee labadii ku jiray godka, markuu saaxiibkiis ku lahaa: ha murugoon, Allaah ayaa nala jira. Waa kuwee labadoodu? Wuxuu yiri: kadib gacantiisa ayuu fidiyey, wuuna la heshiiyey, dadkuna waxay la galeen bayco wanaagsan oo qurux badan". [Waxaa soo saaray Ibnu Abii Caasim kitaabka Al-Aaxaadii wal-Mathaanii].**

Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam wuu suuxay xanuunka iyo daalka darnaantooda darteed.

- Qalbi jilicsan: qof si dhaqso ah u ooya una saameysma.

- Haweenkii Yuusuf: waxaa loola jeedaa haweeneydii Casiiska iyo haweenkii gacmaha iska jaray. Tusaalahan waxaa loo bixiyey maxaa yeelay Caa’isha radiyallaahu canhaa waxay tiri wax ka duwan ujeeddadii Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam, Rasuulkuna sallallaahu calayhi wasallam hawadiisa kama hadlo; ma aha wax aan ahayn waxyi loo waxyooday.

- Xoog yar: firfircooni.

- Ku tiirsaday: wuu cuskaday, wuxuuna sallallaahu calayhi wasallam ku jiray xanuunka geerida.

- Wuxuu damcay inuu dib u gurto: Abuu Bakar wuxuu rabay inuu dib u noqdo si Nabigu sallallaahu calayhi wasallam dadka u tukiyo.

- Wuu u ishaaray: Nabigu sallallaahu calayhi wasallam wuxuu Abuu Bakar u ishaaray inuu salaadda dadka u dhammaystiro.

- Wareersan: qof jahawareersan.

- Ii banneeya: ii ballaariya.

- Saddexdan: waa saddexda fadli ee Abuu Bakar:

1. Midka labaad ee labadii ku jiray godka.
2. Sugnaanshaha Allaah cazza wa jall ku xaqiijiyey saaxiibnimadiisii radiyallaahu canhu ee Nabiga sallallaahu calayhi wasallam iyada oo uu Qur'aanku si cad u sheegay

**﴿لِصَاحِبِهِ﴾ [التوبة: 40]**

**﴿saaxiibki﴾ [At-towbah:40]**

3. Murugada oo laga reebay iyo la-jirka Allaah cazza wa jall oo loo caddeeyey

**﴿لا تَحْزَنْ إِنَّ اللَّهَ مَعَنَا﴾ [التوبة:40]**

**﴿Ha murugoon, Alle baa na la jira'e﴾ [At-towbah:40]**

Taasina waa dhacdadii oofsashada Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam, waana musiibada ugu weyn ee ummaddan ku dhacday.

- **Faa'iidooyin:**

- Marka Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam uu soo miyirsan jiray suuxdintiisa ka dib, waxa ugu horreeya ee carrabkiisu ku dhawaaqo wuxuu ahaa su'aasha salaadda. Wuxuuna geeriyooday sallallaahu calayhi wasallam isagoo ummaddiisa kula dardaarmaya salaadda. Sidaas darteed Allaah ka cabso, Allaah ka cabso, salaaddaada waqtigeeda ku oogo, rukunnadeeda iyo khushuucdeedana ilaali, si kasta oo musiibadaadu u weynaato.

- Saxaabada radiyallaahu canhum waxay ku jireen naxdin, argagax iyo jahawareer, ilaa aysan garan sida loo dhaqmo, sida Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam loo aaso iyo meesha lagu aaso. Laakiin sugnaanta Abuu Bakar As-Siddiiq radiyallaahu canhu waxay ahayd mid aad u muuqata. Eeg fadliga uu Allaah cazza wa jall ku xusay Qur'aanka.
- Feejignaanta saxaabada, maadaama aysan raalli ka noqon in habeen ku dhaafo iyagoon lahayn amiir, inkastoo musiibadoodu aad u weyneyd. Arrintani waxay ka mid tahay sababaha fitnada.
- Feejignaanta Cumar bin Al-Khattaab radiyallaahu canhu, maadaama uu u keenay xujo go'an oo ku saabsan khilaafada Abuu Bakar ka hor inta khilaafku farcamo, cidna xujooyinkiisa kama hor imaan.

▪ Soo noolaynta sunnada:
- Hoggaaminta. Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam wuxuu yiri:

**"إذا خرج ثلاثة في سفر فليؤمِّروا أحدهم".** [أخرجه أبو داود].

**"Haddii saddex qof safar u baxaan, midkood ha amiirsadaan". [waxaa soo saaray Abuu Daawuud].**

- Sunnada shuurada.

﴿وَشَاوِرْهُمْ فِي الْأَمْرِ﴾ [آل عمران: 159].

﴿oo kala tasho arrinka﴾ [**Aala Cimraan:159]**

**219. "عَنْ أَنَسِ بْنِ مَالِكٍ قَالَ :لَمَّا وَجَدَ رَسُولُ الله صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ مِنْ كُرَبِ الْمَوْتِ مَا وَجَدَ قَالَتْ فَاطِمَةُ رضي الله تعالى عنها: واكرباه فقال النبي صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ : لَا كَرْبَ عَلَى أَبِيكِ بَعْدَ الْيَوْمِ إِنَّهُ قَدْ حَضَرَ مِنْ أَبِيكِ مَا لَيْسَ بِتَارِكٍ مِنْهُ أَحَدًا، الموافاة يوم القيامة". [أخرجه ابن ماجه].**

**219. "Waxaa laga soo weriyey Anas bin Maalik inuu yiri: markii Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam dareemay dhibaatooyinka geerida ee uu dareemay, Faadumo radiyallaahu tacaalaa canhaa waxay tiri: hoogay dhibka. Markaas Nabigu sallallaahu calayhi wasallam wuxuu yiri: maanta ka dib aabbahaa dhib kuma dhici doono. Waxaa aabbahaa u yimid wax aan cidna ka hari doonin. Kulanku waa maalinta qiyaamaha". [Waxaa soo saaray Ibnu Maajah].**

- Dhibaatada geerida: darnaanta geerida.

▪ **Faa'iido:**

Nabigu sallallaahu calayhi wasallam wuxuu gabadhiisa u sabirsiiyey markii geeridiisu soo dhowaatay saddex arrimood:

1. Wuxuu yiri sallallaahu calayhi wasallam: "maanta ka dib aabbahaa dhib kuma dhici doono".
2. Wuxuu yiri sallallaahu calayhi wasallam: "waxaa aabbahaa u yimid wax aan cidna ka hari doonin".
3. Wuxuu yiri sallallaahu calayhi wasallam: "kulanku waa maalinta qiyaamaha".

Dhibka ku dhaca awliyada Allaah wuxuu dhammaadaa marka nolosha adduunku dhammaato. Geeridu waxay baabi'isaa dhammaan dhibka adduunka.

Kulanku waa maalinta qiyaamaha. Sidee bay u qurux badan tahay sabirsiintani. Mana aha mid u gaar ah sayyidah Faadumo radiyallaahu canhaa, ee waa sabirsiin u gaar ah muslim kasta oo jecel Nabiga sallallaahu calayhi wasallam. Waa bishaaro u ah qof kasta oo raaca Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam.

Annaguna waxaan leenahay:
Haa, kulanku waa maalinta qiyaamaha. Kulanku waa agta xawdka sharafta leh. Halkaas ayaa ah kulanka ugu weyn ee dhex mari doona mu'miniinta iyo Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam. Allaahow nagu arsaaq quruxda kulanka Rasuulkeenna sallallaahu calayhi wasallam.

## Iftiin

**Kulanku waa maalinta qiyaamaha.**

Tani waa sabirsiin u ah qof kasta oo weyneeyey xadiiska Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam, qof kasta oo weyneeyey Nabiga sallallaahu calayhi wasallam, jeclaaday, jacaylkiisana run ka ahaa, raacay sunnadiisa, raadkiisana baadi-goobay.

**Kulanku waa xawdka agtiisa.**

Halkaas ayaan kula kulmaynaa Nabiga sallallaahu calayhi wasallam, waxaanan cabbaynaa koob aynaan ka dib weligeen harraadi doonin. Halkaas ayaa ah kulanka ugu weyn ee dhici doona mu'miniinta iyo Nabiga sallallaahu calayhi wasallam dhexdooda. Oraahdan: **"kulanku waa maalinta qiyaamaha",** ka dhig hal-ku-dhegga noloshaada marka welwelka iyo musiibooyinku kaa hor yimaadaan.

Xusuusnow in kulanku yahay maalinta qiyaamaha.

Qof kasta oo ku sugnaada amarka Allaah iyo amarka Rasuulka, xusuusnow xadiiskan mar kasta oo aad naftaada la jihaaddo oo aad toosnaato. Mu'min kasta oo diintiisa loogu imtixaamo adduunkan raacidda sunnadiisa sallallaahu calayhi wasallam darteed, ha ku celceliyo oraahdan mar walba qalbigiisa, fekerkiisa iyo carrabkiisa:

Kulanku waa maalinta qiyaamaha. Abaalmarintu waa maalinta qiyaamaha. Kala saariddu waa maalinta qiyaamaha.

Nabigu sallallaahu calayhi wasallam gabadhiisa oo keliya uma sabirsiinayo, balse dhammaanteen ayuu na sabirsiinayaa; ummaddiisa ayuu sabirsiinayaa ilaa ay la kulanto.

Waayidda Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam waa musiibo aad u weyn oo mid kasta oo inaga mid ah ku dhacday, maadaama laga qaddaray joogitaanka Rasuulka Allaah noloshiisa dhexdeeda. Naxariista iyo salaanta ugu wanaagsan uguna dhammaystiran korkiisa ha ahaato.

Hal daqiiqo istaag, naftaada su'aashan weydii: maxaad haysataa oo aad ku farxadgelin karto Nabiga sallallaahu calayhi wasallam?

Ma isku dayday inaad dadka uga warranto shakhsiyaddan weyn?

Maalin ma ku dhaqaaqday oo ma faafisay sunno ka mid ah sunnooyinkiisa sallallaahu calayhi wasallam?

Maxaad kaga dayatay?

Maxaad naftaada kula jihaadday? Sunno kee ka mid ah sunnooyinkiisa? Ma maalin difaacday?!

Allaahow nagu arsaaq xaalad uu Nabigu sallallaahu calayhi wasallam nagu raalli noqdo, nagu faano ummadaha hortooda maalinta xisaabta. Allaahow Nabigeenna nagu farxad geli, dhammaanteenna nooga marag fur runnimo.

Allaahow nagu arsaaq jacaylkiisa iyo raaciddiisa ilaa geerida. Nagu arsaaq shafeecadiisa iyo imaatinka xawdkiisa isagoo naga raalli ah, naguna faraxsan.

Nagu arsaaq derisnimadiisa jannooyinka Firdowsa sare, kan ugu deeqsisan deeqsiyaashow.

Allaahow, naxariis, nabadgelyo iyo barako badan ku shub gacaliyaha Maxamed, naxariis iyo salaan badan oo u qalanta.

******************

**54. Qaar ka mid ah waxa ka yimid dhaxalka Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam**

**220. "عَنْ عَمْرِو بْنِ الْحَارِثِ أَخِي جُوَيْرِيَةَ لَهُ صُحْبَةٌ قَالَ :مَا تَرَكَ رَسُولُ الله صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ إِلَّا سِلَاحَهُ وَبَغْلَتَهُ وَأَرْضًا جعلها صدقة". [أخرجه البخاري].**

**220. "Waxaa laga soo weriyey Camr bin Al-Xaarith, walaalka Juwayriyah, oo saxaabi ahaa, inuu yiri: Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam kama tegin wax aan ahayn hubkiisa, baqashiisa, iyo dhul uu ka dhigay sadaqo". [Waxaa soo saaray Al-Bukhaari].**

**221. "عن أبي هريرة رَضِـيَ اللَّهُ عَنْه قَالَ :جَاءَتْ فَاطِمَةُ إِلَى أَبِي بَكْرٍ فَقَالَتْ: مَنْ يَرِثُكَ؟ فَقَالَ: أَهْلِي وَوَلَدِي. فَقَالَتْ: مَا لِي لَا أَرِثُ أَبِي؟ فَقَالَ أَبُو بَكْرٍ: سَمِعْتُ رَسُولَ الله صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ يَقُولُ: لَا نُورَثُ. وَلَكِنِّي أَعُولُ مَنْ كَانَ رَسُولُ الله صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ يَعُولُهُ وَأُنْفِقُ عَلَى مَنْ كَانَ رَسُولُ اللَّهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ ينفق عليه".[ أخرجه الترمذي].**

**221. "Waxaa laga soo weriyey Abuu Hurayrah radiyallaahu canhu inuu yiri: Faadumo ayaa u timid Abuu Bakar, waxayna tiri: yaa ku dhaxlaya? Wuxuu yiri: ehelkayga iyo carruurtayda. Waxay tiri: maxaan anigu aabbahay u dhaxli waayey? Abuu Bakar wuxuu yiri: waxaan maqlay Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam oo leh: annaga nala dhaxlo. Laakiin waxaan masruufayaa qofkii Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam masruufi jiray, waxaanan wax siinayaa qofkii Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam wax siin jiray". [waxaa soo saaray At-Tirmidi].**

**222. "عن عائشة رضي الله تعالى عنها: أن رسول الله صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ قَالَ: لَا نُورَثُ مَا تَرَكْنَا فَهُوَ صَدَقَةٌ ". [أخرجه البخاري ومسلم].**

**222. "Waxaa laga soo weriyey Caa'isha radiyallaahu tacaalaa canhaa: in Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam yiri: annaga nala dhaxlo, wixii aan ka tagno waa sadaqo". [waxaa soo saaray Al-Bukhaari iyo Muslim].**

******************

**55. Qaar ka mid ah waxa ka yimid aragga Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam ee riyada**

**223. "عَنْ يَزِيدَ الْفَارِسِيِّ وَكَانَ يَكْتُبُ الْمَصَاحِفَ قَالَ: رأيت النبي صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ فِي الْمَنَامِ زَمَنَ ابْنِ عباس فَقُلْتُ لِابْنِ عَبَّاسٍ: إِنِّي رَأَيْتُ رَسُولَ اللَّهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ فِي النَّوْمِ. فَقَالَ ابْنُ عَبَّاسٍ: إِنَّ رَسُولَ اللَّهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ كَانَ يَقُولُ :إِنَّ الشَّيْطَانَ لَا يَسْتَطِيعُ أَنْ يَتَشَبَّهَ بِي فَمَنْ رَآنِي فِي النَّوْمِ فَقَدْ رَآنِي .هَلْ تَسْتَطِيعُ أَنْ تَنْعَتَ هَذَا الرَّجُلَ الَّذِي رَأَيْتَهُ فِي النَّوْمِ؟ قَالَ: نَعَمْ أَنْعَتُ لَكَ رَجُلًا بَيْنَ الرَّجُلَيْنِ جِسْمُهُ وَلَحْمُهُ أَسْمَرُ إِلَى الْبَيَاضِ أَكْحَلُ الْعَيْنَيْنِ حَسَنُ الضَّحِكِ**

**جَمِيلُ دَوَائِرِ الْوَجْهِ -قد- مَلَأَتْ لِحْيَتُهُ مَا بَيْنَ هَذِهِ إِلَى هَذِهِ قَدْ مَلَأَتْ نَحْرَهُ. قَالَ عَوْفٌ: وَلَا أَدْرِي مَا كَانَ مَعَ هَذَا النَّعْتِ فَقَالَ ابْنُ عَبَّاسٍ: لَوْ رَأَيْتَهُ فِي الْيَقَظَةِ مَا اسْتَطَعْتَ أَنْ تنعته فوق هذا". [أخرجه أحمد].**

**223. "Waxaa laga soo weriyey Yaziid Al-Faarisi, oo qori jiray musxafyada, inuu yiri: waxaan Nabiga sallallaahu calayhi wasallam ku arkay riyo xilligii Ibnu Cabbaas. Markaasaan Ibnu Cabbaas ku iri: waxaan Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam ku arkay hurdo. Ibnu Cabbaas wuxuu yiri: Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam wuxuu oran jiray: shaydaanku ma awoodo inuu igu ekaado, qofkii hurdada igu arka, dhab ahaan wuu i arkay. Ma awooddaa inaad tilmaanto ninkan aad hurdada ku aragtay? Wuxuu yiri: haa, waxaan kuu tilmaamayaa nin dhex-dhexaad ah, jirkiisa iyo hilibkiisu dhexdhexaad yihiin, midabkiisu u janjeero caddaan, labada indhoodna kuul leh, qosolkiisu qurux badan yahay, qaybaha wejigiisuna qurux badan yihiin. Garkiisu wuxuu buuxiyey inta u dhexeysa tan iyo tan, wuxuuna buuxiyey qoortiisa hore. Cawf wuxuu yiri: ma garanayo waxa tilmaantan la socday. Markaas Ibnu Cabbaas wuxuu yiri: haddii aad isagoo soo jeeda arki lahayd, intaas ka badan kuma tilmaami lahayn". [waxaa soo saaray Axmad].**

- Tilmaanto: sharaxdo.

- Nin dhex-dhexaad ah: wuxuu ahaa mid dhexdhexaad ah, hilib badan iyo hilib yar midna ma ahayn, mana ahayn dheer aad u muuqda ama gaaban.

- Hilibkiisu u janjeero caddaan: wuxuu u janjeerayey caddaan, wuxuuna u dhexeeyey caddaan iyo casaanyo.

- Qaybaha wejigiisu qurux badan yihiin: qayb kasta oo wejigiisa ka mid ahi keligeed way qurux badnayd, haddaba sidee noqonaysaa marka qurux lagu daro qurux kale?

**224. "قَالَ أَبُو قَتَادَةَ: قَالَ رسـول الله صَـلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَـلَّمَ: مَنْ رَآنِي _يَعْنِي فِي النَّوْمِ_ فَقَدْ رَأَى الْحَقَّ". [أخرجه البخاري].**

**224. "Abuu Qataadah wuxuu yiri: Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam wuxuu yiri: qofkii i arka, taas oo loola jeedo hurdada, dhab ayuu arkay". [Waxaa soo saaray Al-Bukhaari.]**

Suurtagal ma aha in Nabiga sallallaahu calayhi wasallam lagu arko sifo aan ahayn sifadiisa. Haddii shaydaan hurdada ku yimaado muuqaal kale oo aan ahayn muuqaalka Nabiga sallallaahu calayhi wasallam ee aan naqaan, oo yiraahdo: anigu waxaan ahay Rasuulka Allaah, taasi waa riyooyin isku dhex yaacsan.

**225. "عَنْ أَنَسٍ: أَنَّ النَّبِيَّ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ قَالَ :مَنْ رَآنِي فِي الْمَنَامِ فَقَدْ رَآنِي فَإِنَّ الشَّيْطَانَ لَا يَتَخَيَّلُ بِي، وَقَالَ: وَرُؤْيَا الْمُؤْمِنِ جُزْءٌ مِنْ سِتَّةٍ وَأَرْبَعِينَ جُزْءًا من النبوة" . [أخرجه البخاري].**

**225. "Waxaa laga soo weriyey Anas: in Nabigu sallallaahu calayhi wasallam yiri: qofkii hurdada igu arka, dhab ahaan wuu i arkay, maxaa yeelay shaydaanku iguma ekaan karo. Wuxuuna yiri: riyada mu'minku waa qayb ka mid ah lix iyo afartan qaybood oo nabinimada ka mid ah". [Waxaa soo saaray Al-Bukhaari].**

- Iguma ekaan karo: iguma shabbihi karo.

- Qayb ka mid ah lix iyo afartan qaybood oo nabinimada ka mid ah: tani waxay ka mid tahay fadliga riyada uu Allaah tacaalaa ku karaameeyo addoonkiisa mu'minka ah. Riyada wanaagsanina waxay ka mid tahay bishaarooyinka.

- **Faa'iido:**

**Wuxuu yiri sallallaahu calayhi wasallam:**

**"أصدقُكم رؤيا أصدقُكم حديثًا". [أخرجه مسلم].**

**"Kuwa ugu runta badan riyadoodu waa kuwa ugu runta badan hadalkoodu". [waxaa soo saaray Muslim.]**

Qofka runta ku leh noloshiisa, hadal iyo ficilba, waa kan arka riyooyinka runta ah.

**Wuxuu yiri sallallaahu calayhi wasallam:**

**"مِن أشدِّ أمتي لي حبّاً: ناسٌ يكونون بعدي يودُّ أحدُهُم لو رآني بأهله وماله". [أخرجه مسلم].**

**"Kuwa ugu jacaylka badan ummaddayda aniga waa dad iga dambayn doona; midkood wuxuu jeclaan lahaa inuu igu arko ehelkiisa iyo maalkiisa". [waxaa soo saaray Muslim.]**

Kuwa jecel Nabiga wax uma harin marka laga reebo inay Rasuulka sallallaahu calayhi wasallam riyada ku arkaan.

Anas bin Maalik radiyallaahu canhu wuxuu yiri: habeen yar ayaa i soo mara anigoon ku arkin gacaliyahayga sallallaahu calayhi wasallam. Sidaas ayuu oran jiray iyadoo labadiisa indhood ilmo ka qubanayso.

Cabdah bint Khaalid bin Macdaan, oo taabiciyad ahayd, waxay aabbaheed ka tiri: Khaalid marar yar ayuu gogoshiisa tagi jiray isagoo aan xusin hilowga uu u qabo Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam iyo asxaabtiisa Muhaajiriinta iyo Ansaarta. Kadib magacyadooda ayuu sheegi jiray, wuxuuna oran jiray: iyagaa ah asalkayga iyo faracayga, qalbigayguna iyaga ayuu u hiloobayaa; hilowgaygu iyaga wuu dheeraaday, Rabbiyow, degdeg iigu soo qaad xaggaaga. Sidaas ayuu ku jiri jiray ilaa hurdadu ka adkaato.

Allaahow nagu arsaaq jacaylka ugu runta badan iyo hilowga ugu runta badan ee Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam.

Marka aad Allaah cazza wa jall ka baryayso aragga Nabiga sallallaahu calayhi wasallam ee riyadaada, naftaada fiiri.

Ma tahay qof sunnada xambaarsan, qof sunnada leh, ama macallin sunnada ah oo mudan inuu arko Rasuulka sallallaahu calayhi wasallam?

Sunnooyinkani waa cilmi, balse ma aha cilmi aad akhrido oo aad ku dhammaato, ee waa bilowga ku dayashada iyo joogtaynta hanuunka Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam.

U tixgeli kitaabka Shamaa’ilka bilow go’aanno cusub oo aad la yeelato sunnada Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam.

Hadda ka bilow, kuna dhaqan waxa aad baratay sunno sunno. Allaahna weydiiso furitaan inta kale ee sunnooyinka iyo raacid wanaagsan ee gacaliyaha la doortay sallallaahu calayhi wasallam.

**226. قَالَ عَبْدُ اللَّهِ بْنُ الْمُبَارَكِ:"إِذَا ابْتُلِيتَ بِالْقَضَاءِ فعليك بالأثر". [حلية الأولياء].**

**226. Cabdullaah bin Al-Mubaarak wuxuu yiri: "Haddii lagugu imtixaamo garsoorka, athar ku dhegganow". [Xilyatul-Awliyaa’].**

- Haddii lagugu imtixaamo garsoorka: haddii lagugu imtixaamo inaad dadka kala xukunto, taas oo isaga agtiisa imtixaan ahayd.

- Athar ku dhegganow: ku dayo saxaabada radiyallaahu canhum iyo khulafada raashidiinta. Sunnadu waa albaabka badbaadada, ee ku dhegganow. Garsoorkuna wuxuu ka mid yahay arrimaha ugu khatarta badan ee qofku aad ugu baahan yahay hanuun, toosin iyo kaalmo Allaah cazza wa jall ka timid.

**227.عَنِ ابْنِ سِيرِينَ قَالَ: "هَذَا الْحَدِيثُ دِينٌ فَانْظُرُوا عمن تأخذون دينكم" [الكفاية في علم الرواية].**

**227. Waxaa laga soo weriyey Ibnu Siiriin inuu yiri: "Xadiiskani waa diin, ee fiiriya cidda aad diintiinna ka qaadanaysaan". [Al-Kifaayah fii Cilm Ar-Riwaayah].**

Labadan athar waa kuwii ugu dambeeyey ee Abuu Ciisaa Maxamed bin Ciisaa At-Tirmidi raximahullaah ku xusay kitaabka Shamaa’ilka Nabiga sallallaahu calayhi wasallam.

Ujeeddaduna waa in qof kasta oo Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam wax ka weriya aan werintiisa la aqbalayn. Waxaana ku jira daliil muujinaya muhiimadda baaritaanka isnadka, sidii At-Tirmidi uu xaaladdiisa ku leeyahay:

Shamaa’ilkan iyo sunnada kale ee Nabiga sallallaahu calayhi wasallam, ku dhegganow.

Tani waa diin, waa aayo abadi ah, janno ama naar.

Ma aha caqli iyo feejignaan inaad naftaada, qoortaada iyo aayahaaga u dhiibto jaahil. Diinta iyo sunnada lagama qaato qof kasta, waana lama huraan inaad hubiso. Haddii aad rabto xeebta badbaadada, athar ku dhegganow, waqti ay bateen kuwa hooseeya ee arrimaha dadka ka hadla.

Waxaa dhammaaday sharaxa kooban ee kitaabka Shamaa’ilka Nabiga sallallaahu calayhi wasallam ee Imaam Abuu Ciisaa At-Tirmidi.

******************

## Fadliga salaadda lagu salliyo Nabigeenna Maxamed sallallaahu calayhi wasallam.

**﴿إِنَّ اللَّهَ وَمَلَٰٓئِكَتَهُۥ يُصَلُّونَ عَلَى النَّبِيِّ يَٰٓأَيُّهَا الَّذِينَ ءَامَنُوا صَلُّوا عَلَيْهِ وَسَلِّمُوا تسليمًا﴾ [الأحزاب: 56]**

**﴿Hubaal Alle iyo Malaa'igtiisu waxay ku salliyaan Nabiga, ee kuwa rumeeyow! Ku salliya oo salaama salaan la yaqaan﴾[Al-Axzaab: 56]**

- Salaadda Allaah uu ku salliyo Nabiga sallallaahu calayhi wasallam: waa ammaantiisa uu Nabiga ku ammaano malaa’igta agtooda, salaadda malaa’igtuna waa duco.

- Ibn Cabbaas wuxuu yiri: “way ku salliyaan” macnaheedu waa: way u duceeyaan barako.

- Ujeeddada aayaddan waa: in Allaah tacaalaa uu addoomadiisa uga warramay darajada addoonkiisa iyo Nabigiisa uu agtiisa kaga leeyahay kulanka sare, isaga oo sheegay inuu ku ammaano malaa’igta u dhow, iyo in malaa’igtu u duceeyaan. Kadib Allaah tacaalaa wuxuu dadka dunida hoose jooga amray inay ku salliyaan oo salaamaan, si ammaanta isaga loo jeedinayo uga timaaddo dadka labada caalam, kan sare iyo kan hoose dhammaantood. [Tafsiirka Ibn Kathiir].

1. قال رسول الله ﷺ: "إن أولى النَّاسِ بي يَومَ القيامةِ أَكْثرُهم عليَّ صلاةً". [أخرجه الترمذي].

1. **Rasuulkii Allaah sallallaahu calayhi wasallam wuxuu yiri: “Dadka iigu mudan maalinta qiyaamaha waa kuwa iigu badan salaadda ay igu salliyaan.” [waxaa soo saaray At-Tirmidi].**

2. قال رسول الله ﷺ: "أتاني آتٍ من عندِ ربِّي عزَّ و جلَّ، فقال: مَنْ صلَّى عليك من أُمَّتِك صلاةً كتب اللهُ له بها عشرَ حَسَناتٍ، و محا عنه عشرَ سيئاتٍ، ورفع له عشرَ درجاتٍ، و ردَّ عليه مثلَها". [صححه الألباني].

2. **Rasuulkii Allaah sallallaahu calayhi wasallam wuxuu yiri: “Waxaa ii yimid mid ka yimid xagga Rabbigay cazza wa jall, wuxuuna yiri: Qofkii ka mid ah ummaddaada ee kugu salliya hal salaad, Allaah wuxuu ugu qorayaa toban xasano, wuxuu ka tirayaa toban xumaan, wuxuu u kor qaadayaa toban darajo, wuxuuna ugu celinayaa mid la mid ah.” [wuxuu saxiixiyey Al-Albaani].**

3. قال رسول الله ﷺ: "إنَّ اللهَ وكَّل بقَبْري مَلَكًا أعطاه أسماعَ الخلائقِ فلا يُصَلِّي عليَّ أحَدٌ إلى يومِ القيامةِ إلَّا أبلَغَني باسمِه واسمِ أبيه هذا فلانُ بنُ فلانٍ قد صلَّى عليك". [أخرجه البزار].

3. **Rasuulkii Allaah sallallaahu calayhi wasallam wuxuu yiri: “Allaah wuxuu qabrigayga u xil saaray malag uu siiyey maqalka makhluuqaadka; qofna iguma salliyo ilaa maalinta qiyaamaha, illaa uu ii soo gaarsiiyo magaciisa iyo magaca aabbihiis: ‘Hebel ina Hebel ayaa kugu salliyey.’” . [waxaa soo saaray Al-Bazzaar].**

4. قال رسول الله ﷺ: "ما قعدَ قَومٌ مَقعدًا لا يذكرونَ اللهَ عزَّ وجلَّ ويصلُّونَ على النَّبيِّ ؛ إلَّا كان عليهِم حسرةً يومَ القيامةِ ، وإن دخلوا الجنَّةَ للثَّواب". [أخرجه أبو داود والترمذي].

4. **Rasuulkii Allaah sallallaahu calayhi wasallam wuxuu yiri: “Qoom fadhi kuma fariistaan iyaga oo aan xusin Allaah cazza wa jall, oo aan ku salliyin Nabiga, illaa ay maalinta qiyaamaha ku noqoto qoomamo, xitaa haddii ay janno galaan ajar dartii.” [waxaa soo saaray Abuu Daawuud iyo At-Tirmidi].**

5. قال رسول الله ﷺ: "إذا سَمِعْتُمُ المُؤَذِّنَ، فَقُولوا مِثْلَ ما يقولُ ثُمَّ صَلُّوا عَلَيَّ، فإنَّه مَن صَلَّى عَلَيَّ صَلاةً صَلَّى اللَّهُ عليه بها عَشْرًا، ثُمَّ سَلُوا اللَّهَ لِيَ الوَسِيلَةَ، فإنَّها مَنْزِلَةٌ في الجَنَّةِ، لا تَنْبَغِي إلَّا لِعَبْدٍ مِن عِبادِ اللهِ، وأَرْجُو أنْ أكُونَ أنا هُوَ، فمَن سَأَلَ لي الوَسِيلَةَ حَلَّتْ له الشَّفاعَةُ".[أخرجه مسلم].

5. **Rasuulkii Allaah sallallaahu calayhi wasallam wuxuu yiri: “Markaad maqashaan mu’addinka, dhaha sida uu leeyahay, kadib igu salliya; maxaa yeelay qofkii igu salliya hal salaad, Allaah**

wuxuu isaga ku sallinayaa toban. Kadib Allaah ii weydiiya wasiilada, waayo waa darajo jannada ku taal oo aan ku habboonayn cid aan ahayn addoon ka mid ah addoomada Allaah, waxaana rajaynayaa inaan anigu noqdo. Qofkii ii weydiiya wasiilada, shafeecadu way u bannaanaanaysaa." [waxaa soo saaray Muslim].

6. سمع رسول الله ﷺ رجلاً يدعو في صلاته لم يمجد الله تعالى، ولم يصل علي النبي ﷺ، فقال رسول الله ﷺ :"عجل هذا، ثم دعاه فقال له - أو لغيره -: إذا صلى أحدكم فليبدأ بتمجيد ربه سبحانه، والثناء عليه، ثم يصلي على النبي ﷺ ثم يدعو بعد بما شاء". [أخرجه أبو داود والترمذي].

6. **Rasuulkii Allaah sallallaahu calayhi wasallam wuxuu maqlay nin ducaysanaya salaaddiisa dhexdeeda, isaga oo aan weynayn Allaah tacaalaa, oo aan ku salliyin Nabiga sallallaahu calayhi wasallam. Markaas Rasuulkii Allaah sallallaahu calayhi wasallam wuxuu yiri: "Kani wuu degdegay." Kadib wuu u yeeray, wuxuuna ku yiri isaga - ama qof kale -: "Marka midkiin salaad tukado, ha ku bilaabo weynaynta Rabbigiis iyo ammaantiisa, kadib ha ku salliyo Nabiga sallallaahu calayhi wasallam, kadibna ha duceysto wixii uu doono." [waxaa soo saaray Abuu Daawuud iyo At-Tirmidi].**

7. قال رسول الله ﷺ: "ما من أحد يسلم علي إلا رد الله علي روحي حتى أرد عليه السلام". [أخرجه أبو داود].

7. **Rasuulkii Allaah sallallaahu calayhi wasallam wuxuu yiri: "Qofna ima salaamo, illaa Allaah naftayda ii soo celiyo si aan salaanta uga jawaabo." [waxaa soo saaray Abuu Daawuud].**

8. قال رسول الله ﷺ: "البخيل الذي ذكرت عنده، فلم يصل علي". [أخرجه الترمذي].

8. **Rasuulkii Allaah sallallaahu calayhi wasallam wuxuu yiri: "Bakhiilku waa qofka la igu xuso agtiisa, haddana aan igu salliyin." [waxaa soo saaray At-Tirmidi].**

9. قال رسول الله ﷺ: "لا تجعلوا قبري عيداً، وصلوا علي، فإن صلاتكم تبلغني حيث كنتم". [أخرجه أبو داود].

9. **Rasuulkii Allaah sallallaahu calayhi wasallam wuxuu yiri: "Qabrigayga ha ka dhigin ciid la isu yimaado, iguna salliya, waayo salaaddiinnu way i soo gaartaa meel kasta oo aad joogtaan." [waxaa soo saaray Abuu Daawuud].**

10. قال رسول الله ﷺ: "رغم أنف رجل ذكرت عنده فلم يصل علي". [أخرجه الترمذي].

10. **Rasuulkii Allaah sallallaahu calayhi wasallam wuxuu yiri: "Sankiisu dhulka ha ku dhaco nin la igu xusay agtiisa, haddana aan igu salliyin." [waxaa soo saaray At-Tirmidi].**

11. عن أبي محمد كعب بن عجرة رضي الله عنه قال: خرج علينا النبي ﷺ فقلنا: يا رسول الله قد علمنا كيف نسلم عليك، فكيف نصلي عليك؟ قال: قولوا: اللهم صل على محمد، وعلى آل محمد، كما صليت على آل إبراهيم، إنك حميد مجيد. اللهم بارك على محمد، وعلى آل محمد، كما باركت على آل إبراهيم، إنك حميد مجيد. [أخرجه البخاري].

11. **Abuu Maxamed Kacab bin Cujrah radiyallaahu canhu waxaa laga soo weriyey inuu yiri: Nabiga sallallaahu calayhi wasallam ayaa noo soo baxay, markaas waxaan niri: Rasuulkii Allaahow, waan ogaanay sida aan kuu salaamayno, ee sidee ayaan kuugu sallinaa? Wuxuu yiri: "Dhaha: Allaahow, ku salli Maxamed iyo ehelka Maxamed, sidaad ugu sallidayy ehelka**

**Ibraahiim; adigu waxaad tahay mid la mahadiyo oo sharaf badan. Allaahow, u barakee Maxamed iyo ehelka Maxamed, sidaad ugu barakaysay ehelka Ibraahiim; adigu waxaad tahay mid la mahadiyo oo sharaf badan." [waxaa soo saaray Al-Bukhaari].**

**.12 "عن أُبَيّ بن كعب رضي الله عنه قال: كان رسول الله صلى الله عليه وآله وسلم إذا ذهب ربع الليل -وفي رواية: ثلثا الليل- قام فقال: «أَيُّهَا النَّاسُ اذْكُرُوا اللهَ، اذْكُرُوا اللهَ، جَاءَتِ الرَّاجِفَةُ تَتْبَعُهَا الرَّادِفَةُ، جَاءَ الْمَوْتُ بِمَا فِيهِ ،جَاءَ الْمَوْتُ بِمَا فِيهِ»، قُلْتُ: يَا رَسُولَ اللهِ، إِنِّي أُكْثِرُ الصَّلَاةَ عَلَيْكَ، فَكَمْ أَجْعَلُ لَكَ مِنْ صَلَاتِي؟ قَالَ: «مَا شِئْتَ»، قلت: الرُّبُعَ؟ قَالَ: «مَا شِئْتَ، فَإِنْ زِدْتَ فَهُوَ خَيْرٌ لك»، قلت النِّصْفَ؟ قَالَ: «مَا شِئْتَ، وَإِنْ زِدْتَ فَهُوَ خَيْرٌ»، قلت فَالثُّلُثَيْنِ؟ قَالَ: «مَا شِئْتَ، فَإِنْ زِدْتَ فَهُوَ خَيْرٌ لك»، قلت: أَجْعَلُ لَكَ صَلَاتِي كُلَّهَا؟ قَالَ: «إِذًا تُكْفَى هَمَّكَ، وَيُغْفَرُ ذَنْبُكَ»" [أخرجه الترمذي].**

**12."Ubayy bin Kacab radiyallaahu canhu waxaa laga soo weriyey inuu yiri: Rasuulkii Allaah sallallaahu calayhi wasallam, marka rubuc habeenku tago - werin kalena: saddex-meelood laba habeenku - wuu kici jiray, wuxuuna oran jiray: 'Dadow, xusa Allaah, xusa Allaah; ruxmaddii hore ayaa timid, waxaana raacaysa tan dambe; geeridu waxay la timid waxa ku jira, geeridu waxay la timid waxa ku jira.' Waxaan iri: Rasuulkii Allaahow, waxaan badiyaa salaadda aan kugu salliyo, intee ayaan kaaga dhigayaa salaaddayda? Wuxuu yiri: 'Intaad doonto.' Waxaan iri: Rubuc? Wuxuu yiri: 'Intaad doonto, haddii aad badisana way kuu khayr badan tahay.' Waxaan iri: Nus? Wuxuu yiri: 'Intaad doonto, haddii aad badisana way kuu khayr badan tahay.' Waxaan iri: Saddex-meelood laba? Wuxuu yiri: 'Intaad doonto, haddii aad badisana way kuu khayr badan tahay.' Waxaan iri: Ma kuu yeelaa salaaddayda dhammaanteed? Wuxuu yiri: 'Markaas welwelkaaga waa lagaa filnaanayaa, dambigaagana waa laguu dhaafayaa.'" . [waxaa soo saaray At-Tirmidi].**

**.13 قال رسول الله ﷺ : "كل دعاء محجوب حتى يصلّى على النبي صلى الله عليه وسلم". [صححه الألباني].**

**13.Rasuulkii Allaah sallallaahu calayhi wasallam wuxuu yiri: "Duco kasta way xanniban tahay ilaa lagu salliyo Nabiga sallallaahu calayhi wasallam." [wuxuu saxiixiyey Al-Albaani].**

**.14 وقال عمر رضي الله عنه: "إن الدعاء موقوف بين السماء والأرض لا يصعد منه شيء حتى تصلي على نبيك صلى الله عليه وسلم". [حسّنه الألباني].**

**14.Cumar radiyallaahu canhu wuxuu yiri: "Ducadu waxay ku xanniban tahay cirka iyo dhulka dhexdooda; wax ka mid ah kor uma kaco ilaa aad ku salliso Nabigaaga sallallaahu calayhi wasallam." [wuxuu xasan ka dhigay Al-Albaani].**

## Maxaynu ugu sallinaa Rasuulkii Allaah sallallaahu calayhi wasallam?

- **Waxaynu ku sallinaa Nabiga sallallaahu calayhi wasallam annaga oo uga mahadcelinayna oo uga abaalgudayna**, maadaama uu naga saaray mugdiyada jaahiliyada una soo saaray nuurka Islaamka, sidoo kalena uu sabab u ahaa khayr kasta oo aan maanta ku jirno. Sidaas awgeed, waxaynu Allaah u wakiilannaa inuu ka abaalmariyo ninkan weyn ee sababta u ahaa khayr kasta iyo hanuun kasta oo ummaddan gaaray.

- **Waxaynu ku sallinaa Nabiga sallallaahu calayhi wasallam annaga oo wanaag iyo xaq dhowr u samaynayna, waayo wuxuu yiri:**

**"إنما أنا لكم مثلُ الوالدِ أعلِّمُكم". [أخرجه النسائي].**

**"Anigu waxaan idiin ahay sida waalid idiin wax bara." [waxaa soo saaray An-Nasaa'i.]**

Haddii aad badiso salaadda aad ku sallinayso, waxaad u ekaanaysaa qof wanaag u samaynaya oo hadiyado badan u diraya.

- **Waxaynu ku sallinaa Nabiga sallallaahu calayhi wasallam, sababtoo ah Allaah weyn wuxuu ina amray inaan jeclaanno, raacno, kuna sallinno. Isagu waa gacaliyaha Allaah iyo khalilkiisa, sidaas darteed waynu jecelnahay, waana ku sallinnaa.**
- **Waxaynu ku sallinaa si ay inoogu noqoto ammaan qoomamo iyo shalayto ka dhan ah.**
- **Waxaynu ku sallinaa annaga oo ku tartamayna kuraasta welinimada.**
- **Waxaynu ku sallinaa si aan u gaarno faanka la dhaxlo.**

**Waxaa sharaf kugu filan in magacaaga lagu xuso Rasuulkii Allaah sallallaahu calayhi wasallam agtiisa: "Hebel ina Hebel ayaa kugu salliyey." Carruurtaada ku kori macnahan.**

- **Waxaynu ku sallinaa si aynaan uga mid noqon bakhiillada. Nabigu sallallaahu calayhi wasallam wuxuu yiri:**

**"البخيل من ذكرت عنده فلم يُصَلِّ علي". [أخرجه الترمذي وأحمد والنسائي].**

**"Bakhiilku waa qofka la igu xuso agtiisa, haddana aan igu salliyin." [waxaa soo saaray At-Tirmidi, Axmad, iyo An-Nasaa'i].**

- **Salaadda lagu salliyo Nabiga waa sabab aynu ku helno shafeecadiisa sallallaahu calayhi wasallam.**

Aan isku dardaaranno inaanan fariisan hal fadhi, illaa aan xusuusinno dadka nagu wareegsan salaadda iyo salaanta lagu salliyo Rasuulkii Allaah. Xitaa wicitaannada telefoonka, salaanta dadka dhex martaysa, iyo fadhiyada qoyska dhexdiisa, adigu noqo qofka dadka ku baraarujiya salaadda iyo salaanta lagu salliyo Rasuulkii Allaah sallallaahu calayhi wasallam.

Salaadda lagu salliyo Nabiga sallallaahu calayhi wasallam...

Marka si run ah loogu dhawaaqo, waxay noqotaa mid baahiyaha lagu guto, arrimaha waaweyn lagu filnaado, xumaanta lagu tirtiro, darajooyinkana lagu kor qaado.

Qofku wax kasta wuu kaga bogsadaa badinta salaadda lagu salliyo gacaliyaha.

Maxaad ka filaysaa qof aan carrabkiisu ka daalin salaadda lagu salliyo Rasuulkii Allaah habeen iyo maalin, jacayl uu u qabo Allaah iyo Rasuulkiisa dartii?

Immisa albaab oo xiran ayaa furmi doona? Immisa balaayo ayaa la qaadi doonaa? Immisa dambi ayaa la dhaafi doonaa? Immisa rajo ayaa ku rumoobi doonta salaadda iyo salaanta lagu salliyo Rasuulkii Allaah sallallaahu calayhi wasallam?

**Tani buunbuunin ma aha. Salaadda lagu salliyo Nabiga qaab kasta oo ay noqoto waxay leedahay sir weyn oo aan Allaah mooyee cid kale ogeyn. Salaadda Ibraahimiyaduna waa mid ka mid ah qaababka ugu xooggan uguna dhaqsaha badan ee murugada lagu faydo, ducadan lagu aqbalo, sir aan Allaah cazza wa jall mooyee cid kale ogeyn darteed.**

Salaadda aad ku salliso Nabiga waa ganacsi faa'iido leh. Hal salaad oo aad ku salliso Rasuulkii Allaah, Rabbigaagu wuxuu kuugu soo celinayaa toban salaadood. Bal qiyaas Boqorka boqorrada oo ku ammaanaya, kuguna amaanaya kulanka sare! Wuxuuna kugu soo dejinayaa salaad kasta oo aad ku salliso Rasuulka toban naxariisood. Weliba magacaaga ayaa lagu xusayaa Rasuulka sallallaahu calayhi wasallam hortiisa, salaadda aad ku salliday darteed.

**Bal qiyaas, akhristaha walaalkayow, muuqaalkaas weyn:**
**Balaayiin dad ah ayaa ku kulansan maalin weyn oo dadku hirar ahaan isu dhex yaacayaan. Mid kasta wuxuu isku dayayaa inuu u dhowaado hal qof oo keliya, kaas oo ah Rasuulkii Allaah sallallaahu calayhi wasallam. Markaas waad farxaysaa, maadaama fursad laguu siiyey inaad aragto wejigiisa sharafta leh sallallaahu calayhi wasallam. Bal qiyaas daqiiqadda ugu horreysa ee aad arki doonto Nabiga sallallaahu calayhi wasallam, daqiiqaddii aad noloshaada oo dhan ku riyoonaysay. Laakiin si lama filaan ah waxaad ugu baraarugaysaa naxdin: adiga iyo isaga waxaa idin dhex yaal balaayiin qof dhab ahaan. Riyadaasi adiga keligaa kuma koobnayn, ee waxay ahayd riyada muslimiinta oo dhan qarniyadii oo dhan ilaa maalinta qiyaamaha. Adiga oo naxsan ayaad taagan tahay, markaas waxaad arkaysaa qaraabadaada Hebel oo masaafooyin kaa horreeya, saaxiibkaaga Hebelna wuxuu aad ugu dhow yahay Rasuulka sallallaahu calayhi wasallam. Yaa kan taagan Nabiga agtiisa? Waa deriskaaga Hebel. Maxaan arkayaa? Maxay igaga horreeyeen Rasuulkii Allaah? Maxaan anigu ula istaagi waayey safafka hore?**

**Halkaas ayay naxdintu ka timid. Dadkaasi waxay kugu dhaafeen cibaado aad u fudud oo maskaxdaada ka maqnayd; waxaa lagu qabtaa ilbiriqsiyo gudahood iyo meel kasta. Laakiin farqigu wuxuu ahaa inay iyagu u feejignaayeen, adiguna aad ka maqneyd. Dadka maalinta qiyaamaha ugu dhow Rasuulka sallallaahu calayhi wasallam waa dadka ugu badan salaadda ay ku salliyaan adduunka. Bal qiyaas qoomamadaada waqtigaas! Waxaad is weydiinaysaa: maxaa carrabkaygu u taagnaa oo u aamusnaa sannadahan oo dhan?**

**Laakiin waxaan kuu bishaaraynaynaa: fursaddu weli way kuu furan tahay. Meesha aad kaga jiri doonto u dhowaanshaha Nabiga weli lama go'aamin.**

**Ka fiirso:**
**Salaad kasta oo aad ku salliso Nabiga, waxaad kula tartamaysaa tobanaan milyan oo qof ag-joogga Rasuulkii Allaah sallallaahu calayhi wasallam. Buuqbuunin ma aha. Salaad kasta oo aad Nabiga ku salliso, waxaad ka hor maraysaa malaayiin qof, waxaadna safafka uga gudbaysaa dhanka hore, adiga oo u socda Rasuulkii Allaah sallallaahu calayhi wasallam. Waxaa kaloo jira arrin kale oo laga yaabo inay qalbiga ka maqnaato: marka aad Nabiga ku salliso hal salaad, Allaah wuxuu kugu sallinayaa toban jeer. Bal qiyaas maalinta qiyaamaha marka aad furto kitaabkaaga oo lagugu xisaabiyo camalladaada, imisa milyan oo salaadood oo Allaah kugu salliyey ayaad ka heli doontaa camalladaada dhexdeeda?**

**Waxaynu u baahan lahayn mugyo badan si loo sharaxo mudnaanta salaadda lagu salliyo Nabiga. Sidaas darteed carrabkaaga ka faa'iidayso ka hor inta aan cimrigaagu dhammaan, adiga oo ku jira cibaadada ugu sharafta badan: xuska Allaah iyo salaadda lagu salliyo Nabiga sallallaahu calayhi wasallam. "Qoraal la soo xigtay"**

Allaahow, ku salli oo salaam Nabigeenna Maxamed.

Waxaan Allaah ku weydiinaynaa magaciisa Al-Xayy inuu qalbiyadeenna ku nooleeyo aqoontiisa, jacaylkiisa, jacaylka Nabigiisa, iyo jacaylka sunnada.

Allaahow, ku salli, salaam, oo barakee Nabigeenna Maxamed, ehelkiisa, iyo dhammaan saxaabadiisa.

**عن علي بن أبي طالب رضي الله عنه قال: "كُنَّا إذا احمرَّ البأسُ، ولَقيَ القومُ القومَ، اتَّقَيْنا برسولِ اللهِ صلَّى اللهُ عليه وسلَّمَ ".[أخرجه النسائي].**

**Cali bin Abii Daalib radiyallaahu canhu waxaa laga soo weriyey inuu yiri: "Marka dagaalku aad u kululaado, qoomkuna qoomka la kulmaan, waxaan isku difaaci jirnay Rasuulkii Allaah sallallaahu calayhi wasallam." [waxaa soo saaray An-Nasaa'i].**

Adiguna sidoo kale, marka dhib iyo welwel kugu adkaadaan, ku dhegganow salaadda lagu salliyo Nabiga; markaas dambigaaga waa laguu dhaafayaa, welwelkaagana waa lagaa filnaanayaa.

**﴿وَرَفَعْنَا لَكَ ذِكْرَكَ﴾ [الشرح: 4]**

**﴿Oo aanaan kor yeelin meeqaankaaga﴾ [Ash-Sharx: 4]**

qofka xuskiisu kor loo qaaday waa Maxamed sallallaahu calayhi wasallam. Bal qiyaas inaad adigu noqoto qalab lagu hirgeliyo aayaddan, oo Allaah cazza wa jall kuu adeegsado kor u qaadidda xuska Rasuulkii Allaah sallallaahu calayhi wasallam. Waa maxay sharaftan weyn ee Allaah cazza wa jall kugu hareereeyey, kaliya salaadda aad ku salliso Rasuulkii Allaah darteed?!

Haddii salaadda aad carrabkaaga kaga salliso ay leedahay ajarkan weyn iyo kor u qaadidda darajooyinka, maxaad ka malaynaysaa barashada sunno ka mid ah sunnooyinkiisa sallallaahu calayhi wasallam? Sideese noqonaysaa faafinta sunnooyinkaas iyo bariddooda muslimiinta?

Allaahow, fur carrabbadayada iyo qalbiyadayada si ay ugu salliyaan oo ugu salaamaan Nabigaaga iyo gacaliyahaaga Maxamed sallallaahu calayhi wasallam.

# Qaababka salaadda lagu salliyo Nabigeenna Maxamed sallallaahu calayhi wasallam

Sheekh Al-Albaani raximahullaah wuxuu xusay qaababka sugan ee salaadda lagu salliyo sallallaahu calayhi wasallam, taasna wuxuu ku sheegay kitaabkiisa Sifada Salaadda Nabiga sallallaahu calayhi wasallam:

**1. "اللَّهُمَّ صَــلِّ عَلَى مُحَمَّدٍ وعَلَى أَهْلِ بَيْتِهِ وعَلَى أَزْوَاجِهِ وَذُرِّيَّتِهِ كَمَا صَــلَّيْتَ عَلَى آلِ إِبْرَاهِيمَ؛ إِنَّكَ حَمِيدٌ مَجِيدٌ، وَبَارِكْ عَلَى مُحَمَّدٍ وَعَلَى آلِ بَيْتِهِ وَعَلَى أَزْوَاجِهِ وَذُرِّيَّتِهِ كَمَا بَارَكْتَ عَلَى آلِ إِبْرَاهِيمَ؛ إِنَّكَ حَمِيدٌ مَجِيدٌ". [أخرجه أحمد].**

1. **"Allaahow, ku salli Maxamed, ehelka gurigiisa, xaasaskiisa, iyo faraciisa, sidaad ugu salliday ehelka Ibraahiim; adigu waxaad tahay mid la mahadiyo oo sharaf badan. U barakee Maxamed, ehelka gurigiisa, xaasaskiisa, iyo faraciisa, sidaad ugu barakaysay ehelka Ibraahiim; adigu waxaad tahay mid la mahadiyo oo sharaf badan." [waxaa soo saaray Axmad].**

Sheekh Al-Albaani wuxuu yiri: Tani waa ducadii uu isaga laftiisu ku ducaysan jiray sallallaahu calayhi wasallam.

**2. "اللَّهُمَّ صَلِّ عَلَى مُحَمَّدٍ وَعَلَى آلِ مُحَمَّدٍ كَمَا صَلَّيْتَ عَلَى إِبْرَاهِيمَ وَعَلَى آلِ إِبْرَاهِيمَ؛ إِنَّكَ حَمِيدٌ مَجِيدٌ. اللَّهُمَّ بَارِكْ عَلَى مُحَمَّدٍ وَعَلَى آلِ مُحَمَّدٍ كَمَا بَارَكْتَ عَلَى إِبْرَاهِيمَ وَعَلَى آلِ إِبْرَاهِيمَ؛ إِنَّكَ حَمِيدٌ مَجِيدٌ". [أخرجه البخاري ومسلم].**

2. **"Allaahow, ku salli Maxamed iyo ehelka Maxamed, sidaad ugu salliday Ibraahiim iyo ehelka Ibraahiim; adigu waxaad tahay mid la mahadiyo oo sharaf badan. Allaahow, u barakee Maxamed iyo ehelka Maxamed, sidaad ugu barakaysay Ibraahiim iyo ehelka Ibraahiim; adigu waxaad tahay mid la mahadiyo oo sharaf badan." [waxaa soo saaray Al-Bukhaari iyo Muslim].**

**3. "اللَّهُمَّ صَلِّ عَلَى مُحَمَّدٍ وَعَلَى آلِ مُحَمَّدٍ كَمَا صَلَّيْتَ عَلَى إِبْرَاهِيمَ وَآلِ إِبْرَاهِيمَ؛ إِنَّكَ حَمِيدٌ مَجِيدٌ، وَبَارِكْ عَلَى مُحَمَّدٍ وَعَلَى آلِ مُحَمَّدٍ كَمَا بَارَكْتَ عَلَى إِبْرَاهِيمَ وَآلِ إِبْرَاهِيمَ؛ إِنَّكَ حَمِيدٌ مَجِيدٌ". [أخرجه أحمد والنسائي].**

3. **"Allaahow, ku salli Maxamed iyo ehelka Maxamed, sidaad ugu salliday Ibraahiim iyo ehelka Ibraahiim; adigu waxaad tahay mid la mahadiyo oo sharaf badan. U barakee Maxamed iyo ehelka Maxamed, sidaad ugu barakaysay Ibraahiim iyo ehelka Ibraahiim; adigu waxaad tahay mid la mahadiyo oo sharaf badan." [waxaa soo saaray Axmad iyo An-Nasaa'i].**

4. "اللَّهُمَّ صَــلِّ عَلَى مُحَمَّدٍ النَّبِيِّ الأُمِّيِّ وَعَلَى آلِ مُحَمَّدٍ كَمَا صَــلَّيْتَ عَلَى آلِ إِبْرَاهِيمَ، وَبَارِكْ عَلَى مُحَمَّدٍ النَّبِيِّ الأُمِّيِّ وَعَلَى آلِ مُحَمَّدٍ كَمَا بَارَكْتَ عَلَى آلِ إِبْرَاهِيمَ فِي الْعَالَمِينَ إِنَّكَ حَمِيدٌ مَجِيدٌ". [أخرجه مسلم].

4. **"Allaahow, ku salli Maxamed, Nabiga aan wax qorin waxna akhrin, iyo ehelka Maxamed, sidaad ugu salliday ehelka Ibraahiim. U barakee Maxamed, Nabiga aan wax qorin waxna akhrin, iyo ehelka Maxamed, sidaad ugu barakaysay ehelka Ibraahiim caalamyada**

**dhexdeeda; adigu waxaad tahay mid la mahadiyo oo sharaf badan." [waxaa soo saaray Muslim].**

**5. "اللَّهُمَّ صَلِّ عَلَى مُحَمَّدٍ عَبْدِكَ وَرَسُولِكَ كَمَا صَلَّيْتَ عَلَى آلِ إِبْرَاهِيمَ، وَبَارِكْ عَلَى مُحَمَّدٍ عَبْدِكَ وَرَسُولِكَ وَعَلَى آلِ مُحَمَّدٍ كَمَا بَارَكْتَ عَلَى إِبْرَاهِيمَ وَعَلَى آلِ إِبْرَاهِيمَ". [أخرجه البخاري والنسائي وأحمد].**

5. **"Allaahow, ku salli Maxamed, addoonkaaga iyo Rasuulkaaga, sidaad ugu salliday ehelka Ibraahiim. U barakee Maxamed, addoonkaaga iyo Rasuulkaaga, iyo ehelka Maxamed, sidaad ugu barakaysay Ibraahiim iyo ehelka Ibraahiim." [waxaa soo saaray Al-Bukhaari, An-Nasaa'i, iyo Axmad].**

**6. "اللَّهُمَّ صَلِّ عَلَى مُحَمَّدٍ وَعَلَى أَزْوَاجِهِ وَذُرِّيَّتِهِ كَمَا صَلَّيْتَ عَلَى آلِ إِبْرَاهِيمَ، وَبَارِكْ عَلَى مُحَمَّدٍ وَعَلَى أَزْوَاجِهِ وَذُرِّيَّتِهِ كَمَا بَارَكْتَ عَلَى آلِ إِبْرَاهِيمَ؛ إِنَّكَ حَمِيدٌ مَجِيدٌ".[أخرجه البخاري ومسلم].**

6. **"Allaahow, ku salli Maxamed, xaasaskiisa, iyo faraciisa, sidaad ugu salliday ehelka Ibraahiim. U barakee Maxamed, xaasaskiisa, iyo faraciisa, sidaad ugu barakaysay ehelka Ibraahiim; adigu waxaad tahay mid la mahadiyo oo sharaf badan." [waxaa soo saaray Al-Bukhaari iyo Muslim].**

**7. "اللَّهُمَّ صَلِّ عَلَى مُحَمَّدٍ وَعَلَى آلِ مُحَمَّدٍ وَبَارِكْ عَلَى مُحَمَّدٍ وَعَلَى آلِ مُحَمَّدٍ كَمَا صَلَّيْتَ وَبَارَكْتَ عَلَى إِبْرَاهِيمَ وَآلِ إِبْرَاهِيمَ؛ إِنَّكَ حَمِيدٌ مَجِيدٌ". [أخرجه النسائي ].**

7. **"Allaahow, ku salli Maxamed iyo ehelka Maxamed, una barakee Maxamed iyo ehelka Maxamed, sidaad ugu salliday uguna barakaysay Ibraahiim iyo ehelka Ibraahiim; adigu waxaad tahay mid la mahadiyo oo sharaf badan." [waxaa soo saaray An-Nasaa'i].**

## Macnaha salaadda lagu salliyo Nabiga sallallaahu calayhi wasallam

Macnaha salaadda Allaah uu ku salliyo Nabigiisa waa: ammaantiisa iyo weynayntiisa.

Salaadda malaa'igta iyo kuwa kalena ay ku salliyaan waa: inay Allaah tacaalaa uga dalbaan taas. Ujeeddaduna waa dalabka kordhinta, ma aha dalabka asalka salaadda.

Waxaa kaloo la yiri: salaadda Allaah uu ku salliyo makhluuqiisa waxay noqon kartaa mid gaar ah iyo mid guud. Salaadda uu ku salliyo anbiyadiisa waa ammaan iyo weynayn.

Salaadda uu ku salliyo kuwa aan iyaga ahaynna waa naxariis; waana tan wax kasta gaartay.

# Gunaanad

Maxay qurux badnaayeen maalmihii aan la qaadannay kitaabkan.

Alxamdulillaah, Allaahii nagu hanuuniyey tan; hanuun ma aan heleen haddii Allaah aanu na hanuunin. Rabbiyow, nagu ilhaami inaan kaaga mahadnaqno nicmadaada aad nagu nicmaysay annaga iyo waalidkeen, iyo inaan samayno camal wanaagsan oo aad raalli ka tahay. Noo hagaaji faracayaga, naxariistaadana nagu geli addoomadaada wanaagsan.

Kadib barashada Shamaa'ilkiisa sallallaahu calayhi wasallam, waxaan dareemaynaa udgoonka Maxamed sallallaahu calayhi wasallam. Waxaan ku soo xusuusannaa xaalad kasta oo ina dhaafta, waxaanan nafteena u rajaynaynaa inaan u nimaadno xawdkiisa, lana wehelinno isaga iyo saxaabadiisa jannooyinka Firdowsa; jannooyin saqafkoodu yahay Carshiga Ar-Raxmaan. Waxaan noqonnay sidii inaan la joogno ehelkiisa iyo saxaabadiisa, markaas dareennadii way u xiiseen, indhihiina way u xiiseen araggiisa sallallaahu calayhi wasallam.

**Firdowska, Rabbiyow,**
**halkaas, halkaas ayaan ku nasanayaa**

**Rajadaydu, Rabbiyow, waa inaad nagu waafajiso**
**janno dhammaanteed farxad tahay**

Naftaada kula dadaal inaad ku dhaqanto sunno kasta oo aad ka akhriday Shamaa'ilka Nabiga sallallaahu calayhi wasallam; waxaa laga yaabaa in kadib taas furitaan kaaga yimaado inta kale ee sunnada gacaliyaha sallallaahu calayhi wasallam. Kitaabkanna ka dhig mid ka mid ah kitaabadii ugu sharafta badnaa ee aad akhriday.

**﴿إِن يَعْلَمَ اللَّهُ فِي قُلُوبِكُمْ خَيْرًا يُؤْتِكُمْ خَيْرًا﴾ [الأنفال: 70]**

**﴿haddii Alle ku og yahay wax khayr ah quluubtiinna, wuxuu idin siin wax ka khayr﴾ [Al-Anfaal: 70].**

Faafi Shamaa'ilka Nabiga sallallaahu calayhi wasallam adiga oo niyadda ku haya kor u qaadidda xuska Nabiga sallallaahu calayhi wasallam, naftaada, gurigaaga, iyo bari iyo galbeed dhulka. Shamaa'ilkani waa risqi weyn oo loo helay qofkii bartay, ee dareen risqigan. Xifdi tilmaanta Nabiga sallallaahu calayhi wasallam. Xifdi cuntooyinkiisa, fadhiyadiisa, akhlaaqdiisa, iyo siyaabihii uu dadka ula macaamili jiray. Ku dayo isaga. Raac intaad awooddo sunnooyinkiisa. Allaahna ku weydiiso barakada Shamaa'ilkan dartood ag-jooggiisa iyo ag-

joogga Nabigiisa Maxamed sallallaahu calayhi wasallam ee Firdowsa sare, xisaab la'aan iyo cadaab hore la'aan.

**Rabbiyow, ku salli Nabiga, imaamkeenna,**
**una bandhig salaaddayada iyo salaantayada**

**Noogu mannayso, Kariimow, cabbid**
**xawdkiisa ah oo aad ku bogsiiso cudurradayada**

**Allaahow, ku salli gacaliyaha Maxamed, salaad aad ku raalli noqoto, annagana aad nagu raalli noqoto, Rabbiga caalamkow.**

**Allaahow, ku salli gacaliyaha Maxamed, salaad aad nagu dejiso agtiisa Firdowsa sare.**

Sidee ayay qalbiyadiinnu yihiin kadib barashada Shamaa'ilkiisa sallallaahu calayhi wasallam? Maxay yihiin go'aannadiinnu? Maxaad u diyaarsateen si aad indhaha Rasuulkii Allaah sallallaahu calayhi wasallam uga farxisaan?

Allaahow, ku salli Maxamed iyo ehelka Maxamed, una barakee Maxamed iyo ehelka Maxamed, sidaad ugu salliday uguna barakaysay Ibraahiim iyo ehelka Ibraahiim; adigu waxaad tahay mid la mahadiyo oo sharaf badan.

## Ugu dambayn...

**Qofkii kitaabkan ka helay faa'iido, waxaan ka rajaynayaa inuusan naga reebin duco wanaagsan oo uu noo duceeyo annaga iyo waalidkeen, si qarsoodi ah, isagoo noo baryaya raalli ahaansho, aqbalid, iyo Firdowsa sare, xisaab la'aan iyo cadaab la'aan. Allaahna ha ka dhigo kayd noo yaalla maalinta aan la kulmayno.**

**Allaah ayaa la kaashadaa, isaga ayaana gaarsiintu saaran tahay, xoog iyo awoodna ma jiro Allaah mooyee.**

**﴿رَبَّنَا تَقَبَّلْ مِنَّا إِنَّكَ أَنتَ السَّمِيعُ الْعَلِيمُ﴾ [البقرة: 127]**

**﴿Rabbigayow! Naga aqbal, hubaal Waxaad Adigu tahay Maqlaha wax kasta, wax kasta Ogsoon﴾ [Al-Baqarah: 127]**

**Allaahow aamiin.**

**Allaahow, ku salli Sayidka rususha iyo shaabadda anbiyada, Sayidkeenna Maxamed, ehelkiisa iyo dhammaan saxaabadiisa.**

**Salaad joogto ah oo waaraysa weligeed iyo weligeedba,**
**tirada inta ay ku xuseen kuwa xusa,**
**iyo inta ay ka gafleen xuskaaga kuwa gafla.**

**Ducadeenna ugu dambaysana waa: alxamdulillaah Rabbiga caalamka.**

Waxaa qoristiisa la dhammeeyey 22 Ramadaan - 1446 Hijri
Sabti 22 - 3 - 2025 Miilaadi

# Liiska tixraacyada


1. Shamaa'ilka Nabiga sallallaahu calayhi wasallam, qoraaga: Maxamed bin Ciisaa bin Sawrah bin Muusaa bin Ad-Daxxaak, At-Tirmidi, Abuu Ciisaa (w. 279 Hijri), daabacaha: Daar Ixyaa' At-Turaath Al-Carabi - Beyruut.
2. Saxiix Al-Bukhaari, qoraaga: Abuu Cabdillaah Maxamed bin Ismaaciil Al-Bukhaari Al-Jucfi, baaraha: Dr. Mustafaa Diib Al-Bughaa, daabacaha: Daar Ibn Kathiir, Daar Al-Yamaamah - Dimishiq, daabacaadda: shanaad, 1414 Hijri - 1993 Miilaadi.
3. Sunan At-Tirmidi, qoraaga: Maxamed bin Ciisaa bin Sawrah bin Muusaa bin Ad-Daxxaak, At-Tirmidi, Abuu Ciisaa (w. 279 Hijri), baarid iyo faallo: Axmad Maxamed Shaakir (juz 1, 2), Maxamed Fu'aad Cabd Al-Baaqi (juz 3), iyo Ibraahiim Catwah Cawad, macallinka Al-Azhar Ash-Shariif (juz 4, 5), daabacaha: Shirkadda Maktabadda iyo Madbacadda Mustafaa Al-Baabi Al-Xalabi - Masar, daabacaadda: labaad, 1395 Hijri - 1975 Miilaadi.
4. Saxiix At-Targhiib wat-Tarhiib, qoraaga: Maxamed Naasiruddiin Al-Albaani, daabacaha: Maktabat Al-Macaarif lin-Nashr wat-Tawziic - Riyaad, daabacaadda: koowaad, 1421 Hijri - 2000 Miilaadi.
5. Saxiix Al-Jaamic As-Saghiir wa Ziyaadaatuhu, qoraaga: Abuu Cabdirraxmaan Maxamed Naasiruddiin, bin Al-Xaaj Nuux bin Najaati bin Aadam, Al-Ashquudari Al-Albaani (w. 1420 Hijri), daabacaha: Al-Maktab Al-Islaami.
6. Saxiix Muslim, qoraaga: Abuu Al-Xusayn Muslim bin Al-Xajjaaj Al-Qushayri An-Naysaabuuri (206 - 261 Hijri), baaraha: Maxamed Fu'aad Cabd Al-Baaqi [w. 1388 Hijri], daabacaha: Madbacadda Ciisaa Al-Baabi Al-Xalabi iyo shuraakadiisa, Qaahira, kadibna waxaa sawiray Daar Ixyaa' At-Turaath Al-Carabi ee Beyruut iyo kuwo kale, sannadka daabacaadda: 1374 Hijri - 1955 Miilaadi.
7. Musnad Al-Imaam Axmad bin Xanbal, qoraaga: Axmad bin Maxamed bin Xanbal (164 - 241 Hijri), baaraha: Axmad Maxamed Shaakir, daabacaha: Daar Al-Xadiith - Qaahira, daabacaadda: koowaad, 1416 Hijri - 1995 Miilaadi.
8. Saxiix Ibn Xibbaan: Al-Musnad As-Saxiix calaa At-Taqaasiim wal-Anwaac min ghayri wujuud qatc fii sanadihā wa laa thubuut jarx fii naaqilihaa, qoraaga: Abuu Xaatim Maxamed bin Xibbaan bin Axmad At-Tamiimi Al-Busti (w. 354 Hijri), baarayaasha: Maxamed Cali Soonmaz, Khaalis Aay Damiir, daabacaha: Daar Ibn Xazm - Beyruut, daabacaadda: koowaad, 1433 Hijri - 2012 Miilaadi.
9. Saxiix Sunan An-Nasaa'i, silsiladda wariyayaasha oo la soo gaabiyey, axaadiistiisa waxaa saxiixiyey: Maxamed Naasiruddiin Al-Albaani, iyadoo uu u xilsaaray: Xafiiska Tarbiyada Carabta ee Dawladaha Khaliijka - Riyaad, daabiciddiisa, faalladiisa, iyo tusmayntiisana waxaa kormeeray: Zuhayr Ash-Shaawiish [w. 1434 Hijri], daabacaha: Xafiiska Tarbiyada Carabta ee Dawladaha Khaliijka - Riyaad, daabacaadda: koowaad, 1409 Hijri - 1988 Miilaadi.

10. Al-Mustadrak calaa As-Saxiixayn, qoraaga: Abuu Cabdillaah Maxamed bin Cabdillaah Al-Xaakim An-Naysaabuuri, oo ay ku jiraan ku-darka: Adh-Dhahabi ee At-Talkhiis iyo Al-Miizaan, Al-Ciraaqi ee Amaaliihiisa, Al-Munaawi ee Faydh Al-Qadiir, iyo kuwo kale, daraasad iyo baarid: Mustafaa Cabd Al-Qaadir Cataa, daabacaha: Daar Al-Kutub Al-Cilmiyyah - Beyruut, daabacaadda: koowaad, 1411 - 1990.

11. Sunan Abii Daawuud, qoraaga: Abuu Daawuud Sulaymaan bin Al-Ashcath bin Isxaaq bin Bashiir bin Shaddaad bin Camr Al-Azdi As-Sijistaani (w. 275 Hijri), baaraha: Maxamed Muxyiddiin Cabd Al-Xamiid [w. 1392 Hijri], daabacaha: Al-Maktabah Al-Casriyyah, Saydaa - Beyruut.

12. Al-Musannaf, waxaana ku xiga: Kitaab Al-Jaamic ee Imaam Macmar bin Raashid Al-Azdi, werinta Cabdirrazzaaq As-Sancaani [si madax-bannaan ayaa loogu faafiyey Ash-Shaamilah], qoraaga: Abuu Bakar Cabdirrazzaaq bin Hammaam As-Sancaani (126 - 211 Hijri), baaraha: Xabiib Ar-Raxmaan Al-Aczami, daabacaha: Al-Majlis Al-Cilmi - Hindiya, qaybinta: Al-Maktab Al-Islaami - Beyruut, daabacaadda: labaad, 1403 Hijri - 1983.

13. Sunan Ibn Maajah, qoraaga: Ibn Maajah Abuu Cabdillaah Maxamed bin Yaziid Al-Qazwiini, Maajahna waa magaca aabbihiis Yaziid (w. 273 Hijri), baarid: Maxamed Fu’aad Cabd Al-Baaqi [w. 1388 Hijri], daabacaha: Daar Ixyaa’ Al-Kutub Al-Carabiyyah - Faysal Ciisaa Al-Baabi Al-Xalabi.

14. Musnad Al-Bazzaar oo lagu faafiyey magaca Al-Baxr Az-Zakhkhaar, qoraaga: Abuu Bakar Axmad bin Camr bin Cabd Al-Khaaliq bin Khallaad bin Cubaydillaah Al-Cataki, oo loo yaqaan Al-Bazzaar (w. 292 Hijri), baarayaasha: Maxfuuz Ar-Raxmaan Zaynillaah (juz 1 - 9), Caadil bin Sacd (juz 10 - 17), Sabri Cabd Al-Khaaliq Ash-Shaafici (juz 18), daabacaha: Maktabat Al-Culuum wal-Xikam - Madiina, daabacaadda: koowaad, waxay bilaabatay 1988 Miilaadi, waxayna dhammaatay 2009 Miilaadi.

15. At-Tabaqaat Al-Kubraa, qoraaga: Maxamed bin Sacd bin Maniic Al-Haashimi Al-Basri, oo loo yaqaan Ibn Sacd, daraasad iyo baarid: Maxamed Cabd Al-Qaadir Cataa, daabacaha: Daar Al-Kutub Al-Cilmiyyah - Beyruut, daabacaadda: koowaad, 1410 Hijri - 1990 Miilaadi.

16. Al-Macsuul fii Shamaa’il Ar-Rasuul sallallaahu calayhi wasallam, sharraxa kooban ee Shamaa’ilka Nabiga sallallaahu calayhi wasallam ee Imaam At-Tirmidi, qoraaga: Xasan bin Cabd Al-Xamiid Bukhaari, daabacaha: Xarunta Ixsaan ee Daraasaadka Sunnada Nabiga, daabacaadda koowaad, 2021.

17. Saxiix Shamaa’ilka Nabiga sallallaahu calayhi wasallam, sifeynta kooban ee Shamaa’ilka Nabiga sallallaahu calayhi wasallam ee caalimka Al-Albaani raximahullaah, qoraaga: Dr. Aniis bin Axmad Jamaal, daabacaadda koowaad, 1429 Hijri - 2008 Miilaadi, Madiina.

18. Sifada Salaadda Nabiga sallallaahu calayhi wasallam laga bilaabo takbiirta ilaa salaanta, sidii adigoo arkaya, qoraaga: Maxamed Naasiruddiin Al-Albaani (w. 1420 Hijri), daabacaha: Maktabat Al-Macaarif lin-Nashr wat-Tawziic - Riyaad, tirada juz'yada: 1.
19. Sharx Mukhtasar Ash-Shamaa'il Al-Muxammadiyyah, qoraaga: Haani Faqiih, waxaa lagu daabacay kharashka: Waqfka Sheekh Ibraahiim bin Xamad Al-Wuqaysi, daabacaadda: koowaad, 1441 Hijri - 2020 Miilaadi, tirada bogagga: 278.
20. Doorada As-Siraaj Al-Muniir, Xarunta Aayaat, Sheekh Maxamed Khayri.
21. Doorada Shamaa'ilka Nabiga sallallaahu calayhi wasallam ee ijaazada, Sheekh Xasan Al-Xusayni.
22. Qaar ka mid ah muxaadarooyinka Sheekh Dr. Xaazim Shuuman, youtube.
23. Mawsuucada Al-Aajurri ee shabakadda internetka, Abuu Cabd Al-Muhaymin Samiir Al-Baliidi.
24. Mareegta Ad-Durar As-Saniyyah ee shabakadda internetka.

# Tusmada

Hibayn........................................................................................................................................ 6

Hibayn........................................................................................................................................ 7

Qeexidda Shamaa’ilka Nabiga sallallaahu calayhi wasallam .................................................................. 13

Ku soo dhawoow ardayga cilmiga ........................................................................................... 19

Niyooyinka barashada Shamaa’ilka Nabiga sallallaahu calayhi wasallam ............................................... 20

1.Qaar ka mid ah waxyaabihii laga wariyey abuurkii Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam ........ 20

2.Qaar ka mid ah waxyaabihii laga wariyey shaabadda nabinimada ..................................................... 27

3.Qaar ka mid ah waxyaabihii laga wariyey timaha Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam .......... 29

4............ Qaar ka mid ah waxyaabihii laga wariyey shanlaynta timaha Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam..30

5.Qaar ka mid ah waxyaabihii laga wariyey cirrada Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam ...........32

6.Qaar ka mid ah waxyaabihii laga wariyey xinneysashada Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam35

7.Qaar ka mid ah waxyaabihii laga wariyey kuulka Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam ........... 36

8.Qaar ka mid ah waxyaabihii laga wariyey dharka Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam .......... 37

9.Qaar ka mid ah waxyaabihii laga wariyey noloshii Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam ......... 41

10.Waxyaabihii laga wariyey kabaha haragga ah ee Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam ......... 43

11.Qaar ka mid ah waxyaabihii laga wariyey kabaha Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam ........ 44

12.Qaar ka mid ah waxyaabihii laga wariyey faraantiga Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam ... 47

13.Qaybo ka mid ah waxa laga weriyey in Nabiga sallallaahu calayhi wasallam uu faraantiga ku xiran jiray gacantiisa midig ....................................................................................................................... 49

14.Qaybo ka mid ah waxa laga weriyey sifada seefta Rasuulka sallallaahu calayhi wasallam .................. 50

15.Qaybo ka mid ah waxa laga weriyey sifada gaashaanka Rasuulka sallallaahu calayhi wasallam ......... 51

16.Qaybo ka mid ah waxa laga weriyey sifada koofiyadda birta ah ee Rasuulka sallallaahu calayhi wasallam ........................................................................................................................................ 53

17.Qaybo ka mid ah waxa laga weriyey cimaamadda Rasuulka sallallaahu calayhi wasallam.................. 53

18....Qaybo ka mid ah waxa laga weriyey sifada marada dhexda lagu xirto ee Rasuulka sallallaahu calayhi wasallam................................................................................................................................. 54

19.Qaybo ka mid ah waxa laga weriyey socodka Rasuulka sallallaahu calayhi wasallam ......................... 55

20.Qaybo ka mid ah waxa laga weriyey fadhiga Rasuulka sallallaahu calayhi wasallam........................... 58

21.Qaar ka mid ah wixii laga weriyey fadhiga ku tiirsanaanta Rasuulka sallallaahu calayhi wasallam ..... 61

22.......................Qaar ka mid ah wixii laga weriyey ku tiirsanaanta Rasuulka sallallaahu calayhi wasallam ........................................................................................................................................ 62

23.Qaar ka mid ah wixii laga weriyey sifada cunidda Rasuulka sallallaahu calayhi wasallam................... 63

24.Qaar ka mid ah wixii laga weriyey sifada rootiga Rasuulka sallallaahu calayhi wasallam .................... 65
25.Qaar ka mid ah wixii laga weriyey iidaanka Rasuulka sallallaahu calayhi wasallam............................ 68
26.Qaar ka mid ah wixii laga weriyey sifada waysaysiga Rasuulka sallallaahu calayhi wasallam marka cuntada la joogo .......................................................................................................................................... 77
27.Qaar ka mid ah wixii laga weriyey hadalkii Rasuulka sallallaahu calayhi wasallam ka hor cuntada iyo marka uu ka dhammeeyo ............................................................................................................................. 77
28. Qaar ka mid ah wixii laga weriyey koobkii Rasuulka sallallaahu calayhi wasallam ............................ 80
29.Wixii laga weriyey mirihii Rasuulka sallallaahu calayhi wasallam....................................................... 80
30.Qaar ka mid ah wixii laga weriyey sifada cabbidda Rasuulka sallallaahu calayhi wasallam ................. 82
31.Qaybo ka mid ah waxa laga weriyey sifada cabbidda Rasuulka sallallaahu calayhi wasallam ............. 82
32.Qaybo ka mid ah waxa laga weriyey udgoonsiga Rasuulka sallallaahu calayhi wasallam .................... 86
33.Qaybo ka mid ah waxa laga weriyey hadalka Rasuulka sallallaahu calayhi wasallam .......................... 87
34.Qaybo ka mid ah waxa laga weriyey qosolka Rasuulka sallallaahu calayhi wasallam .......................... 88
35.Qaybo ka mid ah waxa laga weriyey sifada kaftanka Rasuulka sallallaahu calayhi wasallam .............. 90
36.Qaybo ka mid ah waxa laga weriyey hadalka Rasuulka sallallaahu calayhi wasallam ee gabayga ....... 92
37.Xadiiska Ummu Zarc ............................................................................................................... 96
38.Qaybo ka mid ah waxa laga weriyey sifada hurdada Rasuulka sallallaahu calayhi wasallam .............. 97
39.Qaybo ka mid ah waxa laga weriyey cibaadada Rasuulka sallallaahu calayhi wasallam .................... 100
40.Qaybo ka mid ah waxa laga weriyey salaadda duxaa ........................................................................ 111
41.Waxa laga weriyey salaadda sunnada ah ee guriga lagu tukado ...................................................... 112
42.Qaybo ka mid ah waxa laga weriyey soonka Rasuulka sallallaahu calayhi wasallam ......................... 113
43.Qaar ka mid ah waxa ka yimid akhriska Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam ..................... 117
44.Qaar ka mid ah waxa ka yimid oohinta Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam ...................... 120
45.Qaar ka mid ah waxa ka yimid gogosha Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam ..................... 124
46.Qaar ka mid ah waxa ka yimid is-hoosaysiinta Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam........... 124
47.Qaar ka mid ah waxa ka yimid akhlaaqda Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam .................. 127
48.Qaar ka mid ah waxa ka yimid xishoodka Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam .................. 133
49.Qaar ka mid ah waxa ka yimid xijaamada Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam .................. 133
50.Qaar ka mid ah waxa ka yimid magacyada Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam................. 135
51.Qaar ka mid ah waxa ka yimid nolosha Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam ...................... 136
52.Qaar ka mid ah waxa ka yimid da'da Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam .......................... 141
53.Qaar ka mid ah waxa ka yimid geerida Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam....................... 142
Fadliga salaadda lagu salliyo Nabigeenna Maxamed sallallaahu calayhi wasallam. ............................... 156
Maxaynu ugu sallinaa Rasuulkii Allaah sallallaahu calayhi wasallam? .................................................. 159

Qaababka salaadda lagu salliyo Nabigeenna Maxamed sallallaahu calayhi wasallam .......................... 164
Macnaha salaadda lagu salliyo Nabiga sallallaahu calayhi wasallam .................................................... 165
Gunaanad ........................................................................................................................................ 166
Liiska tixraacyada .......................................................................................................................... 169

**Markii muslimiinta iyo gaaladu ku kulmeen maalintii Xunayn, dagaalkuna aad u kululaaday oo uu ololkii dagaalku kacay, muslimiintii way dib u gurteen. Rasuulkii Allaah sallallaahu calayhi wasallamna wuxuu ku cararay baqladdiisii isagoo u jihaysan dhanka gaalada, si degdeg ahna ugu dhaqaaqaya mushrikiinta. Markaas ayuu Rasuulku sallallaahu calayhi wasallam yiri: “Cabbaasow, u dhawaaq: Kuwii geedka Samurah lahaaow!” — waana geedkii ay hoostiisa kaga galeen Baycadii Ridwaan. Cabbaas ayaa codkiisii ugu sarreeyey ku dhawaaqay: Kuwii geedka Samurah lahaaow!**

**Cabbaas wuxuu sharxayaa sida ay uga falceliyeen asxaabtii Baycadii Ridwaan markii ay maqleen dhawaaqaas, wuxuuna yiri: “Wallahi, markay codkayga maqleen, usoo laabashadoodu waxay la mid ahayd sida lo’du ugu soo laabato ubadkeeda,” iyagoo leh: “Labbayk, labbayk!” Sida ay ugu degdegeen oo ugu ordeen jawaabta Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam darteed, waxay ugu soo yaaceen sidii ay lo’du ugu degdegto ubadkeeda marka laga fogeeyo.**

**Adiguna...**

**Maxaad samayn lahayd haddii aad ka mid ahaan lahayd kuwii geedka Samurah, Rasuulkuna sallallaahu calayhi wasallam kuu dhawaaqi lahaa? Ma waxaad Rasuulka u odhan lahayd: “Labbayk, labbayk, Rasuulkii Allaahow”?**

**Maxaa dhacaya haddii Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam maanta dhexdeenna joogi lahaa, isagoo naga sugaya inaan nidhaahno: “Labbayk, labbayk, Rasuulkii Allaahow”?**

**Ka dhig kitaabkan tallaabada ugu horraysa ee aad kaga jawaabayso dhawaaqa Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam, kuna celi xitaa qalbigaaga dhexdiisa: “Labbayk, labbayk, gacaliyaha Allaahow.”**

**...Kitaabkani waa hadiyad...**

**Loogu talagalay laambadda ifaysa ee ummaddeenna sallallaahu calayhi wasallam, kana timid kuwa jecel ee ku kala nool dacallada dhulka.**

**“Markii la gaaray maalintii uu Rasuulka Allaah sallallaahu calayhi wasallam soo galay Madiina, wax kasta oo ku dhex jiray way iftiimeen.”**

**Sidaas oo kale ayay qalbiyadeennuna maanta noqdeen ka dib safarkii Shamaa’ilka Maxammediga ah; waxay nagu soo nooleeyeen oo nagu dhiirrigeliyeen fadliga Allaah cazza wa jall darteed, waxaana halkudheggeennii noqday:**

**“Labbayk, labbayk, Rasuulkii Allaahow.”**

**Allaahow nagu irsaaq inaan atharkiisa raacno tallaabo tallaabo, iyo rafiiqnimadiisa Firdowsa sare, sallallaahu calayhi wasallam.**